GUDDIGA MADAXABANNAAN
EE DIB-U-EEGISTA IYO HIRGELINTA DASTUURKA
اللجنة المستقلة لمراجعة وتنفيذ الدستور
Independent Constitutional Review
and Implementation Commission

# MAXDARQORAALKA

## CUTUBKA 2AAD:

## XUQUUQDA AASAASIGA AH IYO WAAJIBAADKA MUWAADDINKA

KULAMADA 17AAD, 18AAD, 19AAD IYO 20AAD

**DIYAARIYEY:**
GUDDIGA MADAXABANNAAN EE DIB-U-EEGISTA
IYO HIRGELINTA DASTUURKA (GMDHD)

FEBRAAYO/MAARSO 2024

**Tusmo:**

Gogoldhig ........ 5

CUTUBKA 2AAD: XUQUUQDA ASAASIGA AH IYO WAAJIBAADKA MUWAADINKA........ 6

Kulanka 17aad: ........ 6

Guddoomiye Sh. Aadan Maxamed Nuur "Madoobe"........ 6

Xil. Xuseen Qaasim Yuusuf Idow: ........ 7

Avv. Burhaan Aadan Cumar: ........ 12

Sen. Said Abdi Hussein: ........ 15

1) Sen. Ahmed Mohamed Said: ........ 16
2) Xil. Omar Ali Abdi: ........ 17
3) Xil. Ahmed Abdi Kooshin:........ 19
4) Sen. Adan Abdinasir Mohamed:........ 21
5) Sen. Samsam Cabdullah Ahmed:........ 22
6) Xil. Mahdi Mohammed Guleid........ 23
7) Xil. Mohamed Adam Moalim Ali: ........ 26
8) Xil. Abdulkadir Sh. Ali Adan: ........ 27
9) Xil. Dr. Mohamed Sheikh Ahmed Mohamed:........ 28
10) Xil. Mohamed Muhumed Mohamed "MMM":........ 31
11) Xil. Dr. Elmi Mohamed Nur:........ 32
12) Xil. Abdirashiid Mohamed Duale:........ 34
13) Xil. Ismail Shire Jama: ........ 36
14) Xil. Abdirahman Mohamed Mohamud:........ 37
15) Xil. Marian Moallim Isaq:........ 39
16) Sen. Abdixakiin Moalin Ahmed:........ 40

Kulanka 18aad: ........ 43

1) Xil. Abdillahi Bildhan Warsame:........ 43
2) Xil. Mohamud Abdulkadir Haji (Jeego)........ 45
3) Sen. Saynab Ismail Mohamed:........ 45
4) Xil. Ali Said Faqi:........ 47
5) Sen. Deqa Hassan Hussein: ........ 48
6) Xil. Abdirahman Isaaq Mohamed: ........ 49
7) Xil. Cumar Ali Isak (Balash):........ 50
8) Sen. Mohamed Abdi Osman: ........ 51
9) Xil. Jama Mohamed Askar:........ 52
10) Sen. Abdullahi Ali Hersi – Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad Aqalka Sare. ........ 53
11) Xil. Abdulaahi Hassan Rooble:........ 54
12) Xil: Saredo Mohamed Hassan: ........ 55
13) Xil. Fawzia Yusuf H. Adan:........ 58
14) Xil. Abdullahi Adan Ahmed (Black):........ 59
15) Xil. Hussein Ali Haji:........ 61
16) Xil. Mowlid Abdi Mohamud:........ 62
17) Xil. Mohamed Ahmed Mohamed (Beerey):........ 63

18) Xil. Abdikarin Omer Hussein: 65
19) Xil. Yasin Abdullahi Mohamud: 66
20) Xil. Abdulasis Mohamed Mohamud QAMBI: 67
21) Xil. Sahur Haji Ulusow: 70
22) Sen. Prof. Dr. Osman Mohamud Mohamed: 71
23) Xil. Mohamed Ibrahim Nur Macalimuu: 73
24) Xil. Ifrah Mohamed Awad: 74
25) Xil. Faaiza Mohamed Jeyte: 75
26) Xil. Abdulkadir Mohamud Dagane "Jeylaani": 77
27) Xil Omar Ibrahim Hanshi: 78
28) Xil. Amina Hussein Ali: 79
29) Xil. Salah Sharif Sayid Ali: 80
30) Xil. Mohamed Omar Aimoy: 81

Kulanka 19aad 83
1) Xil. Ahmed Abdi Kooshin: 84
2) Xil. Abdulkadir Sh. Ali Adan: 86
3) Sen. Saredo Mohamed Hassan: 88
4) Xil. Mohamed Adam Moalim Ali: 91
5) Xil. Yaasin Xaaji Samatar – Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad Golaha Shacabka 92
6) Xil. Jama Mohamed Askar: 93
7) Xil Abdulkadir Mohamud Dagane: 94
8) Xil. Mahdi Mohammed Guleid: 95
9) Sen: Saynab Ismail Mohamed: 98
10) Xil. Mohamed Ibrahim Nur Macalimuu: 100
11) Xil. Abdillahi Farah Mire: 102
12) Xil. Dahir Amin Jesow: 105
13) Xil. Zamzam Muhumed Omar: 106
14) Xil. Adar Ali Mohamed: 108
15) Xil. Abdirizak Adam Warsame (Xusul): 109
16) Xil. Abdinur Ali Adan: 110
17) Xil. Mohamed Omar Aimoy: 111
18) Xil: Salah Sharif Sayid Ali: 113
19) Xil. Shariif Mohamed Abdalla: 115
20) Xil Sareda Mohamed Abdalla: 117
21) Xil Sahuur Haji Ulusow: 117

Kulanka 20aad 120
1) Xil. Mahdi Mohamed Gulaid: 120
2) Xil. Guled Bihi Abdi: 123
3) Sen. Abdixakiin Moallim Ahmed: 124
4) Xil. Abdulkadir Mohamud Dagane: 127
5) Xil. Ifrah Mohamed Awad: 128
6) Sen. Ahmed Ibrahim Mohamed: 128
7) Xil. Abdullahi Hassan Roble 129
8) Xil Daahir Amin Jeesow: 131

9) Xil. Abdirahman Mohamed Mohamud ........ 132
10) Xil. Mohamed Muhumed Mohamed: ........ 134
11) Xil. Ahmednur Sh Mohamed Lohos: ........ 136
12) Xil. Abdinuur Ali Adan: ........ 136
13) Xil. Duniya Osman Yusuf: ........ 137
14) Xil. Mohamed Ibrahim Nur Macalimuu: ........ 138
15) Xil. Mohamed Omar Aimoy: ........ 139
16) Xil. Shariif Mohamed Abdalle: ........ 140
17) Xil. Omar Yusuf Galadid: ........ 141
18) Sen. Naima Hassan H. Mohamud: ........ 143

## Gogoldhig

Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka (GMDHD) waxa uu diyaariyey soojeedinta wax-kabeddelka cutubyada 1aad,2aad, 3aad iyo 4aad ee Dasuurka Federaalka Ku-meel-gaarka ah. Kaddibna waxaa ansixiyey Guddiga La-socodka iyo Hirgelinta Dasuurka ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. GMDHD markii uu diyaarinayey soojeedinta wax ka-beddelka waxa uu latashiyo ballaaran la sameeyey qaybaha kala duwan ee bulshada oo ay ka mid yihiin culummada, ururrada bulshada rayidka, dhallinyarada, haweenka iyo wakiillada dawlad goboleedyada. Waxa kale oo guddigu aruuriyey ra'yiga dadweyne farabadan oo ku kala sugan dalka gudihiisa iyo dibaddiisa iyada oo la isticmaalayo bogga guddigu ku leeyahay internetka. Guddigu waxa uu tixgeliyey fikradaha dhammaan dadkii ka qaybqaatay wadatashiyada. Wadatashiyadaas waxaa iska kaashaday hay'adaha u xilsaaran dastuurka sida GMDHD, Guddiga La-socodka iyo Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka.

Cutubka 2aad waa cutub aad muhiim u ah waxa uuna xeerinayaa xuquuqda iyo waajibaadka aasaasiga ah ee muwaadinka. Waxa uu ka kooban yahay 32 qodob oo u kala qaybsan saddex madax. Madaxa koowaad oo nidaaminaya mabaadii'da guud ee xuquuqda aadanaha. Madaxa labaad oo xeerinaya xuquuqda, xorriyaaadka aasaasiga ah ee qofka iyo xaddididdooda. Madaxa saddexaad oo faahfaahinaya waajibaadka muwaaddinka.

Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka Jamhuuriyadda Soomaaliya ayaa loo soo gudbiyey Soojeedinta Wax-kabeddelka Cutubyada 1aad ilaa 4aad iyo warbixin faahfaahsan oo la socotay soojeedinta. Golayaasha Baarlamaanka ayaa billaabay ka doodista soojeedinta wax-kabeddelka dastuurka si waafaqsan Cutubka 15aad ee Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah.

Maxdarqoraalka hortiinna yaalla waxaa laga diyaariyey doodaha xildhibaannada labada gole ay ka yeesheen Cutubka 2aad ee Soojeedinta Wax Ka-beddelka Dastuurka. Xildhibaannadu afar kulan ayey ku soojeediyeen fikirkooda oo ay ugu dul istaageen qodob qodob iyo faqrad faqrad iyaga oo sameeyey soojeedinno iskugu jira ku celin asalka dastuurka, siiqo toosin, soojeedin ka saaris. Madxadqoraalka hoose waa hadalkii xildhibaannada oo sidoodii loo qoray iyada oo aan wax isbeddel ah lagu sameyn. Waxaa kale oo doodda xildhibaannada laga diyaariyey falanqeyn baaxad leh oo ku saabsan soojeedinnadoodii oo si gooni ah xubnaha labada gole loola wadaagayo. GMDHD waxa ay dib-u-eegis iyo isbeddel ku sameeyeen soojeedinta wax ka-beddelka qodobbada iyo faqrooyinka Cutubka 2aad iyaga oo tixgelin siiyey fikradihii xubnaha labada gole iyo latashiyadii qaybaha kala duwan ee bulshada.

Taariikh: Febraayo 24, 2024

| | | |
|---|---|---|
| Baarlamaanka: | 11aad | |
| Kalfadhiga: | 4aad | |
| Kulankiisii: | 17aad ee labada Aqal | |
| Goobta: | Villa Hargeisa | |
| Guntanka: | Golaha Shacabka: | 150 Xildhibaan |
| | Aqalka Sare: | 31 Sanatar |
| Wakhtiga uu furmay: | 11:20 a.m | |
| Wakhtiga uu xidhmay: | 3:50 p.m | |
| Shir-Guddoonka: | Guddoomiyaha Golaha Shacabka<br>Xil. Sh. Aadan Maxamed Nuur "Madoobe" | |

**Ajendaha:**
(1) Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah.
(2) Ansaxinta Ajendaha.
(3) Dib-u-eegista Dastuurka: Marxaladda 2aad. Ka Doodista soo jeedimaha wax-kabeddelka Dastruurka. Cutubka 2aad. Xuquuqda Asaasiga ah iyo Waajibaadka Muwaadinkta (QODOBKA 10aad ilaa 20aad).

## CUTUBKA 2AAD: XUQUUQDA ASAASIGA AH IYO WAAJIBAADKA MUWAADINKA

**Kulanka 17aad:**

**Guddoomiye Sh. Aadan Maxamed Nuur "Madoobe"**

Bismillaahi Raxmaani Raxiim, xildhibaanada sharaftaleh marka hore inoo ansixiya Ajandaha idinkoo mahadsan, aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin, waxaan rabaa in aan "Brief" yar in aan idinsiiyo inta aan Ajandaha la gudogelin, waxaa maalintii ugu dambaysay isniintii aan dhameystirnay cutubkii koowaad ayaa noodhamaaday, sida habraaca ama shintiriska ku qoran saddex marxaladooda ayaa lamari doonaa, maanta waxaan rabaa in Guddigii Xildhibaanada dood aad u qiimobadan oo aad u fiican ayay soogudbiyeen Doodahaasna bilaash la isagama doodaynin, waxaa larabaa in doodda Xildhibaanada latixgeliyo, nidaamka doodaas looqabanaayo loohaynaayo Guddiga ayaa lagarabaa, anagoo shintiriskeenii iyo saddexda marxaladood ee lamaraayo iyo habraaca kuligood anagoo qiimaynayna taas sideedii in aan u wadno, mudadda way dheeraanaysaa laakiin sikastaba ha ahaatee waxaa la innooga baahanyahay in aan sifiican uga baaraandegno saddxda marxaladoodna sideedii aan kusoconno wakhtigeediina yaynaan ka dibdhicinin, shintiriskan aan ilaalinayno iyo sida habraaca noogu qoran oo loo ansixinaayo jidkaas anagoo kaleexanaynin waxaan rabaa Guddiga qaabka xildhibaanada doododii ay u xafidaayaan barnaamijka looga gudbaayo intaan labilaabin cutubka labaad, Guddigu waxaan rabnaa in ay noosheegaan qaabka ay u xafideen iyo sidii arrinkaas ay u hayn karaan markii hadhoow rastaynta lagaaro, si dhaamtood soojeedinta xildhibaanada in ay ka taxadareen oo aan u ogaano maadaama "Team" dhan qorista iyo diiwaangelinta ku mashquulsanyahay, inta aan Ajandaha loo gudbin Guddiga ayaan u yeerayaa, Guddoomiyaha Guddiga in ay noosheegaan madaama cutubkii aan ka gudbayno sida ay noogu xafideen soojeedinteenii, Guddoomiyaha Guddiga ku soodhawoow, waxaan rabnaa doodii dhamaatay in aad natusisaan sidii aad noogu xafiddeen wixii xildhibaanada soojeediyeen.

**Xil. Xuseen Qaasim Yuusuf Idow:**
waxa u warbixin ka bixiyey sida loo xifdiyey soojeedimihii ay xildhibaanadu soojeediyeen ee ku wajahnayd cutubka 1aad: qodobada 1aad ilaa 9aad:

Mudane Guddoomiye iyo mudanayaasha sharafta leh, waxaan gabogabaynay maalintii salaasada cutubkii koowaad oo ka koobnaa 9qodob, runtii waxa ay ahady dood aad u nuxur badan, waxaa ka hadlay ku dhawaad 90mudane oo ka kooban labada Aqal, waxaan rabaa inta aanan bilaabin inaan dulmaro ama aan soo koobo cutubkii aan gabogabaynay si aan ugu gudubno oo aan u bilowno cutubka labaad, waxaan rabaa inaan 9 qodob aan soo koobno.

Saaxiibadayda, xildhibaanadayda sharafta leh waxaan rabaa inaan ku wargeliyo Guddiga la-socodka iyo Guddiga Madaxbannaan waxay leeyihiin "secretarial" fiican oo qaban kara xildhibaan kasta oo halkan soo istaaga waxa uu ku hadlo, markaa saaxiibaday markay hadlayaan aniga ayey isoo fiiriyaan si ay uu eegaan inaan "note"  qaadayo iyo inkale, markaa arrinkaasi "data base" ayaa jira iyo "secretary effective" ah barito hadii projector la helo ,waxaan rabnaa inaan mudanayaasha la wadaagno sida aan shaqadaas u qabanay si ay xog-ogaal ugu noqdaan iyagu laftigoodu.

Mudane Guddoomiye hadii aad iga ogolaato waxaan abaarayaa arrimaha ugu muhiimsan, iyadoo mudnaanta la siinayo sida hadba soojeedimaha u soo noqnoqdeen afarta cisho ee doodu socotay, anigoo qodobkasta oo ka mid ah 9qodob dul istaagaya arrimaha la xidhiidha soojeedimaha, waxaan ka bilaabayaa.

- **Qodobka 1(1)** sixid luuqadeed ama soojeedimo luuqadeed oo kala duwan ayaa la soojeediyey faqradaasi waxay u dhigantahay: Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya, xildhibaanada qaar ayaa soojeediyey erayga Soomaaliya in laga dhigo Soomaaliyeed. Meel badan ayuu arrinkaasi taabanayaa, halka xildhibaano kalena ay qabeen in sidiisa loo daayo, isla faqradaas qobodka 1(1) eragya sunni ah in loo dhigo: "Soomaaliya waa Jamhuuriyad Federaali ah, muslim sunni ah leh gobanimo ku salaysan caddaaladda iyo sarraynta sharciga", markaa ergayga sunni soojeedintaa waa la sheegay iyadoo xildhibaanad qaarkoodna ay soojeediyeen in lagu daro shaafici mad hab ahaan.

- **Qodobka 1(2):** oo u dhigan xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaas oo dhan waa sixid luuqadeed ayaa xildhibaano badan soo dhaweeyeen in eraybixin xeer loo adeegsado dhamaan qaybaha Dastuurka ee dib-u-eegistu ku socoto meeshana laga saaro sharci madaama "connectation" diimeed ay leedahay.

- **Qodobka 1(3)** oo u dhigan awoodda gobonnimada dalka waxaa iskaleh shacbiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, asagoo awooddaas u isticmaalaya si toos ama si dadban, u adeegsanaya hay'adihiisa uu u xilsaartay, mudanayaashu arrinkaas waxay soojeediyeen in qodobkaa la muujiyo cida shacabka Soomaaliyeed ku matasha danahooga inay yihiin Golayaasha shacabku doorteen ee labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

- **Qodobka 2aad:** oo ku saabsan diinta dalka oo asalkii u dhignaa: islaamku waa diinta dawladda, laakiin soojeedinta cusub ee hada idin hortaala la dhigay: islaamku waa diinta dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

xildhibaano ayaa soojeediyey in sidii hore lagu laabto, halka xildhibaano kale ay keeneen qaab lagu camimayo diinta guud ahaan dalka iyo dawladda taas oo ah islaamku waa diinta, dadka, dalka iyo dawladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Xil. Mahdi Guuleed ayaan u malaynaan soojeedintaa hoosta ka xariiqay.

- **Qodobka 2(3):** iyaduna u dhigan: Waxaa reebban cayda diinta Islaamka iyo karaahiyaddeeda faqrada cusub aad ayaa loo soo dhaweeyey, halka xidhibaanada qaarkood ay soojeediyeen in lagu daro reebista caayidda diimaha oo idil. Erayga karaahiyaddeeda, waxaa la soojeediyey in loo helo eray bixin ka fudud kana habboon.

- **Qodobka 3:** ee la xidhiidha Mabaadii'da Aasaasiga ah. Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuu u dhiganyahay, faqrada koowaad waxay u dhigantahay Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa saldhig u ah, Qur'aanka Kariimka iyo Sunnada Nebi Muxammad (NNKH), wuxuuna ilaaliyaa Shareecada Islaamka iyo maqaasiddeeda.

  Luuqad ahana waxaa la soojeediyey **Nebi** ayaa qoran in laga dhigo **Nabi,** dadka qaarkood sheegeen, laakiin qaamuuska markaan eegnay waxaa toosnaatay in laga dhigo **Nabi.**

  Eragya caddaaladda bulshadeed oo ku jirtay faqrada asalkeedii, waxaa la soojeediyey in aan Meesha laga saarin, isla faqradaas koowaad ee qodobka 3 oo u dhignayd masaadirta islaamka, kitaabka Qur'aanka iyo sunnada in lagu daro **ijmaac** oo taasna la raaciyo, su'aalo ayaa laga keenay fasiraada maqaasida ayadana waa la dulistaagay.

- **Qodobka 3(2)** oo dhigan: Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa dal Muslim ah oo ka mid ah ummadaha Carabta iyo Afrikaanka, waxaa la soojeediyey in marka koowaad inta Afrikaanta iyo Carabta la xusin in lagu daro siiqo luuqadeed oo dhahaysa oo ka mid ah **ummadaha aduunka**, ka dibina Carabta iyo Afrikaanka la sheego.

  Diinta markii laga hadlayey qodobkaas faqradiisa kobaad waxaa ku jirtay dal muslim, iyaduna dooda waxaa ku jirtay in laga dhigo **dal islaam** ah.

- **Qodobka 3(3)** oo u dhigan : Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay ku dhisan tahay mabaadi'da asaasiga ah ee nidaamka awood qaybsiga federaaliga ah, markaa erayga awood qaybsiga aad ayaa looga hadlay waxa loola jeedo, iyadoo dadka qaarkood fasiraadaas ay u qaateen awood qaybsiga beelaha oo dalkeenu isticmaali jiray, laakiin waxaan rabaa fasiraad yar taas xasuusiyo cutubka 5aad waxa uu ku saabsanyahay wuxuu nidaaminayaa baahsanaanta awooddaha dawladda, qaab dhismeedka dawladda ee 3 heer iyo qaab ay u dhisanyihiin dawladda goboleedyada, markaa awood qaybsiga waa midka dawladaha ka dhexeeya ee maahin midkii reeraha.

- **Qodobka 3(4)** oo u dhigan: Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuu ilaalinayaa xuquuqda aadanaha, talinta sharciga, xurmaynta xeerarka caalamiga ah oo aan kahor'imaaneyn shareecada islaamka iyo Dastuurka, **talinta sharciga** waxaa la soojeediyey in lagu beddelo **saraynta sharciga.**

- **Qodobka 3(5)** oo u dhigan: Haweenku waa in ay ka mid noqdaan dhammaan saddexda laamood ee hay'adaha dawladda iyo guddiyada madaxabannaan, xildhibaano ayaa aad u

xusay qodobkaas oo ay hogaaminayaan kookaska iyo madaxda kale ee haweenka in lagu daro faqradaas 30% in haweenku helaan jagooyinka la isu doorto iyo kuwa la isu magacaabo, waxaan filayaa in ay Guddoonka ay la taalo soojeedin arrinkaas la xidhiidha.

- **Qodobka 3(7)** oo u dhigan: Dhulka, badda, hawada iyo kheyraadka dabiiciga ah waa hanti qaran oo ay shacabka Jamhuuriyaddu wada leeyihiin, waxaana mas'uul ka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya, waxaa la soojeediyey in lagu daro **wabiyada** oo aan ku xusnayn xusida kobaad khayraadka marka laga hadlayo, waxaa sidoo kale la soojeediyey in faqrada cusub lagu soo daro taas oo dhigan: **hantida dawladdu leedahay ee Geyiga Soomaaliyeed lama wareejin karo, lama iibin karo,cid aan soomaali ahayna ma intifaacsan karto,waxaan masuul ka ah oo ansixinaya Golayaasha shacbigu u doorteen.**

- Waxaa xusid mudan in arrintan lagu nidaamiyey cutubka 3aad ee aan tagidoono oo ku saabsan dhulka, degaanka iyo khayraadka dabiiciga ah, halkaan waxay ugu jirtaa mabaad'ii guud ahaan ayey ugu jirtaa**.**
- **Qodobka 3aad**: guud ahaan waxaa su'aal laga keenay oo lala akhriyey qodobka 132(2) oo tilmaamaysa wax-kabeddelka mabaadii'da guud ee asaasiga ah, su'aalaha la naga waydiiyey uu "refer" garayn doonaan oo iiga xog-ogaalsan **Avv.Burhan Aden Omer** su'aasha la xidhiidhta mabaadii'da guud dib u-eegisteeda, qodobka 3aad waxa uu ku saabsanyahay mabaadii'da guud, qodobka 132(1)(2) waxay ka hadlayaan mabaadii'da guud wax-kabeddelkeeda, markaa Avv.Burhan ayaa arrinkaas taaban doono.

- **Qodobka 4aad:** oo saraynta Dastuurka la xidhiidha wuxuu u dhiganyahay faqradiisa(2) Cid kastaba, dhammaan hay'adahadawladda, ururrada siyaasadeed iyo ururrada bulshadeedba waxaa waajib ku ah in ay u hoggaansamaan ku dhaqanka iyo ilaalinta Dastuurka, waxaa la soojeediyey in lagu daro **ururrada** Meesha looga daray in **xisbiyada siyaasadeed** laftooda lagu daro.

- **Qodobka 4(3)** oo isaguna u dhigan: Xeer kasta, go'aan kasta, ama tallaabo maamuleed kasta oo kasoobaxa heer kasta ee hay'adaha dawladda, kana soo horjeeda Dastuurka, wuxuu noqonayaa waxba kama jiraan, waxaana burintooda awood u leh Maxkamadda Dastuuriga, arrinkaas Maxkamadda Dastuuriga oo aan hada dhisnayn aragtiyo kala duwan ayaa laga soojeediyey taas oo ay ugu horayso in gabi ahaanba Meesha laga saaro in shaqadeeda maxkammadda sare lagu dhafo oo aan si gaar ah loo dhisin, waxa sidoo kale la soojeediyey inta laga dhisayo awoodeed loo igmado Baarlamaanka.

  Erayga **Maxkamadda Dastuuriga** waxaa dadka qaarkood soojeediyeen in laga dhigo **Maxkammadda awooda u leh.**

- **Qodobka 5aad:** oo Afka rasmiga ah ku saabsan, waxaa si guud looga hadlay in qodobka magaciisa sidiisii hore lagu celiyo oo laga dhigo **Afafka Rasmiga ah,** madaama af ka badani uu rasmi noqonayo carabigu uu afka labaad yahay oo isna rasmi ah.

  isticmaalka luuqad ama af ayada laftikeeda mid ku habboon waa laga hadlay,isla faqrada koowaad qodobkani waxa uu ku saabsanyahay afka rasmiga ah, umaduhuna yagoo Afaf badan leh ayey mid ka mid ah rasmi u aqoonsan karaan.

Afafka rasmiga ah waxaa la soojeediyey in afka ingiriiska ah lagu soodaro madaama aan looga maarmayn daraasaadka, cilmi baadhista,tiknoolajiyada ,xiriiryada iyo heshiisyada caalamiga ah.

waxaa xusid mudan in qodobka 29aad ee cutubka 2aad oo aan ugu tagi doono maalmahan ina soo haya arrimaha la xidhiidha horumarinta afka iyo dhaqanka oo halkan wuxuu ugu jiraa mabaad'ii guud ahaaneed.

Waxaa jira degaano badan oo looga hadlo afaf kala duwan oo uu ugu horeeyo jinbalaansi oo looga hadlo Baraawe, baanjuuni oo looga hadlo Kismaayo, sigwa oo looga hadlo Jubada Hoose, markaa afafkaas oo dhan rasmi ma ah, laakiin afafka wadankeenu leeyahay ayey ka midyihiin.

- **Qodobka 5(2)** oo dhigan: Dawladda Federaalka Soomaaliya waxay daryeeshaa, ilaalisaa islamarkaana horumarisaa Af Soomaaliga iyo suugaantiisa, waxaa la soojeediyey in laga dhigo dawladda Federaalka Soomaaliya waa in ay daryeeshaa oo waajib laga dhigo oo sidaas loo dhigo.

- **Qodobka 6aad**: oo la xidhiidha Calanka iyo astaanta calanka, waxaa la soojeediyay faqrada 3aad ee heesta calanka si dhamaystiran loogu qoro dastuurka si ayna u dhicin wax kale gadaal looga daro, waxa kale oo la soojeediyey bisha oo ah calaamada islaamku leeyahay in calanka meel looga muujiyo.

Midabka calanka soomaaliya si cad loogu xuso qodobka 6aad, maaddaama midabo kale duwan loo isticmaalo maalmahan danbe, waxa kale oo la soojeediyey in heesta calanka iyo astaanta calankaba dib u- eegis lagu sameeyo ,talooyinka qaar waxaa ka mid ahaa in duco lagu daro qaybaheega danbe ,hadii afyahanada iyo suugaanyahanadu ay ku guulaysaataan arrinkaas.

Dhanka astaanta isla faqradaa qodobka 3(2) ee sifaynay muuqaalka astaanta,muuqaalka rasmiga ah waxaad ka dheehan kartaa jadwalka B,"Page"105 oo ka mid ah kuwa ugu danbeeya nuqulka dastuurka wuxuu leeyahay gaashaanta dushiisa waxaa ku yaala rukumo carbeed oo xardhan lehna 5madax oo dahabiya,marka aad muuqaalka eegto waxaad arkaysaa calaamado dheeri ku ah oo sifada ku qeexan qodobka 6(2) dheeri ku ah,sidaas darteed waxaa la soojeediyey in dib -u-eegis lagu sameeyo jadwalka laftigiisa muuqaalka ku xusan.

- **Qodobka 7aad**: oo la xidhiidha Geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

- **Qodobka 7(3)** oo ku saabsanaa xalinta khilaafka soohdimaha oo gabiahaanba la tiray, waxaa la soojeediyey in la soo celiyo, halka mudanayaal kalena ay soojeediyeen in ay saxtahay in Meesha laga saaro.

- **Faqrada 4aad** isla qodobkan ee tilmaamaysa jihooyinka waxaa la soojeediyey in lagu daro **faqrad cusub oo dhigan: in koonfur bari ay inaga xigto badwaynta hindiya.**

- **Qodobka 8aad:** oo la xidhiidha jinsiyada faqradiisa koowaad oo u dhigan: Shacbiga Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa mid, lamana kala qaybinkaro, wuxuuna ka

kooban yahay dhammaan muwaaddiniinta, xildhibaanada qaar ayaa soojeediyey in erayga **soomaaliyeed** oo Meesha laga saaray Meesha lagu soo celiyaa ,halka xildhibaano kalena ay sax u arkayeen in sixid luuqadeed ee Meesha laga soojeediyey ay habboontahay ,waxaa la soojeediyey in sidii asalka ahayd loo celiyo oo ahayd: **jinsiyada soomaaliyeed.**

- **Qodobka 8(3)** oo u dhigan jinsiyad **dal kale** in laga dhigo **dalal kale** si qofka muwaadinka ah uu xaq ugu yeesho inuu dalal badan muwaadin ka noqdo oo uu dalka soomaaliya ka ahayn oo muwaadinka koobaad ka yahay.

- **Qodobka 8(4)** oo lagu daray faqrada labaad in meesheedii lagu soo cesho ayaa la soojeediyey ,xildhibaanada qaarkood waxay sheegeen in la tirayba ,laakiin markii hore mid kale ayaa lagu milay, laakiin waxaa la soojeediiyey in meeshiisii lagu soo celiyo oo dastuurka lagu xeeriyo halka xeer lagu soo saari lahaa laalista iyo ka qaadista jinsiyadda si mug wayn ayaa loog hadlay arrinkaas , waxa sidoo kale si mug wayn looga hadlay in qodobka 8aad lagu daro faqrad cusub oo dhigaysa caruurta ay dhalaan Aabo ama Hooyo Soomaaliyeed ay qaadan karaan jinsiyadda si isku mid ah oo gabdhaha soomaaliyeed caruurta ay dhalaan la takoorin, waxaan filayaa arrinkaas mooshinka haweenka kookas soo gubiyeen oo Gudoonka la yaala inuu xiriir la leeyahay.

- Mudane Guddoomiye Qodobka ugu danbeeyey qodobka 9aad oo la xidhiidha maqaamka caasimada labo su'aal ayaa laga keenay, mid koowaad waxay la xiriirtay maxaa cutubka 5aad loo geeyey iyo maxaa dib loogu dhigay labaduba hal su'aal ah isku noqonaya.

  Waxaan rabaa in xildhibaanada u sheego maqaamka caasimada xulashooyinka laga sameeyey, waxaad ka dheehan kartaan bogga 119 ee warbixinta la socota soojeedimaha waxka bedelka dastuurka.

  Xildhibana ilyaas ayaan u malaynana inuu maalintii halkaas dooddisii ka mid ahayd. Maqaaamka caasimada arrimaha la go'aaminaayo waa arrimo isku jira maamul iyo matalaad labaduba waxay ka dhalan karaan hadba xulushada la qaato, marka xulashooyinkaas laga dodo.

  Xulashooyinka saddexda ah, saddex kuma koobnaan karaan waa ka badan karaan hadii loo baahdo, hanaanka maamul ee xulashada la qaato waxay gali doontaa cutubka 5aad.

  Cutubka 5aad ee dastuurku waxa uu nidaamiyaa baahsanaanta awoodaha dawladda, qaab dhismeedka dawladda ee 3 heer iyo qaab dhismeed dawladda goboleeyada, markaa xulshada la qaato wixii maamul ku sahabsan meeshaas ayey gali doonaan,wixii matalaada caasimada la qaatana waxay gali donaan cutubka 4aad oo doorashada la xidhiidha iyo cutubka 6aad.

  Mudane Guddoomiye hadada iga ogolaato waxaan rabaa inaan kugu wargeliyo warbixinta laga qabtay cutubka 1aad ,waxaan rabaa xildhibaanada hadii ay warbixinta kooban ee aan halkan ka jeediyey ay ka dhex arki waayaan doodii halkan ka dhacday, doodii halkan ka dhacday way ka balaadhanayd intaas,laakiin warbixinta wayn oo ay Guddigu hayaan "secretarial" ay ku jirtaa Guddiguna markuu diyaarinayo marxalad seddexaad nuqulka kama danbaysta ah ,waxay ku khasbanyihiin in soojeedin walba oo xildhibaanku halkan ka

sheegay in ay dul istaagaan,hadaad iga ogolaato Guddoomiye waxaan rabaa inaan siciid cowke hordhiciisa inuu halka ka akhriyo.

Mudane Gudoomiye hadaad iga ogolaato waxaan rabaa inaad Avv.Burhan aad siiso dhowr daqiiqo oo qodobkii 132 oo la xidhiidhay wax-kabeddelka mabaad'iida guud oo xildhibaanadu aad uga doodeen inuu ka hadlo madaama uu yahay khabiir isla markaan uu madax ka yahay Guddiga madaxabanaan ee arrinkaas ka soo shaqeeyey.

**Avv. Burhaan Aadan Cumar:**
Mudane Guddoomiye iyo mudanayaal, waxaan rabaa Guddoomiye Xuseen Idow waa mahadsanyahay, wuxuu soo bandhigay xog kooban oo soo khulaaseeyey, laakiin waxaan rabaa xogtii la qabtay oo dhamaystirin inaan halkaa ku soobandhigno oo aan si kooban 5daqiiqo ilaa 6 daqiiqo waxaan rabaa in xildhibaan walba halkaa is ka arko xogtiisii.

3 arrimood baa la qabanayey "secretory" Guddiga Madaxbanaan uu qabanyey, aydoo video ah waa la qabtay, xildhibaan kasta codkiisii oo arrintii uu ka dhiibtay oo video ah ayaa la diyaariyey, sidoo kale waxaa la diyaariyey oo la qabtay isaga oo cod ah oo dhamaystiran baa la hayaa, asagoo qoraal ahna waa la diyaariyey.

Qoraalkii waxaa loo bedelay in "system" casri ah oo soo koobaya "minute" ama maxdarkii ama hadalqoraalkii oo dhamaystiran xildhibaan kasta iyo siduu yahay in halkaas lagu diyaariyey, maalmihii hada la soo dhaafay waxaa lagu hawlanaa "team secretory" ah oo fiican ay noo diyaariyeen khayr allah siiyee mudadaa kooban ay ku diyaariyeen.

Hadii ay ii suurta gasho in labadii su'aalood ee hore uu Guddoomiye Xuseen Idow uu ka hadlay aan dulistaago.

Arrinta ku sahabsan 132 iyo 133. 133 iyo 132 labo marxaladood ayey ku kala taaganyihiin, marxalada hada dib-u-eegista dastuurka, horta guud ahaan sidaad ogtihiin cutubka 15aad wuxuu ku saabsanyahay dib-u-eegista dastuurka oo marxalada ,habka iyo habraaca la raacayo ayuu si toos ah uu sheegayaa.

133,134,136 waxay si toos u sheegayaan hada xaalada marxalada kobaad oo Baarlamaankii 9aad loogu talo galay oo Baarlamaankii 10 iyo 11aad hada marayso inta dastuurka ay ka ansixinayaan xildhibaanada labada Aqal ,saddex meelood oo labo ay ku ansixinayaan ayuu ka sheekaynayaa oo labada Guddi sida ay u shaqaynayaan iyo Baarlamaanku doorka uu u ku leeyahay ayey aad u cadaynayaan.

132 waxa uu sheegayaa in markii la ansixiyo Baarlamaanka oo ay ansixintiinu dhamaanto wax ma laga beddeli karaa markaa, sidee loo soo marayaa ,yaa soojeedinayaa ma Guddiyada ,ma Guddiga la -socodka soojeedinaya ,mise Guddiga Madaxbanaana soo diyaarinaya,mise Guddi kale?

Wuxuu sheegayaa Guddi kale oo xildhibaanada laga dhex xulayo inuu jiri doono wakhtigaas ka dib,marka la ansixiyo ka dib, hadii la rabo in qodob la beddelo waxa laga shaqaynayaa habraac loo marayo waxay tahay ,waxaa soojeedinkara shacabwayne ,dawladda goboleedyada marxalada gooni oo kale ayuu ka sheekaynayaa oo ah ,laakiin marxalada hada dib u -eegista lagu jiro waxa uu aad ugu sheekaynayaa waxay tahay 132,133.

Waxaan rabaa qodob kale oo la dulistaagay baa jiro oo maqaasidu shareeca ah oo shareecada maxaa loola jeedaa dhowr xildhibaan ay sheegeen.

Maqaasida eray ahaan bay ugu jirtaa waan eray bixin islaami ah oo loola jeedo maqaasid shan ah bay shareecadu islaamku ku soo dagtay oo ah **xifdo diin, xifdu nafsi, xifdu caqli, xifdu nasbi iyo xifdu maal.**

Diinta oo la ilaaliyo , naftoo la ilaaliyo, caqliga oo la ilaaliyo,cirdiga oo la ilaaliyo iyo maalka oo la ilaaliyo shantoo kuliyaatu Khamsa baa la yidhaahdaa,xukunkii waxaa ka danbeeya mar kasta maqsad oo u jeedooyin iyo yoolal gaadhayso shareecada islaamku,xukunkaa waxaa loo soodajiyey in yoolkaa la gaadho diinta in la xifdiyo,nafta in la xifdiyo oo dhinac walba laga xifdiyo dilkana laga ilaaliyo wax yaalihii kalena laga ilaaliyo,markaa wax jira anwaac la kala ilaaliyo oo ay maqaasidu la socoto rag culumo oo waa wayn waa ku jiraan masaalixu daruuriyaad la yidhaahdo iyo xaajiyaat iyo tamliiliyaat saddexaasina waxay raacayaan maqaasida markastana way la socdaan.

Markaa guud ahaan waxaa loola jeedaa ujeedooyinka shareecada islaamku qodobka 3aad bay ku jirtaa mabaad'iida asaasiga ah.

Mabaadii'da asaasiga ah waa in qur'aanka iyo sunnada iyo shareecada islaama iyo maqaasideeda. maqaasidu waa ka mugwayntahay kuligood,markaa waxay u baahantahay markasta in tixgalinteeda la sameeyo.

Mudane Guddoomiye haddaad iga ogolaatid 2 daqiiqo ee horaysa waxaan dul istaagayaa xildhibaan kasta sidaa halkan ugu jeedaan. 71 xildhibaan iyo 14 senatar ayaa hadlay oo la diiwaangaliyey, cutubka 1aad bay doodduna ku saabsanayd, qodobada laga hadlayey 9 qodob bay ahayd.

Aragtiyada halkan laga dhiibtay oo la diiwaan galiyey oo qoraal ah waa 501aragti oo xildhibaanadu jeediyeen, mawaadiicda kala duwan oo loo kala habeeyey waad arki doontaan ayadana 309 aragti weeyaan. Aragtiyo cusub oo lagu soo kordhiyana ilaa 50 aragti oo laakiin isku noqnoqanaysa weeyaan, hadii aad u gudubtaan aragtiyahaasi meelaha ay u kala xoog badanyihiin.

- **Qodobka 1aad**: **63 aragti** baa laga dhiibtay, waxaad dareemaysaa qodobkaa 1aad waa aragtiyihii uu Guddoomiye Xuseen Idow soojeedinayey ' focus' meelihii u badnaa halka ka arki kartaan.

- **Qodobka 2aad: 65 aragti** oo diinta islaamka ku saabsanayd ayaa aad looga hadlay.

- **Qodobka 3aad:** oo arrinta gabdhuhu ku jiraan oo kootooyinkii **95 aragti** ayaa laga dhiibtay, maaha inta xildhibaan ee hadashay waa inta aragti eel aga dhiibtay.

- **Qodobka 4aad: 27 aragti** ayaa laga dhiibtay.

- **Qodobka 5aad: 37 aragti** ayaa laga dhiibtay.

- **Qodobka 6aad: 47 aragti** ayaa laga dhiibtay.

- **Qodobka 7aad: 39 aragti** ayaa laga dhiibtay.
- **Qodobka 8aad: 83 aragti** baa xildhibaano kala duwan ka dhiibteen.
- **Qodobka 9aad: 45 aragti** ayaa laga dhiibtay.

Mudane Guddoomiye haddii aad iga ogolaato waxaan rabaa inaa hada dul istaago xildhibaanada hadlay oo guud ahaan aragtidooda soojeediyey. Aragtida aan hada sheegay xildhibaan kasta sida uu uga hadlay, hadii aan miisaal soo qaato ,waxaa ka mid ah Senator Abdiwali Maxamed Ibraahin oo kale aragtidiisiina waa taa oo diiwaan gashan. Aragtida ku sii xigta xildhibaan Maxamed Sheekh Nuur cisman aragtidii uu dhiibtayn waataas. Xildhibaanka ku sii xiga xildhibaan Mahad Cabdale Cawad aragtida uu ka dhiibtay yadan waataas. Xildhibaan kasta iyo aragtidiisii halkaa ayey ku talaa yadoo diiwaan gashan, cod ah sidoo kalena video ah intaba waa la hayaa ,hadii mawaadiicda laga hadlay aan waxyar dul istaago.

Muwaadiic kale duwan oo waxa aan u kala qaybinay meelaha “focus” la saarayey oo ay ka mid tahay:Haweenka, Diinta, Soomaaliyeed iyo Soomaaliya arrimahaa hadii aad dul istaagtid ayadana warbixinteedii halkaas ayey ku talaa yadoo dhamaystiran,markaa waxaa xusid mudan mudane Guddoomiye xog kasta oo halka ka dhacday way diiwaan gashantahay “puplic” ayey noqonaysaa Guddoonku hadii uu ogaalado waxay noqon doontaa mid diyaarsan ,maxaa yeelay “archive” ayey galaysaa.

Dood maanta dhacaysa waxay taariikh u tahay maxaa loola jeedaa erayga in loo noqdo oo awal ay adkayd, xusuus qor ayey noqonaysaa waana diyaarsantahay. Xogtaa waxaan samayn donaan markaa meelaha loo kala badanyahay iyo siday noqonaysana waan soo diyaarin doonaan,sida hada uu Guddoomiye Xussen Idow uu sheegayey .

Waxaa codsi iga ah xildhibaankii ama senatorkii marka uu hadlayo si ay ugu sahlanaato teamka “secretarial” ee wax qoraya in uu qodobka iyo faqrada uu hal mar dulistaagayo uu xuso, sidii hada loo waday oo kale.

Qodobka 10aad ayaa hada laga bilaabayaa iyo faqradii inuu abaaro si hadhow ay u sii sahlanaato in toos loo sii abaaro, waxaa rajaynanaa in xog fiican oo qurux badan oo diyaarsan oo qof kasta ka dhiibtay aragtidiisii, waxaa xusid mudan “minutes” oo dhamaystirana oo saxeexana waa inoo yaalaa.

Markaa halkaas waxa ka cad wax kasta oo halkan ka dhacay oo diyaarsan in halkan lagu soo bandhig doono yadoo “hard” waa la qaybin doonaan sidoo kale yadoo “digital “ah oo la “access” garayn karo oo xildhibaanku “access” garayn karo in uu xogtiisa halkaas ka helo waa la heli doonaa. Mudane Guddoomiye aad ayaad u mahadsantahay.

**Guddoomiye Golaha Shacabka Mudane Sheekh Aaden Maxamed Nuur “Madoobe”** oo hadalka qaatay waxa uu yidhi: xildhibaanada sharafta leh waad mahadsantihiin,Guddiga runtii waan u mahadcelinayaa waan iska ognahay ,dad baa waxay baarlamaanka ku “propaganda”arrintan waa lala dagdagayaa ,waa lala cararayaa , waa lala ordayaa waxaasi ma jiraan,anaga waxaa umadda Soomaaliyeed nagu aamintay inaan u samayno dastuur mustaqbalkooda dib u-eegistii dhamaystirno ,anaga oo ku salaynayna marxaladda dalkeenu la

jaanqaadi karo, anago shareecada islaamka ilaalinayna, anagoo og xuquuqaadka umadani leedahay laalinayna, Markaa marxaladan aan hada ku jirno maaha intii ansixinta maaha wax ansixin ah hada kuma jirno,markay inaga dhamaato.

Maanta kaliya waxaan ka rabnay sida ay u xafidayaan in xildhibaanadu ogaadaan dooddahoogii ,soojeedimahoogii in ay gacan ku jiraan uun bay ujeedadu tahay. Marka dooddu dhamaato intaan la gaadhin ansixinta ayaa waxaa intan la soo dhigayaa halkan xildhibaan kasta dooddiisii iyo wixii uu sheegayba iyo soojeedimahoogii halkan ayey ka akhrisanayaan, markaas ayaan u gudbi doonaan ansixinta ku meel gaadhka ahayd inaan bilowno.

Guddigii ku talo galkii ahaa in ay xafideen dareenkoodii in ay xildhibaanadu qaataan weeyi,markaa mid kale way inoo hadhsantahay xildhibaanadeena sharafta badan,laakiin ogaada 4.5 ha ku mashquulina arrimahaas iska dhaafa markay dooddu dhamaato intan ayaa la idinku soo dhajinayaa xildhibaan kasta isagoo taagan,asagoo hadlaaya ayaad dhagaynsaynsiin ,wixii idinka dhinaada markaas ayaad su'aalaha galaysaan.

**Sen. Said Abdi Hussein:**
Mudane Guddoomiye waad mahadsantahay**,** Guddoomiye waxaan guda galayaa ajendaha maanta inoo yaala waxa weeyi guda galka cutubka 2aad qodobadiisa u horeeya, markaa waxaan rabaa inaan kormaro ajendaha maanta in horyaala oo ah cutubka 2aad, wuxuu nidaaminayaa xuquuqda asaasiga ah, xorriyaadka iyo waajibaadka muwaaddinka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Sida ku xusan jaantuska warbixinta, waxaa lagu sameeyey toosin 61 faqradood iyo guud ahaan dhammaan qodobbada cutubkan marka laga reebo hal qodob, waxaana lagu soo kordhiyey labaatan iyo todoba (27) faqradood iyo hal (1) qodob oo aan ku jirin asalka Dastuurka, waxaa la tiray labo (2) qodob iyo labaatan iyo saddex (23) faqradood oo ku jiray asalkii Dastuurka KMG ah.
Arrimaha lagu soo kordhiyey waxaa ka ka mid ah:

1) Xaqa ilaalinta xogta shakhsiga ah;
2) Xaqa rafcaan qaadashada;
3) Xaqa dhalinyarada;
4) In aan loo gacan gelin karin muwaaddinka JFS dal shisheeye;
5) Iskaalmaysiga sharciga ah ee caalamiga ah; iyo
6) In uusan jirin waqti u xaddidan furidda iyo oogiddda gal dacwadeed laga garnaqaayo gabood-fallada ka dhanka ah xuquuqda aadanaha.

Cutubku inahaas ayuu koobsanayaa ,waxa uu ka koobanyahay 32 faqradood ,balse maanta waxaa ina horyaala 10faqradood oo ka mid ah,hadii aan kormaro 10faqradood ee maanta la rabo in dooddooda in la dhagaysto waxaa ka mid ah:

- **Qodobka 10aad**: oo ka hadlaya **Karaamada Aadanaha**.
- **Qodobka 11aad**: oo ka hadlaya **Sinnaanta.**
- **Qodobka 12aad**: oo ka hadlaya **Dhaqangelinta Xuquuqda Asaasiga ah.**
- **Qodobka 13aad**: oo ka hadlaya **Xaqa Nolosha.**
- **Qodobka 14aad**: oo ka hadlaya **Xorriyadda iyo Nabadgelinta Qofnimada**.
- **Qodobka 15aad**: oo ka hadlaya **Xorriyadda Ka-mid-noqoshada**.
- **Qodobka 16aad**: oo ka hadlaya **Xorriyadda Ra'yiga iyo Afkaarta**.
- **Qodobka 17aad**: oo ka hadlaya **Xurmada Hoyga**.

- **Qodobka 18aad**: oo ka hadlaya **Xorriyadda Kulanka, Bannaanbaxa, Cabashada iyo Codsi-wadareedka**.
- **Qodobka 19aad:** oo ka hadlaya **Xorriyadda Isusocodka iyo Degitaanka**.
- **Qodobka 20aad**: oo ka hadalay **Xaqa Ka Qaybgalka Siyaasadda**.

10 qodob ayaan maanta dhagaysanaan soojeedimihiina iyo aragtiyadiina fadlan ku soo dhawaada, sidii cutubkii kobaad oo kale markaan qabano aragtiyadiina waxaan rabnaa inaan dulmar ku samayno oo aan sidaa ugu wada shaqayno.

**Guddoomiye Sh. Aaden Maxamed Nuur "Madoobe"** xildhibaanada sharafta leh waan idinla hadlay walalaayaal "point of order" waan idiin ogalaanayaa, hada dooddii caadiga ahayd weeye wax la ansixinayo maaha, qodobadani markay dhamaadaan xildhibaan kasta oo hadlay wixii ka maqnaada ayaad soojeedinaysaan, laakiin hada waxaan rabnaa sidii cutubkii 1aad looga doodday in kana looga dooddo. Guddiga waxaan ka rabnaa inay xafidaan xildhibaan kasta soojeedintisii ma maqnaan karto, marka danbe waxaan isku raacin donaan kuwa aan u aragno inay fiicanyihiin qaadan doonaan. Dooddu ha furnaato xildhibaankasta ha qorto wixii uu qabo hadhow marka la gaadho waa kuu taalaa meelna lagaamo aadayo.

1) **Sen. Ahmed Mohamed Said:**
   Bismillahi raxmaani raxiim shir guddoonka labada aqal, xilibaanada, bahda saxaafada, labada guddi, waxaan ku salamaya salaanta islaamka asalaamu caleykum waraxmatullaahi Wabarakaatuh, bacdu salaam waan u mahadnaqayaa Guddigii soo qabanqaabisay howshan kasoo shaqeeyay, laakiin waxaad moodaa dastuurkaan iney qodobadaan laga hadlaayo ama cutub yadaan iney muujinayaan iney tafaasiil fara badan bixinayaan ,qodoboda qaar kood si sharci oo kalaa, markaas waan guda gali doonaa.

- **Qodobka 11(1)** wuxuu sheegayaa muwaadiniinta oo dhan ayadoo loo eegeenin lab, dhedig, bulsho dhaqaale, diin isir, Wuxuu ka sheekeynayaa sinaanta waxa uu ka digayaa takoorka, ineyn dowlada ku takoorin arrimaha meesha ku qoran, waxa uu mudnaanta koowaad siinayaa xarafka ah diin inaan diin la isku takoorin, waxaan umaleynaya dadka soomaalida waa dad islaam ah waa dad isku diin ah ,markaas lama oran karayo qodobadan takoorka ka hadlaya iyo sinanta , diinta soomaalida wey isku takoorayaan, maaddama dad muslim nahay oo aan diimo kala duwan laheyn.

  Arrinta labaad isirka waxaan leeyahay Soomaalida isir, waa hal isir , waana dad Soomaaliya dad Muslima, dad sunni ah dad shiica ah , markaa arintaasoo kale ayadana leys kuma fuquuqaayo , sorry raali ahaada ,waa dad sunni uune , arrinta kale u baahan waala saxay ,.

- **Qodobka 11(2)** kale ku qoran meesha sinaanta waxa ka hadlaaya: wuxuu leeyahy la iskuma takoori karayo naafada.
  Qodobkaa naafada meelo badan ayuu kusoo noqnoqdaa, waxaa loobaahan yahay qodobka waxaan is leeyahay in meesha laga saaro, oo loo qoro **dadka baahiyaha gaarka qaba.**

- **Qodobka 18(1)** wuxuu sheegayaa xoriyada kulamada banaa baxyada cabashooyinka codsiga wada jirka ah , wuxuu leeyahay qodobkaasu xarafkiisaas , wuxuu sheegayaa iney dadku banaanbixi karaan, ayagoo aan la eegeenin ,ayagoon ogolaasho qaadaneynin, waa sax yaanan ogolaasho qaadanin ,laakiin sharciga haduu siinayo ama qodobkaas haduu siinayo banaabaxa dadka muwaadininta ah, waxaa loo baahan yahay ,iney wargaliyaan

xukuumada , ama dadka meeshaa dowlada meesha ay ka banaanbaxayaan joogta, si aan iyagana lafahooga badbaado looga helo ,umadana markaa looga badbaadiyo.

- **Qodobka 26(2)** wuxuu sheegayaa qofkastaa qaangaara wuxuu xaq u leeyahay, inuu guursado qoys ku yimid rabitaan kiisa, waxaan oran lahaa ha lagu daro faqrad kaloo oroneysa rabitaan kiisa waa sax haku yimaado, laakiin waalidiintana hadey isku dooraan, wax danbiyoo ku jira majiraan.

- **Qodobka 22(3):** wuxuu ka hadlaayaa xiriirka shaqada, markaas xarafkiisa 3 wuxuu sheegayaa shaqo joojinta, wuxuu leeyahay shaqo joojin lama sameyn karo ,hadii ay keeneyso dhibaatooyin amnidaro ,mar hadii loo ogolaaday qodobka sheegaya iney dadku shaqo joojin sameyn karaan, waxey xaq u leeyihiin iney shaqo joojin sameeyan , waxaa loo baahnaa in lagu daro shuruuda kaloo tafaasilinya oo la yiraahdo intaas oo bilood ka hor iney soo wargaliyaan ururadu shaqaaluhu inta anay shaqo joojinta sameyn.

- **Qodobka 22(6)** xarafkiisa 6aad dadka naafada ayuu ka hadlayaa waxay xaq u leeyihiin goobaha shaqada ku helaan sinaan , waa qodobka markiisa hore sii shegey dadka naafada kaliya yaan la soo qaadin, laakiin hala yiraahdo **dadka baahiyaha gaarka qaba.**

- **Qodobka 31aad** xaqa ilaalinta xogta shaqsiga ah, xarafkiisa 4 wuxuu sheegayaa xeer ayuu soo saaraya Baarlamaanka kaasoo nidaaminaya ururinta isku dabaridka xogta muwaadiniinta, Waxaan umaleynaya labada aqal iney ansixiyeen sharcigii xogta muwaadinka.

- **Qodobka 27aad:** caruurta waxaad moodaa qodobkaan aad loo tafaasiiliyay, wax yaaba badan laga qorayoo, sidii sharci yahay loo qoray, anigu waxaan oran lahaa laba qodob un halgu soo koobo Waa qodobka koobaade, hala yiraahdo **caruurtu wixii ka yar 15 sano jir qodobkaasi waa qodob.**

- **Qodobka 27(3 - 7)** waxkasta caruurta dhibaato u keenaya waa ka mamnuuc maskax ahaan iyo jir ahaan ba, waxaan u maleynaya labdaa qodob hadii lasoo koobo kuwaas ay soo hoosgalayaan, qodobda kale oo meeshaan ku qoran , waxa weeyaan caruurta shaqaalo looma diran karayo ,waxaa ku qoran caruurta laguma tacadiyi karo ,waxaa ku qoran caruurta lama ciidameyn kareeyo ,waxaasi waxay yihiin xeerar iyo shuruuc Baarlamanaanda iyo hay'adaha kale ku shuqul leh ay tahay iney soo diyaariyaan, markaa waxaan oran lahaa tafaashiisaas faraha badan Meesha lagu qoray halaga saaro .

Guddoomiyaha Sheekh Aaden Maxamed Nuur "Madoobe" wuxuu soojeediyay inuu ajandaha kusoo noqdo . marka hore waxey aheyd in lasoo diroo illaa intasoo qodob laga doodayaa .

2) **Xil. Omar Ali Abdi:**
Bismilaah ugu horeyn waxan rabaa inaan umahadceliyo xildhibaanada labada Aqal ee Baarlamaanka Federalka Soomaaliya, sidoo kale waxan rabaa inaa araar yar ku darsado oo ah hada wixii aan ka dooddnay qodobkii 1ilaa qodobkii 9 sida loosoo bandhigay , waa arin fiican oo ma aragtay wixii aan ka dooddnay iney ku jiraan iyo in aysan ku jirin in lakala cadeeyo waa arin wanaagsan, laakiin waxaad mooda anigu in anan ka arkin hadii aysan gadaal kasoo bandhigi doonin, qodobka ama farqada uu ka hadlay xildhibaanku, markii ay ka hadasho oo kale 20 xildhibaan ee ay dhahdo hala badalo iyo markii xildhiban dhaho yaan

la badalin wey kala duwantahay, marka waxaad mooda in la sheegay "comments" kaliya laakin tirada xildhibaanada lama sheegin , marka laga hadlaayo farqo ama qodob waxey ku wanaagsantahay in la dhaho 20 xildhibaan ayaa adkeysay sidii hore in lagu dhaafo iyo 2 xildibaan ayaa dhahday halaga badalo ,marka si aan u kala ogaano xildhibaanada wax-badalay iyo kuwa aan wax-badalin, marka fikradaheena waan ka aragnay waan ku amaanan yahay Guddiga sida ay u soo bandhigeen iyo waxii ay qabteen intaba waxan raba marka inaa ka bilaabo.

- **Qodobka 13 Xaqa Nolasha:** waxaa mooda qodobkaas inuu aad u khuseeyo haweenka wuxuu ka hadlaa qodabkaas farqadiisa 3 soo ridida ilmuhu waa arin kasoo horjeeda Shareecada islaamka, waana reebantahay hadii aysan keenin xaalad caafimaad oo aan looga maarmin badbaadinta nolosha hooyada oo uu sugay guddi dhaqaatir ah oo lagu kalsoonyahay: marka meeshas waxaad mooda inta kale waa ay wanaagsantahay in shareecada islaamku ay reebtayna waan adeecsanahay, laakin waxaa mooda in Guddiga dhaqaatirta ah dheeri ku tahay oo waxey ku wanaagsan tahay in laga dhigo **dhaqtar**, waa inuu ogalaada Dhaqtar in la dhaho, hadii oo Guddiga la dhaho qofka waa xanunsantahay waa tacbaan intee guddiga is arkaayan, intay ka tashanaayan, intee go'aan ka gaarayan, waxaa mooda inee qofkiiba sii dhibaatoneyso, waa inuu ogalaada soo rididaas dhaqtar in lagu ekeeyo, dhaqtarkaasina aqoonteeda uu leeyahay ,marka farqadan waxaa la yiri waa farqo cusub ayaa la dhahay een farqada laga soo rarayna waa Qodobka 15aad xuriyada iyo Nabad galyada qofnimada, qodobkaas lasoo raray farqada 5 waa soo ridida ilmuhu waa arin ka soo hor jeeda Shareecada Islaamka waana reeban tahay hadii aan ka aheen xalad caafimad aan looga maarmin badbaadinta nolosha hooyada, intaasay ku wanaagsantahay aragtidayda, arinta Guddiga ah in laga reebo ayan qabaa.

- **Qodobka 16 xoriyada rayiga iyo afkaarta** farqadiisa 2aad: xoriyatul qowlka waxaa ka mid ah xoriyada hadalka saxafada iyo waxwalba oo soo galaayo warbaahinta "electronic iyo Internet" farqadaan waala tiray aya la iri, nuxurkeedana waxa lagu daray farqada 1aad ee isla qodobkaan, farqadii 1aad ayaan soo qaaday hadana, farqadan 1aad ee isla qodobkan wuxuu leeyahay, qof kasta wuxuu xaq uleeyahay inuu yeesho ra'yigiisa kuna soo bandhigo hadal, qoraal iyo saxaafad, farshaxan ama sidii kale ee uu doono hadii ay kahor imaanaynin shareecada islaamka iyo xeerkeeda waxaan qabaa intaan in lagu dhaafo oo aragti ahaan farqadaan 1aad sida lagusoo qaaday ayay ku wanaagsantahay.

- **Qodobka 17** oo sheegaya xurmada hoyga: waxa waajib ah in amarka Garsooraha si toos ah loogu akhriyo deganaha hoyga baarahana waxaa kareeban ku xadgudubka sharciga; waxaa la yiri marka faqradaan waa la tiray maadaama ay nuxur ahaan ku jirto farqada kore iyo qodobka 34aad farqadiisa 4aad waxaan soo qaaday markaa qodobka 34aad farqadiisa 2aad ayaan soo qaaday, wuxuuna leeyahy qof kastaa wuxuu xaq uleeyhay inuu helo garsoor madaxbanan, cadaalad ku dhisan aan eex lahayn laguna qaado maxkamad dadwayne u furan laguna galo mudada xeerku jideeyay; markaa intan waxay sheegaysaa qodobka 19aad farqadiisa 2aad qofka baaraha ah waa inuu imaadaa albaabka qofku hoyga uu daganyahay oo uu yiraahdaa waxaan wataa warqad waxay ka socotaa maxkamada waxay ku socotaa adiga, waxaa lay faray inaan baaro gurigaaga qodobku sidaas ayuu leeyahay , inaan guriga baaro inaad ii ogolato ayaan rabaa ayuu odhanayaa isagoo sharciga dhawraya, qofka la baarayaana wuxuu ogolaanayaa in guriga la galo , qodobkaas meesha ku jiray waa laga saaray waxa lasoo galiyay marka wuxuu xaq uleeyahay maxkamad cadaalad leh oo garsoor leh , haday cadaalad lahayn maxkamada maxaa meesha loo keenay , cadaalad sheegideeda

ayaa meesha la galiyay, lakiin qofka waxa lagu baarayo gurigiisa iyo sababtiisa meeshan inay ku jirto waaye ayna ku cadahay taas halkaas ayaan uuga gudbay.

- **Qodobka 11 (4)** sinaanta wuxuu ka hadlaa: qofna maqaam iyo maamuus uu leeyahay awgeed ugama baxsan karo la xisaabtan iyo ciqaab fal dambiyeed uu galay, waxaa la yiri farqadaan waa farqad cusub, farqadaan waxa loosoo kordhiyay in si cad loogu qeexo dastuurka iyadoo laga duulayo mabaadi'da sinaanta qofka in qofka uusan ka baxsan karin ciqaabta dambi uu galay isaga oo la eegayo maqaamka iyo maamuuska uu leeyahay waxaan rabaa marka intaan inaan xildhibaano si mug leh u fiirino , waxa la yiri qofna maqaam iyo maamuus uu leeyahay awgeed ugama baxsan karo isla xisaabtanka, waxa waaye qofka hadii uu fal dambi ah gacanta kula jiro hadii ay ku cadahay meeshan way wanaagsanaan lahayd, waxaa kaloo la yiri maqaamka looma fiirinaayo Madaxwayne maku jiraa , Raysalwasaare maku jiraa, golaha wasiiradu maku jiraan, xildhibaanadu maku jiraan, xasaanada masoo galaysaa inaad fiirisaan , hada kahor waxaan anaga halkan ku ansixinay sharci ah, askariga nabad sugida ah nama xiri karo iyadoo la leeyahay ayaan halkan ku ansixinay , intana marka waxa ku jirta in qof kasta iyadoo maqaamkiisa iyo magiciisa loo fiirinaayo ugu yaraan ama dambiga isagoo gacanta kula jira ha lagusoodaro ama halaga dhigo raysalwasaare, madaxwayne iyo xildhibaanadu way ku jiraan halagu cadeeyo waxaan kusoo gabagabaynayaa arintaan si gaar ah ayay kolay muhiim u tahay waad mahadsantihiin ama hanala wada xiro ama dadka hala kala saaro waana ka fariistay mahadsanidiin.

3) **Xil. Ahmed Abdi Kooshin:**

waxa aan salaamayaa guddoonka labadiisa Aqal xildhibaanada sharafta leh, marti sharafka Bahda saxaafada iyo dhammaan waan salaamayaa, een cutubkani waa kan ugu muhiimsan markaad eegto xuquuqaha asaasiga ee xoriyada qofka bani aadamka ah ee uu siinayo dastuurku, waxaan qabaa in xildhibaanada si qoto dheer leh intay u fiirshaan qodobadaan wixii laga tiray iyo waxa lagu darayba ay kusoo daraan, hadaan eego aan ku bilaabo dooddayda waxaan diirada saarayaa;

- **Qodobka 11(1)** : waxaa ku jirtay in loo simanyahy diin, ereyga diin ayaa ku jirta farqada 3 isla ereyga diin ayaa ku jirta waxaan u qaatay macnaheedu inay tahay qofka Soomaaliga diinta wuu heysan karaa wadankana wuu ku noolaan karaa ayaan u qaatay, hadana isla qodob 17 waxaa la tiray labadiisii farqadood ee xadidaya, qofkasta wuxuu xor u yahay in uu ku dhaqmo diintiisa, labadaasi isma qaataan ismana qabaan , waxaan markaa guddiga u sheegayaa inta ay gadaal u eegaan in ay iswaafajiyaan labada dhinac ee kay doonayaan in ay qaataan , ma inaan Soomaaliya laga heysan diin kale mise in ay jirto, xildhibaanadaan u daynayaa iyo ra'yigooda, laakiin anigu dastuurka sida uu hada ugu qoran yahay wuu is khilaafsan yahay midna waala tiray labo firqadoodna sideedii baa loogu daayay, waxaan u daayay guddida iyo xildibaanada ra'yigooda in ay ka dhiibtaan.

- **Qodobka 11** ee sinaanta farqadiisa 4 waxaa lagu soo kordhiyey farqada cusub, walaalkay baa hada sheegayey markaan aqriyey waxaan u arkay in ay tahay horta ay farqada qodob siyaasadeysan , qofna maqaam iyo maamuus uu leeyahay uguma baxsan karo la xisaabtan "which is very very proud" iyo ciqaab fal dambiyeed uu galay, dastuurkii ma wuxuu isku badalay xeerka ciqaabta mise waa ministrative law, sideedaba xeerka ciqaabta oo ka ratibmaya dastuurka ama xaqa asaasiga ee oo qofka bini aadamka leeyahay wuxuu si cad u qeexayaa isla qodobkani uu qeexayaa, in ummadda Soomaaliyeed ay dhamaantood u simanyihiin cadaalada iyada oo la eegayo la sinaanayo, sababta loogu soo raray ee dastuurka

loosoo geliyay maan garan, sidaa darteed waa iga su'aal ee farqadani cusubi maxey ka dhigantahay, Soomaalidu sideedaba waxay u dhutinaysaa waa helidda Cadaalad ku dhisan xaq iyo nidaam hufan, waana caqabada koobaad dhamaanteen na haysata, xildhibaanada waxaan rabaa in aan waydiiyo dacwad aan sal iyo raad toona laheyn malagu soo oogi karaa shaqsi soomaaliyeed ama siyaasad awgeed? anigu waxaan qabaa farqadan sideedaba waxa ay gaf ka galeysaa xasaanadda ama xidhibaanada ama dadka kale ayay ka galeysaa , dastuurku wuxuu noo qeexay xasaanadu waxa ay tahay, farqadan cusubi sideedaba ma aaminsani in loo baahanyahay waana in laga tuuro.

waxaan rabaa isla qodobka sinaanta in aan waxayaabo badan oo Soomaaliada dhibaya oo ay soomaalidu hada qaati ka taagan tahay in aan kusoo kordhiyo, waxayna farqad cusub in lagu daro lagu soo kordhiyey sheegeysa in **muwaadiniintu u simanyihiin shaqada iyo waxbarashada dowlada heer kastana u simanyihiin** oo ay noqoto wax lagu muujiyo dastuurka, in muwaadinka soomaaliyeed xaq uu u leeyahay sida walaalkii shaqada u helayo waan kawada dharagsanahay, eexda iyo qaraabokiilka ka jira wasaaradaha, sidaa darteed fursadooyinka shaqo in umada Soomalida ay u simantahay waa in uu dastuurkeenu qeexaa.

- **Qodobka 18** oo hada isku badaly qodobka 16(1) : waa xuriyada ra'yiga iyo afkaarta, qofkasta waxa uu xaq u leeyahay in uu yeesho ra'yigiisa kuna soo bandhigo hadal, qoraal saxaafadeed ama sida kale ee uu doonaa hadii aysan ka hor imaanaynin shareecada islaamka iyo xeerka jamhuuriyadda Soomaliyeed, farqadan inteeda hore waa sax waxa lagu soo kordhiyey shareecada islamka iyo xeerka jamhuuriyadda Soomaliyeed, shareecada islaamka iyada ma xusayo laakiin waxaan rabaa in aan xuso ereyga een ereyga "xeerka jamhuuriyada" dastuurka sidiisaba mudanayaal wuxuu qeexaa mabaadi'da guud halkan wuxuu inoo sheegayo waxa uu qofku xaq u leeyahay, xaq wuxuu u leeyahay in uu ra'yigiisa uu gudbisto, sidaa darteed marka qofka xaqiisa la sheegayo in isla meeshii xaqiisa lagu siiyey hadane lagu xadido ma haboona ,maaha "best pre active" maaha , dastuurada caalamka in isla qodobkii xaqaaga sheegayey lagu xadido isla qodobka dhexdiisii, qodobka 38aad. Ee dastuurka oo an iskugu imaan dono ayaa qeexaya xadidaadaha xuquuqaha uu qofku lee yahay halkaas ayey ku cadahay, Marka xeerka jamhuuriyadda ma ahan mid sidiisaba ku habboon halkaan in laga saaro oo sidiisii hore loo daayo ayaan qabaa farqadda.

- **Qodobka 20aad** ee hadda isku badalay qodobka 18aad xuriyadda kulanka bananbaxa cabashada iyo codsi wadareedka, Qofkasta wuxuu xaq u Leeyahay in uu abaabulo kana qayb Galo kulamo ama banaanbax, cabasho , taageero oo lagu muujinaayo si xasilooni ah iyada oo aan ogolaansho loo baahnayn si waa faqsan xeerarka jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya.

  Waa sidii hore ee wanaagsanayd ee Dastuurka ugu qornaa, lkn waxaa wixii ka reebani waxay u taalay wasaaradaha iyo hay'adaha u taalay, ereygaa markaa lagu soo kordhiyey si waafaqsan xeerarka jamhuuriyadda Soomaaliya waxay xadidaysaa waxa muwaaddinka soomaaliyeed xaq u Leeyahay, iyadoo lagu qeexay qodobka 38aad qaabka loo xadidayo "for example" qofka bani aadanka wxuu lee yahay xaqa nolosha, laakin xaq uma laha haduu qof dilo xagee markaa lagu cadeeyay, waxa lagu cadeeyay xadidaada xuquuqaha qofka bani aadanka lee yahay Qodobka 38aad in Marka si waafaqsan xeerka jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya lagu qoro, waxaan qabaa in sidiisii hore loo raaco loonadaayo guddiguna ay dastuurka isku akhrido.

- Qodobada inta aan u Soo gudbin xoriyadda isku socodka iyo dagitaanka qofkasta sifo sharci ah ayuu ku jooga waa "general" qodobka 19( 2) aad muwaaddin kasta wuxuu xaq u leeyahay Soogellida,kabixidda iyo joogitaanka wadanka , halkaa waxaa ka maqan **isku socod**, waan ognahay mas`uuliyiin halkaan fadhiya goobahoodii laga Soo doortay aan tagi Karin, Marka qofka muwaaddinka in uu xaq u lee yahay in uu u safro goob kasto oo Soomaaliya ah ku taala gudaheeda tagi karana in lagu muujiyo baan qabàa.

- **qodobka 20(1)** Xaqa ka qayb galka siyaasadda: waxaa lagu Soo qoray si waafaqsan xeerka jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya, xuriyadkasta oo dastuurka tilmaamaysa in uu muwadinku lee yahay, Guddigu waxa ay ku so kordhisay caqabado hordhigtay si waafaqsan xeerka jamhuuriyadda, Dhammaan dhawr iyo toban qodob oo kujira ee isla qodobkan ee cutubka 2aad ayaa la hordhigay caqabad aan loo baahayn iyada oo aan lafiirinayn oo laga dulbooday waliba noo sharxaayo, sidaas darteed waxaan qabaa isla qodobkan in laga saaro **xeerarka jamhuuriyadda Soomaaliya**, fadlan dastuurka "competition" ka aan kadayno is dhexyaacana wuxuu macna tirayaa dastuurku wuxuu u taaganyahay qodobka 16aad farqadihii latiray baan doonayaa Inaan idinku so celiyo.

- **Qodobka 17(2)aad** xurmada hoyga waala tiray, ee waajibinaysay In aan askarigu Gali karin guri isagoo shahaado wadan asagoo u sheegin muwadinkan waxa uu ku haysto ama waaranku keenay, waala tiray in la Soo celiyo ayaan qabaa.

- **Qodobka 13aad** xuquuqda xorriyaadka asaasiga ah ee qofka la xadidayo farqadda 2aad ee cusub ee la Soo kordhiyey wax matarto, sida aan aminsanahay dastuurku mabixiyo sharxaad, sharxaad waxaa looga baahan yahay xeerka jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya, Dhammaan tood waynu wada ansixinay Marka dastuurka "compilation" iyo aragti ahaan sidaa ani ila muuqato in celceliska laga dhaafo ayaan qabaa, Waxaana dareemay siday ila muuqato inay Guddiga iska jeclestay in uu fara galiyo Dhammaan farqadaha Dastuurka ku qoran bal cutubkan u fiiirsada, 61 farqadood baa toosin lagu sameeyay, 27 farqadood oo cusub baa la keenay, hal qodob oo aan ku jirin dastuurki yaraa baa lagu soo daray, waxaa la tiray 2 qodob oo waawaynaa oo ku jiro kan diinta iyo 23 farqadood oo dastuurka ku jiray, waxan ma ish calaa dhamaystir baa mise waa ish calaa ku feygaar dastuurka, dastuurku meelaha uu ku saxsanyahay waa in faraha looga qaadaa "competition" kana laga daayaa Wabillahi tawfiiq.

4) **Sen. Adan Abdinasir Mohamed:**

Inta aanan gudogelin waxaan sii raacaaya hadal uu halkan kajeediyay Guddoomiyaha guddiga dastuurka Xil xusen Idow , mari uu kahadlaayay qodobka 5(1) Af ka Soomaaliga Maay iyo Maxaa tiri farqada labaad oo kasiibaxaysa ayaa jirta waxay qodobkaan ee dhahaysa hormarintiisa, ma aheen marka in uu dadka soomaaliyeed marinhabaabiyo waxaa jira Afaf kale baraawe iyo jubooyinka iyo looga hadlo , kaliya waxaa loo diray oo dastuurka ku qoran waxay ahayd Af ka soomaaliga oo May iyo Maxaa tiri ka hadlaayo kaliya, waxay ahayd in uu halkaas ku ekaaado waxyaabaha kale ee marin habaabinta dadka Soomaaliyeed uu udiraayo in uu ka joojiyo ayay ahayd .

- **Qodobka 11aad** : ciwaanka qodobkaan oo hada u qoran sinaanta oo kaliya in lagu soo kordhiyo **sinaanta Muwaadiniinta** .

- **Qodobka 11aad (4)** ee uu guddiga sookordhiyay waxay ilatahay in aysan halkan ku haboonayn , :qofna maqaam iyo maamuus uu leeyahay awgeed uga ma baxsan karo la xisaabtan ciqaab fal danbiyeed uu galay , waxay ka hadlaysaa isla xisaabtan ma ahayn in ay halkan keenaan.

- **Qodobka 15(1)** : oo odhanaysa qofkasta wuxuu xaq u leeyahay in uu kubiiro qof kale xaqaas waxaa ka mid ah ururro ay kamid yihiin ururro shaqaale ama xisbiyo siyaasadeed, wuxuu kale oo uu xor u yahay in uu cidna kubiirin lagumana khasbi karo in uu cid kale kubiiro , meesha ey erayga sexeen meesha qofkale ahayd waxay dheheen dad kale, maxaad ula jeedaan qofkale ama dadkale? soo kama haboonayn meesha qofkale ama dadkale aad kadhigtgeen in uu qofka xaq uleeyahay in uu kubiiro **ururo shaqaale ama xisbi siyaasadeed**

- **Qodobka 18aad**: oo ka hadlaya xoriyada kulanka banana baxa cabashada iyo codsi wadareedka. **Qodobka (2)** : qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu cabasho qoraal ah u gudbinkaro Hay'adaha dowladda, cabashada ma Hay'adaha dowladda dhamaan ayaa loo gudbinayaa mise Hay'ad gaar ah oo loo gudbinaayo ayaa jiraysa?

  **Qodobka 13aad**: ayaan ka booday oo ka halaya xaqa nolosha.

- **Qodobka 13(3)** oo dhahaysa soo ridi'da ilmaha waa arin kasoo horjeeda shareecada islaamka waana wax reeban, waxaan talo ahaan u soojeedin lahaa in qodobkaan loo raro qodobka 26aad oo ka hadlaysa xuquuqda qoyska.

5) **Sen. Samsam Cabdullah Ahmed:**
   Asalamu callaykum waraxmatulahi wa barakatuhu, qof walba mansabkiisa ayaan ku salaamaayaa oo guddoonka ugu horeyo iyo xildhibanada, guddiga dastuurka aad bay u mahadsanyihin shaqo fiican ayay qabteen, waxaan rabaa marka doodda in aan ku darsado cutubka 2aad.

- Qodobkiisa 11(1) xildhibanadi iga horeyay waxay so jeediyeen in ay diin kujirto wuxuu qodobkan u qoranyahy: Muwadiniintu oo dhan iyaga oo aan loo eegaynin lab iyo dhadig diin midab xaalad bulsho, ama dhaqaalo, afkaar siyasadeed, qabiil naafanimo xirfad dhalasho isir, Da iyo af guri toona xuquuqda iyo waajibaadka way u simanyihin xeerka hortiisa si wafaqsan shareecada islaamka; Hadaba hadii aan muwadininta oo aan dhahno muwadiniin oo diina aan ku darsano ma waxa jira muwadiniin soomaliyeed oo diin aan diinta islamka ah haysan, ma jiraan haday jiraan riddo waaye hadii uu qofka diinta islamka ka baxo wuu riddoowayaa, murtad buu noqonayaa, taana shareecada islaamka waxay ka qabtaa xukunkeeda iyo qawaaniinteeda, marka halka waxa jeclaan lahaa meesha diinta ku qorantahay in laga saaro, sababta oo ah waxay ku qorantahay isla qodobkan faqradiisa 3aad waxa kujirta iyadana diinta iyadana in laga saaro, madaama diinta islamka tahay diinta kaliya looga dhaqmo wadanka soomaliya wax kenaayo in halka diin lagu soo daro majiraan ,dastuurka qaybtiisa hore qodobka 2aad wuxu shegayaa diinta islamka in ay tahay diinta dalka marka qodobkan halkaas ayaa uga gudbayaa. Waxan la qaba xildhibanadi iga horeyeen:

- **Qodobka 11(4)** ee lagu soo kordhiyay qofka maqaamkiisa iyo maamuuska uu leyahay awgeed ugama baxsan karo, in qodobkasna laga saaro siyaasada ah ee lagu soo daray dastuurka, iyadana waxaan la qabaa xildhibanadi iga horeyay in laga bixiyo.

- **Qodobka 14(4):** xoriyada iyo nabad galyada qofka waxa kujiro farqadiisa 4aad waxaa lagu soo kordhiyey gudniinka fircooniga markii laga hadlayay ee gabdhaha waxa lagu soo diyaariyay fircooni iyada oo lala tashaday culumada, marka qodobkan ani waxa qabaa oo aan soojeedinayaa in sida u aha lagu soo celiyo, madaama dadka Soomaaliyeed intooda badan fircooni mooyee wax kale aqoonin, halkan marka waxaa cadaynaysaa hadii labaneeyo gudniinkani in fircooni un la baneysanayo wax kale oo meesha so socon, teeda kale qodobkan ah Gudniinka fircooniga lagu la dhahayo aslan gudniinka gabdhaha waa masalo qilaafiya sida culumadu ay soo daliishadeen oo ay sheegeen in lala tashadayna , nascad oo cadeynaya oo nabiga SCW ka imaaday ama jamaacul culuma ay isku wafaqsanyihin in gabdhaha La gudo majirto, waa suno oo "makruuhiya" waye waana khilaaf masalatu culumaa islam ay isku khilafeen marka, ani waxaan soo jeedin lahaa qodobkan sida uu aha in loogu soo celiyo dastuurka Oo laga joojiyo qayidkan firconiga.

- Waxaen kale oo aan rabaa in aan soo jeediyo qodobka 13(2)aad qaybtiisa ugu hoosayso waxay ku qorantahay af guri ama af xaafaded wax la dhaho af dasturi ama qaanuuniya kuma qorna, faqrada qaybta ugu dambayso ee ah xukun maxkamaded ama kama dambaysa in lagu xukuno qofkaas lagu rido ama uu ku dhaco saas lo qori karaa waa mahadsantihiin.

6) **Xil. Mahdi Mohammed Guleid**

Dhamaantiin waan idin salaamayaa xildhibaanada sharafta leh iyo guddoonka, waxaan rabaa inta aan qodobada gudo galin inyar oo gogoldhig ama hordhac ah ka sameeyo cutubkan oo muhimka ah ee xuquul insaanka ama xuquuqda aadanaha, wuxuu ka hadlayaa cutubku had iyo jeerna is barbaryaala xuquuq iyo waajibaadka muwaadinka Soomaaliyeed saaran ee uu xaqa u leeyahay, sidookale xorriyadaha iyo xuduudaha qofka waxa uu xor u yahay in xuduud loo sameeyo oo uuna qof ku xadxugdbin xurriyada uu leeyahy.

3 shay ayaan rabaa oo cutubkan aadka u ballaaran in aan dadka Soomaaliyeed ku baraarujiyo, midka koowaad shayga la yiraahdo dimuqraadiyada ama "democracy right" ee ay reer galbeedku aadka u riixaan ama innagu halka uu naga joogo iyo sida aynu ugu dhaqmayno oo iyagu qudhoodu marka ay ka sheekeeyaan waxay yiraahdeen " too much democracy is unright" dimuqraadiydda oo xariga loo sii daayo waxay keentaa nidaam darro iyo qas, mida labaad, xoriyatul qowlka iyo xoriyadda Saxaafadda oo ah kan labaad ee laga sooqaatay xuquuqul insaanka ee aadka loo wayneeyo ee loo buunbuuniyo, afka wuxu la xoog yahay, sidee baynu iyaduna u jihaynaa xoriyadda saxaafadda, xoriyatul qowlka loona ilaaliyaa curfiga, akhlaaqda suuban iyo Amniga Qaranka taasina waa mida labaad oo ay tahay in ay is weydiino cutubkan side ayuu u jihaynayaa?

mida 3aad iyada oo gabdhaha Soomaaliyeed raali iga yihiin xuquuqda haweenka iyo sida loo riixo ama loodhigo intaa markii la isku daro waa xuquuq kale oo asaasi ah oo waawayn oo barbartaala aan la eegin ama laga hadal, sadexdaas marka la isku daro waxaa inoo taala su'aal ah sidee baynu u jihaynaa? Maxay tahay doorka aynu ka leenahay cutubkan xuquuqul insaanka in uuna noqon "copy and Past" ayna noqon halkaas kasoo qaad halkaas keen, waxaan annigu aaminsanahay in ay asaasi u noqoto, koow shareecada islaamka oo uu hada Burhaan inoo shegayay culumaa'udiinka Soomaliyeedna wax badan ka hadlay, laba dhaqanka Soomaaliyeed ee suuban marka laga yimaado caadooyinka haraadiga ah markaynu intaa isku darno ayaynu jiheyn karnaa cutub ina anfaca oo xuququl insaanka ka hadlaya.

walalayal waxa ogtihiin xuququl insaanku wa "Tool" ama aalad ama hub siyaasadeed Oo ku salaysan dhowr "standard" laba wajiilayn lajiifiyaa banaan lajoojiyaa banaan iyo "democracy" munaafaq ah , nin oday ah oo Soomaaliyeed ayaa I yiri markii dadkii Soomaaliyeed ay qurbaha u keceen family-yadii dhaqan adag oo suuban oo soomaaliyeed haystay caruurtooda way u badbaadeen ayuu yiri,family-yadii shareecada islaamka haysatay ee ku dhaqmayayna caruurtoodii way u badbaaday, kuwii kale se daadka ayaa qaaday. Marka waxaan ku celcelinayaa in saldhigyo iyo aasaas ay u ahaato shareecada islaamka iyo dhaqankeena wixii ka baxsana aan isla eegno oo aynu ka doodno, waxaana u imanayaa doodaha.

- **Qodobka 10aad** oo ka hadlaya karaamada aadanaha Sida ay guddigu u qoreen waxaan orran lahaa "**Aadamaha**" aynu niraahno.

- Qodobka 11(1): muwaadiniinta oo dhan iyada oo aan loo eegin lab ama dhedig, lab iyo dhedig yaan la oranin sababta oo ah isma galaan oo way kala saaranyihiin, marka wa in uu ahaadaa "lab ama dhadig" halka " iyo " aad tirahdeen, sharciga marka laga hadlayana "Cumulative" ayay noqotaa isku lifaaqidaa marka lab iyo dhedig meesha ah **lab ama dhedig** aynu niraahno, Isla farqada 1aad "Diin" xilldhibaan Kooshin ayaan la qabaa oo halka dambena waan u iman doonaa, sheeikh soomaaliyeed oo nala jooga waanba kala dooday, xoriyadda diinta marka aynu gaarno, marka diin halkaasi isma qabanayaan ee hala cadeeyo.

- **Qodobka 11(2)** waxaa reeban Dowlad iyo Shacab baan annigu ku daray, halka aad tiraahdeen waxaa reeban oo waayo xuquuqul insaanka waxaa ku xadgudba dowladda inta badan oo la iska ilaaliyaa.

- **Qodobka 13(1)** qof kasta wuxuu xaq u leeyahy in uu Noolaado ayaan annigu u qori lahaa qofkasta wuxuu xaq u leeyahay Nolol ma ahan uu " **Noolaadaa**" ayaa kaga haboon, marka qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu noolaado.

- **Qodobka 14(3**) halka u dambeeya ayaan soo qaadanayaa annigoo waqtiga ka faaiideysanaya, qofka haduu aanu sharciyan awood u lahayn' " **Aanu**" ayaan ku soo daray si dhadhanka akhrisku uu macno u sameeyo.

- **Qodobkaa 15aad** qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu kubiiro dad kale halka uu ka leeyahy "urur" marka koowaad, marka dambe ayaa waxay imanaysaa ururada bulshada iyo ururada siyasada iyo wixii lamid ah in ay noqoto dad kale ama koox kale aynu niraahno Urur.

- **Qodobka 17(1)** qof kasta wuxuu xor u yahay in uu ku dhaqmo diintiisa, waa qodobka aan waydiiyay sheekha malaha culumada aad kala doodeen, wadanka Soomaaliya waa dal wayn oo balaaran 15 million kaliya ku nool , hadii aan ula jeedno dadka muslimiinta ah ee Soomaliyeed oo aynu leenahay diintooda iyo caqiidadooda dood iyo muran magasho, waa run oo 100% muslim ayaynu nahay, laakiin 10 million oo qof ah oo ajanabi ah oo khibrad yaqaana sharcina yaqaana oo injineero ah oo saynisyahano ah dhakhaatiirna ah ayaynu u baahanahay, marka waa in aynu niraahnaa " qof kasta oo ajanabi ah waxa uu xor uyahay in uu ku dhaqmo diintiisa " "لا اكراه في الدين" ninka saynisyahanka ah ee khabiirka ah ee kuu yimid ee ah dhaqaalyahanada waawayn ee aduunka, dhakhaatiirta oo aad u yeeratay hadii aad tiraahdo Gurigaaga kuma cibaadaysan kartid ama meelaha kale ay isugu yimaadaan,

taas waxaan filaa in dib loogu noqdo, culumadana dib loogu celiyo, innaga haa oo ma aha muran caqiideed iyo diimeed in aynu galno ma ah, laakiin ajanabiga noo imanaya waxay ilatahay xuquuq bay leeyihiin sida annaguba dalalkooda marka aynu joogno aynu xuquuq u leenahay.

- **Qodobka 17(1)** Hoyga, qofna hoygiisa ama meelaha kale ee u gaarka ah lama baari karo lamana "**dhagaysan karo**" ayaan ku soo daray oo in aan la dhagaysan qof hoygiisa .

- **Qodobka 19(3)** Muwaadin kasta wuxuu kale  xoogaa waxay dhigaysa macno la'aan ama macno darro marka si uu u cadaado waa in aynu niraahno " waxa oo kale" .

- **Qodobka 20(1)**  kama mid noqon karo urur ama xisbi aynu ku koobno.

Waxaan u imanayaa faqradii dooddu ay ka taagneed oo xildhibaanadii iga horeeyayna ay ka hadleen oo u baahan in la isla akhriyo qodobka 11(4)  qofna maqaam ama maamuus uu leeyahay uguma baxsan karo ciqaab ama fal dambiyeed uugalay, marka qodobkaas waa in lala akhriyaa qodobka 70(1-4) xasaanada xildhibaanka soomaaliyeed  ee golaha shacabka uu leeyahay iyo qodobka 78(1,2) ee xasaanada aqalka sare, ama hadii aan isku qaadno xasaanada labada aqal ee Baarlamaanka ay leeyihiin, marka qodobkaas mugdi buu keeni doonaa  iyo in sidii doono loo turjumo.

guddiga arrimaha gudaha iyo amniga ayaan ka tirsanahay dabadeedna xeerarkii iyo shurucuudii naloo keenay ayaan guddiyadii kula kulanay  hay'ad kamid ah hay'adaha ayaa khabiir holland-di ah Oo phd sharciga ka haysta iyo qaanuunka ay wadatay dabadeedna dood baynu galnay qodobka 38aad ee xuduuda iyo xadidaada xuquqda bini'aadmiga ayuu doodi keenay holland marka leeyahay soomaali buu aha raali ahada dibada ayu wax ku soo bartey, xuquuqdii bini`aadmiga qodobkaas noo ogola waanu xadidnay, marka qabyo qoraalkii hindiso sharciyedka ayaynu kuso xadidnay, marka waxa la yiri garyaqaano anoo ku ixtiramaya malaha si qaldan u fahantay xadidaada xuduudaha wa mabaadi'da  guud tusaale maxaa la xadiday "right to life" qofka waxa  uu xaqa u leyahay inu noolaado laakiin marka aad qof kale aad disho Maxkamad baa lagu geynayaa sharciga ciqaabta ku maxkamadeynaya, waxaad u ledaahy xaq in aad xor ahaato oo aad socoto laakiin markaa dambi gasho waa lagu xirayaa oo xoriyadaadii dhaqdhaqaaqa ayaa la xadiday,  waa u ledahay in aad xoriyad hadasho laakiin imika inta soo istaagtid theater lagu dawanayo muxaadarada oo aadd tirahdo alla dabka alla dabka ood qayliso oo dadkii qof walbo is yiraahdo naftada la cayrso la baxso oo ay is jiiran oo dad badan jajabaan oo ay dad neef qabato oo ay kudhintaan, xoriyada hadalka ma xaq baad u ledahay marka?  waala xadidayaa hadalka,  marka "right's and duties" xuquuq iyo wajibaad xoriyad ama xadayn shurucdana ay dhigayaan halka aan qodobka u dambeeyo ku soo gaba gabeynayo.

Dastuurku wa "generic" waxkasto ma faahfaahiyo, hada af ingiriisi ku aqriso wuxu oranaya "particullars should be declared by law" yacni faahfahinta xeer baa tilmamaya, marka qodob kasta hada aragtaan iyada oo la leeyahy xeer baa tilmamaya dee wa xerarka inaga inoo yaalo oo ay tahay in aynu ansixino ama lifaaqa ugu danbeeyo inta sharci ay wax iska badalayaan ku lifaqan qodob walba xeer baa ka dhasha oo la sameeynayo.

Ugu dambeyntii guddoomiye adiga oo raaliya habraaci baan doonayaa in aan kuso noqdo aynu halkan ku ansixinay, lamana yaabani xildhibanada oo mugdi ba kaga jira maynaan dooddin aadna umayna fahmin fursad lagu aqriyana lama helin, laakiin 3 marxaladod bu

dhigayaa, koow,marxalada codeeynta, labo, Marxalada ansixinta, sadex Marxalada mooshinka, marka xildhibaano innagoo waqtiga ka faa'ideysanayna annigu waxan oran laha labada guddi iyo shir guddoonka mooshinada aan ka yareyno wixii mooshina marka 4 ta cutub ay dhamaadan ayaynu isla imanaynaa aakhiro war jiraa, labadii nin garabka wadagayay waxay yirahden, marku subaga gunta dagay war aakhiro war jiraa subagga gunta ka raadi , marka mooshinada waa inoo 4 ta cutub markey dhamadan waa mahadsantihiin.

7) **Xil. Mohamed Adam Moalim Ali:**
Waad mahadsantahay Guddomiye, horaan u galayaa maadaama uu waqtigu yaryahay, horta waxaan rabaa inaan u mahad celiyo labadii Guddi gaar ahaan Guddiga farsamo yaqaanada ah oo wixii aan sheegnay oo dhan halkaas noogu bandhigay, sidoo kale qodobada qaar aragtidii aan ka qabnay, Guddomiye Iidow si gaar ah ayaan uugu sheegay oo uu ka tagay laakiin waa qorantahay, intaasaan ku qancay maadama ay qorantahay, waxaan rabaa inaan toos u galo.

- **Qodobka 11 (4)** oo lagusoo kordhiyay qodobada dastuurka una dhigan sidan, qofna maqaam iyo maamuus uu leeyahay awgeed ugama baxsan karo la xisaabtan iyo ciqaab fal-dambiyeedka uu galay, qodobkaas waa qodob dheeri ah oo lasoo kordhiyay markii horena kumuusan jirin, waxaan "second" garaynayaa xildhibaanada qaba in laga tiro meesha ayadoon ognahay duruufaha iyo waxa jiro, qodobo kale oo xasaanada ka hadlaaya ayuu ka hor imaanayaa, maadaama dastuurkiina hada aan dib-u-eegistiisii ku jirno qodobo kalena uu ka hor imaanayo, inaan caqabad cusub abuurno ma rabno maadaama qodobada soo socda oo xasaanada iyo waxaas ka hadlaaya uu toos uuga hor imaanaayo.

- **Qodobka 12 (1)** waxaa ku qoran, maadaama aan argtidii horena ku dhiibanay, wali waxa qoran inkastoo uu "version" kii hore yahay waan ku boorinaayaa, dawlad goboleedyada maalintii xildhibaano badan oon ka mid ahay waxaa lasoo jeediyay, maadaama dawladdii ay tahay kaliya dawlada federaalka oo kuwa kale ay maamul goboleedyo yihiin, in lagu qoro meeshaas maamul goboleed, oo aad u qaadataan qodobadii dib u saxa aad ku samaynayseen inaad ku biirsataan.

- **Qodobka 13 (3)** waxa qoran, dhakhaatiir ayaa qoran, waxaan qabaa xildhibaankii iga horeeyay ayaan ku waafaqsanahay, in laga dhigo dhakhtar, maadaama dhakhaatiir hadii la dhaho ay tahay koox, kooxina waxay ka bilaabataa sadex iyo wixii ka badan, waxaba laga yaaba qofkii markaas go'aanka laga gaari inuu dhinto inta la isku raadinaayo dhakhaatiirta, markaa meeshaas dhakhtar takhasuskeeda leh inuu go'aankaas ka gaaro ayaan qabaa in lagu qoro, oo meeshaas dhakhaatiir lagu badalo dhakhtar.

- **Qodobka 16 (2)** waxaan qabaa in lagu kordhiyo, maadaama uu dastuurkeena "base"kiisu yahay shareecada islaamka iyo xeerarka, waxa ka dhiman, sidan ayuu u qoranyahay, qof kasta wuxuu xaq uleeyahay in uu si xor ah usoo bandhigto aqoontiisa ama hal-abuurkiisa faaf-reeb la'aan, markaa anaguna dad islaam ah ayaan nahay dastuurkeenana waxa "base" u ah shareecada islaamka waxaan rabaa in lagu daro oo lagu kabo halkaas haduusan ka hor imaanayn shareecada islaamka iyo xeerarka jamhuuriyada federaalka soomaaliya, qof kasta wax alaala wixii kusoo dhaca bulshada intuu lasoo hor istaago oo uu siduu rabo ula hadlo, xoogaha waxay ka hor imanaysaa wixii aan ka shaqaynaynay oo ahyd dastuurka "base"kiisu inay ahayd shareecada islaamka.

- **Qodobka 17 (2)** waa la tiray waxaana lagu sheegay qodobka 34aad oo imaan doono farqadiisa 2aad ayaa faahfaahinaysa, waxayna ahyd xurmada hoyga, qodobka 2aad waxa waajib ah in amarka garsooraha si toos ah loogu akhriyo daganaha hoyga, baarahana waxa ka reeban ku xadgudubka sharciga, meeshan waa laga tiray oo wuxuu Guddigu soo jeediyay in farqadan la tiro, waxaan qabaa anigu in farqadaan lasoo celiyo, farqada qodobka 34aad waan fiiriyay sidan farqadan u qorantahay uuma faahfaahsana, waa sax qofka waa lasoo eedayn karaa danbi waa lagu heli karaa laakiin mar haduu gurigiisa ku jiro warqadii lagusoo xukumay inta loo akhriyo dambigaana lagugu haystaa sidaas darteedaana laguu xirayaa in la dhaho oo aan meeshaan laga tirin, qodobka 34aad markaad tagto ayaad ogaan doontaa sidan uuma qorna, waxaan qabaa oon ku kordhinayaa markaa aragtidayda, in sideeda lagusoo celiyo oo aan laga tirin, waad mahadsantihiin salaamu caleykum.

8) **Xil. Abdulkadir Sh. Ali Adan:**
Salaamu caleykum, waad mahadsantahay mudane Guddoomiye, bini aadamku wuxuu ku fiicanyahay marka isaga la dhagaysto inuu wax dhagaysto, laakiin intay iska hadlaan dadku hadana meesha iskaga tagaan xoogaha waa laga fiicanyahay waayo adiga waa lagu dhagaystay oo waa laguu fadhiyay waxa fiican inaad adigana wa xoogaha dulqaadatid ood fadhiisatid ood dhagysatid, markaan sii galo barnaamijkayga marka aad fiirisid "page"ka 13aad xoogaha sixitaan yar baan rabaa inaan sameeyo, Guddigu wuxuu diyaarinayaa cilmi baadhis dheer oo tilmaamaya aragtida, waxa ku qoran meesha **madahaahibta** waxaan u malaynayaa in loola jeeday **madaahibta** markaa xoogaha "type error"kaasa meesha ku jiree marka uugu horaysa in meeshaas la saxo waan rabaa.

- **Qodobka 11 (1) iyo (2)** waxa qoran, iyadoon loo kala eegayn lab iyo dhedig ayaa qoran, waxaan ku waafaqsanahay raysalwasaare ku xigeen Mahdi Guuleed, in laga dhigo **lab ama dhedig**, waxa kaloon qabaa soomaali dhamaanteed inay tahay muslim sidaa daraadeed laga saaro, iyadoon loo eegayn diin meesha ah, eraygaas diinta in meesha laga saaro oo uu u qornaado, muwaadiniinta dhamaantood iyadoo aan loo eegaynin lab ama dhedig, midab, xaalad bulsho ama dhaqaale iyo afkaar siyaasadeed, sidaas inuu u qornaado, maadaama ay dadku wada yihiin muslim waaa inaan lagu muujinin diinta meesha waayo waxaa imaan karto khilaaf kaloo diimeed inay meeshaas ka timaado, farqada 2aad na markaad fiirisid waa sidaas sida ay u qorantahay markaa waa in eraygaasi si aad ah loo saxo.

- **Qodobka 11 (4)** ee dadku walwalka badan ay ka muujiyeen oo lasoo jeediyay waliba in faqradaan ay cusub tahay hadana walwal badan laga muujiyay, waxa la dhahay qof maqaam ama maamuus uu leeyahay awgeed ugama baxsan karo, ani hada xildhibaan ayaan ahay hadaan dambi oo "folegaranso" ah oo la arko aan galo waxay noqonaysaa miyaa inaan laysoo qaban ama laysoo eedaynin ama dacwad madani ah aan laygu qaadin?, qofka waa shakhsi muwaadin ah xaq baa loogu leeyahay in dacwad madani ah lagu qaado marka inuu ka baxsado cadaalada iyo xasaanadiisa ka reebaysa waxoogaha waa laga fiicanyahay, waliba anigu waxaan ku xoojinayaa in lagu daro, lagumana difaaci karo, shakhsiga dambiga galay xasaanadiisa laguma difaaci karo haduu dambi galo waxaan qabaa in dambiga sida uu yahay loogu qaado.

- **Qodobka 13** waxa qoran soo ridida ilmaha waa arin kasoo horjeeda shareecada islaamka waa sax wayna reebantahay, hadii ayna keenaynin ayaa lagu qoray, eraygaas aad ayaa loo sahlay oo la yiri ayna keenaynin, anigu waxaan qabaa in laga dhigo ayna jirin, hadii laga

dhigo ayna keenaynin waa wax iska fudud, oo dhakhtar ama labo ayaa go'aamin karaan, markaa waxaan dhihi lahaa hadii ayna jirin xaalad caafimaad oo aan looga maarmin badbaadada hooyada, markaa in qodobkaas isagana sidaas loo qaato

- **Qodobka 14(3)** markaad fiirisid waxa qoran qof kasta wuxuu xaq uleeyahay badqabka jirkiisa waana laguma xad-gudbaan, qofna laguma samayn karo tijaabo dhakhtareed ama mid cilmi baaris ogolaansho la'aantiisa, hadii qofku shakhsiyan awood u lahayn inuu wax ogolaado waa in la helaa ogolaanshaha xigtadiisa, meeshaas xigtadiisa waxa ka horeeya waalidkiisa labadiisa waalid ayaa ka horeeya hadii la waayo waalidkiisa xigtadiisa in lasoo raadiyo waa macquul laakiin waa in la idhaahdo, waa in la helaa ogolaanshaha waalidkiisa markaa insha Allah waxaan rajaynayaa in iyadana la qaadan doono talo soo jeedintayda oo xigtada lagu badali doono waalid.

- **Qodobka 15** waxa qoran qof kasta wuxuu xaq uleeyahay inuu ku biiro dad kale, waan fahmi waayay anuu dad kale, waa la dhihi karaa xisbi kale, ururro kale waa macquul laakiin in la idhaahdo dad kale xoogaha waxay u baahantahay iyaduna fasiraad dheeraad ah ama in la ogaado waxa looga jeedo dad kale.

- **Qodobka 16 (2)** qof kasta wuxuu xaq uleeyahay inuu si xor ah uugu bandhigo aqoontiisa waa sax ama hal abuurkiisa faaf-reeb la'aan, anuu waxaan qabaa in lagu daro qof kasta wuxuu xaq uleeyahay inuu si xor ah usoo bandhigo aqoontiisa**, cilmi baaristiis**a waayo waxa laga yaaba qofka inuu sameeyo "research" oo uu cilmi baaris sameeyo waxyaabo cusub uu soo helo markaa inaan faaf-reeb lagu samayn karin in lagu daro cilmi baaristiisa.

- **Qodobka 17** oo markii hore ahaa qodobka 19aad oo lagusoo celceliyay, **farqadiisa (2)** waxa loo qoray, waxa waajib ah in amarka garsooraha si toos ah loogu akhriyo degenaha guriga baarahana waxa ka reeban ku xad-gudubka sharciga, waa qodob dastuuriya, sharciya oo umada dhan anfacaya oo runtii aad u fiican waxaan soo jeedinayaa sida walaalahayga xildhibaanadii iga horeeyay ay sheegeen in dib loosoo celiyo oo sidiisii loosoo celiyo qodobkaasi oo meesha laga saaaray ama la tiray, waxaan rajaynayaa intaasay ku dhantahay talo soo jeedintaydu maanta aad ayaad u mahadsantihiin,

9) **Xil. Dr. Mohamed Sheikh Ahmed Mohamed:**

Guddomiye, shir guddonka, xildhibaanada sharafta leh iyo Guddiga asalamu caleykum waraxmatullahi wabarakaatu, waxaan kaga qayb qaadanayaa dooddan maanta cutubka 2aad marka koobaad waxaan bogaadinayaa runtii dastuurkeena sida uu u qeexay meeshan xuquuqda aadanaha hordhaceeda.

- **Qodobka 10** si cad buu wuxuu uugu qeexay maqaasida shareecada islaamka runtii oo ku salaysan xuquuqda uu insaanku leeyahay waxa gundhig u ah Allah sw karaamo uu siiyay oo uu isagu hibo u siiyay ayay ka imanaysaa, maaha falsafada reer galbeedka, qofku uu isagu sidiisa xuquuqda u leeyahay, arintaasi waa muhiim, maqaasida islaamka markaad eegto oo ay dadku wada yaqaanaan oo uu mar dhawayd Guddomiyuhu inoo tirinayay oo ah "xifdu diini, wa nafsi, wa nasli, wal caqli, wal maal" shantaas waawayn oo aadka loo sheego sadex kamid ahi waa bini aadamka laftiisa, maxaa yeelay nafta bini aadamka, caqligiisa iyo tarankiisa sadexdaasiba waa bini aadamkii kaliya waxa soo hadhay shaqadii uu qaban lahaa oo diintii oo khilaafadii,cibaadadii iyo cimaaraadii" ahayd iyo wixii uu kaalmaysan lahaa oo maalkii ah labadaasaa shan ku ah markaa maqaasida shareecada sadex ka mid ah in bini

aadamka laftiisa uu noqdo waxay astaan u tahay karaamada Allah sw bini aadamka uu huwiyay markaan u imaado qodobada.

- **Qodobka 11 (1) iyo (3)** erayga diin ayaa kusoo noqnoqonaysa, waxyaabaha laysku faquuqi karo oo lab iyo dhedig, naafonimo, iyo xaalad bulsho iyo aragti siyaasadeed la xidhiidha ayaa waxa lagusoo daray diin, marka taas waxay ka dhigantahay in wadanka diimo kala duwani ay ka jiraan oo qaarkood qaar kale ay faquuqi karaan qaar kalena ay sareeyaan, macnahaasina sax maaha kama jiro wadanka markaa waxa sax ah in erayga diin laga gooyo labadaas faqraba laakiin waxa jiri kara aragti diimeed baa jiri karta oo lagu faquuqi karo dadka, waayo aragtiyo kala duwan iyo madaariis iyo madaahiib baa kala jira fikri ah, markaa kala aragti duwanaasho diinti dhexdeedi ah waa lagu faquuqi karaa, waa suufi, waa salafi, waa akhwaan iyo waa hebel iyo waa qolo hore iyo waa qolo dambe. hadii markaa qolada xukunka haysata ay qolada kale faquuqaan waa wax dhici kara laakiin waxan qabaa meeshaas in lagusoo daro meeshaas afkaar siyaasadeed ama mid diineed halkaas in la raaciyo oo afkaarta siyaasiga ah labada meeloodba way ku jirtaaye in la raaciyo **fikir diini ahna inaan lagu takoori karin**, laakiin diin asal ahaan laysku takoorayo meesha ma yaalo.

- **Qodobka 11 (4)** farqadan lagusoo kordhiyay oo ah ruuxna in maqaamkiisa iyo maamuuskiisa uusan uuga baxsan karin in lagula xisaabtamo dambiga waan soo dhawaynayaa, aniga waa ila qurxantahay hadii xaasaasiyad laga qabana dadka ka qabaayi ha sheegaan wixii lagu xidhi lahaa, laakiin ruuxna dambi in lagu qaado maqaam kasta oo uu lahaado oo uusan ka waynayn aniga ahaan mabd'a sax ah weeye.

- **Qodobka 12 (1)** qaybta soo jeedinta Guddiga ay soo jeediyeen, nooc iyara fasaaxad daro ah ayaa ka muuqata oo erayga "kasta kasta kasta" ayaa sadex jeer kusoo noqonaya, wayna jirtay arintaasi oo cutubkii 1aadna meel waxa jirtay sidanoo kale ah oo erayga "kasta kasta"ah ay afar jeer kusoo noqonaysay, markaa si fasaaxa leh haloo siiqeeyo macnuhu dhib kale ma qabee.

- **Qodobka 12 (3)** oo ka hadlaysa xuquuqda lagu aqoonsaday cutubkan sharci uunbaa lagu xadidi karaa sida ku xusan qodobka 38aad, hadiiba ay halkaa ku xusantahay waa meesheeda laakiin waa fiicantahay meeshan mabaadi'da in lagu sheego oo in sharci ama xeer mooyee aan si kale loo baabi'in karin markaa faqradaa in layska daayaan qabaa.

- **Qodobka 14** ee la gooyay waan ku raacsanahay hada macno badan masoo kordhinayo oo meel kale ayaa lagu sheegay wixiisii .

- **Qodobka 14** ee cusub **F(4)** oo ka hadlaysa gudniinka gabdhaha oo senator Samsam ay ka hadashay mar dhawayd ,waxa lagu xidhay gudniinka fircooniga ah waxaad ogsoontihiin gudniinka si ahaan shareecada islaamka "shacaa'irta" ayuu ka mid yahay, raga inuu waajib yahay iyo inuu sunne yahay labadaba madaahibtu way qabaan, dumarka laakiin gudniinkooda taqriiban mad habka shaaficiga oon inagu haysano ayaa wuxuu qabaa inuu waajib yahay laakiin madaahibta kale ee islaamku inta badan waxay qabaan inuu wax iska baanaan yahay ama sunne inuu yahay ama caado fiican inay tahay, dunida islaamka markaan sidaa u jaleecno "caalamul islaam" dadka aan islaamka ka eeganaynay ee asalka u ahyd carabta ama khaliijka ha noqdeen ama waqooyiga Africa ha noqdeene "caalamul islaami" wax gabdhaha guda waxa jira Masar, Sudan, Soomalia, Moritania, iyo Jabuuti intaasna gudniin fircooni ah ayay u isticmaalaan, dadka kale gabdhaha ma gudaan markaa su'aal wayn oo si saxa in loo dul istaago u baahan weeye, marka la yidhaahdo marka

gudniinka fircooniga ah hala diido, cilad waxa imanaysa anagu gudniin kale miyaan naqaana horta?, dad yar ma ogi oo dhulkaas xeebaha ah inay yaqaanaan waa laga yaaba laakiin anagu gudniinka fircooniga ah uunbaan naqaanaa dadka hawshaas qabtaana gudniin fircooni uunbay yaqaanaan markaa gudniin fircooniyaa la diiday hadii la idhaahdo oo mid sunni ah baa la ogolyahay, haye kii sunniga ahaa uunbaan gudaynaa bay iska odhanayaan markaa dhibkiina waa halkiisii uunbuu joogaa, arintaasi markaa waxay u baahantahay in xisaabta si fiican loogu daro oo hadii aan la xadidi karin oo halbeeg ama aalad ama xeerar xadidaya hadaysan jirin in la xaqiijin karo in dadka inta lasoo tababaro oo dad dibada laga keeno oo la baro gudniinku muxuu yahay oo markaa kadib hirgalintiisana dawlad damaanad qaada hadaan la xaqiijin karin, in sidiisa layskaga daayaaba la qaatay oo gabi ahaanba layska dhaafo oo dunida islaamka waxaan dhaafini anaga na dhaafi maayaane layska daayo.

- **Qodobka 17** ee la gooyay ayaan rabaa inaan faahfaahin yar ka bixiyo oo dood dheerna dhaliyay oo ku saabsan xoriyada diinta iyo caqiidada, horta qodobkani waa qodob halbeeg u ah dasaatiirta dunida oo dhan oo lagu qiyaaso in inteele'eg buu dastuurkaasi macno samaynayaa oo xoriyaadka iyo xuquuqda uu u ilaalinayaa dasaatiirta dunidoo dhan, taasi waa mida keentay markaa dadkii inoo samaynayay inay qodobkan sooqaataan, markay sooqaateen maadaama uu halbeegi dasaatiirta uu yahay ayaa wax aka hor timid "ishkaaliyo" ah anagu diin kale ma lihine maxaa la tixgaliyaa oo xoriyada la ilaalinayo maxay tahay markaa ,taasna waxay ku qasbanaadeen inay ku ladhaan faqro kale oo odhanaysa diin aan diinta islaamka ahyn lama faafin karo, maloo baahnaa markaa aslan, waa sax dunida halbeeg buu u yahay laakiin anagu waxaan leenahay astaamo aan kaga duwanahay dunida kale oo dhan, dalkeenu boqolkiiba boqol waa islaam diin kale oon aqoonsanahay kama jirto, dad tuugo ahi waa jiri karaan, sidaas daraadeed dhibka ah waxa loo baahanyahay "xoriyatu diin iyo caqiido" inama haysato ,markaan muwaadiniinteena soomaaliyeed ka hadlayno ,markaa waan kaga duwanahay Saudi iyo Morotania iyo dalalka aan lagasoo dheeganin dasaatirta marka lagasoo tago lkn wadamad "caalamul islaami" ee lagasoo dheegto dasaatiirta iyo kuwa kaleba diimo kala duwan ayay leeyihiin in la tix galiyana way ku khasbanyihiin ,anaga baahidaa ma qabno markaa dastuurkana waxaa la rabaa baahida bulshada soomaaliyeed inuu ka turjumee inuu ka turjumo baahida dunida maaha, qodobkaasi marka baahideena kama turjumayo, waxa intaas dheer labo qolo oo dhib nagu haysa, labaduba qodobkaas ayay haystaan oo ay cuskanayaan, qolo waa qolodan khawaarijta ah een la dagaalno oo waxay leeyihiin dastuurkiina iyo dawladiinuba waa murtad oo wuxuu dhigayaa in qofku diinta uu doono haysan karo oo uu ku dhaqmi karo qodobkaasay haystaan, qolo kale oo waxa jirta iyaga kasoo horjeeda waa dadka soomaalida ah ee asal ahaan islaamka u ah ee gaaloobay ee riddoobay waxayna haystaan iyaguna qodobkanaa noo fasaxaya in diintii aan doono aan qaadano, labadaas qolo ee dhibka nagu haysaa labaduba qodobkanay daliishanayaan, sidaa darteed wax baahi ah oo qodobkan loo qabo ma jirto labadiisa faqro midnaba , dhib wax aan ahyn oo uu keenayaa ma jirto, waxa kuusoo hadhay dad waxa jira aan soomaali ahayn oo ajaanib ah oo diimo kale haysan kara oo wadanka siyaabo kala duwan u dagi kara shaqo u iman kara oo ku noolaan kara, dadkaas ma loo ogolyahay inay diintooda ku cibaadaystaan?

  Haa, hadii kuwaas loola jeedo hala cadeeyo oo hala idhaahdo dadka ajaanibta ah een soomaalida ahyn ee wadanka ku nool waxay xaq uleeyihiin diintooda inay ku cibaadaystaan halagu qoro, hadaan la huraynin hala idhaahdo ruux kasta oo soomaali ah oo muslim ah waxa waajib ku ah diintiisa islaamka inuu ku dhaqmo faqrada 1aad halaga dhigo, faqrada 2aadna ruux kasta oo ajaanib ah oo wadanka si sharci ah ku jooga wuxuu xaq uleeyahy inuu

diintiisa ku cibaadaysto maxaa yeelay diinta in lagu dhaqmo xaq maaha waa waajib farqigaasa u dhaxeeya, intaasaan kaga baxayaa waad mahadsantihiin.

10) **Xil. Mohamed Muhumed Mohamed "MMM":**

Bismilaahi raxmaani raxiim, Guddoonka, xildhibaanada sharaftaleh iyo marti sharfta kale awalan aslaamu calaykum wa raxmatulaahi wabarakaatu, Waxaan islaahey maanta qodobada aynu ka hadlayno ama cutubkan ciwaankiisu waa xuquuqda iyo waajibaadka muwaadinka, inta badan markaad akhriso waxaa la rabaa wuxu markaa isku dheelitiran yihiin, xuquuqaadka dadku ay leeyihiin iyo waajibaadka dadka laga rabo, tusaale ahaan marka la yiraahdo qofka laga hadalayo xoriyadiisa waxa muhiima inay u fahansanahay qofka xoriyadiisu intay le'eg tahay, wax iska mudlaqa oo iska furan miyaa xoriyadiisu, mise xayndaab ay ku eeg tahaa jira, waxaa la yidhaahdaa inta badan qofka xoriyadiisu waxay ku dhamaataa meesha qofka kale xoriyadiisu ayka bilaabmayso, inaad intaad idaacada iska soo hor istaago waxaa doonto aad tiraahdo dadka cirdigooda iyo sharaftooda aad ku xad gudubto oo tiraaahdo xuquudii saxaafadu ii ogolaatay ee xoriyada ahayd ayaan waxaan doono ku sheegayaa sax maaha, markaa inta badan waxaa la rabay "chapter"radan in xuquuqdana la cadeeyo waajibaadka qofkana la raaciyo si fahan fiican meeshaa looga qaato, markaa inta badan waxaad moodaa waxyaabihii waajibaad koodhan way ka yara maqan yihiin, inta badan hadaad fiirisaan chapterka intiisa badan ciwaanka waajibaadka waa ku jiraa, laakiin meelo uu ku xusan yahay oo badan ma jiraan, markaa insha allah guddiga waxaan dhihilahaa sida xuquuqda loo sugayo ,hadana waajibaadka muwaadinka inay meesha ka muuqato inay tahay wax sax ah, wax sax ah markaan leehay tusaale ahaan , waxa sidookale la yidhaahdaa maxaa sax ah maxaase khalad ah ,waxa sax ah iyo waxa khalada waxaan ku jaangooynaynaa waxaan isla garano, sababtoo ah waxa qofka kale sax u ah waxaa laga yaabaa inaan qalad u arko, aduu waxaad khalad uragtana sax u arko , markaa "that is why" loo waxeeyaa waxyaabaha "constitution" ka ama "social cotracts" ha la dhaho ama waxa dadku heshiis ku yihiin, oo ay ka heshiiyeen waxan haduu khalad yahayna khaladnimadooda sax haduu yahayna sax ahaantiisa, markaa taas in la isku "balance" gareeyo waa midaa ,markaa hadaan u galo cutubkan qodobka 10 ilaa 20 waa in iska yar , kaliya markaa waxaan Ayyidi lahaa xildhibaano hore oo hore uga hadlay Qodobka 11(1).

- **Qodobka 11(1**) erayga diinta xildhibaan baa soojeedshay in erayga in meesha laga saaro barako ayuu ahaa baan jeclahay, maadaama la tiray kii kaleeto, markaa waxaan dhihi laahaa maadaama maqaasideena iyo shuruucdeena chapterkii 1 aad qodonkiisa 2 aad Farqada 1,2 iyo 3aad intaba cadynaso dalkan diintiisa waxaan lagu faafinkarin, madaama ay cadaynayso muhiim maaha meeshan in lagu xuso, hadiise lagu xuso sida xildhibaan Mahdi sheegayey dad waxaa jira dhakhaatiira , macalimiin noqon kara oo "technician" ah oo wax badan wadanka u qaban kara, dadkaa xuuqdooda hadii meeshan lagu sugana qodobkii kaleeto ee meesha ku jiray in la tiraa maahayn ,markaa si la isku "balance" gareeyo in laga saaro qodobkaa waan soo jeedinayaa, sidoo kaleeto isla qodobkan hada ka horna waa laga hadlaan u malaynayaa waxyaabaha wali qoran waxaa ka mida xeerka hortiisa, meelaha xeerka hortiisa in **sharciga hortiisa** lagu bedelo oo eray bixintaas loo sameeyo.

- **Qodobka 11(3)** waxay u qoran tahay sidan anuu kolay inaan fahmaan isku dayey waa fahmi waayey, waxay u qoran tahay waa inaan loo arkhin fal takoorida barnaamijyadada dawlada sida xeerka hab siyaasadeed, hab maamuleed oo loo qorsheeyey in sinaan buuxda lagu gaadhsiiyo dad ama koox hore loogu geystay

takoorid ama ku sugan xaalad dib u dhaceed; Waxaan isleehay waa qodobka 11(3) arintan markaa inta badan dastuuradu wax heshiisa oo dadku iyagoo wada fadhiya ay wada qortaan ayey ku fiican yihiin laakiinse "cut and paste" markuu yahay oo meelkale wixii laga soo min guuriyo, waxaad soo guurinaysaa waxyaabo aan adiga ku khusayn, Eraygan ama Faqradan waxaa loo soo guuriyey dadkii red indian ka ahaa oo la laayey dhulkoodiina la qaatay, markaa xuquuq gooniya in dawladu mar walba gooni u siiso, waxaa ognahay ummada soomaaliyeed taariikhdeeda anagu dad intaa la takooray la cunsuriyeeyey waxoodiina la qaatay xaquuq goooninya maanta dawlada ku leh, ma filayo inay jirto, hadaan nahay soomaalida dhaqanka naga, waa laga yaabaa dadku inay iska "apply" gareeyaan, barnaamijkan ama qodobka faahfaahin saxa halaga bixiyo ama meesha halaga saaro, hadii kale waxay noqonaysaa qodob sidii la doono loo adeegsan karo hadhaw, oo bari ka maalin qofka "executive" haduu rabo degaan inuu wax gooniyasiin karo ama wasiiro gooniya siin karo ama horumar gooniya siin karo ama uu lee yahay dadkaa waa la faquuqay ama xuquuq gooniyey leeyihiin sharciganaa idiin cadaynaayo uu dhihi karo, markaa dastuurku inuu noqdaa wax qeexan oo qof walba fahmi karo, sidan si ka badalan hadii loo qoro oo faahfaahsan, waxaa jiray hada ka hor markii nidaamkan federaalismka laqaatay in layidhi si gobolada la isku soo gaadhsiiyo , gobolada dib u dhacoodu uu hooseeyo waa in lasoo gaadhsiiyaa gobolada kale, tusaale ahaan, hada soomaaliyoo kaleeto markaad eegto meelaha dib dhacu kajiray dhinaca horumarka wax yaabihii dawladu qabanaysay oo kale waxaa ka mida gobolka bakool iyo gobolka Gedo, tusaale ahaan waxay xaq u leeyihiin barnaamij horumarineed haduu yimaado oo wado ah, waa meelaha ugu xaqa leh, sabobtoo ah meel wada leh oo ama waxa la dhaho oo wax laga sameeyey laguma celin karo ilaa meel u baahani ay jirto, wado hala sameeyo hadii wadankan la yiraahdo waxa la eegayaa yaan wado loo samayn sideedaba, gobolada aan wax wado lahayn way ka xaq leeyihiin gobolada kale, markaa qodobo noocaas oo kaleeto ah asal ahaa waa laga dhigikaraa, laakiin Sida ay hada u qoran tahay anu waxaan dhihi lahaa wax halaga bedello.

- **Qodobka 14 1aad iyo 2aad** xuquuday ka hadlayaan labadaba waxaad moodaa markaad macnahooda fiiriso labadaba way isku laalaabanayaan markaa in la iswaafajo waxyaabaha erayada carabiga ah ee ku jira hadii eray soomaali ah laheli karo, sidoo kale waxaa ku jira erayga ***cunfiga ah,*** eraygaa cunfiga ah in soomaali ahaan loo helikaro ayey ani ila tahay, markaa erayadaas in labadalo oo erayo soomali ah oo la fahmi karo laga dhigo insha alaah, hadii loo heli karo.

11) **Xil. Dr. Elmi Mohamed Nur:**

Bismilaahi laahi raxmaan raxiim, Guddoonka sharafta leh xildhibaanada dhamaantiin waad salaaman tihiin, asalaamu calaykum waraxma tullaahi wa barakaatu, waxaan umalaynayaa muwaadiicda maanta oo ku kooban arrimaha xuquuqda, isla markaana qayb kamida cutubka anuu waxaan ka eegayaa tootoosin yaroo kookooban oo aan kolay badnayn.

- **Qodobka 10 (3)** ee karaamada aadamaha ah waxaa qoran: qofna lama adoonsan karo xoogna looguma shaqaysan karo lagamana ganacsan karo shaqana laguma qasbikaro, waxa soo noqnoqotay xoogna looguma shaqaysan karo shaqana laguma qasbikaro markaa laba macna kaliya uun bay bixinayaan, markaa in la soo celceliyo waxaa ka haboon in halmar lagu dhawaaqo oo la yidhaahdo **qofna lama adoonsankaro xoogna loogama raadinkaro xog oo wax khasaba lagama keeni karo, lagamana ganacsan karo shaqana laguma qasbikaro ujeedo kasta ha laga lahaadee** , markaa arrinta soo noqnoqotay ee shaqada in laguma shaqaysan karo in laga saaro oo shaqana laguma qasbikaro kaliya ay markaasi

noqoto, maxaa yeelay qofku haddii uuna ikhtiyaarkiisa ku shaqaynayn qof xoog loogu shaqaystuu noqonayaa.

- **Qodobka 11(1)** ee sinaanta ka hadlaaya muwaadiniinta oo dhan iyaga oo loo eegin erayga takoor baa soo noqnoqday markaa iyada laftideedana waa la toosin karaa waxaa la orankaraa **iyadoon lagu kala takoorin lab iyo dhidig oo kale**, waxa kaloo soo noqnoqday erayga qabiil, dhalasho, isri, intaasiba way isku wada dhaw yihiin markaa in qaarkood la qaato waxay haday "over labing" badan isku noqdaan macna badan ma samaynayaan, markaa ama halayidhaahdo dhalasho iyo isir midkii lagu daayaaba ama qabiil iyo isirba hala yidhaahdee waxaan is leehay saddexda eray isma wada qaadan karaan, waan ku waafaqsanahay arrinta kale takoor ee **diina** in laga saaro meesha.

- **Qodobka (3)** waxaa qoran waa inaan loo arkin, shuruucdu ma qorto waa inaan loo arkin, qofku inuu u arko maaha in la yidhaahdo oo sidaa soo kale loo dhigo maaha, ee waxa weeyi meeshu inaany takoorba ahaynba la qeexo oo la yidhaahdo, fal takoorida ah ma noqonayaan barmaamijyada dawlada ee loo qorsheeyey in sinaan buuxda lagu gaadhsiiyo qayba bulshada ka mid ah oo ku sugan xaalad dib u dhacsan, markaa barnaamijyada qaarkood marka dadku geediga horumarka la wada jaan qaado dadka baa dib u hadhaya , markaa barnaamijyo la isku soo gaadhsiiyo waa in lahelaa, mesalan daryeelka caruurta iyo dhalaanka hooyada, dadka da'da weny leh waxaas oo dhan hadii barnaamijo gaara loo sameeyo oo lagu soo gaarsii daryeelkooda iyo horumarkooda lagu soo gaadhsiiyo takoor maaha , in markaa barnaamijyada anu waxaan idhi fal takoorida ma noqonayaan barnaamijyada dawlada sida shuruucda iyo hab siyaasadeedka iyo hab maamuleedka waxaasi macno weyn ma samaynayaan, barnaamijyada dawladda ayaa ku filan ee loo qorsheeyey in sinaan buuxda lagu gaadhsiiyo qaybo bulshada ka mid ah, lagana saaro dad ama kooxo hore loo takoori jiray, inagu ma lihin dad hore loo takoorijiey oo sidaa soo kale dib u dhac nuucaaas oo kale ku jiro, ee waxa weeyaan qaybo bulshada ka mid ah oo ku sugan xaalad dib udhacsan, in horumar lagaadhsiiyo taas uu baa muhiima.

- **Qodobka 12 (1)** waxa qoran hay'adaha dawladda heer federaal iyo heer dawlad goboleed ba xisbiyada siyaasadeed ururkastoo gaar loo leeyahay, ururka gaar looma yeesho, ururku waa wax umadd ka dhexeeya weeye oo dad ka dhexeeya markaa ina layidhaaahdo **hay'ad kastoo gaar loo leeyahay, hay'addaha iyo company yada gaar loo yeelan karaaye**, hadii bulsho wax ku ururto wax gaara markaasi uma muuqdo, markaa waxaan odhan lahaa haya'add kastoo gaar loo leeyahay, hayadkastaa iyo qofkastaa waa inay uwada hogaan samaan markasta xuquuqda aasaasig iyo xoriyaadka lagu aqoon saday cutubkan waxaan odhan lahaa inay u hogaansamaan xuquuqda maaha, inay marstaba u hogaansamaan dhawrista xuquudda waa inay u hogaaansamaan, laakiin inay xuquuda u hogaansamaan maaha macnaheedu.

- **Qodobaka 12(2)** dawladu waa inay mar walba ilaalisaa damaanad qaadaa hirgalinta iyo ku dhaqanka xuquuqda asaasiga ah iyo xurriyaadkaba, waxa runtii ah inay xukuumadu damaanad qaado ilaanta, waxay damaanad qaadaysaa ilaalinta weeyi waa inay markasta damaanad qaadaa ilaalinta iyo hirgalinta ku dhaqanka xoriyaadka, kalma xoriyad baa soo noqnoqotay marna xoriyad labada waxaa kala qoran xoriy oo (o) haddana dhexda waxaad ka arkaysaa xuriyadaad oo (u) xuriyad in la is waafajiyo iyada laftigeeda. **Hadii aan u gudbo madaxa labaad ee xuquuqda iyo xoriyaadka**

- **Qodobka 13( 3)** ***qodobka xaqa nolosha*** waxaan ku waafaqsanahay sidii loo yidhi arinta ah sooridida ilmuhu waa arin kasoo horjeeda shareecada islaamka waana reebantahay , hadii layidhaahdo sooridida ilmuhu waa reebantahay baa ku filan kaliya, beacuase dastuurka oo dhani shareecada ayuu u quduucayaa hadii aysan jirin waa ku waafaqsanahay xildhibaanka yiri xaalad caafimaad oo waliba maaha guddi dhakhaatiira maaha dhakhtar lagu kalsoon yahay kalsoonidu waa wax qalbiya dhakhtar awood ama aqooneed ama sharci u leh, aqoon sharci awoodu waa mid aqooneed iyo mid sharci uhaysta uu arintaa sameeyo.

- **Qodobka 14(2)** xoriyadda nabadgalyada iyo qofnimada waxaa qoran qofkastaa wuxuu xaq uleeyahay aminga qof ahaantiisa iyo hantidiisa qofna looma gaysan karo qaabkastoo jirdil ah ama fal bani'aadamnimada kabaxsan, erayga fal bani'aadam nimada ka baxsan wax la qiyaasi karo maaha markaa sidaa darteed meesha kuma habboona , jirdil uun in lasameeyo waxaana reeban inta kale waa okey.

- **Qodobka 15** xoriyada ka mid noqonshaha qofkastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu ku biiro inuu abaabulo ama ku biiro koox ama dad kale , dad kale halkii kaliyah laga oran lahaa koox ama dadkale ayuu noqonkaraa, sida ururo ,shaqaale ,xisbiyo siyaadasdeed wuxuu kaloo xor u yahay inuusan cidna ku biirin inataasi looma baahnaan leehay, lagumana khasbikaro inuu cid ku biiro taas baa kufilan mar hadaan cidna ku khasbi karin inuu cidkale ku biiro dee xorbuu u yahay inuu cidba ku biirin "Automatically" bay iska muuqataa, markaas uma baahna in taas la sii bayaamiyo.

- **Qodobka 18 (1)** qofkastaa wuxuu xaq uleeyahay inuu abaabulo kana qayb galo kulamo ama banaanbax oo lagu muujinayo si xasilooni ah cabasho ama taageero iyadoon aan ogolaasho lagu xidhin, iyadoo ogolaansho loo baahnayn baa qornayd **iyadoo ogolaansho lagu xidhin** ayaa kaga habboon, si waafaqsan xeerka jamhuuriyadda baa qoran waxaa fiican xeerarka dalka.

- **Qodobka 19** xoriyda iskusocodka iyo degenaanta waxaan is leehay **faqrada (1)** Qofkasta oo dalka sifo sharci ah ku jooga inuu dego meesha uu rabo kuna dhex socon karo dalka gudihiisa si xor ahna uga bixikaro dalka goortii uu doono, arintaa si xor ahna uga bixi karo dalka markii uu doono, waxay ku cadahay **faqrada (2)** markaa soo celcelinta iyada lafteedu ma habboona maxaa yeelay **faqrada (2)** waxay dhahaysaa muwaadinkastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu si xoriyada usoo gali karo uga bixi karo baasaboor qaadan karo markaa **faqrada (1)** inaad ku sheegtaa runtii waxay noqonaysaa kusoo celcelin.

12) **Xil. Abdirashiid Mohamed Duale:**

Mahadsanid Guddoomiye, xildhibaanada sharafta leh waan idin salaamayaa asalaamu calaykum waraxmatullaahi wa barkaatu, ma badinaayo qodobada muhiimadooda waa laga hadlay waxaan filayaa cutubka 2aad ciwaankiisu waxaa weeyi mabaadiida guud ee xuquuqda asaasiga ah iyo waajibaadka muwaaadinka, runtii waa mawduuc aad muhiim u ah wuxuuna tilamaamayaa xuquuqda asaasiga ah ee qofka muwaadinku uu leeyahay iyo waajibadka laga rabo waa "rights and duties" labaduba laakiin sida meesha ku qoran soo jeedinta waxa kaliya ee laga hadlayo waa xuquuqihii asaasiga ahaa laakiin waajibaadkii laga rabay qofka muwaadinka ah kuma cada kolay waxaan umalaynayaa in qaybakale loo wareejiyey ama cutubyo kale ama qodoba kale sidaan filaayo qodobka 41 baan ku arkaayey haday timaado xuquuq waa jibaad baa imaanaaya qofkii muwaadina waajibaad baa lagu leeyahay waa inuu "tax payer" noqdaa, waa inuu dalka difaaciisa ka qayb qaato, waa inuu

"environment" ilaaliyo, kolay waxa ah waxyaaba haasoo dhan marba hadii ciwaanka lagu soo qoray in lasoo raaciy waajibaadkii "duties"kii qofka muwaadinka ahna laga rabay waa inay iyaguna cadyihiin oo meesha ku jiraan oo qodobka ku jiraan way ahayd, taa markaa guddigaa inoo faahfaahin doona meesha qaybta ay ku soo dareen, laakiin halkan hada kuma jirto wax cad oo tilmaamaya waajibaadkii laga rabay qofka muwaadinka ah, xuquuqaha asaasiga ah oo halkan ku tilmaaman waxaa ka mida ah,

- **Qodobka 11(1)** muwaadiniinta oo dhan iyaga oo aan loo eegin lab iyo dhedig, diin, midab, xaalada bulsho ama dhaqaale ama afkaar siyaasadeed, qabiil iyo naafanimo, arintaa waxaan filayaa inaga dastuurkeena horta waxaa "base" u ah shareecada islaamka waxa sooraaca waa anaga dhaqankeena, labadaas baa "base" u ah hadii markaa aan u fiirino qodobkastoo oo ku jira waxyaabaha xuquuqda asaasiga ah ama dimuquraadiyada dalalka kale ay ku dar sadeen dastuuradooda oo in taan soo min guurino aan ku darno dastuurkeena,oo aan soo qaadano oo aan niraahno waa xuquuqaha asaasiga ah oo qofka muwaadinku leeyahay ,waxyaabo badan oo dhaqankeena ka hor imaanaya oo diinteena ka hor imaanaya ayaa laga yaabaa inay qayb ka yihiin ,waxaan qabaa markaa arinta ku saabsan *muwaadiniinta oo dhan iyadoon loo kal eegayn, lab iyo dhidig,diin* taa markaa arinta diinta ina laga saaro sababtoo ah qofkastoo muwadin ah oo soomaali ah diintiisu waa islaam, diinta islaamkuu haystaa, hadii markaa fursad loo siiyo dad muwaadiniin ah inay diinkale xor u noqon karaan ama aan loo eegayn, waxaa weeyi qofka soomaaliga ah ama diinkale haysta ayaa fursad meeshaas ka helaaya, markaa in laga saaro "colum" ka ku saabsan arinta ***muwaadiniinta oo dhan iyadoon loo kal eegayn , lab iyo dhidig, diin*** **meeshaas diinta in laga saaro** ***muwaadiniinta oo dhan iyadoon loo kal eegayn lab iyo dhidig,midab iyo xaalad bulsho*** layidhaahdo oo diinta laga saro ayaan qabaa, qodonkaa waxaan qabaa in taas laga saaro.

- **Qodobka11(4)** qofna meeqaamka iyo maamuuska uu leeyahay awgood ugama baxsankaro la xisaabtan iyo ciqaab fal danbiyeed uu galay, qodabkaas isna waxay ila tahay inuu muhiim yahay laakiin in lagu cadeeyo fal danbiyeed cad oo uugalay in layihaahdo, oo fal danbiyeedku uusan noqonin fal danbiyeed tuhun ah, oo fal siyaasadeeda ama fal lasoo abaabulay oo qof lagu soo abaabulay uusan noqonin oo uu noqdo fal danbiyeed cad oo la xaqiijiyey in laga dhigo in kastoo fiicnayd in qodobkaa la sii akhriyo qodobka xasaanada xildhibaanada tilmaamaya oo isna ku jira dastuurka.

- **Qodobka 15** qofkastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu ku biiro dadkale faqradaa sidaa dhahaysa wuxuu xaq u leeyahay inuu ku biiro dadkale ma cada arintaas iyadana dadka kale uu qofku ku biirayo qofku inuu urur ku biiro waa la garan karaa qofku inuu association kale u biiiro, inuu xisbi ku biiro waa la gartay, laakiin sobobta uu dadkale ku biirayo macada iyadana, in iyadana faahfaahin laga bixiyo waa muhiim qofku qofkale ama dadkale kuma biiri karo waxa uu ku biiri karo xisbiyo ama ururo kale ama "association" kale ama waxay rabaan ha noqdaane wuu ku biirikaraa laakiin sifaha inuu ku biiro dadkale taas iyana waxaan qabaa faahfaahin dheeriya ay u baahan tahay.

- **Qodobka 16 (2)** qofkastaa wuu xaq u leeyahay inuu si xor ah usoo bandhigo aqoontiisa iyo hal abuurkiisa faafreeb la'aan, qodobkaas waxa ila tahay in iyadana waxyaabo baban ka imaan karaan, ooy ka imaan karaan waxyaabo dhaqankeena iyo diinteena "applicable" ku ahayn oo dalkeena u wanaaagsanayn inuu qofku afkaartii ama fikirkiisa ku cabir ama uu buugaag ku soo qoro ama joonaalo uu ku soo daabaco in dalka lagu baahiyo waana dhibaato imaan karta oo saamayn ku keeni karta markaa arinta faafreeb la'aanta in laga daayo oo

layidhaahdo **qofka hal abuurkiisa oo aan ka hor imaanayn shareeda islaamka iyo dhaqanka soomaaliyeed ee suuban** in la raaciyo iyadana qodobkaa intaasaan ku dari lahaa.

- **Qodobka 19** qofkasta oo dalka sifo sharci ku jooga wuxuu xaq u leeyahay, inuu dego meesha uu rabo, uuna ku dhex socon karo dalka gudihiisa , si xor ahana uga bixikaro dalka goortii uu rabo, taa lafigeeda waxaan qabaa "exceptions" inay yeelan karto sababatoo ah qof kastoo sifo sharci la yiri uu ku soo galo dalka meesha uu rabo dalka gudihiisa waa ka marikaraa hadii la yidhaahdo wuxuu booqankaraa xeryahaha ciidamada meelwalba wuu gali karaa meelkasta oo xog ka raadinkaro ama sir ah wuu gali karaa, taa laftigeedu inay faafreeb leedahay waa muhiim oo qofku meelo uu san tagi Karin oo dalka gudihiisa ka jiri karto, markaa qofkasta hadii layidhaahdo meelkasta oo dalka gudihiisa xor buu u yahay iyada lagtigeedo faafreeb ma laha taana waxyaaba gaara in lagu soo saaro way fiicnaan lahayd. Inta kale qodobadu way iska ag dhaw dhaw yihiin, waxaan ku soo gunaanadayaa xildhibaanada sharafta leh wax kastoon meeshan ku darayno inay qaybka noqdaan aan u fiirino shareecada islaamka iyo dhaqankeena aan "base" uga dhigno oo aan u fiirino siday inoo saamay karaan mustaqbalka, arinta hada laga hadlayo maalmihii dhawayd cararuurta dhalashadooda ama dadka kaloo ajaanibta ay dhalaan saamaynbay ku yeelanaysaa dadka dhaqankooda iyo isirka markaa waxyaabahaa in si foojigan hoos loogu fiiriyo waan soo jeedinayaa.

13) **Xil. Ismail Shire Jama:**

Bismilaahi raxmaani raxiim, waa salaamaya Guddoonka iyo guddiga dastuurka oo hawshan ku mashquulsan aad waxaan ugu hambalyeynayaa wax badan baa goluhu aad uga cabnayeen shaki weyna ka muujiyeen waxa halkan laga yidhaahdo inaan la qaadin oo la dabagalin oo waxba la qorin laakiin maanta arintaan meesha ku aragnay in wixii halkaa laga yidhaahdo iyadoo muuqaal iyo maqala labadaba in lana tusay taasna waa hambalyo aad u weyn, waxaan leenahay aad iyo aad baad arintaas ugu mahadsantihiin, intaanan guddo gali qodobada waxaan raacin lahaa oon yara xasuusinayaa Baarlamaanka maalintuu Madaxweynuhu halkan ka hadlaayey oo uu lahaa shan masalo baa inoo yaala saddex anaa leh labana idinkaa leh oo labadeenuu u baqaayey oo ahayd dastuurka iyo ansixinta miisaaniyada saddex uu isagu lahaana inagu u baqaynay, saddexda wuxuu yiri waxaan soo qaadayaa cafintii daynta, iyo cuna qabataytii dalka lasaaray oo laga qaadaayo iyo tii saddexaad ma xasuusto saddexdiiba madaxweynuhu waa ku soo guulaystay, waxaad moodaa labadii madaxweynuhu inooga baqayey inay taagan tahay, Baarlamanka waxaa leehay sida dastuurka loogu jiro aad buu u liitaaye si xooga oo mug leh haloo wado hana loo dhanaado saacadaha ugu danbeeya la baxaayana halaga Joogsado hana si cilmiyan oo arinta loo fahmo dastuurka dhamastirkiisa, dadajintiisa iyo wax ka qabadkiisa inaynu aad iyo aad ugu heelanaano waa fariintii madaxweynuhu haadaan kasoo baxno siduu sheegaayaa cadaanaysoo inaan labadii qodob ku aadi weynoo isna saddexdiisii qodob ku aadoo wax ka qabto way noqonaysaa inay tiisii run tahay, markaa taasi boorrin bay iga tahay bismilaahi ramaani raxiim waxaan guda galayaa dastuurka.

- **Qodobka 10(1)** karaamadu aadamuhu waa deeq ilaahay SWT ku manastay qofkasta oo biniaadama, xuquuqda aadamahana deeqdaas ayey ka dhalatay, waxaan qabaa isla qodobkii hore ee meeshiisa ku jiray in loo daayo.

- **Qodobka 11(1)** waxaan qabaa in laqaato qabteeda xirfada, dhalashada isirka dada afguri toona, ***afguri toona magaran***, xuquuda iyo waajinaadka way u siman yihiin xeer hoosaadka si waafaqsan shareecada islaamka, qodobkaa oo soo bandhiga waxaa qabaa inla qaato

- **Qodobka 11(2)** wax fal takoorida hadii natiijadaasi noqoto is hortaag ama dhiiri galin xaqa qofka xataa haduu falka si ula kac ah aan loo sameeyn, taas waan jeclaan lahaa in la bayaaniyo oo la jilciyo.

- **Qodobka 11(4)** waxaan qaadanayaa qodobka lagu soo siyaadiyey oo ra'yi ahaana, qofna maqaam iyo maamuus uusan lahay awgeed ugama baxsankaro la xisaabtan iyo ciqaab fal danbiyeed uu galay, waa uu galay weeyi haduusan galin waa khasab, haduuse galay isagoo masuuliyad sheeganaya iyo isagoo deraja kale sheeganaaya marna ugama baxsankaro, haduu galey weeyi, haduuse galina oo markaasi ku cadayn inuu denbigaa galayna maaha mid markaasi lagu soo oogaayo waxaa kamida dhawr jeerbay xildhinaanadu halkaas ku barbalaariyeen wax aka mida  sida xasaannada Baarlamaanka iyo xasaanado badan oo dadkale si inaan markaa loogu soo ganban, qabashadu waxaa keenaaya hadii ay san jirinba danbi uusan galin ama lagu cadayn Baarlamaanka lala soo aadimaayo ama ninka loo xuquuq kale leh cidna ma diidikarto, laakiinse haduu galo weeyi.

- **Qodobka 13 (1)** Qofkasta wuxuu xaq uleeyahay nolol baa hore u qornay talo soojeedintii waxay noqotay qofkasta wuxuu xaq u leeyahay sideedii baa loo qaatay waxba lagama bedelin, waxaan raacin lahaa nolol la iska noolaadu oo nabadi ku jirin qiimo yeelan mayso, qofku wuxuu xaq u leeyahay **nolol iyo nabad** , nolol haduu helo waa inuu nabad helaa sidaa saan qodobada u soo dhawynayaa ugana baxayaa igana raali ahaada, waxaan ku soo koobay in taayar wakhtiguna aad buu yar yahay aad baad umahadsantihiin, wax yaroo codsiyaan raacin lahaa Guddoonka Baarlamaanka imaanshihiisa aad buu utiro badan yahay marka hore bixitaankiisuna aad buu uyar yahay xiliga la baxaayo jedwal warqada hala dhigo oo marka lasoo golo la saxiixaayo bixitaankana inuu jiro wakhti  la saxiixaayo qofku aan saxiisin bixitaankana kiisii hore uu yimid hadhaw inay ka go ayso sidaasaa lagu maamuli karaa shaqaalaha in kastuu Baarlamaanku shaqaale ahayn  laakiin si qofka loo ogaado inuu joogo "control" keeduna ku imaan karo.

14) **Xil. Abdirahman Mohamed Mohamud:**

Mahadsanid Guddoomiye,  waxaan rabaa inaan marka hore si hor dhac ah ugu mahadcelino guddiga shaqada adag ay qabteen iyo warbixintii ay maanta siiyeen weyna ku mahadsan yihiin, waxaan islahaa saaka  shalay fariinta ma fiirin,  saaka waxaan is lahaa waxaa laga wada shaqeyn doonaa dhamaan cutubyada, cutubka lababaad qodobada uu ka kooban yahay oo ah 32 qodob, maadaama waqti adag ay tahay fasaxna uu soo socdo  Baarlamaanka, Saaka markaan fariinta dib u fiiriyay, waxa qornayd 10 qodob, cutubkana waxa uu ka kooban yahay 32 qodob, marka ma aqaan sida ay ku dhamaan karto mudadaas hada aadka u dhow iyo kala fadhigii oo gaba gabo ah, marka Waxaan soojeedinlahaa maadaama hada cutubkii 1aad aan ka baxnay, cutub cutub in loo daayo  shaqadii inta badan xildhibaanadu way ka shaqeeyeen in cutubkaas lagu daayoo sidiisa, cutubyada aan ugu wadnay ay shaqada ku socoto mudadaas shaqada, wey ku mahadsanyihiin guddoonka, In wax lagu daro sida aan soojeedinay. aad ayaan u soo dhawaynaynaa  in la cadeeyo waqtiga lagu daray sida ay noqonayso, maadaama jadwal uu leeyahay xildhibaanada ay howlo leeyihiin banaanka ah, sidookale waxaan u mahadcelinaynaa walaasheena halkaan lagu taageeray,

xildhibaanad foosiya in kalmad mahadcelin ah in lasiiyo aad ayay u mudnayd, intaas ka dib waxaan galayaa barnaamijkii;

- **Qodobka 11(1):** waxaa ku qornaa muwaadiniinta oo dhan iyagoo aan loo eegin lab iyo dhadig sida la soojeediyay ayaan laqabnaa, Diin waxaan is leeyahay meeshaas muwaadiniinta lagu qoray, Diinta faquuq wey noqon kartaa oo meelaha qaar sida lagu xusay in lagu daayo ayaan soojeedinlahaa. xaalada diinta, midabka, xaalada bulshada, ama dhaqaalaha ama afkaarta siyaasadeed, qabiil, meesha naafada ay ku qorantahay in lagu badalo **Baahiyaha gaarka ah** dadka qabo, oo sidaas loo dhigo, maadaama uu sidaas ku habbooneen erayga naafada.

- **Qodobka 11(4):** oo sinaanta ah, oo cusub lagu soodaray qodobka 4aad ah, waxaan **aamisanahay** in aan loo baahneen farqdaas: Qofna maqaam iyo maamuus uu leeyahay awgeed uguma baxsan karaan la xisaabtan ama ciqaab faldanbiyeed uu galay, marka xeerarkeena ayay ku qorontahay faahfaahin intaas la'eg uma baahna dastuurka. Qodob kaas Waxaan leeyahay in laga maarmi karo dastuurka uusan xisaabtan ugu baahneen.

- **Qodobka 12(1)** waxaan horay ugu hadalnay hay'adaha dowlada heer federaal iyo heer dowlad goboleed in meshaas lagu badalo hay'adaha **dowlada heer federaal ee maamul goboleedyada** in laga dhigo, oo laga saaro heer dowladeed soo noqnoqday, si dowlada federaalka u cadaato walba dastuurka uu ku qoran yahay si ugu dhexmilmin.

- **Qodobka 13(3)** waan ka mahad celinaynaa guddiga qodobka ay ku soo dareen, Waxaan soojeedinayaa soo rididda ilmaha, waa arin ka soo horjeeda shareecada islaamka, waana reeban tahay, hadii ayna jirin In lagu badalo "**Keenida xaalad caafimaad oo aan laga maarmin, badbaadinta nolosha hooyada oo sugayo**", Meesha guddiga uu soojeediyeen ayaan qabaa in laga saaro dakhtar taqasuskiisa leh In lagu daro, oo taqasus loo daayo, dakhtar taqasuskeeda leh.

- **Qodobka 15(1**) waxey leedahay xoriyada ka mid noqoshada, qofkasta waxa uu xaq u leeyahay inuu ku biiri koox in laga dhigo, meeshaas koox la galiyo 2 laga dhigo "urur ama ururo" hadana lagu xijiyo xisbiyo siyasadeed in intaas lagu daro ayaa soo jeedinayaa sidaas ayay ku quruxbadan tahay.

- **Qodobkan la tiray oo 16aad,** 17 ku qoran tahay xoriyadda diinta iyo cadaaladda waxaan soojeedinayaa qofkasta oo muslim aan aheyn kuna nool jamhuuriyadda federaalka soomaaliya gudaheeda wuxuu xor u yahay inuu ku dhaqmo diintiisa in laga dhigo, oo sidaasi loo cadeeyo, isla qodobka labaad in sidiisa lagu daayo oo uu fasiro qodobkaan koowaad oo la dhaho diin aan islaam aheyn laguma faafin karo jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya oo labadaas qodob is fasiraan. Ayaduna sidaas ayaan soojeedin lahaa.

- **Qodobka 17(2)aad xormada hoyga,** waxaa ku qoran waxaa waajib ah in amarka garsooraha si toos ah loogu aqriyo daganaha hoyga, baaraha waxaa ka reeban ku xad gudubka sharciga, qodobkaan waxaa la yiri waxaa loo raray qodobka 34aad(2), qodobka 34aad(2) waxaa ku qoran xaqa dacwada iyo mowduuca waxaa waaye mowduuca, qodobkuna wuxuu leeyahay qofkata wuxuu xaq u leeyahay inuu helo garsoor madaxbanan, caadil ah marka isma fasiri karaan labadaas qodob, in marka qodob kaan waa qeyxan yahay

sidiisa lagu daayo ayaan soojeedinayaa oo muhiim yahay oo meeshaan laga saarin. Waad mahadsantihiin warbixin teyda intas ayay ku egtahay wad mahasantihiin.

15) **Xil. Marian Moallim Isaq:**

Bismillaahi Raxmaani Raxiim, guddoonka Baarlamaanka, xilibaanada labada gole, guddiga labadiisa qeyb ee dastuurka, howl wadeenada, marti sharafta, aqoonyahanada Asalaamu Caleykum waraxmatullaahi Wabarakaatuhu, allaah baa mahadleh Alaahii na abuurtay oo halkaan isku kaaya keenay anagoo caafimaad qabna, waxaan u mahad celinayaa guddiga labadiisa qeybood oo xaqiiqdii uga soo shaqeeyay dastuurka si fiican oo xaqiiqdii howsha la saaray howl aan cid walba ka bixi Karin ay tahy sida ay uga shaqeeyeen aad iyo aad bey u mahadsanyihiin, wixii xilibaanada ay ku dareen oo ayaga ka il duufeen xilibaanada waa ay ku mahadsanyihiin, guddoon kuna wuu mahadsanyahay sida uu noogu dulqaadanaayo, Intaas markaan ka gudbo aniga waxaan rabaa inaan ka hadlo.

**Qodobka 14aad(4)** wuu badan yahay qeybta ka hadlayao gudniinka gabdhaha, dad iga horeeyayna waa ay ka hadleen, sheekheena halkaan buu fadhiyaa Samsam-na waa ay ka hadshay, marka waxaa waaye gudniinka gabdhaha markaan ka hadalno illahay qofkasta oo bini aadam ah wuxuu u abuuray sida ugu quruxda badan, Hadii aad tiraahdid Maryam Moallim wey indho weyn tahay, hadii aad tiraahdo furuur yaheeda wey dheer dheer yihiin midaan gaabinaa fool xumuu ka keenayaa, hadii aad tiraahdid ka caafimaad ahaana gudniinka uma fiicna, anoo ahayn caafimaad ka culumo ahaan nooma sheegin meel ay ku ku fiican yahay, ka qurux ahaan uma fiicno gudniinka gabdhaha, ka dhaqan ahaan uma fiicno gabdhaha, gudniinka gabdhaha halagu daro sababta oo ah waxaa waaye gabdho badan ayaa u dhintay u dhiig baxay, gabdho badan dhalo u dhiig baxay, gabdho badan waxa ay ku dhinteen fool ayagoo ah ayay saas u dhinteen meel ay soo maraan ilmihii waayeen, horta gudniin-ka halagu daro gadhaha fircoon ha dhihina, fircooni hadaa dhahdaan ka daaya, ka daaya gudniinka fircooniga, gudniinka gabdhaha hala joojiyo oo halaga daayo, yaanan la hoos galin, culumada kusoo dartay fircooni halaga daayo ee suno halaga dhigo sina kuma fiicna, illaahayna maqadarin culimada illaahay meel walbo ayay joogaan ilaa jaamacatul azhar culimo ka imaatay baanu arknay, Meel ay qorayso malahan gudniinka gabdhaha, mar hadii diin ahaan u haysan, mar hadii aan caafimaad ahaan u heysan, mar hadii qurux ahaan u heysan, mar hadii dhaqan ahaan u haysanin, maxaa gudniinka gabdhaha maala daayo, raga hadaad tihiin soojeesta, mas’uul guriga idinkuu idin saaranyahay, ka daaya gabdhaha, hooyooyinka ha ku daynina wiilashiinaba kuma deysaan idinkaa guda, gabdhahana ha ku deynina ka daaya gabdhaha halaaga ,Habluhu waa dhibtoodeen inta aan ka ogahay qof ka og majiro, 60 baan jiraa wax badan baan ka ogahay wax aanan arkin malahan, mar hadii culumada illaahay leedahay gudniinka gabdhaha waa xaaraan, kuwaaa dhahaaya fircooniga halaga daayo hala suneeyo, ka daaya, ayaguna haka daayeen wax la isku qarinaayo malahan gabdhaha yaanan la gudin.

Gudniinku ma fiicno gabdheheena yaan la gudin oo yaan la googayn gibilkooda yaan la jarin, gayaankood gabdhaha gaf yaan lagu samaynin, gabdhuhu gortii la gudo gowrac bay mutaan, marka ay guursadaan waa la goynayaa, guurka iyo qabista gacaltooyo kama helaan, gabdhaha waa loo gafay waa in laga garbaxo oo halaga daayo gabdha gudniinka.

Aniga taas meel walba oo aan joogo way itaabanaysaa wax badana waan ka ogahay haloo guntado aabaha alaylahey xumaan bay badeen xaawaleey dumar, xaqdaro iyo waxay sameeyeen xaasid nimo wayn, xeerkii fircoon dhaafay xidid bay uyeeleen, xubnahooda tarankey gadhaha xaabinayaan, xidida dareenka ay jarayaan xububeysaha , marka ay xireen

ay xabak ku dhoobaan, qaar badanoo xasaasiyo qabo xeyqab seexsan baa jira, qaaraa xanaaniyo aqoon xaalka leeyahay, xukunkii ku waan helin xeelka caada ah, aabuhu gabdha kama xanuunsado xubnahooda taranka la galay kama xumaadaan, waa lala xisaabtami xaraanka aakhiree war xayaatada intaad nooshihiin xaqa usoo jeesta"

Hadaa tihiin aabayaalka gabdhaha xubinteeda shirka maaha, ayada iyo ninkeeda shirka ku tahay in 100 hablood loo keeno oo la fara fareeyo, waa xubinta ugu qaalisan ishaada ma awoodi karta in lagaliyo sakiina halaga daayo "salaamu caleykum warax ma tullaahi wara kaatuhu.

16) **Sen. Abdixakiin Moalin Ahmed:**

Bismillahi raxmaani raxiim, alxamdullilaah wasalaamu wasalaatu calaa rasuulillaahi, mudane Guddoomiye mudanayaasha sharafta leh Asalaamu caleykum waraxmatullahi wabarakaatuhu. Waxaan umaleynayaa xildhibaano badan ayaa ka dhiibtay ra'yigooda cutabkaan anigu si toos ah ayaan u galayaa aragtida cutubkaan iyo xuriyaadka uu ka hadlayo.

- **Qodobka 11(2)** ee ka hadlaaya sinaanta ereyga waxaa laga tiray xukuumada maarka mas'uuliyada laga hadlaayo in ay ilaalinayso iyadu maxaa liyiraahdaa xoriyaadka iyo in ay ilaalinayso xukuumadii laga badalay, marka waxaa laga dhigay shacab, meeshaa shacabkaa laga dhigo qaabka laga yeelay, waxaan qabaa inaa mas'uuliyadaa laga qaadin ee dowladaa laga qaadin, "at least" in lag dhigo sidii uu xildhibaan ka soojeedinayay halkaan ra`isul wasaara ku xigeen kii hore "mahdi" oo ah shacabka iyo xukuumadaba laga dhigo, oo aan mas'uuliyada laga rafcin xukuumadda. waaa Qodobka 11aad(2 xukuumada laga saaray xukuumada lagu celsho iyo shacabkana la yiraahdo taas ayaan soojeedinayaa.

- **Qodobka 11(4)** xildhibaanada ay ka hadliyeen weeye oo ka hadleysey maqaamka iyo maamuuska uu leeyahay owgeed qofka xasaanada leh, anigu waan qabaa in ay markasta jirto qofka xasaanada leh haduu danbi galo xasaanadu ma'ilaaliso dambiga ama xildhibaan ha ahaado ama qof kale ha ahaado, xasaanadu dunuubta qofku haduu ficil danbi laqayaano uu galo kama ay rafcineyso in lagu maxkamadeeyo oo cadaalada lagu horgeeyo, laakiin in sidaan uu hada u qoran yahay wax laga badalo oo laga dhigo fal dambiyeed qof lagu qabtay inuu noqdo gacanta asagoo dambiga kula jira lagu qabtay in uu noqdo, ee sidaan uu u furan.yahay inaan loo.furin ayaan soojedinayaa.

- **Qodobka 15(2)** oo hada isku badalay 14 ayuu noqday Meesha ugu dambaysa lagu ekeeyay ee la yiri curfiga iyo marka laga hadlaayo haweenka iyo caruurta la yiraahdo "li'anna" caruurteena laftirkooda way nugul yihiin, marka meesha caruurta iyo haweenka layiraahdo aan soojeedinaya.

- **Qodobka 15aad** hore waxa uu u ahaa 16 hada isbadelka la sameeyay madaama qodobo la xadfay ayuu noqday Qodobka 15(1) kalimada lamida marka laga hadlayay ururad iyo waxaas shaqaalaha iyo xisbiyada siyaasada, hal urur la sheegay meeshan oo waxaa la yiri, ururka shaqalaaha ama xisbi siyaasadeed, waxaa la yiri ururka shaqaaleed ama xisbi siyaasadeed la yiri, marka waxaan qabaa in meeshaas xirfad lagu badalo oo xirfadle-yaal la dhigo, ururada shaqaal kaliya maahan, ururadu wey badanyihiin xirfadahoodana wey kala badalan yihiin, marka in xirfad lagu saleeyo magaca shaqaalaha aan lagu koobin ayaan

soojeedinayaa iyo xisbiyada siyaasadeed, ururada xirfadla yaasha matalaan iyo xisbiyada siyaasadeed in la yiraahdo.

- **Qodobka 17aad waala tiray (1,2)** waala tiray, waana qodobka ka hadlaaya qofkastaa waxa uu xor u yahay in uu ku dhaqmo diintiisa, aniga qodobkaan rabaa runtii inaan si fiican isku kortaago, hortaa waa in aynaan marka aan ka hadlayno islaamkeena iyo diinteeta waa in aynaan go'aan keena ku saleysnaanin iyo go'aamadaan qaadaneyno oo dhan, aniga waxa ay ila tahay inaanu ku saleysnaanin ee nusuusta sharciga iyo diinta islaamka iyo waxa ay ka qabto in uu ku saleysnaado ayaa wanaagsan ,oo uun caadifadeena saameyn ku yeelan ,islaamku jumla minal mabaadii buu meeshaan qeexayaa, oo sugeysa xuriyatul cibaada, oo qofka aan muslimka aheyn inuu ku caabudi karo, waxa uu aaminsan yahay diin ahaan uu rumeysan yahay, dal aan dalkeena Soomaaliya uu joogo inuu xaq u leeyahay in uu cibaadadiiisa sameysan karo ayaa jira, markaa marar badan shacabkeena madaaama ay caadifadiisa iyo xaga shareecada iyo diinta iyo rabitaanka ay u hayaan ay aad u tira badan tahay, dadbaa inaan si toos looga hadlin oo "issue" ga muhiimka saameynta leh aan si cad loo sharxin, yaad moodaa in ay culeys ku sameynayso, marka cabsi dadka laga cabsanayo ayaa marar badan indhaha laga laabtaa wax aan sax aheyn in la sheego, aniga waxaan rabaa halkaan in aan sheego dhoor qoodob Allah subxaanahuu watacaalaa marka uu ka hadlaayay waa marwalbaa wey jireen, dunida muslimka ama dal muslimka ama xukunka dowladda islaamka hoostiisa, waxaa jiray dad aan muslimiin aheyn oo ku dhex nool oo mar walba cibaadadooda xaq u lahaa, ee islaamkana anagu diinta Nebi muxammed SCW ilaahey subxaanahuu wata caalaa wuxuu leeyahay "fadakir inna maa anta mudakir, lasta caleyhim bimu seydir", yacni Nabi SCW waajibaadka lala soo diray oo dadka muslimiinta wakiil uga yihiin, waxa weeyaan waa gaarsiinta diinta, lakiin qahri iyo ku qasbid majiro," لا اكراه في الدين" illaahay subxaanahu wata caalaa qiyaamahaa lagu kala saaraa oo lagu xisaabiyaa, qofkii diinta qalad ka gala iyo qofka qaladka aan galin " ان الذين آمنوا والذين هادوا والنصاري " aayadaas qعraan ka ahi ilaahey waxa ugu hadlaya subxaanahu watacalaa, qofka muslim ahi iimaanka leh ee ilaahay rumeeyay iyo midka saabiga ah ama nasaarada ah ama majuusiga ah ee diima kale iyo wax kale heysta iyo kuwa muslimiinta ah, illaahay subxaanahuu watacaalaa asagaa kala fasilanaya asagaa midna qiyaamaha maalinta la is xisaabinayo ciqaab marinaya, midna janada ku abaal marinaya iyo wixii wanaagsanaa uu sameystay, laakiin aduunka marka ay joogaan dadka muslimiinta ah waxaa ku dhex nool marwalba dad aan diinta islaamka aan aaminsaneyn baala noolaa, culimadana waxay yiraahdeen hadiiba ilaahay dhahaayo "laa'ik raaha fiddiini qad tabayana Rushdi," markuu dhahaayo yacnii hadii qofka lagu khasbo inuu islaam noqdo, oo diinta isalamka lagu lagu khasbo, waxaa dhaceyso inuu nifaaq yimaado oo qofaan diinta aaminsaneyn uu muujiyo inuu diinta aminsanyahay, iyada laftirkeeda qatarkale oo ka daran, marka waa inoo qofkii aan diin aaminsaneyn oo aan muslim aheyn la ogyahay inuusan muslim yahay.

Taasaa waxay ka fiican tahay inuu munaafuq kugu dhax nool ahaado ka fiican tahay, marka " ولو شاء ربك لجعل الناس امة واحدة "yacni mar waliba dadka iyo diinta iyo muslimiinta iyo umado ku dhex noolaa jiray, waxaad xasuusataan qisadii " cumar binu khadaab radiyaallahu canhu, markii uu kaniisad qiyaama uu salaada ugu soo gasahy asagoo qayskii ama baadariga ahaa ninkii e xukumayay asagoo la jooga, uu damcay inuu tukado oo uu weydiistay meel lagu tukan karo ayaa la yiri halkaan ku tuko, markaa wuxuu yiri, waxaan ka cabsanayaa inaan hadaan halkaan aan kaniisada ku dhax tukado, in muslimiinta ay yiraad meeshii "cumar ku tukaday waaye, marka banaana kaan ku tukanayaa, marka asagoo ilaalinaya inaan laga

qaadin kaniiisadaan laftirkeeda oo u xifdinaya, marka muslimiintu daa`iman dad la noolaa jiray oo aan diinta islamka aaminsanayn, inaan ka cararna maahan,

wadan kaan aan jooga waa wadan aan rabno umadaha ilaahay mid shidaal soosaraya, iyo mid kheyraad kana nalaga shaqeynaaya, mid gaala iyo jinni oo dhan inuu halkaan yimaado ayaan rabnaa, wadan kaan waa wadan aan rabno in ay dadku yimaadaan wadamada carabta waa taqaanaan 900 oo kun wadan dadkiisu yahay 5,000 ku nooshay ,munaafisaa kaala dhaxeysa, tartanaa kaala dhaxeeya, umadahaas oo dhanaa rabtaa in ay halkaan yimaadaan,Inaad marka dastuurkaaga aad ka tirto qodob dhahaaya, dadka diintuu aaminsan yahay ayu ku dhaqmi karaa oo shareecada islaamka kugu fardineynin , waxaan u maleynayaa in aysan sax aheyn , marka waa in loo daayaa qodob kaa faqradaa waa in lasoo celiyaa meesha waxaa ku qoran culimada mark lala tashtay nusuus sharciya iyo diin hana tusiyeen hana bareen mesha ay xuriyatul cibaada, oo dadka muslimiinta taariikhda waligooda lagu diiday hana tusiyeen.

- dadku caamo ma wada ahan, dadka inta badani waalakala fiicanyahay Culimada lala tashanaayo laftirkeeda waxaa la rabaa taqasus in la ilaaliyo la rabaa, waa in ay shareecadii yaqaanan, waa in ay fiqigii garanayaan iyo dastuurka laftirkiisa calaaqa waa iney la leeyihiin ,lkn qof walba oo culimaa kama tala bixin karo dastuurka kama tala bixin karo, markaa anigu waxaan qabaa in arintaa ayada ah aad buu muhiim inoogu yahay, ee Nabiga SCW saxabadii ayaa waxey aad ugu cel celiyeen markii wasaniyadii kasoo baxeen oo islaamka soogaleen ayay aad waxey ugu celceliyeen, in ay is difaacaan oo ay gaaladii iska difaacaan , Nabiga SCW wuxuu dhahaayay marwaliba jooga oo salaada hala oogo wuu ka celinaayay, illaa markii danbe ilaahay subxanahuu watacaa oo uu soo dajiyay " اذن للذين يقاتلون بانهم ظلموا" iyo sidoo kale " لَّذِينَ أُخْرِجُوا مِنْ دِيَارِهِمْ بِغَيْرِ حَقٍّ إِلَّا أَنْ يَقُولُوا رَبُّنَا اللَّهُ وَلَوْلَا دَفْعُ اللَّهِ النَّاسَ بَعْضَهُمْ بِبَعْضٍ لَهُدِّمَتْ صَوَامِعُ وَبِيَعٌ وَصَلَوَاتٌ وَمَسَاجِدُ يُذْكَرُ فِيهَا اسْمُ اللَّهِ كَثِيرًا وَلَيَنْصُرَنَّ اللَّهُ مَنْ يَنْصُرُهُ إِنَّ اللَّهَ لَقَوِيٌّ عَزِيزٌ" alladiin ukhrijuu min diyaarihim biqeyri xaqin ilaa an yaquuluu rabiyallaah wallowlaa dafcunnaasi naasa bacdahum bi bacdin lahudimat sawaa mico wabiicun wasala waatun wamasaajidun fiihasmu llaah. fiiri asagaa islaamku wuxuu ilaalinayaa uma imaanin kaliya islaamku aaydaan marka laga hadlaayo oo loo igmaday saxaabadii ama loo ogoladay in ay is difaacaan looguma fasixin kaliya xataa in ay ilaaliyaan masaajidii, laakiin waxaa laga hormaiyay halkaan ku qoran ,meelahaan la sheegayo oo dhan waa meelo nasaaro iyo yuhuud ku caabudeyeen weeye, waxaan loo idmay islaamkii iyo diintii markaa daa'iman wey jirtay dadku muslimiintaa dad ku dhaxnool oo meel ay dad ku caabudaan leh oo iyagu aaminsan islaamku diinaan aheyn aaminsan waana la ilaalin jiray, marka qiyaamahaa ilaahay subxaanahuu watacaalaa ayaa kala saaraya dadkan, dacwada iyo kheyr ka in la gaarsiiiyo ayay u baahan tahay, marka waxaan soojeedinayaa qodobkaan, "reason"majiro sabab majiro loo tiro, waliba kan kaloo ku xigaa kabaaya, oo sheegayaa diinta islaamka diin aan aheyn in aan la faafinKarin, marka kan horena waa in la dhaafaa, midka danbana oo diinta islaamka diin aan ahayn dalka in lagu faafin karinna waa in la daayaa, sidaa qodobka 17 labadiisa farqo oo ka kooban yahay in la soo celiyo ayaan aaminsanahay, mana ahan waxaan shareecada ku khilaafeyno, maaha wax aan diinta danbi ugu galeyno, wasalaamu caleykum warax matullahi wabarakaatuhu. aad ayaad u mahadsan tihiin.

**Taariikh:** Febraayo 26, 2024

| | | |
|---|---|---|
| Baarlamaanka: | 11aad | |
| Kalfadhiga: | 4aad | |
| Kulankiisii: | 18aad ee Wadajir Labada Aqal. | |
| Goobta: | Villa Hargeisa | |
| Guntanka: | Golaha Shacabka: | 148 Xildhibaan |
| | Aqalka Sare: | 29 Senatar. |
| Wakhtiga uu furmay: | 11:20 a.m. | |
| Wakhtiga uu xidhmay: | 4:20 p.m | |
| Shir-Guddoonka: | Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad ee Golaha Shacabka Xil. Sacdiya Yaasin Xaaji Samatar. | |

**Ajendaha:**
(1) Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah.
(2) Ansixinta Ajendaha.
(3) Dib-u-eegista Dastuurka: Marxaladda 2aad. Ka Doodista soojeedimaha wax-kabeddelka Dastuurka. Cutubka 2aad: Xuquuqda Asaasiga ah iyo Waajibaadka Muwaadinkta. QODOBADA 10aad ilaa 20aad

**Kulanka 18aad:**

1) **Xil. Abdillahi Bildhan Warsame:**

Guddoonka labada Aqal, xildhibaanada sharafta leh asalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatuhu. Waxa aan rabaa in aan marka hore ku bilaabo in aan u mahadnaqo "presentation"-kii maalintii u dambaysay ay inoo soojeediyeen labada Guddi ee dastuurka, oo runtii si qurux badan u soo bandhigay cutubkii 1aad iyo sidii ay doodihii ay ahaayeen, waan ugu hambalyaynayaa. sida oo kalena uga mahadnaqayaa sida fiican ay qaybana u "record"-gareeyeen, qaybana u soo qoreen.

Waxa aan sidaa oo kale iyagana ku boorrinayaa cutubada culayska badani ka jiro oo ay dadku sugayaan in dooddahooga la bilaabo oo sidaa si leeg xildhibaanada dhamaantood warkooda u qoraan, sida oo kalena Meesha loo badanyahay dadka u tilmaamaan si daahfuranaanta dib-u-eegista dastuurka looga shaqeeyo. Odayaasha saaxiibaday ee siyaasiyiinta ahaa ee lahaa Baarlamaanku wixiisu ma daahfurno, oo waa la boobayaa, si ay arrintaa iyaga laftigoodu ugu baraarugsanaadaan, halkaaan yimaadanoo, dooddooda ka dhiibtaan.

Haddii aan u gudbo qodobada maanta lagu jiro ee cutubka 2aad, waxaan ayyidayaa xildhibaano badan oo halkan ka hadlay.

- **Qodobka 11(4):** waxaa lagu soo kordhiyey kalmad ama faqrada odhanaysa: Qofna maqaam iyo maamuus uu leeyahay awgeed ugama baxsan karo la xisaabtan iyo ciqaab fal dembiyeedka uu galay;

Qodobkaas waxaad moodaa inuu mugdi ku jiro oo mararka qaar ay dhicikarto dad si kale u fikiraya inay ku xalaashadaan xasaanada dadka masuuliyiinta ah ama baarlamaanka ama xildhibaanada ah, Marka qodobkaas ha la cadeeyo ama meesha ha laga saaro ayaan soojeedinayaa siday xildhibaano badan soojeediyeen, waayo **mugdi badan ayaa ku jira, wax hadda meesha looga baahanyahay oo loo soo galiyey runtii ma garan karo**.

- **Qodobka 14(4):** waxa aan iyadana ku raacsanahay xildhibaanno badan oo halka ka hadlay hadalkoodii ahaa: Gudniinka gabdhaha waa caado naxariis-darro iyo xaqiraad ah oo u dhiganta **jirdil**, Gudniinka gabdhaha waa reeban yahay. Waxaan ku talinlahaa in sidiisii loo daayo, wax lagu bannaysan karo in khaladaad lagu sameeyo meesha ma yaalaan, hadii la yidhaahdo Gudniinka fircooniga lama samayn karo dad badan oo caado iskaga dhagan baa waxay ku xalaashanayaan in la samayn karo, **markaa qodobkan in sidiisii loo daayo ayaan soojeedinlahaa.**

- **Qodobka 17(1):** Qof kastaa wuxuu xor u yahay in uu ku dhaqmo diintiisa. Qodobkan xogahaa mugdi badan baa ku jira, maadaama diintu wadanku ay tahay diinta islaamka, qodobka kuxigana u cadeeyey inaan wadanka lagu fidinKarin diin aan islaam ahayn, hadana qodobkaas xildhibaano horena waa ka hadleen ee, wadanka waxa aan rabnaa inuu noqdo wadan balaadhan, "investors" yimaadaan. Ajinabi badan ayaa hadda inala jooga oo wadanka ka shaqeeya, markaa iyaga laftoodu waa inay xaq u yeeshaan inay diimahooda caabudaan, Culimada qaybtoodna waa ay ka hadashay, oo waxa ay yidhaahdeen dadka ajinabiga ha lagu qoro, oo ha lagu koobo, markaa **qodobkaa dib ha loo siiqeeyo, laakiin ha lagu soo cesho meeshiisii**. Waan ognahay diintu karaahiyo ma ahan, la iskumana khasbo, dadka inala joogaana kuma qasbi karno inay diinteena qaataan. markaa waxyaalo badan oo in diinta islaamka khasab ku soogashay iyo inta wanaaga ku soogashay waxaa badan inta wanaaga ku soogashay, markaa in dadka laftooda latuso, laakiin dadka soomaalida ah ay daliishan oo ay noqoto waxa soomaalidu daliishanayn ileen diinta wadankana waxaa la yidhi waa diinta islaamka, diin aan iyada ahayn laguma fidin karo.

- **Qodobka 18(1)**: Qof kastaa waxa uu xaq u leeyahay inuu abaabulo, kana qaybgalo kulammo bannaanbax ah oo si xasilooni ah cabasho loogu muujinayo, iyada oo aan oggolaansho loo baahnayn. Waxaa lagu soo daray in ogolaasho loo baahanyahay, ma garanaayo waxa looga bedelay sidiisii. Si waafaqsan xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya macnaheedu waxaa weeye ogalaansho soo qaado. Xeerarka Jamhuuriyadda waxaa ka mid ah xeerka amniga oo Wasaaradda amnigu ay odhanayso hadii aan annaga la nala waydiisan bannaanbax lama samayn karo., Markaa qodobkaas xorriyadii lagu muujinayey si amni ah marka horaaba lagu xidhay oo nabada, mar hadii uu si nabad ah yahay waa inaan lagu xidhin xeerar kale la aado, **markaa qodobkaas sidiisii hore ha loo daayo** xeerarka lagu xidhanayo waxay keenayaa dhibaato iyo inaan cidba mudaharaadi karinba, nin kastoo meel joogaba wuxuu  xeer ka dhiganayaa ama xeer isagu soo saartay ama xeer kale.

Qodobada dhowrka ah ee aan ka hadli lahaa waa intaa. Waxaa xildhibaanada ku baraarujinayaa madaama wakhtigu cidhiidhi yahay cutubkan oo kale waxaa laga hadlayaa waa 10qodob, badankiisa waa laga hadlay, qofkastaan wakhtigiisa ha soo koobo, anigu intaas ayaan ku soo dhameeyey.

2) **Xil. Mohamud Abdulkadir Haji (Jeego).**
Guddoomiye waad mahadsantahay, waxaan rabaa inaan ka hadlo:

- **Qodobka 16(2):** xorriyadda qofka waxaa ka mid ah; xorriyadda hadalka, saxaafadda iyo wax walba oo soo gelaya warbaahinta elektaroonikada iyo internet-ka. Muhiimaddaydu waxa ay ahayd "xorriyatul qawlka" dastuurka sidii hore ee ay ugu qornayd waa laga saaray. Waxa aan rabaa inaan adkeeyo xorriyatul qawlka sidii hore ee ay dastuurka ugu qornayd in loo daayo, markaa maanta waxaan rabaa inaan ku soo gaabiyo qodobka 18. Cutubyada kale ee soo socda uun bay dooddaydu ku sahabsanaan doontaa kuwa ugu adag. Waad mahadsantihiin.

3) **Sen. Saynab Ismail Mohamed:**
Waxaan salaamayaa Guddoonka, Guddiyada dastuurka, bulshada rayidka iyo xildhibaanada labada Aqal ee meesha ku sugan, iyo sida oo kale "media-ha" dhamaan Asalaamu calaykum. Waxaan rabaa inaan ka hadlo:

- **Qodobka 10(2):** Karaamada Aadanaha waa laguma xadgudbaan, waana mas'uuliyad qof walba saaran inuu ilaaliyo. Waa run qof walba way tahay inuu ilaaliyo, balse waxa loo baahanyahay cid gaar ah oo mas'uuliyaddaa qaaddaa. dastuurka waxa aad moodaa, dastuurku ma u baahanyahay in lagu qoro qodobo sharciya? Haddana waxaa la rabaa inayna meesha ka maqnaan fankii soomaaliga, waayo qofku marka wax akhrinayo waxaa la rabaa in wixii ay isku xidhanyihiin oo uu jiro wax "related" la ah, markaa karaamadii qof walba mas'uul ka ah, markaa waxa ay ahayd in xuquuqda qofka inay dawladdu difaacayso ay halkaas la xidhiidhsantahay.

  Meesha halkan lagu soo qoray qofna lama adoonsan karo, marka loo eego waxa ka dhaca Soomaaliya ama ka dhacaayay haddeer bulshada dhexdeeda 32 sano ee aynu u burburnay dhaqan dhaqaale iyo dowladnimo waxaa moodaa wax badan ayaa baaba'ay markaa loo eego dadkaa aniga i la'eg ama iga sii weyn, Soomaaliya sida ay ahaan jirtay dhaqankeedii, waxaana ka dhaca tacadiyo faro badan, laakiin way yartahay addoonsi inuu ka dhaco.

  Qabaa'il baynu nahay, qof qabiil ka tirsan inta la soo kaxaysato lama adoonsan karo, laakiin maxaa dhaca? Xadgudubyo ku dhaca dadka tabarta darran baa dhaca, waxa la rabaa dastuurku inuu dhulka yaalo, laakiin dastuurku hadii uu yahay wax "copy" oo cido kale ama gumayste laga keeno "context" ama dhaqankeenii iyo sida oo kale meeshii aan joognay kama turjumayo. Waxa aan qabaa halkaas in lagu caddeeyo ama ay badiil u tahay xadgudubyada xakamayntooda inay dawladdu masuul ka tahay, oo halkaas waxa jira lagu cadeeyo, laakiin adoonsiyo mid kale sidaad wax u akhriyasid uun baad arkaysaa qodob la soo gamay oo aan meeshaba la xidhiidhsanayn, Markaa waxa aan u soojeedinayaa Guddiyada fankii Soomaaliga ama sidii aan wax u qori jirnay yaan laga tagin, wuxu ha isku xidhnaado.

- **Qodobka 11(3):** takooridda; inaan qof lagu takoorin wax lagu takoorayo, hadda innagu jaranjarada aan ka soo galayno aqalkeena waa jaranjar dheer, iyada laftigeeda ayaa takoora, waayo qof "handicap" ma soo gali karo. Markaa takoora waa inay ku muuqataa dadka lixaadkooda la' inay ku caddahay, laakiin qodobada dastuurku waa asaaskii, waa mabaadii'dii. Dastuurka ayaa hadhow waxa uu noqon doonaa lafdhabarta xeerarka la qorayo, haddii xeerkii wax loo cuskadaa ayna ku oolin Dastuurka lafdhabar ma noqon doono Dastuurku, markaa waxaa loo baahanyahay inay caddahay arrintaasi.

- **Qodobka 13(3):** Aniga ayaa waxa aan la xidhiidhiyey Qodobka 29 baa waxa uu ka hadlayaa xaqa carruurta, waxaan soojeedin lahaa ilmahana la soo ridayo iyo hawlihiisa inaynu halkaas kaga hadalno, waayo Soomaalidu taran bay isku faantaa, ilmo Aabo iyo Hooyo dhaleen haddaanay imaan arrin caafimaad ah lama soo rido, laakiin maxaa keena? Kufsigii baa baddaas ah, inan yar oo 15 jir oo iskuul dhigata baa macalinkeedii faraxumaynayaa waxbaa dhaca, waxaasi waa in ay cadyihiin waana in ay isku xidhanyihiin waxa lagaga hadlaya dastuurka si qodoba qodobka kale ugu noqdo tiirkii celin lahaa, sidaas ayana ka wadaa. **In qodobkaa 29aad loo raro ayaan soojeedinayaa** si aynu si faahfaahsan uga hadalno ilmaha la soo ridayo muxuu yahay iyo waa goorma?

- **Qodobka 15(1):** Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay inuu ku biiro koox ama ururr walbaa; Anigu odhan maayo qof walba waxa uu xaq u leeyahay inuu ku biiro koox ama urur siyaasadeed, oo faqradda waa inay ku dabo-taalo inay reebban tahay oo qofku uusan xaq u lahayn inuu ku biro urur ama koox duminaysa qarannimada Soomaaliya, kana soo horjeeda amniga. Haddaan la caddayn intaasi, ma aqaano waxa looga gabbanayo, oo loo leeyahay wax baa isku biiri kara, waayo kooxaa naftii Ilaahay inoo keenay sow ma ahan?

- **Qodobka 19aad**: ka saarida hoyga marka laga hadlaayo, yaa hoyga laga saaraa? Ma nin soomaaliyeed baa loo imaan karayaa oo hoygiisa laga saari karaa ,haddaanay wax weyn aysan jirin, jawaabtu waa maya, dadka hoyga laga saaro oo dhibanaha u ah, waxaan leeyahay dastuurka dhulka ha la dhigo oo hooyada iyo dhalaanka, Nin baa 10 markay u dhasho oo ay islaantii kala dabacdo, waxa uu guursanayaa inan yar, islaantii 10ka carruur ah u dhashay iyo iyadiiba dibada ayuu u saarayaa waa in ay halkaa ku caddahay dastuurka hooyada inaan la saari karin sida ay Qur'aanka ugu caddahay "Suurata Dalaaq." Dumarka waad furi kartaan laakiin guriga lagama saari karo, haddaanay la iman faaxisho iyo wax danbi ah. Waa in dastuurka madaama diintii islaamku u ah "base" la yidhi waa in ay ku cadahay si hadhow qodobad hoose oo ka hadlaya ama xuquuqaha ka sheekaynaya ay lafdhabar ugu noqoto ,laakiin dhaqanka Soomaaliga waxa inagu dhacay inaan dhaqan burburnay ,anigu barigii hore ma arki jirin, laakiin hadda waxaad arkaysaa hooyo 11 carruura dhashay oo ninkii gurigii ka saaray oo ay tolkii ula hadlayn oo la odhanayo guriga isaga iska leh. Waxa aan qabaa oo aan Guddiga u soojeedinayaa iyo Xildhibaannada in ka saarida hoyga sida dhabta ah ee dadka looga saaro lagu xuso meesha.

  Tan kale waxa aan leeyahay shaqadii ayaantii dhawayd waan ku faraxsanahay ee ay Guddigu "Presentation" ku sameeyeen, laakiin waa in ay caddahay "presentation" dambe ee la samaynayo wixii la qaatay, ileen waa laga gudbayaaye.

  Qodobkaa Xildhibaannadaa u badnaa waa la qaatay iyo kaa lama qaadan in la kala yiraahdo weeyo, laakiin hadii wixii lagahadlaa hadhow yayna dood kale innagu celin. Wixii loo bato go'aannada laga gaadhay inay meelahaas ku cadyihiin baan soo dhawaynayaa.

4) **Xil. Ali Said Faqi:**

Guddoonka iyo dhamaan Xildhibaannada waan salaamayaa. Sida oo kale, Guddiga soo diyaariyey dastuurkaan aad ayaan ugu mahadcelinayaa, Meesha waxaa yaala qodobo runtii meelo iska mid ah, meelana iskaaga hor imanaaya.

- **Qodobka 10(3):** Awoodda Dawladda waa in aan marnaba loo isticmaalin ku xadgudbidda karaamada Aadanaha., Waxa aan soojeedinayaa in lagu daro **xuquuqda Aadanaha**, Aniga waxa aan garan waayey karamaada; maxay tahay "definition"-keeda? Waxa aan garanayaa xuquuqda iyo sharafta qofka, oo sharafta qofka hadii lagu xadgudbo waxa ay la mid tahay iyada oo xuquuqdiisii lagu xadgudbay.

- **Qodobka 11(1):** madaama muwaadiintaa ay ka hadlayso diinta meesha ha laga saaro, hadii ay tahay in loogu talo galay ajinabiga qodobkaasi waa saxsanyahay, laakiin muwaadinka ha laga saaro.

- **Qodobka 11(4):** Waxa aan soojeedin lahaa qofna maqaam, maal, iyo maamuus uu leeyahay awgeed ugama baxsan karo la xisaabtan iyo ciqaab fal dembiyeedka uu galay.;Markaa taa iyaduna waa muhiim, oo sharciga waa inay dadka dhan u sinnaadaan.

- **Qodobka 14(4):** Gudniinka fircooniga ee gabdhaha waa caado naxariis-darro iyo xaqiraad ah, ficil ahaanna u dhiganta jirdil, waana uu reebban yahay. Waxa aan soojeedin lahaa **in erayga "xaqiraad" meesha laga saaro** oo la dhaho ficil ahaan u dhiganta jirdil, waana ay reebban tahay.

- **Qodobka 15(1):** Meesha la leeyahay Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu ku biiro dad, ma fahmi karo **waxa ay tahay inuu ku biro, koox ayaa roon in meesha lagu beddelo.**

- **Qodobka 16(2):** Waxa aan qabaa in qodob kale lagu daro, oo "xorriyatul qawlka" qofka waxaa ka reeban sumcad dilidda, hagardaamo, iyo hadallada nacaybka ah oo **"social media"-ha la iskaga jeedinayo in lagu soo daro halkan waa muhiim.**

- **Qodobka 20(1):** Muwaaddin kasta waxa uu xaq u leeyahay inuu ka qaybqaato arrimaha siyaasadeed ee dalka, uuna samaysan karo, kana mid noqon karo xisbi siyaasadeed, loona dooran karo xil kasta, oo xisbiga gudihiisa ah, madaama doorasho laga hadlayo in xil qaran meeshii lagu soo daro ayaan qabaa. Dumarka xuquuqdooda marka laga hadlayo, *waxa aan* qabaa **in lagu soo daro fasax dhalmo, waayo xaq ayey u leeyihiin.**

- **Qodobka 24(2):** Dawladdu waxa ay si khasab ah hanti ula wareegi kartaa marka ay jirto dan-guud. Sidaas darteed, hantidaas waxa aan qabaa in la caddeeyo, ma lacag baa mise dhul mise guryo. Waxa ay ku habboon tahay in meeshan lagu caddeeyo.

- Ubadka marka ay dhashaan waxa ay xaq u leeyihiin in loo bixiyo magac suubban, iyo in si rasmi ah loo diiwaangaliyo, oo ay dawladda hoose diiwaangeliso,Waa in khasab laga dhigo weeye, si hadhow loo ogaado meeshii uu ku dhashay iyo wakhtiga uu dhashayba intaba.

5) **Sen. Deqa Hassan Hussein:**
Guddoonka labada gole, Xubnaha Baarlamaanka labada gole, habdhawrka, labada Guddi ee madaxbannaan ee dastuurka, "media-ha", iyo hawlwadeenada, dhamaantiin Asalaamu Caylkuma Warxmatullaahi Wabarakaatuhu.

- **Qodobka 10(4):** Waxa aan la qabaa Senator Saynab iyo intii iga horraysa ee odhanaayay Qofna lama adoonsan karo. Waxa aan jeclaan lahaa in la siiqeeyo, madaama uusan adoonsigu jirin in laga dhigo **qofna laguma xadgudbi karo**, xoogna looguma shaqeysan karo, lagamana ganacsan karo, Waan ognahay maanta magaalada waxa ka jira,Waxaa jira dad runtii gabdho yaryar oo "teenage" ah guryo ku haaya, oo maalin dhawayd ay ka mid ahayd gabadh dib loo heli jiray oo reerkooda ka maqnayd mudo badan, ganacsigu uu jiraa ,dastuurkuna runtii uu xadididoonaa,laakiin wax addoonsi ah oo hada jira ma jiraan, Markaa waxa aan jeclaan lahaa in la siiqeeyo oo la yidhaahdo: **qofna laguma xadgudbi karo, xoogna looguma shaqeysan karo, lagamana ganacsan karo**, markaas waxa aan uga gudbayaa in la siiqeeyo**.**

- **Qodobka 11(3):** faqraddaan 3aad waxa ay iyadana caawinaysaa qodobkii ay gabdhuhu ay aadka uga hadleen, ee ka hadlaayay **kootada in loogu daro**.

- **Qodobka 11(3):** waxa uu leeyahay: Waa in aan loo arkin fal takoorid ah barnaamijyada dawladda sida xeerarka hab-siyaasadeed iyo hab-maamuleed ee loo qorsheeyey in sinnaan buuxda lagu gaarsiiyo dad ama kooxo horay loogu gaystey takoorid ama ku sugan xaalad dib-u-dhacsanaan. Barnaamijyo waxaa jira ay dowladdu ku horumarinayso dadka qaar oo ay ka mid yihiin dadka baahiya gaarka qaba ama naafada ah, Waxa kale oo ka mid noqon kara haweenka Soomaaliyeeed meel walba oo ay joogaan, waxa ay ka yihiin runtii aad ayey ugu yaryihiin, markaa barnaamijyada looma arki karo fal takoorida ah, ileen waa barnaamijyo ay dawladdu ku horumarinayso ama xeerarka hab-siyaasaddeed ama hab-maamulo ee la rabo in lagu horumariyo dad ama koox gaar ah, Waxaa ay caawinaysaa dooddii gabdhaha. Waxaa kale oo ay caawinaysaa dadka baahiya gaarka qaba, hada inkastoo baahiyihii gaarka in laga badalay aan u malaynayo ama naafada.

- **Qodobka 11(4)**: In isagana meesha laga tiro, madaama laga soo raray faqradda kale, **isagana in meesha laga saaro**.

- **Qodobka 12(3):** ee la tiray waan ku raacsanahay Guddiga, waana **soojeedinayaa in meesha laga saaro**.

- **Qodobka 13(3):** oo ka hadlaya xaqa nolosha faqradda ay ku soo kordhiyeen Guddigu ee ah soo rididda ilmaha waa arrin aan sax ahay , laakiin waxa aan ka soo horjeedaa in loo saaro Guddi lagu kalsoonaan karo, waayo xaaladaas marka ay taaggan tahay Guddi dhakhaatiir ah oo lagu kalsoonyahay wakhti looma hayo, Waxa aan jeclaan lahaa in iyadana intaas laga saaro, laakiin faqraddu meesha way ku habboontahayey in loo daayo.

- **Qodobka 14aad**: Isaga dhan madaama loo raray qodobka 10aad, waa in isagana meesha laga saaro.

- **Qodobka 14(5):** Isagana sidookale, waxaa loo raray qodobka 13aad. Waa in sida looga tiray uga maqnaado.

- **Qodobka 15(1):** Oo ka hadlaya Xorriyadda ka-mid-noqoshada. Qof kastaa waxa uu xaq u leeyahay inuu ku biro dad ama koox, waxaa soojeediyey xildhibaankii iga horeeyey, sidaas darteed aniga ilama saxsana dad ama koox midna, waxa ay ila tahay in siiqada la saxo, Dad waxa ay noqon karaa dad kale, Koox hadii la yidhaahdana sharci maalin dhawayd naloo keenay oo ahaa sharciga magan-galyodoonka iyo qaxootiga, waxaa aad ugu soo noqnoqday koox ,Kooxduna waxa ay noqon kartaa sidaad ogtihiin, waxaa jira kooxo siyaasadeed, waxaa jira kooxo dad aan dhaqan ahaan soomaaliya ka shaqayn karin, markaa in dad ama koox la yidhaahdo sideedaba waa ila khaldantahay ,Guddiga waxa aan u soojeedinayaa in si kale loo siiqeeyo, oo dadna laga saaro. Sida oo kalena kooxna aan lagu darin oo xaga siiqada laga saxo.

- **Qodobka 17(1):** Qof kastaa waxaa uu xor u yahay inuu ku dhaqmo diintiisa; Waa khalad, diinta islaamka ayuu dastuurkani oo cutubkii aan soo dhaafnay lagu qoray, dadka loo qorayna waa dadka Soomaaliyeed. Diin aan diinta islaamka ahayn in qodob ama faqrad kale lagu ogolaado waxaa diidaya qodobkii hore inuu kahor imaanayo, Dadka qaar waxa ay soojeediyeen in ajaanibta uu qodobkani khaas u yahay, madaama aan se dastuur ka shaqaynayno, dastuurka waxaa iska leh dadka Soomaaliyeed iyo dalka Soomaaliyeed, sidaas darteed meeshaas ma qaadanayno, waa in laga saaraa.

- **Qodobka 17(2):** Waxaa waajib ah in amarka garsooraha si toos ah loogu akhriyo degganaha hoyga. Macnaha taas markii maxkamadu warqad soo qorto, warqadu waxa ay sheegaysaa in qof kaasi uu yahay eedaysane, guriga marka ay yimaadaana waa inay u sheegaan, laakiin waa marka ay warqad haystaan. Iyadana waxa aan soojeedinayaa in faqradaas aan la tirin oo la soo celiyo, laakiin lagu daro siiqayn ah "**marka uu baaruhu haysto sharci"** intaas lagu soo daro.

6) **Xil. Abdirahman Isaaq Mohamed:**
   Mudane Guddoomiye, Xildhibaannada sharafta leh, mudane iyo marwooyin, waxa aan idinku salaamayaa salaanta islaamka ah: Assalamu Caylkum Waaraxmattulaahi Wabarakaatuhu, Intaan qodobada dhex galin ka hor, waxa aan rabaa dawladdihii dalkan soo maray inaan raaligelin siiyo, maxaa yeelay hadal uu maalintii dastuurka arrimihiisu bilaabanayeen Guddoomiye Xuseen Idow uu halkan ka soojeediyay.

- **Qodobka 13(3):** Soo rididda ilmaha sabab ayaa keenta, markaa waxa aan aad u jeclaanlahaa warka in la israaciyo oo warkan qabyada ah laga dhaafo, Waxbaa "cause"-gareeya xanuunka marka laga reebo in ilmaha la soo rido marka labadii qof la isku diido bannaanka ayay iska doonayaan, kadibna ilmo ayaa imanaayo. Ilmihii waxa ay noqonayaan in la soo rido, markaa taasi si ay u dhicin waxa an rabaa guurka marka hore in la fududeeyo oo lacagtana la dhimo, Sida oo kalena, dadka la isku ogalaado. Qodobkaas in intaas lagu soo kordhiyo ayaan aad u jecelaanlahaa.

- **Qodobka 14(4):** Waxaa kale oo aan rabaa inaan ka hadlo Gudniinka fircooniga, iyadana waan taageerayaa, Hadeer Xil. Bildhaan waxa uu yidhi: dad ay caado u tahay arrintaasi. Caado fiican ma ahan arrintaasi Xil. Bildhaanow. Dadka in la luggooyo ma ahan; in gabdhuhu Sunni ahaadaan ayaa muhiim ah, oo inta ay adduunyada joogaan iyaguna raaxaystaan oo la luggoynin. Arrintaas waan soo dhawaynaan in la sameeyo, oo waliba si fiican loo qeexo.

- **Qodobka 18(1):** Waxa aan rabaa qodobka kale ee aan ka hadlaayo uu yahay, qof kasta waxa uu xaq u leeyahay inuu bannaanbaxo; Anigu waxa aan qabaa in qodobkaas si fiican loo xoojiyo, Umaddaan Soomaali ayaa la yidhaahdaa in warqad ogalaasho ah la helo oo waliba warqadaas la sii xoojiyo oo ay meelo badan soo marto, hadaad rabtaan in qoryo la isku qaato oo waan banaanbaxaynaan la yidhaahdo oo hadhowna la is xabadeeyo sidan u fududeeya, laakiin hadii aad rabtaan in wax la xakameeyo in la xoojiyo arrintan oo ay waliba dhowr wasaaraddood iyo wasiiro gacanta loo galiyo, dastuurkana lagu muujiyo ayaan qabaa.

  Maanta waad i afduubtay war ayaa igu jiray, Guddoomiso inaan hadlaan rabaa, Waxa aan rabaa baalkii dawladihii waddanka ay galiyeen inaan laga abaal dhicin, Afka Soomaaliga aan maanta ku hadlayno ciddii qortay, maalina meeshan lagama sheegin.

7) **Xil. Cumar Ali Isak (Balash):**
   Waxa aan aad ugu mhadcelinayaa Guddiga dadaalka badan wada. Doodda maanta laga doodaayo waa qodobada laga bilaawo 10aad ilaa 20aad.

- **Qodobka 11(1):** ee sinnaanta muwaadiniinta oo dhan iyada oo aan loo eegaynin lab iyo dheddig, diin, xaalada bulsho; Ujeeddadayda meeshaa waxaa weeye maaddaama muwaaddin la yiri waa muwaadiniinteena Soomaaliyeed, ma jiri kiro erayga diinta ah in meesha lagu soo daro, maxaa yeelay in la is ku faquuqo diin iyo sheekadaas marka la keeno, waxaa waaye muwaadiniin aan muslim ahayn ayaa jiri karo waaye micnaheeda,Waxa ay ila tahay in eraygaa "diinta" ah meesha laga saaro, soomaali waa isku diin, isku dhaqan, isku af ,Laba jeer ayuu ereygaa soo noqday; tii hore sidaas ayaa ku qornayd, idinkana tii ayaad soo celiseen.

- **Qodobka 11(2)**: Waxaa reebban in qof lagu sameeyo si toos ah ama si dadban takoor. Ereyga takoor la yiraahdo fasiraad badan ayuu u baahan yahay. Qofka qaabkee loo takoori karaa, ma qabiil ahaan, ma deegaan ahaan, mise luuqad ama curyaannimo? **Takoorkaas lafiisa in laqeexo oo la faahfaahiyo way fiicnaan lahyd**.

- **Qodobka 11(4):** Waxa aad moodaa in lagu soo kordhiyay farqad kale, awal 3 farqadood ayuu ka koobnaa, mid dheeraad ah ayaa lagu soo daray oo u qoran; qofna maqaam iyo maamuus uu leeyahay awgeed ugama baxsan karo la xisaabtan ciqaab faldambiyeed uu galay, Waxa ay ila tahay maadaama uu awal ku jirin in wax badan oo mugdi ah uu keeni karo, xasaanadii dad badan oo masuuliyiin ah meeshaas culeys uga imaan karo,Waxaa ay ila tahay, farqaddaas sideeda annagu maanan fahmin, waxyaabo badan ayaa ku duuggan, marka asal ahaanba in la tiro, oo sidii hore in lagu daayo ayaan qabaa, oo aanan la fuduydsanin, oo Xildhibaannada laftoodu dareenkaas uu galo, Qodobka 11(4) in qof walba si gooni ah u fiiriyo, qaybta dhexe saddex qaybood ayaa meesha ku qoran, dastuurkii asalka ahaa qeybta 1aad qeybta 2aadna midka hadba la rabo in la sameeyo, qaybta 3aadna waa faahfaahin, marka iyadoo sidaas loo fiirinaayo farqadda **qeybta dhexe ku qoran in il gaar ah lagu fiiriyo, ayaan soojeedinayaa.**

- **Qodobka 14(2)**: Jirdil qofna looma gaysan karo, qaab kasta oo jirdil ah, Marka aad fiiriso jirdilka laba meelood buu ka dhacaa; mid waxaa waaye, qofka marka la soo qabanaayo badanaa ay soo qabanayaan Hay'adaha amniga, ama uu dagaalamo in jirdil loo geysto, qofkii

Arrintaa lafteeda in laga fiirsado si lagu soo qaban karo eedaysanaha in jirdil loo gaysanin, iyo marka su'aalaha la waydiinaayo mararka qaarkood in jirdil loo gaysto ayaa jirta si su'aalo badan uga jawaabo, Marka in la yara faahfaahiyo way ficnan lahayd, Waxaa kale mararka qaar jirdil ka jiraa dugsiyada Qur'aanka iyo iskuulada. Jirdilka halkaan ku qoran masoo geli karaan macallimiinta ushoodii badnayd iyo iskuullada laftooda ma soo geli karaan.

- **Qodobka 17 (2)**: In lasoo celiyo farqadda, sidii hore ay ahaydna in loo daayo. Faahfaahinta marka la aado qodobka 34(2) ayaad inoo dirteen, laakiin way ka duwantahay, taas lafteeda marka aad soo akhriso ayaa la dhihi karaa aad ayay u kala duwanyihiin. Meeshaan waxaa ku qoran xorriyadda hoyga, waxaa waajib ah in amarka garsooraha loogu akhriyo deganaha hoyga, idinkana midaan aad noo dirteen qodobka 34(2) waxa ay leedahay in marka la soo qabto kaddib loo sheego sababaha loo soo qabtay, tii horana waxaa ku qoran intaan la qabanin in loo sheego, marka meesha la geeyo kaddib in sababta loo sheego sax ma ahan, sidii awal ku qornayd ayaa xorriyadda u dhaw.

- **Qodobka 18 (1)**: **Waxa aan qabaa in sideedii hore loo soo celiyo,** tan dambe xoogaa waxbadan ayaa kujira. Si waafaqsan Xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ayaa lagu soo kordhiyay, xeerarkaas maxay yihiin, iyaga laftooda dood ayaan ka qabaa.

8) **Sen. Mohamed Abdi Osman:**
Cutubkaan 2aad ee aan ku jirno waa cutub muhiimad gaar ah leh, Waxa uuna ka hadlayaa xuquuqaha iyo waajibaadka (drito e devore), labadaas ayuu ka hadlayaa, waana arrin muhiim ah, oo qofku uu leeyahay xuquuq, wajibaadna lagu leeyahay. Sidaadarteed, waxa aan rabnaa inaan si mugleh uga doodno, una lafagurno, Waxa aan runtiii aad ugu mahadnaqayaa Guddiga Madaxabanaan oo soo diyaariyay hawshaan, Waxa aan uga mahadnaqayaa maalinki dhawayd "presentation"-kii ay so bandhigeen, oo runtii macluumaadkii sidii loogu talo-galay inta badan ayay ka muuqatay, iyadoo xildhibaanadu meelihii uu "focus"-koodu ku badnaa lagu muujinaayay, aad baan ugu hambalyaynayaa, Waxa aan leeyahay cutubyada soo socda sidaas iyo si lamid ah baa loo baahanyahay inay uga muuqato, waadna mahadsantihiin.

- **Qodobka 11(3)**: Waxaa ku qoran Xukuumadda matakoori karto qofna; Halkaas Xukuumadda ah waxa aan soojeedinayaa xarafka dambe ee "A" ee ku jira "Xukuumadda" in lagu beddelay xaraf "**U**"

- **Qodobka 11(4)**: Qofna maqaamkiisa iyo maamuuskiisa uu leeyahay awgeed ugama baxsan karo la xisaabtan iyo ciqaab fal dambiyeed uu galay. Runtii qodobkaas Xildhibaanno badan baa ka hadlay, sida uu u qoran yahayna waxaa weeye qodobkaas mugdi badan baa ku jira, siyaabo badan oo aan xaq ahayn baana loo isticmaali karaa. Waxa aan ayyidayaa oo ku raacayaa Xildhibaannadii badnaa ee ka hadlay **in qodobkaas meesha laga saaro.**

- **Qodobka 14(2)**: Waxa uu leeyahay; qof kasta waxa uu xaq u leeyahay amniga qof ahaantiisa iyo hantidiisa, qofna looma gaysan karo qaab kasta oo jirdil ah ama fal bini'aadanimo ka baxsan ah, waxaana reebban xarriga aan sharciga ahayn waafaqsana waxkasta oo cunfi ah oo ay ka mid tahay in la gula kaco haweenka, Halkaas **waxa aan ku dari lahaa "caruurta", haweenka iyo caruurta .**

- **Qodobka 17(1)**: qofna hoygiisa ama meelo kale iyo waxyaabaha u gaarka ah lama baari karo, lamana basaasi karo amar Garsoore la'aantii. Kalmadda "waxyaabaha" waxa aan ku beddeli lahaa **"iyo meelaha kale oo isaga u gaarka ah".**

- **Qodobka 15aad**: Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay inuu ku biiro dad kale ama koox kale; Arrintaas Xildhibaanno badan baa "emphasis"-gareeyay, markaa kooxda uu ku biirayo **"clarification**" badan ayay u baahantahay.

- **Qodobka 17(1):** Asalka qof kasta waxa uu xaq u leeyahay inuu ku dhaqmo diintiisa. Arrinkaan Xildhibaanno badan baa ka hadlay, labadaan marna waxaa la leeyahay qofku waxa uu xaq u leeyhay inuu ku dhaqmo diintiisa, marna waxaa la leeyahay diin aan islaam ahayn laguma faafin karo dalka Waa run, laakiin waxaa meesha ku jirta oo aad looga hadlay dalka dad baa nagula nool, ummadaas iyada oo aan diinteeda faafin, meelaha ay ku noolyihiin inay diintooda ku caabudaan waxa aan umalaynayaa xaq bay u leeyihiin, laakiin diin aan islaam ahayn dalka laguma faafin karo waa sax. Marka waxa aan rabay arintaas in la is waafajiyo, "space" la siiyo dadka bini'aadanka ah ee dalka innagula nool, iyaga oo aan shirar qabsanayn ama aan wax fidinayn waxa ay xaq u leeyihiin inay meelaha ay iyagu leeyihiin ku caabudaan diintooda, Kalmada ah **iyo** in lagu bedelo **ama** senator Mahdi baa ka hadlay.

9) **Xil. Jama Mohamed Askar:**

   Inta aan u gudagelin qodobada, waxa aan rabaa inaan mabaa'dii guud aan sheego, oo ku saabsan "xuquuqul insaanka." Xuquuqda halkaan aan kaga hadlaynaa ma ahan xuquuq ay soomaali keentay, laakiin waa xuquuq caalami ah. "Dasaatiirta" caalamiga ah oo dhan ayay ku yaalaan, oo heshiisyo caalami ah ayaa ay ku jiraan, Soomaaliya heshiisyada caalamiga ah qayb ayay ka tahay, tusaale ahaan heshiiska "mucaahadada" xuquuda madaniga ah ee siyaasiga ah ee soo baxay 1966kii dhaqangashayna 1976dii, Soomaaliya waxa ay "verified"-garaysay, ogolaatayna 1990-kii iyada oo wax "taxafudaad" ah ama "reservation" ah ka qaadan, Xuquuqda halkaan ku qoran oo dhan Soomaaliya waxa ay saaraysaa waajibaad, "obligations" caalami ah ayay saaraysaa, oo ay tahay marka aynu ka shaqaynayno dastuurkeena in aynan meesha ka saarin "obligations"-kii caalamiga ahaa ee soomaaliya saarnaa, Tusaale ahaan, xuquuqaha arrimaha bulshada, dhaqanka, iyo dhaqaalaha ee Qaramada Midoobay Soomaliya qayb bay ka tahay, "mucaahadada" ka hadlaysa "disability"-ga Soomaliya qayb ayay ka tahay, "mucaahadada" jirdilka ama in si foolxun loola dhaqmo bini'aadamka Soomaaliya qayb ayay ka tahay, marka aynu eegayno "Rights and Freedom"-ka ku qoran dastuurkeena waa in aynu la akhrinnaa, oo aan ixtiraamnaa "obligations"-ka ina saaran dawlad ahaan.

- **Qodobka 11(4)**: Oo Xildhibaanno badan ka hadleen, oo ka hadlaysa in aan qofna kaga baxsan karin ciqaab xil uu hayo, **waxa aan ku taageersanahay Xildhibaannadii halkaan ka hadlay, gebi-ahaanba hala tiritiro**. Waxa ay noqonaysaa in loogu soo dhuunto, dadka xasaannada lehna lagu beegsado.

- **Qodobka 13(2)**: waxa uu ka hadlayaa xaqa uu u leeyahay qofka inuu noolaado, laakiin isla farqaddaasi waxa ay ka hadalaysaa in qofka noolasha looga qaadi karo qaab waafaqsan sharciga inay sidaa tahay filayaa. Waxa aan jeclaan lahaa in qaab "Negative Statement-"ah ama si jumlad taban ah loo dhigo oo la yidhaahdo: qofna loogama qaadi karo nafta qaab baalmarsan sharciga. Waa waxa ay yiraahdaa "Arbitrary deprivation of life".

- **Qodobka 14(4)**: Waxa uu ka hadlayaa badqabka qofka, laakiin faqrad 4aad waxa ay ka hadlaysaa gudniinka fircooniga ah, Waxa aan jeclaan lahaa "definition" uu leeyahay gudniinka fircooniga oo aan isla garanayno majiro; mid sunni ah oo waxa uu yahay dadku isla garanayaan majiro, Qofta dumarka ah waa in ay jirkeedu badqabaa, Waxa aan ku talin lahaa in farqaddaas sidiihore lagu celiyo, oo gebi-ahaanba laga saaro waxa lasoo kordhiyay.

- **Qodobka 16(1)**: Oo ka hadlaayay xorriyadda fikirka halka u dambaysa ayaa waxaa lagu qoray; "Si waafaqsan Shareecada Islaamka iyo Xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Shareecada Islaamka ma diidanin, laakiin axkaamta Shareecada Islaamka ee halkan khusaysa waa in la caddeeyaa. "Xuquuqul insaanka" waxaa iska leh muwaadiniinta Soomaaliyeed, Qofka muwaadinka Soomaaliyeed xaqiisa wax sugan waa in uu ahaadaa, oo uu cad yahay oo aan u baahnayn tafsiir kale; wadaad iyo in qof meel fadhiyaa inuu u tago halkan wa inay ku cadadaan axkaamta Shareecada Islaamka ee halkan khuseeyo. Hadii kale waa in laga saaraa gebi-ahaanba. Sida oo kale, Xeerarka "Xorriyatul Tacbiir-ka" ka hadlaya ee la yiri Xeerarka Jamhuuriyadda Soomaaliya waa in la cadeeyaa waa Xeerkee? Si waafaqsan xeerkaa wa inaad tiraahdaan, oo xeer "mucayin" ah waa inuu ahaadaa. Qofka marka uu rabo "xorriyatul tacbiirkiisa" ama xoriyada dhanka fikirka wax sheegida marka uu doonayo in uu "exercise-"gareeyo ama ku dhaqmo, wa inuu fahmi karaa ilaa heerka uu xaqa gudan karo, Waxa aan soojeedinlahaa **Shareecada Islaamka iyo Xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya maaddaama ay halkan ku caddayn gebi-ahaanba in laga saaro, ama la caddeeyo.**

- **Qodobka 17(2)**: Waxa uu ka hadlayaa xurmada hoyga, Waxaa halkaan laga saaray qodob sheegaya in qofka marka gurigiisa la galayo waran maxkamad la soo goosto, qof kana loo sheego, Waxa aan jeclaan lahaa qodobkaa in la soo celiyo, sababta oo ah qodobka ay soojeediyeen Guddigu waa qodobka 34aad e, waxa uu ka hadlayaa xuquuqda eedaysanaha, oo isku mid ma ahan. Marka **waa in la soo celiyaa farqadaa meesha laga saaray**.

- **Qodobka 17aad** : Oo ka hadlaaya qof walbaa waxa uu xaq u leeyahay inuu ku dhaqmo diintiisa. Mabaadi'da "caam" ah ayaan soo sheegnay marki dastuurka awalkiisa soo maraynay qodobka 2aad, oo waxa uu ka hadlaayay in Islaamku yahay diinta dawladda. Waxa uu ka hadlaayay in aan lagu fidin karayn diin aan ahayn diinta Islaamka, Waxa u ka hadlaayay dhammaan Xeerarka soo baxaya inay waxba-kama-jiraan yihiin haddii ay khilaafsanyihiin diinta Islaamka, Markaa qodobkaan waxa uu ka hadlayaa xoriyadda dhinaca cibaadada, **Waxa aan jeclaan lahaa in qodobkaas sidiisii loo soo celiyo,** oo qofka halkaan jooga Soomaali ha ahaado ama "Non-Soomaali" ha ahaado e, **waa in uu helaa xorriyadda dhinaca cibaadada**.

**10) Sen. Abdullahi Ali Hersi – Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad Aqalka Sare.**

- **Qodobka 13 (3)**: waxa ay leedahay: soorididdа ilmaha, taas Senataro iyo Xildhibaanno badan baa ka hadlay oo ku noqnoqday. Waxaa jira ubad la dhalo, oo la tuuro, Waxaa la rabaa in meel lagu ogaado oo Dastuurku xaqooda uu ilaaliyo. Waxa aan oran lahaa caruurtaa la dhalay ee la tuuray, inta kartoon ama bacyar lagu soo duubo ayaa meelahaa la dhigaa, dabadeedna dad baa hela, Waxaa la rabaa caruurtaas la tuuray in dawladda ay mas'uuliyaddooda qaaddo, cidii dhashay ee tuurtayna, haddii la helo in la maxkamadeeyo, oo wax ha laga qabto, Haddii kale waxa ay noqonaysaa wax iska fawdo ah, Waagii

dawladdii Siyaad Barre jirtay ubaxa kacaanka baa la oran jiray, oo waa la aruurinjiray, dawladdaa uruurin jirtay .

Arrinta kale, ee aan rabo in aan idin sheego ee Guddoonku isla gaaray waxa ay tahay, waxa aad moodaa in Dastuurku innagu jiitamayo, Ramadaanna inna haayo. Sida ku qoran Xeer-hoosaadka labada Aqalba 9:00 subaxnimo in shaqada billabato weeye, arbacada laga bilaabo in 9:00 subaxnimo halkan la yimado Guddoonkuna 10:00 soo fariisto go'aanka la gaaray kaa weeye. Xildhibaankii ama Senatarkii isqora maanta oo ka taga waa laga soconayaa, xaq ma aha in dadna fadhiyo ilaa 4:00 galabnimo uu sugo inuu doodo, Xildhibaannada iyo Senatarada ay baxaan oo ay yiraahdan berri baan doodaynaa.

**11) Xil. Abdulaahi Hassan Rooble:**

- **Qodobka 10aad:** Waxa aan qabaa inuu yahay laba qodob oo aan israaci karin. Laba farqadood ayaan rabaa inaan ka dhigo; ta ugu horraysa addoonsi baa laga hadlayaa iyo ganacsi waa qodobka 10 (4). Waxa an leennahay qofka lama addoonsan karo, xoog looguma shaqaysan karo, lagumana khasbi karo hawl aanu raali ka ahayn ama rabin. Farqad kale ayaan is leeyahay ka ganacsiga dadka, waxa uu odhanayaa sharciga dalka Soomaaliya ma oggola ka ganacsiga dadka. Inaan sidaa u kala qaadno ayaa ila habboon

- **Qodobka 11(1)**: Muwaaddiniinta ayaa lagu billaabay, laakiin muwaadin kaliya ayaa lagu soo koobi karaa, Muwaadinka laguma takoorikaro lab iyo dheddig, midab, heer bulsho, fikir siyaasadeed, qabiil, naafannimo, iyo diin. Ereyga diinta labo erey baa rabaa in a midna la saaro, midna la xoojiyo, Ereyga diinta waxa aan la qabaa Xildhibaannadii hore ee sheegay, hore ayaannu u nidhi dalkan waxaa lagu maamulayaa diinta islaamka, haddaba yaynan tataabanin arrintaan sideeeda ha loo daayo, oo qodobada hore ee mabadiii'da guud ee koowaad sidooda ha loo daayo, haddii aynu hadalka badinno su'aalo badan baa innagu imaanaya, xeerarka yare e isla hoose qof walba gurigiisa diintiisa waa ku isticmalin karaa baan u malaynayaa. Iminkaba cidi ma diido laakiin dalka lama oggola in lagu fidiyo diin aan Islaam ahayn sidaa ha loodaayo, Ereyga aan ku soo darayaa waxaa weeye "**goob-dhalasho**". dhalashadu ma aha tii isirka ahayd isirku waa meeshiisa sababta loogu soo daray maxay tahay? Waxa aad moodaa hadaa dadka inuu usii kala gurmayo, meelo aad u fogfog qabaa'il oo kale inuu sii noqonayo, gobolo ayuu sii noqonayaa, waa la kala sii fogaanayaa maxaa imanaya haddaba? Xuquuq kasta oo jirta waajibaad ayay la imanaysaa, marka aad gobolkaaga tiraahdo anaa leh, oo aad keligaa tiraahdo anaa qaadanaya oo xuquuqdiisa anigaa xaq u leh, waxaa imaanayo waajibaadka ahaa berrito inaad dalkaga difaacdo, Waxaa la waayayaa gobolkaa in cid kula difaaci waydo, xuquuqda iyo wajibaadkuna waa isku xiran yihiin, waxaana doonaynaa dalkan in laga daayo arimaha jira goobta dhalashadu waa inay noqotaa xuquuq qofku isla leeyahay oo aan cidina ka qaadayn, laga soo dooran karo, cidna uu ka dooran karo, waxa uu doono uu ka samayn karo ee aysan noqonin intaynu gobollo iyo qabaa'il u kala baxno, dabadeedna aan niraahno anaa leh wajibaadkii muwaadinka Soomaaliga ah saarnaan lahaa, hadhown meesha laga waayo cid gudato waajibaadkaa .

- **Qodobka 12(1):** Waxa aan rabaa in sidaan loo dhigo: Cid kasta oo ummadda maamul fulin u haysa waa inay ilaalisaa xuquuqaha, doodda iyo xorriyada loo aqoonsaday labadaba wa in loo aqoonsado, Ma aha muwaadiniin ee muwaadin keliya ayaa ku filan.

- **Qodobka 14(2)** Isagana waxa aan ka dhigaynaa labo faqradooda, waayo hadalkii ayaan is qaadanayn. Kow, qof kasta waxa uu xaq u leeyahay nabadgelyada naftiisa, hantidiisa,

qoyskiisa, iyo sharftiisa inta islaamku ogol yahay intaa weeye, Wixii kale, ee lagu soo darayo waxaa ka mid ah: qofna looma gaysan karo waxyeelo jireed ama nafeed. Maxaan ereyga nafeed uga danleeyahay, jireed waan garanaynaa? Nafeedka waxaa ka mid ah: Inaad qofka ku sheegto wax gaar ah, tusaale ereyada dadka aynu ku dulmino ee faraha badan, sida; tumaal, midgaan, iyo laangaab oo kale aan kasoo qaadno. Ereyadaas lafo-jebis weeye, aan la ogolayn in mujtamac lagu dhaho, waayo qofka qalbigiisa bay waxyeelaynaysaa, xitaa hadii uu kula shaqeynayo waa muwaadin adiga kula mid ah. Marka ujeedkaygu waa inaan jir ahaana loo dilin, naf ahaana loo dilin oo ama dareenkiisa la xumayn.

- Qodobka 14(4) Waxa aan soo qaadanayaa faqradda 4aad ee gudiniinka fircooniga, ah, waxaa lagu daray sifooyin kale, waxaad og tihiin fircoon waxa uu sameeyay oo dhan waa wada khalad iyada lafteedaa danbi ah in waxkale lagu siidaro uma baahna kaliya in layiraahdo gudniinka fircooniga ah dalka soomaliya fal danbiyeed weeye uma baahna in aa sii fasirno allah baaba diiday.

- **Qodobka 15aad:** Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay inuu ku biiro urur, ururkas wa in uu shardi leeyahay, cid kasta kuma biiri karto wax aan la aqoon, ururkaasi waa inuu ahaadaa mid mabaadii'diida uu xambaarsan yahay laga ogolyahay dalka, Waxa aan u qoraynaa sida aan is leeyahay, sidaan: **qof kasta waxa uu ku biiri karaa urur mabaadi'diisa aysan ka hor imaanaynin xeerarka iyo shuruucda dalka Soomaaliya**. Waxa aan xoojinayaa arrintii ay Guddigu soo bandhigtay ee ahayd in la qoro Xildhibaannadu waxay yiraahdeen, oo muqaal ahaan loo sii daayo, waliba waxa aan ognahay fikirka la soojeediyay ee ahaa in lagu daro inta Xildhibaan dhinaca u tidhi iyo inta dhinaca kale u tidhi labadaba, dabadeedna aynu ogaano dadka intiisa badani xaagga ay raacsan yihiin, si hadhow aynu ugu kalsoonaanno go'aanka aynu qaadanayno waxa uu yahay.

12) **Xil: Saredo Mohamed Hassan:**
Bismilahi Al-Raxmani Al-Raxiim.

- **Qodobka 10aad**: Karaamada Aadanaha, faqradda 2aad waxa ay oranaysaa: Karaamada Aadanaha waa laguma xadgudbaan, dhawristeeduna waa wajib saaran dadka oo dhan. Laguma xadgudbaan, "already" waxaa ka dhalanaya ciqaab. Qodobka 10(1,2), faqrada koowaad oo oranayso karaamada aadamaha waa deeq Ilaahay (Subxanahu Watacala) uu bixiyo, deeq Ilaahay marka oranayno meel loo noqonayaa oo ka weyn ma jirto, marka in haddana lagu soo celiyo karaamada aadamahu wa laguma xadgudbaan, iyada oo qodobo kale oo dastuurka mabaadi' u ah jiraan ilama qurxoona.

- **Qodobka 10(4)** waxa ay oranaysaa qofna lama addoonsan karo, laguma shaqaysan karo. Waxaa u malaysaa faqraddan inay isku karis tahay, oo xuquuqdi iyo hay'adiihi iyo waxyaabo badan isku darsanayso iyo ka ganacsigi jirka iyo waxyabo badan isku qaadaysa, marka meesheedii ahayd **qodobka 14aad faqrada 3aad in lagu daayo ayaan qabaa,** maadaama xuquuqda qofka ka hadlayso iyo jirdilka. Qodobka in meeshiisa lo daayo ayaa qurux badnayd.

- **Qodobka 11(3)**: Waxa ay leedahay bal af Soomaligiisa ila eega: Waa in aan loo arkin fal takoorid ah barnaamijyada dawlada, sida xeerarka hab-siyaasadeedka, hab-maamulka ee loo qorsheeyay in hab-nidaam buuxo lagu gaarsiiyo dad ama kooxo hore loogu gaystay takoorid ama ku sugan xaalad, Dastuurka waxaa loogu talagalay qof walba inuu fahmo oo

uusan u baahan tarjumaad iyo in loo sharraxo. Hadda qodobkaan dhan waxa uu sheegaayo ani wax kama fahmin. Markii aan waydiiyayna, waxaa la igu dhahay sidiisii baa loo soo minguuriyay oo mida "English" ku ahaa waxa laga hadlaya dad la dhahay wa hore iyo kale iyo waxyaabo aan annagaba noo oollin, dastuurka xaalad bulsho marka ay taaggantahay xal u noqdaa, **Marka qodobkaan Soomali "relevant" lama laha, waa un "English" la Soomaaliyeeyay.**

- **Waxa aan kasoo booday Qodobka 11(1),** oo oranaya muwadininta oo dhan iyadoon loo eegin lab iyo dheddig, diin iyo midab, xaalad bulsho ama dhaqaalo, afkaar siyadaded, qabiil, naafannimo, dhalasho, isir, da', iyo af-guri toona xuquuqdooda iyo waajibaadkooda waa ay u simanyihiin xeerka hortiisa, si wafaqsan Shareecada Islaamka, Muwaadiniinta maadaama la yiri muwaadiniinta Soomaliyeed ba laga wadaa, sida horay loogu soo sheegay baaqa jamhuuriyadda, mbaadi'da asaasiga ah waxaa ka mid ah inay diinta islaamka tahay diinta dalka, haddaba faqraddaan diinta ay ka hadlayso ee wa loo siman yahay la leeyahay waatee? Waxaa la oran karay Soomaalidu madaa'hib un bey ku kala duwantahay, madama diintena islaam tahay halkaas diinta in uu madmadow badan ka imaanayo ayay ila tahay. diinta la **leyahy mudawidinta ha u sinaadeen wa tee?** Waxaa kale oo ku jiro af-guri, af-guri waxa laga wado ani ma fahmin. Ma lahjad baa laga wadaa? Ma afka guriga laga wada, ileen guri walbo isku af ayaa looga hadlaa, Soomaali baan ku hadalnaa; Maay baynu ku hadalna, ama Maxaatiri, marka afguri ma xafadeeda waxa looga hadlaa mise guri kale? Ani lahjaddaa waan fahmi waayay, waa Af Soomaali noocee ah?

- **Qodobka 11(4)**: Waxa uu oranayaa: qofna maqaam iyo maamuus uu leeyahay awgeed ugama baxsan karo isla xisaabtan, qodobka waxa meesha loogu soo celiyay ma garanayo, iyadoo looga hadlay cutubka 1aad qodobka 4(2) ee ka sheekaynaya sarraynta sharciga iyo inuu dastuurku ka sarreyo qof walba. Qodobkaas baa xitaa la dhaafi karin oo wax yar oo kale lagu dari karin hadii la rabo, laakiin "Reason" ay halkan ka qabanayso malaha. In **laga saaro ayaan soojeedinayaa.**

- **Qodobka 12(2)**: Dawladdu waa inay mar walba ilaalisaa damaanad-qaadaana hirgelinta iyo ku dhaqanka xuquuqda asaasiga, Arrintan mabaadi'da asaasiga ayaa lagu soo sheegay, waxa ayna ku jirtaa qodobka 3(4) ee cutubka 1aad marka aad tagtaan waxa aad ku arkaysaan inuu leeyahy waa in la ilaaliyo mabaadi'da asaasiga, xorriyada qofka, "so" halkan waxa ay ka soo doontay waa doolaalo. Dastuurka waxa uu ku quruxbadan yahay inu kooban yahay, la fahmi karo, luuqad dabacsanna uu ku qoranyahay.

- **Qodobka 13(1)**: Xaqa iyo noolosha, waxa uu oranayaa: qof kasta waxa uu xaq u leeyahy nolol, waxaan ku dari lahaa **"qof walba waxa uu xaq u leeyahy noolol wanaagsan"**. Isla qodobka 13(3) waxa uu oranayaa soo rididda ilmo waa arrin ka soo horjeeda shareecada islaamka wayna reebantahay, haddii ayna keenin xaalad caafimaad oo aan looga maarmin badbaadinta nolosha hooyada oo ay sugeen guddi dhaqaatiir ah oo lagu kalsoonyahay. Horta karaamada bani'aadamka marka aynu ka hadlayno oo qodobkii hore lahaa karaamada bani'aadanka waa in la ilaaliyo, karaamadu maxay tahay? Xildhibaan ayaa hadaayay halkan ka yiri, su'aal muhiim ah ayay ahayd. Karaamada waa in la ilaaliya xuquuqdooda asaasiga ee dastuurku uu sheegaayo, sida xaqa nolosha, xaqa shaqada, xaqa caafimaadka, dhamaantod waa karaamada "ibnu'aadamka" oo la dhawro. Gabadha karaamadeeda waxaa kamid ah; sidii shay inaan loola dhaqmin, oo hadii ayba soojeedo oo ay saxiixan karto go'aan nafteeda ay u gaari karto inay rabto in qalitaanka gasho iyo in ayna

rabin, waxaan reeban gabdho korkooda gorgortan lagu galayo, Aabihii halkaan ayuu taagan yahay, waxaa uu leeyahay, gabadheyda magteeda ayaan rabaa, maba ayna dhiman waa ay nooshahay maxaad magteeda rabtaa? Ninka qabana waxa uu leeyahay; ilmahayga caloosha ku jira xaqiisa meel halagu sheego, intii gorgortankaas lagu jiro gabadhaas way dhimatay, Marka dhawrista xaqa bani'aadamka waxaa ku jira kan uu isagu "choice" leeyahy in uu dooran karo oo aan loo dooran karin waxa noloshiisa ku saabsan iyo caafimaadkiisa. Fitno marka ay imaato qof kasta ishiisa ayuu gacanta saarayaa, Marka Inan shay laga dhigin bal gabadhi meel laga soo galiyo dorashadeedi aan go'aan laga gaarin. Guddi dhaqaatiir ah ba la yiri, misna lagu kalsoon yahay. Soo lama oran karo kuma kalsoni, oo aabbuhu ma oran karo kuma kalsooni, oo qofka kale ma oran karo ana kuma kalsoni, kalsoonidu waxa ka muhiimsan in uu khibrad u leyahay. Tan labaadna guddi inta la saarayo xeero iyo fandhaal kala dhacay, miskiintiiba dhimatay, guddi goorme wax lala gaara? Marka halkaas wa inuu noqdaa dhaqtar khibradeeda leh, aqoonteeda leh oo gali kara hawshaas. Teeda kale qeexitanka hawshan wa in la yiraahdo, taas oo lagu qeexi doono xeer, xeerkas baa si fican usii faahfahin doono waxa ilmuhu kala noqon doonaan Hooyada "choice" ma leedahay? iyada ma saxiixi kartaa waxyabahas oo dhan wa in lagu daro xeerka qoyska, ama meel uun lagu qeexi doono hawshaas.

- **Qodobka 14(4)**: waxa uu oranayaa gudniinka fircooniga ee gabdhaha wa caado naxariis-darro iyo xaqiraad ah, oo u dhiganto jirdil; Markii hore waxa ay ahayd gudniinka wa caado naxariis daro ah oo u dhiganta jirdil, gudniinka gabdhuhuna wa reebbanyahay, Tafsiirka halkan warbixinta kusoo qoren guddiga faqradan waxaa lagu qoray marka ay wadeen waxa ay dhaheen waxaa soojeediyay Culimad,. Waxa aan jeclaan lahaa Culimada waxa ay soojeediyeen in buugga warbixinta ay ku qoran tahay aayadda ay cuskadeen iyo xadiiska ay cuskadeen, Marka aad culumada halkaan ku qorteen maxay Culimadu ka sheegeen buugga warbixinta? Waan ka raadiyay, kumana qorna wax sharaxaada oo ay culumadu ka bixisay, Cilmigayga yarka inta aan ku ogahay ma jiro xadiis suneeyay, mana jirto aayad waajibisay, ama diiday, Xadiis jideeyay hal xadiis baa jiro, oo laga soo xigan karo in la is gudo, oo "qitaanka" ka hadlaya, Marka kaasna ma sheegayo qaabka loo gudaayo marka iyadana xeer qeexaya qaabka gudniinka in la raaciyo baan qabaa.

- **Qodobka 15aad:** Qof kasta waxa uu xaq u leyahay inuu ku biiro dad kale. Xaqaas waxaa ka mida inu sameeyo ama ka mid noqdo ururro ay ka mid yihin. Waxa aan aaminsanahay halkan in faqrad kale lagu daro ahayd oo oranaysa: Lagama mid noqon karo argagixiso takfiiriyiin ah, Waan aragnay "group-"yo waxaa jiro dadka gaalaysiiyo, Dastuurka wa inu mamnucayo in lagu biiro kooxo u adeegta cunsuriyad ama dad in la baabi'iyo oo gabigoda eber laga dhigo oo la laayo.

- **Qodobka 17aad**: Xorriyada diinta. Faqrada 1aad waxa ay oranaysa: Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay inuu ku dhaqmo diintisa. Rasuulkeena Muxammad (Naxariis iyo Nabadgelyo Korkiisa Ha Ahaate) marka uu Madiina yimid, "Cuhuud" badan buu galay oo uu la galay "Banii Qaynu qaac", "Banii Nuqayr," "Banii qurayda" oo Yahuud ahaa. "Cuhuudaa" Rasuullu la galay oo uu la noola si "sibli" oo wanagsan loogu wada nolaa Madiina, Mabda'a aasaasiga ah ee Islaamkaja waa: "Laa ikraaha fidiin." Markaa maxaa diidayo dadka inay ku noolaadaan waddankeena, iyagoo haysto diintoda annagana dayanayo tasamuxa wanaaga ayna noqon karaan dadkan dad diinta kusoobiro, Waxa aan qabaa qodobkan sidiisa ha loo daayo, oo yaan laga saarin, haddii loo baahdo waa la qeexi karaa. Diin aan ahayn Islaam laguma faafin karo Jamhuuriyadda. iyada waan ka gudbayaa.

- **Qodobka 20aad:** Waxa uu oranaya: muwaadin kasta waxa uu xaq u leyahay, inuu ka qayb qaato arrimaha siyaasadeed, uuna samayn karo kana mid noqon karo xisbi, si wafaqsan Xeerarka Jamhuriyadda Federaalka Soomaaliya. Sidookale, buuga meelo badan dastuurka ka mid ah qabyo qoraalkiisa baa waxaa lagu soo qoray si wafaqsan xeerarka. Xeerarkas in naloo sheego waaye, ma kuwa hada kaddib la allifi doonaa, oo lagu "base-gareen" doono? Waa mahadsantihiin.

13) **Xil. Fawzia Yusuf H. Adan:**

Bismillah. Dhamaan Guddoonka iyo labada Guddi iyo marti sharaftaba, aad ayaan idiin salaamayaa. Anigu ku dheeraan maayo, laakiin labo qodob ayaan sooqaatay. Aad baa looga hadlay kuwa badan oo waxa aan qoraayay ama ku fikiraayay, ku noqod malahan.

- **Qodobka 10aad**: Waxaa qoron karaamada aadamaha waa deeq llaahay (SWT) ku mannaystay qof kasta oo bini'aadam ah, xuquuqdu aadamaha deeqahaas ayay ka dhalatay ayaa qoran; Anigu waxa aan ku beddeli lahaa ayay ka mid tahay. isla qodobkaas 10(4) **waxaan ku raacsanahay xildhibaan Cabdullaahi sida uu u qeexay ama u siiqeeyay**.

- **Qodobka 11(3)**: Waxa aan ku "confuse"-garoobay dad badan ayaa aad uga hadlay fahankiisa, markaan akhriyay waxaad moodaa in aan yara fahmay laakiin siiqadaan ayaan u dhigi lahana: Marka barnaamijyada dowladda waa halka ay ka bilaabanaysay waa in aan loo arkin waxaan kabilaabay "Barnaamijyada dowladda; sida xeerarka hab-siyaasadeedka iyo nidaamka-maamulka ee loo qorsheeyay in sinnaan buuxdo lagu siiyo ama lagu gaarsiiyo muwaadiniinta" waxa aan ku beddelay: dad ama kooxo muwaadiniinta hore loogu gaystay takoorid ama ku jiro xaalado dib-u-dhac xag hormar iyo xag deegaanba, waa in aan loo arkin sedbursi ee loo arkaa sinnaan iyo cadaalad.

- **Qodobka 13(3):** Marka laga hadlaayo soo-rididda-ilmaha qaybta u dambaysa waxa aan oron lahaa badbaadinta noolasha hooyada oo uu sugayo dhakhtar ma ahan guddi dhakhaatiir ah "because" waa ay murmi karaan, waqti ayaa ka dhici kara dhakhtarka wuu la tashan karaa guddiga laakiin dhakhtar lagu kalsoonyahay.

- **Qodobka 14aad:** Xorriyadda iyo nabadgelinta qofnimada sida ay ila tahay in loo qoro: Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay nabadgelyada naftiisa iyo amniga hantidiisa. Qofna looma gaysan karo jirdil nooc kasta oo uu yahay ama fal bini'aadannimada ka baxsan. waa intii qorneed inta hore. Waxaana reebban xarig aanan sharciga waafaqsaneen iyo waxkasta oo cunfi ah oo ay ka mid tahay dhibaatooyinka loo gaysto haweenka iyo dhalaanka.

- **Qodobka 14(3):** Sidaan ayaan u siiqeen lahaa: **Qofka waxa uu xaq u leeyahay badbaadinta jirkiisa waana laguma xadgudbaan,** qofna laguma sameenkaro tijaabo dhakhaatiireed iyo mid cilmi baariseed ogolaansho la'antiis. Halka ay ka qorneed "ogolaansho la'aantiis," waxa aan oran laha: **ogolaashihiisa la'aanteed**. Haddii qofka sharciyan awood u lahayn inuu oggolaado waa in la helaa ogolaashaha waalidiintiis ama xigtadiisa ugu dhaw oo ku salaysan talo uu bixiyay Xeeldheere Caafimaad, waa sidii qorneed e.

- **Qodobka 14(4)**: Halka gudniin-ka fircooniga lagu celcelinaayo, anigu waan ka saari lahaa qodobkaas oo dhan, waayo wax badan ayaa xuquuqda haweenka laga hadlay, waana la sii

adkeen karaa meelaha kale. **Waa ın xeer lagu soo saara oo aanan dastuurka lagu qorın gudnıın ka fırcoonıga, taana waan qabaa**.

- **Qodobka 15aad:** sııqadan ayaan uqorı lahaa: Qof kastaa waxa uu xaq u leeyahay ınuu ku bııro ururo shaqaalo, xısbıyo sıyaasadeed, ıyo ıskaashatooyın. Qofna laguma qasbı karo ınuu cıd kale ku bııro, taasina waa siiqadaa.

- Qodobkayga u dambeeya oo runtıı xasaası ah oo dastuuradıı hore aad moodo inuu ku jiro, kana wuu ku qoran yahay.

- Qodobka 19(1): Waxaa qoran, qof kasto oo dalkaan sıfo sharcı ah ku joogo, waxa aan oron lahaa: Qof kastaa oo dalkan sıfo sharcı ah ku jooga sıda; safaaradaha, shırkadaha ganacsı ee ajanabıga ah, ıyo hay'adaha caalamıga ah ee kale, waa ınuu fasax ka haystaa wasaaradaha ıyo hay'adaha quseeya marka uu safar ugu baxaayo dalka gudihiisa, waayo argagıxıso ayaa ınoo joogto, dad badan oo kale ayaa jıro, oo "company-yo" securıty oo faro badan ayaa jıro, dadka sıdıı la rabay looma adeegsan karo haddayna xakamaynın, Dastuurka muddo dheer ayaa loogu talagallay hadda lee ma'ahan, marka ıntaas oo qodob ayaan ku darsaday, Waana mahadsantıhıın.

**14) Xil. Abdullahi Adan Ahmed (Black):**

Waad mahadsantihiin Guddoonka iyo Guddiga labada aqal ee ka soo shaqeeyay Dastuurka. Waa maalintii labaad ee laga hadlayo 10-kan qodob. Qolada xiriirka inoo haysa way ogyihiin dadkii ka hadlay. "Already" waxyaabihii aan islaha aad baa looga hadlay Xildhibaannaddii hadda u dambaysay ee Fawsiyo haba u badnaatee, Waxa aan rabaa in aan ku bilaabbo mahadnaq Guddiga labada qaybood ah juhdiga badan ee ay geliyeen. Sida ay u qorantahy markaan fiiriyay waxay ku xisaabtameen dadka ay dastuurka u samaynayaan ee Soomaaliyeed ee maanta jooga waa intii dhalatay intii uu burburka jiro, 34 sano u dambeysay taas ayaan ku sii dhawaynaysa ama ku kalifaysa inay waqti badan geliyaan, oo faahfaahin iyo fasiraad badan galiyaan si loo fahmo. Waxa aan idin leeyahay waad ku mahadsantihiin arrintaas.

Waxa aan rabaa hadalkayga in aan ku bilaabo su'aal in aan waydiiyo guddiga maalmihii laga hadlayay cutubkii 1aad iyo kan 2aad ee hadda gabgabo ah maalin dhoweydna waxaad na tusteen sida dadka hadlaya aad u qorayseen, marka su'aashayda waxaa weeyaan: hadii aad aruuriseen dadka sida ay u hadlayeen dabcan Baarlamaanka oo dhan ma hadli doona, qayb ka mid ah ayaa hadlaysa, ugu danbayntii maxaa ugu talo gasheen habka go'aan ka gaarista dambe ee qodobada laga hadlay? Ma dadkii hadlay ayaad ku salaynaysaan oo iyagii intaad qortaan hadii Baarlamaanka 309 yahay 150 ay hadasho tusaalo ahaan aruurintaas ma waxa kusoo arurinesaan intii hadashay? Qaabkas waxa aan jeclaanlahaa inaad fasiraad naga siisaan habka u aruurin doontaan, Taas hadaan ka gudbo aniga inta badan waa la qaatay waxyabihii marka hore ii diyaarsanaa, laakiin mid iyo labo ayaan raba in aan ku biiriyo aragtidayda ah, sida ay u qoranyihin iyo in wax-lagabeddelo.

- **Qodobka 11(4)**: Waa qodob aad looga hadlay. Kan xasaanada dadka way ka wada hadleen laakiin tan xasaanada awal kuma aysan jirin qaabka loo dhigay. Waxa aan ula jeedaa qofka kama celinayso mas'uuliyadda uu hayo, qodobkaas xooga mugdi badan ayaa ku jira, Dadkii iga horreeyay oo dhan ayaa ka hadlay. Faqraddaas sababta meesha lookeenay waa inaad faahfaahin ku dartaan, ama waa in meesha laga saaro shaki badan ayaa ku jira, "because"

xasaanadda meelo badan oo dastuurka ka mid ah ayay ku caddahay. Qofka xasaanadda leh, hadii uu dambi la yimaado si loo wajaho ayaa jirta; haddii falku yahay fal dambiyeed uu markaa faraha kula jiro oo lagu qabto hab loo wajaho ayaa jira, hadii uu yahay kiis kale oo dacwad ka timid iyadana hab kale oo lo wajaho ayaa jirta. Markaa qodobkaas **waxa aan dhihi lahaa meesha halaga saaro ama wixii kalifay faahfaahin halaga sameeyo.**

- **Qodobka 15aad:** Qodobkan sidookale, aad baa looga hadlay. Waxa uuna u qoranyahay: Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay inuu ku biiro dadkale. Ereygaas dad kale "kalmadaas" jumlo ayaan ka dhigi lahaa oo "**ururro**" ayaan dhihi lahaa, Markaas wixii fasiraad ah ee lagu dari karo in lagu daro, inuu ku biiro urur siyaasadeed ama shaqaale ama kuwo bulsho. Urur way ku jirtaa laakiin dhaxda ayay ugu jirtaa. Qodobkaas saas ayaan u dhigi lahaa. Isla qodobkaas laftiisa, cidda lagu biirayo inay caddahay oo lagu caddeeyo sharciga, tusaale ahaan, qof hadda iga horreeyay ayaa ka hadlaayay, sida hadda uu halkan ugu qoran yahay waxa uu xaq u leeyahy inuu ku biiro dad kale. Haddii la yiraahdo noocyada maanta ina haysata dalkeena oo argagixisada ugu horrayso, oo diinta Islaamka noogu soo gabbado, kulligood waa firqooyin, Marka taas waxa aan dhihi lahaa oo sharciyaysan in lagu daro, cidda lagu biiriyo inay tahay cid sharciga waddanka yaala waafaqsan, **cid walbana in aan lagu biiri karin halkaa in lagu cadeeyo weeyo.**

- **Qodobka 17(2)**: Qofka hoygiisa ayuu ka hadlayaa. Sida markii hore ay u qornayd ayaa igula habboon in loo daayo, isla markaasna marka hoygiisa la baaraayo in loo akhriyo sababta hoygiisa loo baaraayo qofka muwaadinka oo aan la iska baarin. Waxa kale oo dhici karta, waxa laga baaraayo ma hub baa mise wax kale? Ma kiis kalaa lagu haystaa? iyada lafteeda waxa laga baaraayo in dastuurka lagu caddeeyo weeyo.

- **Qodobka 19(2)**: Muwaadin kasta waxa uu xaq u leeyahay soo-galidda, ka-bixitaanka, iyo joogitaanka waddanka; Marxaladda hadda aan joogno, haddii aan fiirino waxa aan dhihi lahaa wax caddayn halagu daro, Tusaale ahaan, hadda waxa aan xasuustaa 2bil kahor dal dibadda ah ayaan safar kasoo ahaa markaan "immigration"-ka imid waxaan la kulmay qoladii immigration-ka. Waxa ay igu yiraahdeen, halkee baad u safraysaa, waxaana ugu jawaabay Soomaaliya, Kaddib, waxa ay igu yiraahdeen wax "document" ah ma haysataa oo Soomaalinnimadaada cadaynaaya, Markaas ayaan ku iri, may. "Id-card" ma haysataa? maye. Passport Soomaali ma haysataa? Maye. Kan aan wato ayaan haystaa ayaan ku iri. Waxa ay igu yiraahdeen Soomaaliya uma safri kartid, Ii fasira ayaan iri, sidee ayaan ugu safri karin? Soomaalinimadaada wax caddaynaayo ma jiro, Muran baa na dhex maray.

  Qof dumar ayay ahayd, waxa aan ku iri, cidda kaa saraysa u yeer, Waxa ay iigu yeertay nin kale isagana waxa uu i yiri, "passport-ka" uu ku safrayo meesha uu ku dhashay ka fiiri. "Passport-kii" ayay fiirisay, waxaase ku qornaa Soomaaliya in aan ku dhashay, Ninka waa Soomaali, Soomaaliya ayuu ku dhashay ee siidaa buu ku yiri, Waan soo safray inta ayaan imid. "immigration-ka" ayaan tagay, Waxa aan ku iri, ma sharci aad soo saarteen ayaa jira, qof ka soomaaliga ee dibadda ka soo safraya ee passport-yada kale wata Soomaalinimadiisa wax caddynaya haddii uusan wadanin in dalka uusan usoo safri karin. Dabcan wuu jooga madaxa "immigration-ka." Markaas ayay waxa ay igu yiraahdeen, arrin hadda ka hor ayaa jirtay oo oranaysa ilmaha Soomaaliga ah ilaa qof soomaali ah iska dhaleen balse dibadda ku dhashay "visa" ayaa looga baahanayahay, labadiisa waalid soomaali ayay ku dhasheen ilmaha dibada ku dhashay, ilmahaas imaanaya dalka marka ay usoo socdaan dal ku gal ayay u baahanyihiin oo "visa" ayay u baahanyihiin. Arrintan lafteeda in lagu baraarugsan yahay

dhacdo, ani igu dhacday, arrintaas in ay dad badan ka warqabaan ayaa laga yaaabaa, Hadda qodobkan sida uu u qoran yahay "imaan karo, ka bixi karo," marka arrintaas waxa an oran lahaa Guddiga dedaalkiina waan idinku amaannayaa, bal in lagu baraarugsanaado. Waa mahadsantihiin.

15) **Xil. Hussein Ali Haji:**
Waxa aan salaamayaa Xildhibaannada sharafta leh, labada Guddi ee Dastuurka, bahda saxaafadda iyo dhamaan marti sharafta Assalaamu Calaykum. Waxa aan rabaa inaan u mahadceliyo labada Guddi; Gudiga Madaxabanaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka iyo kan Baarlamaanka. Shaqada ay so qabteen inaan uga mahadceliyo ayaan rabaa, aad ayaan ugu faraxsanahay inaan ka mid noqdo Barlamanka 11aad ee Dastuurka dib-u-eegistiisa u fadhiya. Waxa aan rabaa in aan toos u galo dooddayda:

- **Qodobka 11(1)** waxaa ku qoran: muwaadiniinta oo dhan ayaga oo aan loo eegin lab, dheddig, diin xaalad bulsho ama dhaqaale, afkaar siyaasadeed qabiil ama naafannimo. Muwaadiniinta hadii la dhaho waxa ay noqonaysaa ummada Soomaliyeed. Marka waxa aan qabaa diinta in meesha laga saaro, sababta oo ah Soomaali marka la dhaho Soomaali oo dhan waa isku diin iyo isku dhaqan, marka taas ayaan qabaa.

- **Qodobka 14(4)**: Gudniinka fircooniga waa wax dhib badan oo ummadda dhibay, gabdhahana ay xanuun fara badan ka qaadaan. Waana arin fiican ka horaggiisa. Ilaa iyo hadda dad ayaa wado Wacyigelin badan waa in laga sameeyaa oo arrintaas la joojiyaa. Jirdil ma ahanee waa jariimo in qof ka la jaro, dhibaatadaasna loo gaysto. Maamooyinka waxaas samaynaayo ayagaa laga yaabaa inay fircooni yihiin, marka waxa aan qabaa inaan gabdhaha yar yar lagu samaynin arrinkaas.

- **Qodobka 15aad**: Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay, inuu ku biiro qof kale ama koox; Xaqaas waxaa ka mid ah inuu abaabulo ama uu ka mid noqdo ururro ay ka mid yihiin ururro dhaqaale ama xisbiyo siyaasadeed. waxaa kale oo uu xor u yahay inuu ku biiro ururro koox dad baa ku gabbanaayo, sida ururro diimeed; Khawaarijta oo kale, Marka **waxa aan qabaa in la xaddido ururradaas.**

- **Qodobka 20aad**: Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay inuu abaabulo, kana qaybgalo kulamo iyada oo aan oggolaasho loo baahnayn. qofkaan meesha uu bannaanbaxa ka samaynayaa maamul ayaa kajiro. Qofkaas aminigiisa in la sugo ayuu u baahan yahay, Waxaana qabaa in lagu soo daro qofka bannaanbaxa samaynaayo inuu maamul meesha ka jiro warqad kasoo qaato si aminigiisa loo ilaaliyo. Hadii kale Soomaali wa naqannaa, bannaanbax samaynaa, boor yar iska so qadanaa, amniga iyo "problem" kale meeshaas ka dhacaya. Arrintan in aad loo fiiriyo ayaan qabaa.

- **Qodobka 17(1)**: Qofna gurigiisa ama meesha kale ee u gaarka ah lama geli karo, lama baari karo, lamana basaasi karo amar garsoore la'aantiis. Qofka hadii uu arko qof qof dhibataynaayo lama basaasi karo, waxa aan u fahmay, qofkaas lama sheegi karo Sababta oo ah, qofkaan qof qof dilaayo wa aragyay, qofka maxkamad muu tagaa? Saldhigga u dhow tagaa, oo uu ku shegaa in qof kan lagu dhibatenayo ama meel hoobiyo laga so tuuri kara, qof arki karo inu usheega muhiim waayo, Waxa aan qabaa qofka wax sheegaayo inaan maxkamad lagu xirin, Waxa aan qabaa in qodobkaan dadka loo faahfaahiyo si ay dadku u fahmaan. Sida oo kale waa aan rabaa in aan ku darsado arrin ka bixsan dooda (dood iyo is

qabqabsi) --------------- Guddoomiye Sacdiyo: mudane iska fariiso waad mahadsantahay, wax ka baxsan doodda dastuurka lama oggolo).

16) **Xil. Mowlid Abdi Mohamud:**

Waxaa laga hadlayaa waa 10 qodob oo ah cutubka labaad, qodobkiisa 10 ilaa 20aad. Xildhibaannadii iga horreeyayna waan xoojinayaa. Waxa aan rabaa inaan ka bilaabbo qodobka 11aad: Sinnaanta iyo caddaaladda muwaadiniinta oo dhan iyaga oo aan loo eegin lab iyo dheddig, diin, midab, xaalad bulsho ama dhaqaale afkaar siyaasadeed qabiil, naafannimo, xirfad, dhalasho isir, da' iyo afguri toona, Xuquuqda iyo waajibaadka way u siman yihiin xeerka hortiisa si waafaqsan Shareecada Islaamka. Qodobkaas waxa aad moodaa in si xogaa iskaga hor imaanayo. waxa aan ku jira ereyga "diin:, marka waa diinte diinta la leeyahay? Marka waxa aan qabaa in ereygaas diinta laga saaro, madaama gadaal looga sheegaayo farqada 1aad "aakhirkeeda" uu ku jiro si waafaqsan Shareecada Islaamka

- **Qodobka 11(4)**: Qofna maqaam iyo maamuus uu leeyahay awgeed ugama baxsan karo la xisaabtanka iyo ciqaab faldambiyeedka uu galay, Waxa aan dhihi lahaa qodobkaas wuu kooban yahay ee in "tafaasiil" yar la geliyo oo caddeynaysa qofka xasaannada leh xeerarka loo marayo, garyaqaanka, xeer ilaalinta iyo maxkamada. markaa qofka xasaanada leh waa in loo soo maro xeer ilaalinta, garyaqaanka, maxkamada markaas kadib oo na la arko isaga oo ficilkii faraha kula jira. **Markaa waxa aan oron lahaa qodobkaa waa koobanyahay hala baaro ama aysan ahayn sidiisii ha loo daayo**

- **Qodobka 13(2)**: Xaqa noolosha. Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay noolol waa sax. Nooloshu waa deeq Ilahay Subxaanahu Watacaalaa siiyay bani'aadamka oo dhan, Shukran yaa Rabbi; Sidaas daraadeed, waa xaq dabiici ah oo qofna laga qaadi karin. Xoogahaa qodobkaan maadama waxa uu dastuur yahay waxaa ku jira tafaasiil dheer, waxa aan oran lahaa: meesha ay ka bilaabannayso oo ah, haddii aysan jirin asbaabo uu xeerku tilmaamayo in xaqaas lagu waayi karo iyada oo xukun maxkamadeed oo kamadambays ah lagu xukumo qofka, waxa aan oran lahaa xeerka halagu soosaaro, maadama waxa dastuur bulsho yahay, oo warkaas tirada badan xeer hala geeyo ayaan oran lahaa.

- **Waxaa jira isla Qodobka 13(3)** ee soo-ridida-ilmuhu waa arrin ka soo horjeeda Shareecada Islaamka, waana reebbantahay. Waa sax marka anigu soo-ridid waligay ma maqlin, waxa aan maqlay soo-xaaqid. Ereygaas waxa aan oran lahaa hala dhoho soo xaaqida. Ilmaha maadaama aysan ahayn wax meel saaran oo la soo ridayo.
- Haddii ayna keenin xaalad caafimaad oo aan laga maarmin badbaadinta nolosha hooyada, ayna sugeen Guddi Dhakhaatiir ah, oo lagu kalsoon yahay, Iyadana waxa aan oran lahaa: Noolasha hooyada uu sugay dhakhtar u khaas ah dhalmada, Sababtana waxaa weeye: Hooyo uu sidkeedii go'ay oo xaalad adag gashay, oo meel tuula ah joogto oo la rabo in la kala badbaadiyo ilmaha iyo hooyada, Guddi Dhakhaatiir ah halkee bay ka imaan? Ma guddi heer Maamul-gobaleed baa, mise heer Federaal? Micnaha Guddigaas muxuu yahy? Ma cadda! Waa in la caddeeyo Guddiga Dhakhaatiirta ah ee markaas lala xiriirayo. Haddii Guddigaas laga maarmana waxa an oron lahaa ha laga dhigo: Sugay dhaqtardbhalmada u gaar ah. Si loo badbaadiyo qofkaas muwaadinka ah, oo aysan labadaas nafood u wada go'in

- **Qodobka 15aad**: Xornimada ka mid noqoshada. Iyada waxa uu qof kasta xaq u leeyahay inuu ku biro dad. waxa aan oron lahaa in laga dhigo “xisbi siyaasadeed,” sababta oo ah, koox kale haddaan dhahno waan ognahay dhibaatada kooxaha kala geddisan iyo waxa

dalka dhibka ka jira.  qof kasta waxa uu xaq u leeyahay inuu ku biiro xisbi siyaasadeed, ku biiritaanku halkaa ha innaga joogo, ku biiritaan kale yaan la inoo soo qorin.

- **Qodobka 17(1):** Xurmada hoyga. Qofna hoygiisa ama meelaha kale ee u gaar ka ah lama baari karo, lamana basaasi karo amar garsoore oo sababaysan la`aantii. Halkaas waxaa ku jira shacab iyo qof xasaanad leh ba, Markaa waxa aan oran lahaa, qofka xasaanadda leh lama caddayn sida loo baarayo hoygiisa annaga oo og in xeerarka uu marayo qofka xasaanada leh marka la baarayo sida in xeer-ilaalin, garyaqaanka guud, maxkamad in warqad laga soo qaato marka qodobkaana xoogaha waa kooban yahay, tafaasiil yar in la geliyo ayuu u baahan yahay.

- **Qodobka 17(2):** ee dastuurka ku-meel-gaarka ah, faqradiisa 9aad dhahayso; waxaa waajib ah in amarka garsooraha loogu akhriyo daganaha hoyga, baarahana waxaa reebban ku xadgudubka sharciga, Qodobkaas xurmada hoyga ayuu ku beegan yahay, waa laga booday. Waxa aan oran lahaa qodobkaas waa qodob si fiican wax u tafaasiilinaya halagu soo daro oo haloo daayo sidii hore, sababta oo ah halkan faqrada waxay sii raaciyeen faqradaan waa la tiray, maadaama ay nuxur ahaan ay kujirto faqarada kore iyo qodobka 34aad faqrada kore sifiican uguma cadda, Sida halkaan ugu caddahay haloo daayo, faqradda 34aadna waan aqriyay kumajiro. Marka waxa aan oran lahaa, sideedii hore ha loo daayo. Gudoomiye Xuseen waxa aanu malaynayaa waad mashquul baadan tahay, anigana waan hadlayaa. Waxa aan rabaa soojeedimaha aan soo jeediyay, waan ku xisaabtami doonaa waana mahadsantihiin, Assalaamu calaykum.

17) **Xil. Mohamed Ahmed Mohamed (Beerey):**

Guddoonka labada gole, Xildhibaannada sharafta badan Assalaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatu. Intaas kaddib, waxa aan u mahadcelinayaa dabcan Guddiga Baarlamaanka iyo Guddiga Madaxabannaan shaqada fiican ee ay runtii soo qabteen iyo dadaalka ay bixiyeen, way ku mahadsanyihiin, Wuxu markay bilowyihiin dabcan "maraaxil" badan ayay iska marayaan, waxaana rejaynaynaa marka in sida hadda ay wax u socdaan marka looga sii dhawaado, qodobada sida gaarka aan rabo inaan u dul istaago. Marka hore waxaan rabaa erey-bixin kooban. Meelo badan waxa lagu sheegay ereyga "cunfi". dad badana waa ka hadleen, ereygaa Af Soomaali ma ahan dabcan, waxaana isleeyahay inta af Soomaali sax ah looga helaayo, gacan-ka-hadal in lagu beddelo, haddii wax ka dhaw la keenana waa fiicantahay. Sidookale, waxaa soo arooray oo meelo badan kusoo arooray jumladda "sharciyan." Sharciyan Af Soomaali ma ahan, marka ha lagu beddelo jumladdaan: sharci ahaan, Waxaa wax badan la sheegay oo buuggaana runtii ku qoran qodobo la yiri waxa loo qoray hab-qaanuuni ah. Dhawr qodob ayaa jirta oo la idhi waxa loo qoray hab-qaanuuni ah, Waxa aan jeclaan lahayn habkaas qaanuuniga ah goortaan helayno. Haddii ay Guddigu noo soo hor marin lahaayeen natiijada ugu dambaysa markaasaa la heli lahaa, qodobada hab-qaanuuni ah ayaa loo qoray marka la idhaahdo waa la dhameeyay waaye micnaheeda, Marka waxa waaye inaan helno qodobadaas ku cad buugga oo la yiri hab-qaanuuni ah ayaa loo qoray meeshaanna aan ku caddayn in la soo caddeeyo si aan uga gudubno, haddii ay wax u dhimanyihiinna aan wax uugu darno. Intaas kaddib, waxa aan rabaa qodobada aan is leeyahay dabcan wax badan ayaa laga hadlay oo xildhibaanadu waa ka hadleen, waxa aan isku dayi doonaa wixii horay looga hadlay inaan ka gudbo, wixii aan laga hadlina wixii ra'yi ah aan ka dhiibto.

- **Qodobka 10 (1):** Oo looga hadlay karaamada aadanaha. Si guud waxaa meesha lagu qoray, karaamada aadanuhu waa deeq Ilaahay (SW) uu ku mannaystay qof kasta oo bini'aadam ah, xuquuqda aadanuhuna sidaas ayay ka dhalataa. Intaas kuma filna ayaan is leeyahay, Maxaa dhawraaya? Maxaa xifdinaaya? Maxaa sharci ah oo ilaalinaaya? Waxa aan u baahannahay in lagu daro, **Waxaana damaanad qaadaya sharci,** ileen annaga Illahay ayaa insaanka karaamo siiyay oo qur'aankiisa ku sheegay: (وَلَقَدْ كَرَّمْنَا بَنِي آدَمَ وَحَمَلْنَاهُمْ فِي الْبَرِّ وَالْبَحْرِ).

  Laakiin sidaa maa la isku siinaa, intaasi maku filantahay? Karaamo Ilaahay siiyay insaanka Ilaahay xagiisuu kala imid, halkaasay ku dhantahay ma uga gudbi karnaa? Waxa aan is leeyahay marka in annaga aan soo afjarno oo siday Alle uga timid ku darno sharciguna inuu sideeda u damaanad qaadaayo. Qodobkaas intaasaan dhihi lahaa, waxa kale oo aan meeshaan aan is leeyahay habka-qoraalka sidii hadda Xildhibaanno badan ay ka sheegeen sida loo qoraayo qodobada qaar xoogaa Af Soomaali ah oo iska sheeko camal ah ayay u eegtahay, marka qaanuun la qoraayo ama dastuur la qoraayana waxaa fiican wuxu inuu "luuqatul qaanuun" ku qornaado.

- **Qodobka 10 (2)**: Waxaa meeshaa ku qoran oo aan is leeyahay karaamada aadanaha, waa dabcan faqrada labaad waaye, Faqradaan sideedaa loo qaatay baa ku qoran gunaanadka laakiin waxa ay u qorantahay karaamada aadanaha waa laguma xadgudbaan, dhawristeeduna waa waajib saaran dadka oo dhan. Waxa aan isleeyahay kuma filna, dadka oo dhan haddii is dhawrayaan qaanuunba looma baahdeen marka waxaaan isleeyahay iyadana waa in lagu daraa sharciga ayaa u damaanad-qaadaaya, sababta oo ah, sidaas ayay u xusantahay, sidiisii ayaa loo soo guuriyay. Waa inaan annagu markaa sharcigeena ku caddaynaa iyo dastuurkeena inuu isagu damaanad-qaadayo, sidaasna uu ku damaanad qaadaayo.

- **Qodobka 10 (3):** Waxaa qoran awoodda dowladda waa in aan marnaba loo isticmaalin ku xadgudbida karaamada aadanaha, iyadana waxa aan isleeyay siiqo qaanuuni ah uuma qorna. Waxa aan is leeyahay inay ku bilaabato "waxaa reebban" maadaama ay tahay wax sharci ah oo hadda la rabo in lagu cadeeyo. Waxaa reebban in loo isticmaalo awoodda dowladda ku xadgudbida karaamada aadanaha in la dhaho oo luqada laga dhigo waxaa reeban, ereyga in sidaas loo isticmaalo.

- **Qodobka 11 (1):** Wax badanaa laga hadlay meesha waxa ku jirta diin ayaa ku jirto, diintana mawduuceeda sida Culimo badan ay sheegtay, Xildhibaanno badanna ay sheegeen waa lasoo xaasiliyay. Qaanuunkuna waa cad yahay dastuurkuna waa cad yahay, diinta meel ayaa la dhigay sida hadda xildhibaan Abdullahi uu lahaa faro-faraynta badan in laga dhaafo ayaan qabaa, Diinta meel ayaa la dhigay, dastuurkeenu waa caddaynayaa, diinta dadkeena, dalkeena iyo dawladdeenu waa islaam inaan meeshaas uga gudubno oo laga saaro meeshaan diinta, maxaa yeelay baahi hadda keenaysa in halkaan diinta lagusoo celiyo ma jirto, mawduuca diintu waa xasilisanyahay, faqro gaar ah oo dastuurka ah ayaana lagu soo xasiliyay, sideeda in loo dhaafo ayaan ku raacsanahay, xildhibaanada runtii soojeediyay, marka in laga saaro diinta faqradaan.

- **Qodobka 17 (1):** Waxaa lagu sheegay qof kasta waxa uu xor u yahay inuu ku dhaqmo diintiisa. Labo qodob ayaa u baahan marka inaan kala saarno, daaraha cibaadada oo loogu talo galay dadka aan muslimiinta ahayn "duurul cibaada" ayaa la dhahaa, dalkaan markaan ka hadalno diintiisa iyo dad islaam ah inuu yahay aan soo xasilinay waxa soo haray waa

dadka imaan kara oo ajaaniibta ah, dee diintaa xasilisay ( ولولا دفع الله الناس بعضهم ببعض لهدمت صوامع وبيع وصلوات) Diinta islaamku waa ka horraysaa wax walba. Waxa la sheegaayo oo la leeyahay haddii aan Ilaahay dad, dadka kale uusan u dabcin lahayn waxa la dumin lahaa (صوامع وبيع وصلوات) intaas annaga malihin waa dad kale oo diimo kale leh ayaa loogu talo galay in loogu ilaaliyo meesha ay ku cibaadaysanayaan, Annaga waxaan ku leennahay waa Masaajid, markaa diinta Islaamku iyadaa, Intaas waxaa dheer dadka muslimiinta ah oo Soomaaliyeed, wax waxaa jira diinta Islaamku ay ka hadashay oo la idhaahdo “dimah”. Dimada muslimiinta, nabigu csw waxa uu yidhi waa “waaxid,” yacni dadka muslimiinta qofka ugu yar ayaa qaadan kara lamana taaban karo “dima-”da. Aniga oo qof muslim ah oo Soomaali ah ayaa waxa aan siin karaa dad aan Islaam ahayn. Waxaa waajib ah marka inay helaan meel ay ku cibaadaystaan oo ay diintooda iyo xuquuqdooda ku qaataan, markaa anigu waxaan leeyahay yaan la ksku darin qodobka diinta oo sheegaaya dadka Soomaaliyeed iyo dastuurkiisa iyo diintiisa iyo qodobka dadka ajaaniibta ah ee aan islaamka ahyn ee xaqa u leh in loo sameeyo meelo ay ku cibaadaystaan, dalkanina waa lahaan jiray, ha loo dhiso Kaniisadahoodii, Ha loo dhiso meelihii ay ku tukan jireen, Ha imaadaan dalka, taas waxaan qabaa marka in sharciga mudnaan sidaasa ku lahaato sidaasna u cadaato.

- **Qodobka 14 (2):** Marka laga hadlaayo xorriyada**,** qof kastaa waxa uu xaq u leeyahay amniga qof ahaantiisa, hantidiisa. Labadaas qodob ayaa lasoo qaatay, marka laga hadlaayo qofka bini aadamka ah oo islaamka ah waxa uu xaq u leeyahay "Maqaasida Shareecadu" intay sheegtay weeyi. Waxa aan soojeedin lahaa marka in la dhamaystiro oo aan lagu soo koobin keliya hantidiisa iyo naftiisa, aan lagu soo koobine intii Shareecada Islaamku ay siisay oo maalkiisii iyo naftiisii iyo xorriyadiisii iyo in la is raaciyo oo qodobkaas intaas lagu soo daro, Waxa aan ku dari lahaa, isla qodobkan waxaa ku jira inaan qofna loo gaysan karin qaab kasta oo jirdil ah ama fal bini'aadantinmada kabaxsan, Falka bini'aadannimada kabaxsan laftiisu waxa uu u baahanyahay in la sheego maxaa fal bini’aadannimada ka baxsan ah? maxaa se ahyn? Waxa aan ku dari lahaa marka meesha la yidhi waxa reebban xadhig, ama **xorriyad ka qaad in lagu daro** qodobkaasna, sidaas baan ku tilmaami lahaa.

- **Qodobka 13 (3)**: Faqraddaan oo ay dad badanina ka hadleen oo ku saabsan ilmo-soo-ridida, waxa badanaa laga sheegay runtii. Meesha aan uga socdo waxaa waaye, meesha la yiri, Guddi 3 dhakhaatiir ah; Dhawr qof ayaa ka hadashay, runtii oo caddaysay, marka diinta Islaamku waxaan oo kale ay ka hadlayso ama fuqahadu ay dajinayaan waa la “qayidaa”. Waxaa la idhaahdaa qof lagu kalsoonyahay, khibradna leh. Waxa aan soojeedinayaa sidii hadda meeshaan qofkii iga horreeyay uu ka hadlay, **in la yiraahdo dhakhtar, khibrad leh, laguna kalsoonyahay,** oo intaas loo dhaafo oo aan Guddi laga dhigin.

- **Qodobka 17 (1):** Ee ka hadlaaya qofka hoygiisa ama meelaha kale iyo waxyaabaha uu gaarka u leeyahay lama basaasi karo amar garsoore oo sababaysan la’aantiis, aniga waxa aan ku dari lahaa oo aan codsan lahaa in lagu daro, **in aan la gali karin habeenkii 8:00pm ilaa 6:00am.** Qodobkaas intaas lagu soo daro si looga gudbo "Ziwaalu leyl" waxa la yodhaahdo. Waad mahadsantihiin.

18) **Xil. Abdikarin Omer Hussein:**

Bismilahi Al-raxmani Al-raxiim. Guddoonka Golaha, Xildhibaannada sharafta leh, waxa aan rabaa inaan wax yar ku darsado dooddan socoto, Waxa aan rabay maantay inaan ka hadlo, nimanyahow waan ka xumahay golaha waa laga maqanyahay, dad badan inay joogaan ayaan jeclaa, waan hanjabaa markaan meesha imaado iyada oo dad yar ay joogaan.

Marka waxa waaye dastuurkan aan taataabanayno waa dastuur markii hore ay sameeyeen ama ay soo diyaariyeen dad isku cadhaysan, Haddaad xasuusataan 2000 markii arrimahaan la galaayay, "television"nada ayaad kala socoteen Soomaalidu waxay ahaayen Soomaali isku cadhaysan oo is dishay, is dagaashay oo nin kasta ninka kale iska riix uu leeyahay, nin kalena uu leeyahay ka kale ka wax badso, laakiin hada waxaa la joogaa waqti sidii laga degganyahay. Marka aan arrintaas ka hadlaayo waxa aan la hadlayaa Guddiga Madaxabannaan ee dastuurka iyo Guddiga la socodka dastuurka.

Markaa hadda waxaa la doonayo waa dastuurkan iyo Soomaalidaba in salka loo dhigo, oo si nidaam ah oo deggan loo fadhiisiyo, ileen "engineer-" ku marka uu guri dhisaayo "basically" horta waa inuu aasaaskiisa fadhiisiyaa, Guri aan aasaaskiisa la fadhiisin berrito waa soo dumaayaa, Marka waxaa waaye in aasaaska guriga aad si fiican uga dhistaan, si aysan Soomaalidu dib dambe isku ciilkaambinin, isku xumaynin, isku caroonin, ooy wax iskaga sheegin, idinkaa la idinka rabaa inaad intaas ka shaqaysaan hadii Alle yiraahdo.

Taasi waa arrin yar oo aan idin la damacsanaa inaan idin sheego, waad ku mahadsantihiin sida aad uga soo shaqayseen bahalka iyo sidaad ku wadaan laakiin waxa aan idiin sheegayaa waxbadan inay idin sugayaan, "because" Soomaalida wax 4.5 la yiraahdo ayaa dhib faro badan u gaystay, 4.5ka inaad ka saartaan idinkaa la idinka rabaa, Guddiyadan hawshan loo diray ayaa la rabaa inay ka saaraan, 5 beelood oo siman in la noqdo wax wayn waaye "because" 5 beelood oo siman haddii la noqdo waa la isla jaanqaadi karaa, laakiin banooni inay wada ciyaaraan kooxo kala xirfad ah is lama jaanqaadi karaan. Markaa waxa waaye, arrintaas waxa aan uugu darsanayo waxa waaye in aad loo fiiriyo, oo sida aad u fiirin kartaan aad u fiirisaan ood wax ka qabataan arrintaas. 4.5 waddankaan kuma socon doono, waa waxa qaribbay waaye, waana aasaas aad u xun laakiin markaas xal ayay ahayd.

Marka qodobkaas 10aad, innaga oo ka jaanqaadayna, waa in sinnaantii lagu soo celiyaa dastuurka iyo horey u socodka siyaasadda dalkaba, Sinnaan iyo caddaalad hadii la helana waxkasta way iska hagaagayaan, wax walba sinnaan iyo caddaalad bay rabtaa. Markaa nimanyahow Soomaalidu waxa ay tiraahdaa marmar, waa xal ayaa la idhi oo xaq maaha maalinkii la samaynayay ee carta la joogay, waa xal ee xaq maaha ayaa la yidhi, diinta Islaamkana kuma jirto waxaan waa xal ee xaq ma ahan, Marka waxa waaye in arrintani si fiican loo fiiriyo, oo hoos loo fiiriyo, wax wayn oo meesha ku jiro waaye "that means" waxaa jira hadda hala dudumiyo maaha laakiin waa in arrintaas dib loo fiiriyo oo la saxaa, maanta wax waa la sixi karaa weeye.

Shalay haddii aan lasixikarin oo dadka dhan wada caraysnaa, maantay dadku way deggan yihiin, sidii hore waa la dhaamaa 50%, ani sidaasaan qabaa wax intaas kasii dheer waa baraarujin aan baraarujinayay Guddiga in arrintaas ay dhinac kasta ka fiirshaan, waana mahadsantihiin dhamaantiin.

19) **Xil. Yasin Abdullahi Mohamud:**

Bismillahi. Alxamdulillah. Guddoonka labada aqal, Xildhibannada labada aqal, Guddiyada labada heer iyo dhamaan saxaafada Assalamu Calaykum Waraxmatullahi Wabarakaatuh. Bacda salaama, waxa aan rabaa inaan gudagalo qodobada aan abaarayo:

- **Qodobka 17:** Oo ka hadlaya xorriyada diinta iyo caqiidada, meesha waxa ku qoran waa la tiray, sababta loo tiray iyo cidda la gala tashaday Guddigu waxa ay sheegeen haddaanan

khaldanayn in Culimada la gala tashaday. Markaa culimada waa lala tashan karaa oo waa sax, laakiin waxa ku qornaa qodobkaas qof kasta wuxuu xaq uleeyahy inuu ku dhaqmo diintiisa, markaa diinta sida la sheegay soo laalaabashadeeda, haddii lagu laalaabto waxyaabo khaldan ayaa lagala kulmayaa. Anigu waxa aan qabaa marka qodobkaas in sidiisa loodaayo, waa latiray, calaamado ayaa saran meeshana waxa aad kusoo qorteen in latiray intaas kaddib,

- waxaan rabaa isla, **Qodobka 17(1):** ee aad kusoo qorteen xurmada hoyga, waxa ku qoran qofna hoygiisa ama meelaha kale ee u gaarka ah lama baari karo, lamana basaasi karo. Iyadana waxa aan qabaa baaritaanku waxa uu leeyahay siyaabo kala duwan ama waddooyin badan ayaa loo maraa in dad la baaro, waxaan is leeyahay markaa baaritaanka, waxa aan la baari karin in aysan jirin ayaan aaminsanahay. Aniga waxa ay ila tahay marka qofku hadii u xasaanad leeyahay isaga iyo gurigiisa, laakiin qof walba, wax walba waa labaari karaa, markaa iyo waxa uu wato ayaan qabaa in laga daayo ayaan qabaa anigu.

- **Qodobka 18(1)**: Oo ka hadlaaya bannaanbaxyada iyo cabashooyinka. Waxa aad ogtihiin waxa aan soosaarnay, labadaan qodob way is keenayaan qodobka 17aad iyo qodobka 18aad, xeeraar ayaa ka yaala bannaanbaxyada, amniga iyo baaritaanka. Waxa aad ogtihiin annaga shuruuc aan "pass"-gareynay ayaa jirta, xeerarkaas annaga aan "pass"-garaynay oo dastuurku uu "base"-ka u ahaa waxa aan isleeyahay dastuurka in lagu qoro waxyaabaha "base" ka ah, si haddii xeer ka yaala uu jiro loo waafajiyo. Haddii xeer ka yaala uusan jirina xeer loo sameeyo. Markaa bannaanbaxyadu waxa aan isleeyahay, xaalada markaas jirta hadii ay tahay amniga ama wixii markaas jira in la waafajiyo, waxa ay u baahantahay marka in hafdii ay tahay marka wasaarad iyo haddii ay tahay cid kaleba in "calal aqal" laga qaato booliiska fasax laakiin aysan ahayn in bannaanbax la iska samayn karo, Waxa aan is leeyahay marka xeerar ayaa ka yaala, haddii aysan ka oolina ha loo sameeyo, laakiin dastuurkii inaan waxba laga samayn karin inaan lagu qorin, intaasaa ka leeyahay.

- **Qodobka 15aad:** Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay inuu ku biiro dad kale, Waa kuma dadkaas? Waxa aan is leeyahay qodobkaan 15aad waxa laga soo min-guuriyay qodobka 16aad haddaanan khaldanayn. Mararka qaar waxa aad is leedahay maa sidii hore loo daayo, waayo waxa laga mid noqonaayo inay caddahay waaye, marka in lagu qoro, qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu kamid noqdo ururo, ama urur siyaasadeed ha noqoto ama ururo shaqaale ha noqoto ama urur waxbarasho ha noqoto laakiin meesha cid kale iyo waxaas lagu qorayo in urur lagu qoro, ururkaas marka lasii faahfaahiyo ayaan qabaa. Assalaamu Calaykum.

**20) Xil. Abdulasis Mohamed Mohamud QAMBI:**

Bismillaahi Alraxmaani Al-raxiim. Assalaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatu. Waan soo koobayaa oo waqti badan ma jiro. Dastuurka waxa weeye hawshiisii ugu dhibta badnayd, waxa aan isleeyahay way dhimantahay, intanina hawshayday leedahay, markaa qodobadaan toos u galayaa:

- **Qodobka 11 (1):** Marka aad akhrido, waxa ay ka hadlaysaa muwaadiniinta oo dhan. Xildhibaanno badan baa sheegay, waan adkaynayaa, maxaa yeelay adkayntaasi waxay saamayn ku yeelanaysaa wax-kabeddelidiisa. Muwaadiniinta oo dhan iyada oo aan loo eegin lab iyo dheddig, "**ama**" meeshii uu xildhibaanku ku daray waan qabaa, diin ayaa ku qoran markaa aniga waxaan isleeyahay diinta kiiskeedi waan xirnay dhanka muwaadiniinta oo

diinta dalka iyo dawladu waa Islaam ayaan niri, sidaas daraadeed meeshaas muwaadiniinta ah qof kasta ama cid kasta hala idhaahdo oo muwaadiniinta halaga badalo ayaan qabaa, oo arinta halkaas sidaas ha noqoto.

- **Qodobka 11 (1) iyo (2):** Wax macno ah kuma kala duwana, waa isku mid sida muuqata. Sidaadaraadeed, waxa aan is leeyahay iyadana wixii laga qaban karo halaga qabto, Waxa aan aad u sheegayaa, dastuurka waxa aad moodaa in uu sidii "novel"-kii u qoranyahayba, Meelaha qaarkood, sheeko ayaaba ku qoran Allah Subxanahu Watacalaa iyo si sheeko sheeko ah ayuu u qoranyahay, Markaa waxa aan is leeyahay halagu celiyo siiqo qaanuuneed, Haddii Guddiga ay "capacity-"gooda ka baxsan tahayna ciddii ay la kaashan karaan hala kaashadeen.

- **Qodobka 11 (4)**: Gebi-ahaanba hala saaro ayaan qabaa. Waan ognahay oo dalkeena waxa ugu badan oo dhibaatadu ka jirtaa ma aha waxa inoo qoran, ee waa sida loo dhaqmo weeye, Awoodda dawladnimada sida aynu u adeegsano weeye, qodobkaana waxa weeye wax badan baa loo adeegsan doonaa oo wax lagu dhimi karo, **waxaana is leeyahy qodobkaan la soo kordhiyay hala tirtiro, waa faqrada 4aad.**

- **Qodobka 12 (1)**: Oo ka hadlaaya dhaqangelinta xuquuqda asaasiga ah, waxa aan qabaa sidii tii hore ayaa aniga ila faham fiican, sidii hore halagu celiyo oo **sidiisii hore ha loo daayaan qabaa**.

- **Qodobka 13(1) iyo (2)**: Waa meelaha aan leeyahay dastuurku "novel" ayuu u ekaaday, oo buug sheeko ah ayaad moodaa. Waxa ay faqradiisa 1aad leedahay: Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay noolal, hoos waxa ku qoran noloshu, noloshii ayaa la fasirayaa. Dastuur fasiraadaha kuma shaqeeye aniga waxa aan is leeyahay, hal faqro halaga dhigo, hana la yiraahdo: **Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay noolal, waa xaq dabiici ah**, Intaa kale oo dhan meesha ha laga saaro, hal faqrana ha laga dhigo. **Aniga hal faqro ha laga dhigo ayaan qabaa,** oo meeshan sheeko barolayda badan oo ku qorana ha laga saaro.

- **Qodobka 13 (3):** Arrinta ka hadlaysa ilmaha iyo hooyada isku xanuunsada, waxa aan la qabaa dadkii yidhi guddiga halaga saaro, oo **dhakhtar shaqadaas yaqaana ha loo daayo.**

- **Qodobka 14 (2):** Faqraddan oo hadaaya aan u malaynayo inay Senataraddu sheegtay, sida ay ka sheegtay aniga waan fahmi waayay, Waxaa weeye dastuurkana dhawr jeer baan niri yuusan noqon wax ummada Soomaaliyeed garan waydo oo fasir uga wada baahato ee uu ahaado wax la wada garan karo, wixii markaas u baahda fasiraad dheeri ahna Maxkamadda dastuuriga oo shaqada ku leh lala aado.

- **Qodobka 14(4):** Oo xorriyada iyo nabad gelyada qofnimada ka hadlaayo, waxa aan is leeyahay qaybtiisa gudniinka fircooniga ah ka hadlaysa loomaba baahna, ee meesha ha laga saaro. Dastuurka gudniinka fircooniga ah iyo waxaa gudniinada ka sheekaynaya ama wax "uniform" ah ha noqoto oo faqrad gudniinka ka sheekaynaysa hala qoro ama halaga wada saaraba, Dastuurkaan aad moodo "NGO"-gii gabdhaha iyo shaqadii banaanka ka jirtay, ceeb weeyaan waxaas dastuurka halaga saaro. Shareecada Islaamka iyo diintu waxa ay qabto ayaa dalka sharci iyo xeer u ah kaasaa dhaqaya, sida la isku gudaayo, nooca la ksku gudaayo uma baahna, markaa dastuurku mabda'na ma noqon karto gudniin fircooni ah in dastuur lagu qorana m qabo, ee **halaga saaro.**

- **Qodobka 15aad:** Oo ka hadlaaya xorriyadda ka mid noqoshada, waxa ku qoran: qof kasta, hoosna waxa ku qoran xisbiyo siyaasadeed. Qof kasta waxa aan isla sheegnay inuu yahay cid kasta oo Jamhuuriyadda ku nool. Markaa dadka aan muwaadiniinta ahayn maku biiri karaan xisbiyada siyaasadda? Halkaa waxa aan qabaa, qof kasta meesha ku qoran halaga saaro oo ama **muwaadiniinta hala dhaho ama siiqo kale oo lagu kala saari karo hala sheego, ileen** qof kasta oo dalkaan ku nool kuma biiri karo cidda uu doono e.

- **Qodobka 17aad:** Oo laga hadlay, oo la tirtiray, aniga waxa aan qabaa in la soo celiyo. Waa la sheegay si qoto-dheer baa Xildhibaannadu uga hadleen, oo uu ugu dambeeyay xildhibaan Beeray. Diinteena suubban waxa ay dhiirigelisaa wada noolaanshaha. Waxa ay dhiirigelisaa "Tacaayish silmi-"ga, Markaa aniga inaan dadka faquuqno, dadkan la noolaano dano badana aan ka leenahay, wax badan oo dalkeena horumarkiisa ku xidhanna ay ku xirantahay, ma noolaan kartaan oo ma cibaadaysan kartaan ma qabato. Aniga **waxa aan qabaa faqradaas siday ahayd ha lagu soo celiyo.**

- **Qodobka 16 (2):** Waan soo koobayaa, meesha waxa ku qoran qof kasta waxa uu xaq u leeyahay inuu si xor ah usoo bandhigo aqoontiisa ama hal-abuurkiisa faaf-reeb la'aan. Faaf-reeb la'aantaasi meel dheer ayay innala aadaysaa Waxaa weeye, waxa qofku uu soo bandhigi karaa wax dadka iska hor keenaya oo fidno keenaya Waxa uu soo bandhigi karaa wax "mukhil canil sharaf wal caqiida" ah. Aniga waxa aan qabaa faaf-reeb la'aan ha laga saaro halkaa, faaf-reeb la'aan meel dheer bay aadaysaa dadka waxaa ay siinaysaa xorriyad "mudlaq" ah, oo suurtagal ay tahay inay wax badan ku halaabaan.

- **Qodobka 17(1):** Waxaa qoran qofka hoygiisa ama meelaha kale iyo waxyaabaha gaarka u ah. Waan fahmi waayay, nin waxaan kala hadlay Guddiga ka mid ah. Markaa sida uu ii fahansiiyay aniga siiqo taas ka duwan baan is idhi haloo dhigo, taas oo sidaan ah: Qofka hoygiisa ama agabkiisa iyo goobaha kale ee gaarka u ah. Waxyaalaha kale macno badan bay leedahay, markaa kalmadahaas jiidjiidka badan geli karo halaga tago. Meelaha kale, waxa la iigu sheegay, xafiisyada shaqada oo kale, goobaha kale oo uu ka tirsanyahay, **markaa goobaha kale ee gaarka u ah hala idhaahdo ayaan qabaa.**

- **Qodobka 17 (2):** Oo la tiray aniga waxa aan qabaa ha la soo celiyo, maxaa yeelay qodobka 34aad eedaysane iyo waxkale ayuu ka hadlayaa, sidaa daraadeed **faqradaan 2aad oo la tiray ha lagu soo celiyaan leeyahay**.

- **Qodobka 19 (1)** : Waxa uu leeyahay: Qof kastaa oo dalka sifo sharci ah ku jooga waxa uu xaq u leeyahay inuu dego meesha uu rabo, kuna dhex socon karo dalka gudihiisa, si xor ah, ugana bixi karo dalka goorta uu doono. Waxa aan qabaa sidii Xildhibaan Foosiya sheegtay, dad badan oo noocyo kala duwan ah ayaa dalka ku noolaan kara, dad dano "ijraam" ah iyo waxyaabo kale looga shikisanyahay baa ku noolaan kara. **Waxa aan qabaa aniga in la qayido oo halkaa gadaal laga raaciyo hadii aysan jirin sabab sharci oo diidaysa,** intaa in gadaal laga raaciyaan qabaa oo la qayido oo aan dadkaas iyagana aan la siin xorriyad dhamaystiran

- **Qodobka 20 (3):** Waxa aan qabaa qodobkaam faqraddiusa (3) hala tirtiro, oo looma baahno, maxaa yeelay, waxaa ka hadlaayaba qodobkii aynu soo dhaafnay ee 4aad ee ahaa sarraynta Dastuurka. Qodobkaan waxa uu leeyahay: Xuquuqda ku xusan faqrada 1aad iyo

2aad ee qodobka waa in lagu dhaqmaa, si waafaqsan dastuurka. Waxa aan is leeyahay looma baahna in halkaan dastuurka shaki la geliyo, oo qodobada qaarkood in si gaara loogu dhaqmo la qoro. Waxa aan isleeyahay waxa ay xumaynaysaa dastuurka habka loo dhigayee, halaga saaro aayaan qabaa. Waad mahadsantihiin. Assalaamu Calaykum Waraxmatullahi Tacaalaa Wabarakaatuh.

21) **Xil. Sahur Haji Ulusow:**
Bismillahi Al-raxmani Al-raxiim.

- **Qodobka 11(1):** Sinnaanta muwaadiniinta oo dhan iyada oo aan loo eegin lab iyo dheddig, diin, midab, xaalad bulsho ama dhaqaale, afkaar siyaasadeed, qabiil iyo naafannimo intaba. Ani waxa aan dhihi lahaa lab ama dhedig, diintana waan ka saari lahaa maadaama annaga muwaaadiniin Soomaaliyeed aan wada nahay marka afkaar diimeed maba na qaban karto, marka sidaan sheegnayna diinteena waa Islaam, sunni, shaafici ayaan isku raacnay ama aan soo marnay, meel kastana waxa lagusoo celceliyay afkaar diin. Markaa ma garanaayo micnaha oo diinta mar kastaba loogu soo dabaqaayo, maadaama aan sheegnay inaan dal Islaam ah o diintiisa islaam tahay aynu nahay. Markaa meeshaas **waxaan dhihi lahaa lab ama dheddig, diintana ha laga saaro.**

- **Qodobka 11 (4):** Faqraddaas lagu daray waxa aan anigu soojeedinlahaa in laga tiro. Qofna maqaam iyo maamuus uu leeyahay awgeed ugama baxsan karo fal uu gaystay. **Taas aniga waxaan qabaa in la tirtiro.**

- **Qodobka 11 (2):** Waxaa reebban in qof lagu sameeyo si toos ah ama si dadban takoor. Intaana waxa soo gashay diinta, marka dadka aan Islaamka ahayn miyaa loo sameeyay horta mise dastuurka waxa loo sameeyay umadda Soomaaliyeed? Umadda Soomaaliyeed haddii loo sameeyay waa umad hal diin wada leh. Marka meeshaan marwalba diinta, diinta, lagu soo celcelinaayo aniga waxa ay ilatahay "conflict" badan ayaa ka dhalan karo.

- **Qodobka 13 (1)**: Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay noolal, iyo **amni** ayaan ku dari lahaa. Waxaa kale oo la soo raaciyay noolashu waa deeq Ilaahay. Waxaas oo dhan aniga waxa aan u arkaa hadaltiro inay yihiin.

- **Qodobka 13 (3):** Soo-rididda-ilmaha waa arrin kasoo horjeeda Shareecada Islaamka, waana reebantahay, Aniga intaas keliya ayaan ku dayn lahaa, wixii intaas ka faahfaahsan waa in lagu soosaaro xeer, oo yacni ilmaha lasoo ridaayo sidee yihiin? Marxaladda uu ku suganyahay, yaa lagala xiriiri karaa? Waxaas oo dha wa in xeer gaar lagu soosaaro.

- **Qodobka 14 (4):** Gudniinka fircooniga waxa aan qabaa in sidiisii hore lagu soo celiyo. Fircooniga in laga saaro, Gudniinka sidiisaba waa reebban yahay, Waxaana qabaa **in sidiisii hore ee uu ku qornaa asalka ahaa loo dhaafo.**

- **Qodobka 17:** Xorriyada diinta iyo caqiidada, Qof kasta waxa uu xor u yahay inuu ku dhaqmo diintiisa. Lama cayimin qof ka uu yahay; qof soomaali muwaadin ah miyaa? Qof kale miyaa? Arrintaas ani qalad ayaan u arkaa, Waxa aan ku beddeli lahaa: qof kasta waxa uu xaq u leeyahay inuu ku dhaqmo diintiisa Islaamka ah ee sunniga ah, Wixii Soomaali ka baxsan markaas waddanku Xildhibaanno buu leeyahay oo xeerar ha laga soosaaro sidii dadka aan Islaamka ahayn ay ugu dhaqmi lahaayeen waddanka.

- **Qodobka 15**: Qof kasta waxa uu geli karaa qofka uu rabo. Tan iyadana waa qaldantahay, qofka ma waxa uu gali karaa haduu rabo, sida bini'aadannimada Illahay ugu talo-galay intuu ka baxo miyuu dad kale ku biiri karaa? Taas iyadana ma cayyina. **aniga waxa aan dhihi lahaa: Muwaadin walba waxa uu xaq u leeyahay inuu ku biiro urur siyaasadeed kasta**.

- **Qodobka 18 (1):** Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay inuu abaabulo, kana qaybgalo kulamo ama bannaanbaxyo, cabasho, taageero oo lagu muujinaayo si xasilooni ah, iyadoo aan ogolaansho loo baahnayn; Aniga intaasaan qabaa, meel walba waxaa lagu soo qoray si waafaqsan Xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Meel walba, marka jamhuuriyada federaalka soomaaliya waxa qeexayso qodobka 38aad oo muwaadinka xuquuqda uu leeyahay dhan qeexaysa marka waxaan qabaa qodobkaas in dib loogu noqdo. Assalaamu Calaykum Waraxmatullahi Wabarakaatu.

22) **Sen. Prof. Dr. Osman Mohamud Mohamed:**

Bismialaahi Al-raxmaani Al-raxiim. Guddomiyaha iyo guddoonka sharafta leh ee labada aqal, Xildhibaannada labada Aqal, Hab-dhawrayaasha, dhammaan labada Guddi ee hawsahan ka soo wada shaqeeyey Guddoomiyo-yaashooda, dhamaan inta joogta, martida iyo saxaafada, Assalaamulaahi Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatu. Mudane Guddoomiye, wakhtiga oo gaaban iyo wax badan oo hore loo sheegay awgood, waxa aan isku dayayaa wixii la sheegoon dhihi lahaa inaan "second"-gareeyo, wixii aan markaa u arko in aan waxoogaa nuxurkooda taabto si markaa wakhtiga u baykhaamiyo ,wakhtiga oo la joogo oo wakhti pressure ku dhac uu yahay saacadana la dareemi karno, mida ugu horaysa waxaan rabay,

- **Qodobka 11(4)** oo sinnaanta ah faqradiisa (4) sida rag badan ay ka dhawaajiyeen, waxa aan "Second-"garaynayaa qodobkaas oo ah: *qofna maqaam ama maamuus uu leeyahay awgeed ugama baxsan karo la xisaabtan iyo ciqaab fal danbiyeedka uu galay,* waa koobban tahay, Guddiga sharafta leh waxa aan ka codsanayaa mudane Guddoomiye, arrintani wax xoogaa xasaanadday soo galaysaa ee in faahfaahin balaadhan in laga sameeyo inshaa'allaah. Waan soo koobayaa qodob aad loogu nuuxnuuxsaday baa jira muhiiimad gaarana u leh bulsho ahaan, bulshada soomaaliyeed.

- **Qodobka 13(3)** ee soo-rididda-ilmaha markaa laga hadlaayay ee "bacdamaa majaalkaygu" yahay dhakhtar waxaa loo baahan yahay si faahfaahsan oo cilmiyaysan oo ku wajahan xaga cilmiga caafimaadka laga warramo, Waayihii la soo maray iyo wixii soo dhacay si kooban, waxa uu leeyahay: soo-rididda-ilmuhu waa arin ka soo horjeedda Sharciga Islaamka, waana arrin reebban haddii aysan keenin xaalad caafimaad oo aan looga maarmi karin badbaadinta noolasha hooyada oo ay sugayaan Guddi dhakhaatiir lagu kalsoon yahay.

  Arrintaan waa waxyaabo maalin kasta dhaca laftiisa waxaa loo baahan yahay “abortion” ka waayee ama soo ridida ilamaha waa labo nooc ayuu noqon karaa cilmiyan “abortion” mid waa “abortion criminal” ah oo sharciga ka soo horjeeda, midka kale waa mid ku wajahan caafimaadka, oo waliba arirnta caafimaadku amraysaba in qofkaa “abortion” loo sameeyo oo iyadana laba xaaladood ay ku imaanayso; xaalad waa xaalad khatar ku jirto hooyadii. Midka “criminal” ah sharciyan isaga waan ogsoonnahay oo waa mid kan caruurta la iska soo rido, oo dhibaatada weyn bulshada ku haaya, oo loo baahan yahay sharciyo aad iyo aad u xakameeyo, Waa qof uur “illegal” ah, oo sharcidaro ah qaadaaya, markaa waxaa aan

sheegaynaa kaa waddankan keena uu mamnuuc ka yahay, Waddamo badan oo reer galbeedka iyo waddamada horumaray ah qaarkood waa mubaax. Sharciyo waxaa jiro u fasaxaayo qofkii rabaa inuu iska soo-rido carruurtii ama ilmihii hadduu illegal yahay xataa, laakiin annaga diiniyan waa mamnuuc, sharciga dawladeenana waa mamnuuc in la iska soo ridi karo "abortion"-ka. Soo-riditaanka ilaahayba Qur'aankiisa wuu inoogu sheegay, "Shuyuukh" badanna way nala joogaan. Ilaahay waxa uu Qur'aankiisa ku leeyahay: وَلَا تَقْتُلُوٓاْ أَوْلَٰدَكُمْ خَشْيَةَ إِمْلَٰقٍۖ نَّحْنُ نَرْزُقُهُمْ وَإِيَّاكُمْۚ إِنَّ قَتْلَهُمْ كَانَ خِطْـًٔا كَبِيرًا

Waad ogtihiin wakhtigii ay ku timid culumads meesha joogtaa si fiican ay u yaqaaniin, cunuga la dilayaa waa cunug nool, markaa taas waa "abortion criminal" ka ah oo gebi-ahaanba mamnuuca ah, Midka hadda doodda ka taaggan tahay waxa uu yahay, mudane Guddoomiye, waa midka badbaada ku imaanaaya, habartii "rapture" baa ku dhacay, hadda ka hor waa dhacday qiso nagu dhacday, oo dhakhaatiirta ka dhex jirta. Habartii baa uu dilaacay ama "rapture" uu sameeyey "utter-kii" ama ilmo-galeenkii, iyada oo "shock" ku jirtaa la keenay. Dhakhtarkii markii loo keenay "emergence immediately" waa inuu ka gaadhsiiyo, oo arintaa degdeg wax uga qabto, Haddii cunugii noolyahay iyo hadii cunugii dhintayba, habartii waa in la badbaadiyaa, taas markaas uma baahnaanayso Guddi Dhakhaatiir ah oo lala sugaayo, Dhakhtarka markaa joogo ayaa u leh sharciyan inuu go'aan ka gaadho, si degdega ah. Haddii kale saacado ama daqiiqado gaarto waxaa dhici karta habartii iyo cunugii inay isku dhintaan ama cunugii hadii hore u dhintay habartiina dhimato, markaas taas sidii dadkii yaan la qabaa in laga dhigo midaa.

Mid waxaa jirta badbaadi hooyada. Hadda ka hor waxaa dhacay hooyo cunugii "rapture" ku soo dhacay, habartii "utter-kii" dillaacday cunugiina ku dhex dhintay, ayaa nin dhakhtara oo hadda magiciisa aanan ka sheegayn oo dhakhatiirta waaweyn, ayaa intuu badbaadiyey habartii oo ku jirto "shock in comma." Markii uu badbaadiyey waxaa dhacday oo habartii ka soo baxshay cunigii oo badbaadiyey oo "utter-kii" ilmo galeenkii baxshay. Dhakhtarkii waxaa lagu dacweeyey inuu hooyadii "utter-kii" ka baxshay amar la'aan. Iyada oo dhiman lahayd amar uma baahnayn intuu waliba warqad ka saxeexay oo qofka marka la qalaayo laga saxeexaayo wax kastoo ku yimaada, arrintii waxay noqotay dacwo socotay muddo ilaa lix bilood oo dhakhtarkii markii dambe ku khasabtay in magdhaw la waydiiyo, oo dhakhaatiirtii iska qaadhaameen, dhakhtarkiina markii dambe wadanka ka cararay, taas waa taariikh la soo dhaafay waan ka tagayaa.

- **Qodobka 14(2)**: Waxa aan ka hadlay maalin dhawayto "maqaasiida". Markaan ka hadlaayaan soo xasuusanayaa: Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay amniga qof ahaantiis iyo hantidiisa. Qofna loomagaysankaro qaab kasta oo jirdil ah ama fal bini'aadannimada kabaxsan, waxaana reebban xadhig sharciga waafaqsanayn iyo wax kastaa oo cunfi ah, oo ay ka mid tahay kan lagula kaco haweenka. Horta cunfiga meesha halaga dhaafo, Af Soomaali buu leeyahay ee af Soomaaliga ha lagu daabaqo, oo wax kasta oo dhibaato ah hala yidhaahdo, hana la cadeeyo oo *ay kamidtahay* waxaan haweenka lagula kaco. Cunfigu ama dhibaatada in waxoogaa la xaqiijaa loobaahanyahay.

- **Qodobka 14(4):** Mudane Guddoomiye, mid kale oo muhiim ah, waxaa weeyo gudniinka fircooniga. Gudniinka fircoonigu waxa ay soo galaysaa majaalka caafimaadka, meeshan "qabala kulli shay," waxaa ku taala *Faqraddan waxaa lagu qoray hab kooban oo qaanuuni ah, waxaana lagu soo kordhiyey ereyga "fircooniga ah" si loo qeexo gudniinka reebban, kaddib latashiga Culimmada*, waa sax culimada xaga diinta waaye, laakiin marka la tashi la samameeyey culumada iyo dhakhaatiirta, guddigaan u sheegayaa dhakhaatiirta in laga tagay,

maxaayeelay markaad u soo noqotid *gudniinka fircooniga ah ee gabdhaha waa caado naxariis daro ah iyo xaqiraad u dhiganta jir dil, waanu reebban yahay.* Anigu waxa aan u qori lahaa siiqadan: "Waa caado naxariis-darro ah meesha la leeyahay un dhiganta xaqiraada una keenaysa dhibaato caafimaad waanu reeban yahay", maxaa yeelay **in la xuso weeyi dhibaatada caafimaad** uu keenaayo aa ka weyn dhibaatada caafimaad ee keenaayo mustaqbalka dhaw iyo mustaqbalka dheer ba, markaas taas in la xuso inuu dhibaato caafimaad keenaayo koow, tan kale ee aan jeclaanlaahaa in latashi lala sameeyo dhakhaatiirta.

- **Qodobka 16(2)**: Middii ugu ugudambayso, is dhammaystirto jumladdii, oo waxaa ka maqan tan ugu dambaysa ee faafreebka: Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay inuu si xor ah u soo bandhigo aqoontiisa ama hal-abuurkiisa faafreeb la'aan. Sidii "colleague" kollay waa ku waafaqsanahay, Xornima kastaa waa okey, laakiin faafreeb la'aan ma suurtoobi karto, Waxkastaa inay faafreeb leeyihiin ayey ku qumman yihiin, haddii kale bulshada fasahaad baa lagu dhex faafin karaa.

23) **Xil. Mohamed Ibrahim Nur Macalimuu:**

Bismilaahi Al-raxmaani Al-raxiim. Mudane Guddoomiye, Xildhibaannada sharafta leh, marka hore xildhibaanada halkan imaanaaya ee Guddoomiso iska dhahaaya waa inay iska dhaafaan Gudoomiyadda. Gabadha haddii Wasiir tahay iyo haddii Guddoomiye tahay guddoomiye waaye. Marka aan ka hadlo cutubka labaad ee Xuquuqaha aasaasiga iyo Waajibaadka muwaadinka.

- **Qodobaka 11(4)**: Waxa aan la waafaqsanahay: Qofna maqaam iyo maamuus uu leeyahay awgeed ugama baxsankaro la xisaabtan iyo ciqaab faldambiyeedka uu galay. Shuruucda waddanka u taala caddaynaysa, markaa maadaama arrinta laga hadlayaa ay tahay xasaanad iyo wax la mida **waxaa sheegi lahaa in meesha laga saaro sida ay xidhibaano badan soojeediyaan,** sababta oo ah, xilli waliba la leeyahay nidaam "Presidential" la aadayaa, haddana hadduu qodobkaa meesha kusiijiro dhibaato ku noqonayaa Xildhibaannada.

- Qodobka ka hadlaaya xuquuqda iyo xorriyaadka asaasiga qofka iyo xadidaadiisa oo ah qodobka 13. **Qodobka 13(2)** Noloshu waa deeq Ilaahey Subxaanahu Watacaalaa siiyey banii'aadamka oo idil, sidaas daraadeed, waa xaq dabiici ah oo qofna laga qaadi karin. markaa Ilaahay baa waxna dila, waxna nooleeya, "yuxyii wa yumiitu", maaddaama uu wax cusub oo meesha lagu soo kordhiyey waa in la iska fiiriyaa sharci ahaan haddii loolajeedo "qatli nafsulaahi latii xarma" inay tahay meeshaasi si kale haloo dhigo. Markaa siiqadu waxa ay noqonaysaa: "Alle noloshii siiyey Subxaanahuu Watacalaa baa un go'aan ka gaari karo, laakiin bini'aadam go'aan kama gaadhi karo". Markaa haddii dil loola jeedo inay arinkaa Guddigu dib ula noqdaan.

- **Qodobka 13(3)** Arrinta ku saabsan isla qodobkaa soo-ridida-ilmaha, waxa aan "second-"garynayaa isla qodobkii uu Dr. Dufle halkaa ka soojeediyey, ee haddii ay tahay in lagu daro, hadii ay timaado xaalad degdeg ah, sababta oo ah in "case emergence" ay timaado (Consultatzione Medico) waxa la yidhaahdo dhakhaatiir isku timaada iyo waxaa looma baahno, Waa xaalad ka gaar ah qof go'aan gaadhayo. Markaa waa in si degdega go'aan loo gaadhaa, go'aankaasna dhakhtarkaa gaadhaya ee dhakhatiir ma wada gaadhikaraan, wakhtina ma siinayo, sababta oo ah, waxaa dhici karta dhiig-bax degdeg ah, Waa xaalad caafimaad oo aad u dhib badan.

- **Qodobka 16:** ee ka hadlaaya xorriyada ra'yiga iyo afkaarta. Laba qodob oo isku xiga oo ku qornaa dastuurkii hore oo midana ka hadlaayey "freedom of speech" midana ka hadlaayey "freedom of media" ayaa hal meel la iskugu keenay. Markaa labadaan qodob waa labo qodob, oo mid kastaa ahmiyaddiisa leeyahay, qofka muwaadinka uu xaq u leeyahay inuu hadlo oo ra'yigiisa cabiro, warbaahintuna xaq ayay u leedahay inay xor tahay, sidaa darteed, labadaas arrinba waa inay kala saarnaadaan, hal meelnaa la iskuguma keeni karo. Markaas kaddib baa haddana dabbar la sii galiyey, dabbarka la galiyey oo la lee yahay haddii uusan ka hor imaanaynin Xeerarka Jamhuuriyada. Qof kasta oo la rabo in la xaddido waxaa la leeyahay waxa uu ku xadgudbay Xeerarkii waddanka u yaalay, markaa dadka badankooda baa loodiidi doonaa inay cabbiraan afkaartooda, warbaahin badan baana loo adeegsandoonaa, Sidaadarteed, waxa aan qabaa in dabarkaa laga saaro, **sidii hor uu ahaana in loo daayo.**

- **Qodobka 19aad**: Runtii Guddigu si fiican ayay u dhigeen, oo arrimaha hoyga laga hadlaayo, inkasta oo ay fiicnaan lahayd in la caddeeyo wakhtiga iyo sida qofka loogu tagaayo. Ma waxaa horraysa in guriga la galo mise waxaa horraysa in qofka "visa" la siiyo oo i maw la yidhaahdo ama loo yeedho.

- **Qodobka 19 (3):** Muwaaddin kasta waxa kale oo uu xaq u leeyahay inuu helo baasaboor Soomaali ah, Waxa uu xaq u leeyahay inuu helo, haddii uu xaq u leeyahay inuu helo la yidhaahdo macnaha waxaa weeye isaga oo gurigiisa joogo inuu helo, Haddii la yidhaahdo baasaboor waxaa fiicnaan lahayd siiqada in la wanaajiyo oo la dhaho, haddii uu doono inuu qaato waxa uu xaq u leeyahay inuu helo. Markaa isagaa doonanaya, isaga oo lacag bixinaya. Isagaa qaadanaya, laakiin haddii la yidhaahdo waxa uu xaq u leeyahay inuu qaato, macnaheedu waa in guriga loogu geeyo. Markaa meeshaasna siiqada halaga hagaajiyo. Aad iyo aad baad u mahdadsantihiin.

24) **Xil. Ifrah Mohamed Awad:**

**Ass**alaamu calaykum Guddoonka, Xildhibaannada sharafta leh. Waxa aan rabaa inaan ka hadlo dhawr qodob oo ku jira cutubka labaad ee dastuurka:

- **Qodobka 11 (4):** Qofna maqaam iyo maamuus uu leeyahay awgeed ugama baxsankaro la xisaabtan iyo ciqaab fal dambiyeedka uu galay, taas waynu ognahay qof kasta oo dambi galay sharciga kama baxsan karo, laakiin ma cadda, sababta loogu soo darayna na looma sheegin, markaa **waxaa an soojeedinlahaa farqadaa in sideedaba laga saaro meesha.**

- **Qodobka 13 (3**): ee ah xaqa noolasha. Xildhibaanno badan baa ka hadlay. *Soo-rididda-ilmuhu waa arrin ka soo horjeedda Shareecada Islaamka, waana reebban tahay, haddii ayna keenin xaalad caafimaad, oo aan looga, maarmin badbaadinta nolosha hooyada oo uu sugay guddi dhaqaatiir ah oo lagu kalsoonyahay.* Waxa aan jeclaan lahaa in laga saaro sugiddaa, "because" hooyada noolasheedu hadday khatar ku jirto oo shilgasho, haday xaalad degdeg ahi ku dhacdo lama sugi karo in guddi dhakhaatiir ahi ay sugto markaa **waxaa ila habboon inay ka reebaan intaas** Guddiga dib-u-eegista Dastuurka iyo guddiga Madaxabannaan labaduba.

- **Qodobka 14 (4)** ee ka hadlaya markii hore waxa uu ahaa sidan: *Gudniinka gabdhaha waa caado naxariis-darro iyo xaqiraad u dhiganta jirdi. Gudniinka gabdhaha waa reebban yahay;* Markaa ma fahmaayo sababta Guddigu u sababaysay hal gudniin, waddanka gudniino badan oo

noocyo badan baa ka jira gabdhaha oo dhanna dhibaato ayuu ku yahay, **Markaa qodobkaa sidiisii hore uu ahaa in lagu daayaan soojeedinayaa.**

- **Qodobka 17:** Markii hore ahaa Qodobka 19(1) laakiin markii danbe waxaa loo soo wareejiyey 19. Markii hore waxa uu ahaa: *Qofna gurigiisa ama meeshii kale ee isaga u gaar ah lama gelikaro, lama baarikaro, lamanabasaasi karo amar garsoore oo sababaysan la'aantiis.* Guddigu waxay ka saareen: *"Qofna hoygiisa ama meelaha kale iyo waxyaabaha u gaarka ah lama baarikaro, lamana basaasi karo"* waxa ay ka saareen ***gelidii.*** Sidaan wada ogsoonnahay guriga haddii lagu soo galay sharci daro, warqad aan garsoor laga wadanin dee qofku sidii uu rabo buu ka yeelan karaa, laakiin waa inay is dhammaystirto jumladdii, oo waxaa ka maqan **lama geli karo, markaa gelitaankaas in lagu soo daro ayaan u sheegaynaa Guddiga.**

- **Qodobka 18(1):** Xorriyadda kulanka bannaanbaxa, cabashada iyo codsi-wadareedka. *Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay inuu abaabulo, kana qaybgalo kulamo ama bannaanbax, cabasho, ama taageero lagu muujinayo si xasillooni ah, iyada oo aan oggolaansho loo baahnayn si waafaqsan,* middaan laftirkeeda *"xeerka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya"* la raaciyey. Haddii dastuurku qofka muwaadinka ah u oggolyahay inuu bannaanbixi karo si aan dhibaato ku jirin fikirkiisa uu cabiri karo ma garan karo, xeerka sababta loo raaciyey.

25) **Xil. Faaiza Mohamed Jeyte:**

Guddoonka labada gole, iyo Xildhibaannada labada gole iyo guddiga, saxaafada dhamaantiin Assalaamu Caleykum, Waxa aan rabaa si guud maadaama uu waqtigu yaryahay oo duhurkii la gaaray inaan usoo koobo hadalkayga. Horta qodobada laga hadlay oo dhan, Xildhibaannada dhan isku si bay uga hadleen intooda. Waxa aan u hormarinaaya kii diinta looga hadlaaye:

- **Qodobka 17:** Qof kasto waxa uu xaq u leeyahay inuu diintiisa ku dhaqmo, Horta annaga haddaan Soomaali nahay inaan Muslimnimadeenna ka shakisannahay ayaad u malaysaa. Sababta oo ah dad muslim ayaan nahay in aan cibaadaysanno waan oggolnahay, cidkale inay diintoodu ku cibaadaysatana in loo diido diinta islaamka ma qabto, caqli ahaanna xitaa wax sax ah ma ahan, Guddiga waxa ay dhaheen waxaa la soo tashannay Culimo. Culimada Soomaalidu way macno badanyihiin, kuwa xitaa annaga in nala dilo oggol ayaa jiro, ma kuwaasaa? "I don't know" ayagaa sheegidoono Culimada ay la soo tashadeen.

- **Qodobka 11(4):** Waxaa jiro, xasaanadda oo kale qodobkeeda guddiga waxa ay ku soo dareen qofna xasaanadiisa laguma dhaafi karo. Xasaanaddu dastuurka ayay ku qoran tahay, ayaga ma diidi karaan, Waa wax dastuuri ah. Haddii ay beddelaayan, waxa ay ku beddelayaan waxaa waaye aragti sax ah, Xasaanadda Xildhibaanku, haddii dadka caadiga la mid noqoto, waxaa meesha ka muuqato digtaatooriyad in loosocdo oo dastuurka qaabka looqoraayo inay tahay qaabka kacaanka oo kale ah, Maxkamadda Badbaado'dana inay soo socoto, sidaasaa meesha ka muuqato.

- **Qodobka 18(1):** Waxaa la yiri, lama bannaanbaxi karo, ayada oo aan fasax la soo qaadan, Horta qofka bannaan-baxaayo waa qof cabanaayo, marka ma qofka uu ka cabanaayo ayuu fasax ka soo qaadanayaa? Ma u oggolaana marka? Taasina waa danbi. Qalad kale waaye. Xuquuqda aasaasiga ay dadka leeyahiin ayay ka mid tahay inuu qofka bannaan-baxo, marka looma diidi karo inuu shacabka banaan-baxo.

- **Qodobka 14(4)** Tan gudniinka, xeerna waa lagu soosaari karaa, sideeda horana waa loo celin karaa.

- **Qodobka 15:** Xaqa ku biirista ururrada. Lama sheegin ururrka. Waxa la rabaa hadii la yiraahdo ururro ayaa lagu biira karaa, ururka waa urur sidaas ah oo siyaasadeed ama dhaqaale oo habel ah oo dalka ka diiwangashan. Ururro dhibaato nagu haayo ayaa jiro oo waddankaan ka jiro, marka waxaa loo fududeena dadka inay ururadaas ku biiran sidee meesha wax ugu qoran yahiin. Marka taas waa inaa wax- kabeddeshiin.

- **Qodobka 16(1):** Waxa jiro qodob looga hadlaayo soo bandhigida araahda taas wax "problem" badan ma jiro "Xoriyatul qawlka". qodobadaan meesha looga hadlay oo dhan waa qodobo aad dareemayso digtaatooriyad. Anigu waxa an soojeedinlahaa qodobka cutubkaan 9-ka qodob oo dhan in sidoodii haloosooceliyo.

  Sida ay u qornaayeen ayay u fiican yihiin, wax "problem" ahna kama jirin, wax la isku diiddan yahayna ma jirin, qofka garsoore la'aan qof lama xiri karo waa sida sharciga ah taas waa la tiray. Waxaa kale, oo la tiray tii diinta ku dhaqankeeda. Inta qodob ay tireen waa inay ku soo celiyaan, intee ku soo dareena wax macna ah ma samaynayso, waa inay ka dhaafan. Haddii ay diidaana waxaajiro xildhibaano badan oo aragtidaas leh, waa sidakale oo sharciga ogalaa aya usoo qoridoonna. Marka taas sideedaba waxa aan soojeedinayaa cutubka labaad sida uu u qoran yahay, oo hadda dastuurka ugu qoran yahay uu ku wanaagsan yahay in loo celiyo.

- **Qodobka 13(3):** Waxa aan rabaa inaan hal qodob ka hadlo, waana kan ilmaha la-soo-ridaayo. Horta ilmaha la soo ridaayo labaa loo kala qaaday, ilmo waa ilmo "problem" iyo dhibaato imaatay loo-so-ridaayo, taas waa isla garanay. Ma'ahan qof dhimanayo guddi in lagu xidho. Dhakhtarka waa inuu go'aan ka gaara. Hooyadana hadii ay ogaal leedahay waa inay ayada isa saxiixda, hadii ay markaas aysan ogaal lahaynna oo Kooma ay ku jirto, cidda masuuliyaddeeda leh baa leh saxiixa. Taas intaas bay ku kooban tahay. Tan kale, waa Ilmaha la-soo-ridaayo ee uurka sharci-darada ah ee ay ku yimadaan awadeed la rabo in nafta loo dhaafiyo. Waxa aan dhahnay Shareecada Islaamka ma oggolo in ilmo la-soo-riddo sax waaye, laakiin marka horena ma oggolo ilmo in la-soo-riddaayo la ogyahay in la dhalo. Horta, ilmo in lasooridaayo la ogyahay sababta loo dhalaayo maxay tahay? Waxaa la rabaa in la soosaaro xeer ah gabdha cunug haday dhasho oo ninka ku inkiro DNA laga qaadaya ninka dhalaana dusha loosaara, Intaas hadii la helo, ilmo la tuuraayo waa la yaraynayaa, laakiin inta larabo labo qof oo dambiilaha ah qofna bari noqdo, qofna dambiile uu noqdo, ilmo waa la soo ridaa, Runta in la isku sheega la rabaa, ummaddan Baarlamaanka ayaa ka musuul ah wax sax ah inuu sheego waaye waqti badan lagu joogi karo oo xeer la soosaaro, Waa in la soosaara xeer DNA aa la qaada gadhaba hadii uur yeelato oo la waayo ninka dhalay, ninka DNA laga helaa cunugaas isagaa dhalay. waajib buu ku leeyahay; isagaa biil looga rabaa, ilmo in lasoorido ma dhacayso, Laakiin ninna waxa uu ku faanayaa heblaayo anaa cunuga ka dhalay, waana ku inkiray, taas baana keenaysa inay ku qasban tahay in ay soo-riddo cunuga yar. Dadka waxa ay leeyahiin waa saxan tahay, iyada Sharmuuto waaye, ninkana sheikh waaye. Sida ay ku suuroobi waxaas? Wax suuroobaayo ma ahan! Markaa waxa la rabaa in xeer la soosaaro, hadii la rabo in la joojiyo ilmo-soo-rididda. Hadii kale ummadda ha sirina, waxaas in dastuur lagu qoro ma ahan ee xeerar ha loo soosaaro horta lagu joojiyo. Dastuurka si guud, waxaaa an u soojeedinayaa labadda Guddi ee Dib-u-eegista Dastuurka, waxaa jiro dad takhasuskooda dastuur samayn yahay, oo master iyo PHD ku

haysto, hadda dastuurkan kan la qoraayo keena horaa boqol jeer ka fiican. War Guddiyow, hadii aydaan lahayn dad cilmigaas leh u wacda oo idinka caawiyo sida buugaag sheeko waaye sida hada dastuurka u qoraysaan, sidaasina si sax ah ma ahan.

26) **Xil. Abdulkadir Mohamud Dagane "Jeylaani":**

Mahadsanid Guddoomiye. Bismilaahi Al-Raxmaani Al-Raxiim. Alxamdulilahi Rabbil Caalamiin. Waxa aan toos u galayaa qodobada. annaga wakhtigii baa nalagu sii yareeyey, sidaan hadda maqlayo. Sidaa daraadeed, qodobadaan gudagalayaa.

- **Qodobka 10(2)** Karaamada aadamaha waxbadan lagama beddellin. Faqradda 2aad uun baan waxa aan ku darayaa *"waa waajib saaraan dadka oo dhami in ay ilaaliyaan"*, inaysan waxa dad ilaalinayn waan ognahay, sharcigaa wax ilaaliya. Waajibkaasi in sharci laga dhigo aad iyo aad bay muhiim u tahay. Dadku haddii ay wax ilaalinayaan danta guud wixii ahaa bay ilaashan lahaayeen; jidadkii ugudambeeyey dadku ilaashan lahaayeen. Sharciga weeyaan waxa wax ilaalinaya. **Waxa illaalinaya, halkaas faqrada 2aad in laga dhigo inay tahay sharciga aad iyo aad muhiim u ah**.

- **Qodobka 11(1)** Muwaaddiniinta oo dhan, iyaga oo aan loo eegin lab iyo dheddig, diin. Sida hore, loo sheegay lab iyo dheddig baan qabaa, halkaa diinta lagu soo darayna meesha in laga saaraan qabaa. Waxa aad moodaa in diinta aad iyo aad loogu rafanaayo. Cutubkii koowaad baan arrintaa uga hadalnay; dalka diintiisu inay Islaam tahayna horaan uga hadalay.

- Halkaa markaa qodobkaa ah faqradda (3) ama (2) noqotay waxa aad moodaa inaysan ku jirinba eraygaa diinta ee lasoo celceliyey "totally" in meesha laga saaro ayaa aad iyo aad muhiim u ah.

- Qodobkaan maadaama wakhtigu igu yar yahay waxa aan la akhrinayaa qodobkii 17 ee aad tirteen, ee u qornaa :*"Qof kastaa waxa uu xor u yahay inuu ku dhaqmo diintiisa."* Qodobkaasi waxa aad dhahdeen Culimaan kalatashanay. Culimada yiri, hala saaro, maxay u arki waayeen qodobka 11aad ee halkaan? Qof kastaaba ku qorane, ee muwaadiniinta oo dhan qoraaya haddana diinta soo gelinaya, maxay u arki waayeen? markay qodobkan arkeen, **qodobka 17 anuu waxaan qabaa in lasoo celiyo siiqa toosin haddaad ku samaynaysaan** oo waxa weeyaan ajaanibta ama dalka ku nool ama shaqada ka hayo wax xaddidayana aad iyo aad bay u fiicnaan lahayd qodobkaa isaga ah.

- **Qodobka 11(4)** ee aad soo kordhiseen "**completely**" **waa in meesha laga saaraa.** Wax ku jiray ma ahan. Xasaannad ciiddii leh oo looga baqaayo ama in la xiro ama Maxkamad la keenana qaab loo maraa jirta. Xasaanad dadka iskaleh dastuurka cutubyadeed markaan gaadhno ayaan ka hadlidoonnaa, laakiin waxaa muhiim ah ereygan ama qodobka aad soo kordhiseen in uusan meesha ku jirin baad moodaa.

- **Qodobka 12 (1)** Dhaqangelinta xuquuqda aasaasiga ah *"Hay'adaha Dawladda heer Federaal iyo heer Dawlad goboleedba* ama maamul goboleed iyo dawlad goboleedyada aad hadda sheegteen dastuurka hore nooguma qornayn, oo eray aad soo kordhiseen weeye, magacbixin cusub oo aad soo kordhiseen weeye, Dastuurka dhan marka aad fiirisid qodobadiisa "dawlad-goboleedka" aad hadda idinku sheegaysaan ka hadlaya, waxaa ku qoran Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka, ee kuma qorna dawlad-goboleedka. Ereygan markaa ma kanaa la qaatay faahfaahin inaad ka bixisaan bay ahayd si hordhaca,

in kan aad qaadateen oo laga guuray magacii hore ee loo yaqaan dawlad-goboleedyada oo ahaa Dawladaha Xubnaha ka ah Dawlada Federaalka.

- **Qodobka 13 (3)** Soo-rididda Caruurta. Xildhibaanno faro badan baa ka hadlay, kuma sii dheeraanaayo. Waxa aan "ta'kiidinayaa" si loo badbaadiyo naftaa wax walba ka horeysee, arrintan arrin guddi sugi karto ma ahan. **Dhakhtar aqoonteeda leh inuu saxiixo oo uu arintaa kagaaro go'aan ayaa muhiima**.

- **Qodobka 14 (2)** Waa lasoo celceliyey. Cunfi baa ku jira ama ereygaas in lagu beddelo xadgudub ama ereyada kale ee Soomaaliga ayaa sax ah, Waxa aad dhadeen wax kasta oo cunfi ah oo ay ka mid tahay kan lagula kaco haweenka, halkaasina waxaa muhiima **caruurtana** in lagu darro, waayo haweenkii iyagaaba isku doodayoo, Baarlamaanka joogee, **caruurta da'yarta ah ee dad u dooda aan haysanin in lagu daro weeyo.**

- **Qodobka 15:** Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay inuu ku biiro dad kalaad dhahdeen, dad ka kale waa in la caddeeyaa. Dad kale maxay noqon karaan? Ma argagixisay noqon karaan? Ma gaangis bay noqon karaan? Ma ururro siyaasadeed bay noqon karaan? **dadkale inay caddahay baa aad iyo aad u mihiimsan**. Waad mahadsan tihiin.

**27) Xil Omar Ibrahim Hanshi:**

Guddoonka, Xildhibaannada labada Gole, Guddiyada Madaxabanaan ee inoo keenay "draft"-gaan, Assalaamu Calaykum Waraxmatulaahi Wabarakaatu. "Bacda salaam." Aniga waxa aan dhihi lahaa marka ugu horrayso cutubkan labaad, dhammaantiis marka la fiiriyo, waa sidii uu u qoran yahay e, xuquuqda aasaasiga "human right"-ga buu k hadlayaa. Xuquuqda aasaasiga oo dhan, halkaan lagu qeexay, waa waxyaalaha arrimaha bulshada iyo Soomaali inaan nahay aan u baahannahay, waxaana lagu qeexay Diinta, Qur'aanka, iyo Axaadiista, Annaga waxaa naloo sheegay wadan dhammaan Muslimiin ah inaan nahay, diinta Islaamkana ku dhaqma, Horta waa inaa sidaa u fahannaa marka ugu horraysa, Marka haddii la leeyahay xuquuqda asaasiga, diinta Islaamkana ku dhaqmayno inaan is waafajinaa aad iyo aad bay muhiim u tahay, waana in wax walibaa ay diinta u marjac noqotaa.

- Qodobka 10aad ilaa 20aad, sida loo soo diyaariyay way fiican tahay, laakiin waxa aan dhihi lahaa in asaga oo dhan horta la is raaciyaa, laga soo qaada qodobo is leh oo la dhahaa qodobka 10aad ilaa 20aad waxaa lagu salaynayaa diinta Islaamka iyo Shuruucaha la dhihi jiray "international norms", markaa kaddib waxaa loo yeelayaa habraacyo iyo shuruucyo kale oo Baarlamaanka ka shaqayn doonno, sidii faahfaahin dheeraad ah ay ugu dhaqan geli lahaayeen, Marka halkaan siday u qoran tahay waxa ay lamid tahay shuruucyadii aan Baarlamaanka marin jirnay, dastuur ahaanna uma qorna, marka taa ayada ah dib ha loo fiiriyo, mise ha loo dhaafo sidii ay ku qorneyd dastuurkii ku-meel-gaarka ahaa.

- Sida ay sheegtay Xildhibaanad Fawsiya kaas baa yara aad iyo aad uga toosnaa, markaan la isla fiiriyo jumlo ahaan, waxaa fiicnaan lahayd in hab-qaanuuni ah loo soo qoro, kii hore siduu ahaa oo kale. Hab-qaanuuni ah ha loo qoro, ereyada la saxo, ereyada qaarkood sida hadda tusaale ahaan meesha muwaadiniinta laga dhigaa muwaadin, meelaha qaarkood Xukuumadda la isticmaalay Dawladda laga dhiga, ereyada la toosiya, oo hab qaanuuni loo soo qoro, kii hore loo dhaafaa marka intaas waa iska talo soojeedin. Markaa haddaan gudaha u gala.

- **Qodobka 11aad:** Waxaa la dhahay muwaadiniinta oo dhan, meeshaa in muwaadin loo beddelo waa isla fahannay oo Xildhibaanno badan ayaa sheegay, laakiin qofka aan muwaadinka aheyn muxuu noqonayaa isagana? **Waa in iyadana lagu qeexaa.**

- **Qodobkaas 11aad:** Sinnaanta marka laga hadlaayo, muwaadiniinta waan isla fahannay. Qofka muwaadinka ahayn, laakiin halkaan nala jooga, sharci ku joogo, **asagana "at least" in halkan lagu qeexa weeyaan.**

- **Qodobka 11(4):** oo dhahaayo: qofna maqaamkiisa iyo maamuuska uu leeyahay awgeed uguma baxsan karo la xisaabtan, taasna waxa aan qabaa in meesha laga saaro, waayo Xildhibaamno badan ayaa hortay ka hadlay. Waxaa ku jira mugdi badan, faahfaahin u baahnaanayso, sidii la rabo la yeeli karaa haddaan dhaho hala sii galo. Marka **aniga waxa aan sooojeedinayaa taas in meesha laga saaro.**

- **Qodobka 13 (3):** Xaqa noolasha. Iyadana waa laga hadlay, caruurta la soosaaraaya, iyadana aad baa looga hadlay. Anigana codkayga ku darsanayaa meeshaa iyada horta waa inaan isla qaadanaa, "abortion"-ka inuu "prohibited" u yahay oo uu xaaraan yahay, Kaddibna, wixii ku yimaada xag caafimaad, noloshii iyo qofka caafimaadkiisa in la isla waafajiyo. Waa in aan la dhihin Guddi dhakhaatiir. Hal dhakhtar ah meeshaa iyadana loo beddelaa oo la sheegaa. Midda labaad waa in iyadana la qeexaa "abortion"-ka laftiisaa qaybo kala duwan leh. "Abortion" dambi ah iyo ku caafimaad baa kala jira. Kan dambiga qaybo kale u sii kala baxaa, "threatened abortion", iyo "abortion" caadi la soosaaraayo. Marka kuwaas "at least" faahfaahin ha laga bixiyo, oo loo dhaafo in xeer lagu soosaaro ama sharci lagu soo saaro. **Ereyadaas hala isku toosiyo, hab-qaanuuni ah ha loo sameeyo ha la dhaho, oo xeer ayaa lagu soosaarayaa** hala dhaho.

- **Qodobka 17aad:** qof walbo waxa uu xor u yahay inuu ku dhaqmo diintiisa.

28) **Xil. Amina Hussein Ali:**

Bismilaahi. Guddoomiyaha, labadiisa Ku-xigeen, Xildhibaannada labada aqal dhammaantiin waa salaamantihiin. Runtii qodobka aan rabay in aan ka dhawaajiyo marna waxaa qaatay Dr Dufle, marna waxa aad u malaysaa Cabdulqaadir inuu iga qishaayay, marna mar hora la qaatay.

- **Qodobkaan 14(2):** ayaan ka hadlaayaa. Qof kasta waxa uu xaq u leeyay amniga qofnimadiisa iyo hantidiisa. Qofna looma gaysan karo qaab kasto oo jirdil ah ama fal bini'aadinnimada ka baxsan. Runtii Xildhibaannada sharafta leh jirdilka haweenkanka lagu soo koobay hadda waxa aad u malaysaa jirdilka nooc kasta ayuu u imaan karaa, Waad aragteen sanadihii hore wariyayaal ayaa la jirdili jiray, Wariyayaasha waxaa ku dhexjira haween iyo dhalinyaro, Meeshaas oo haweenka ayaa lagu sookoobay, Carruurta iyo dhalinyarada in lagu soo daro ayaa fiicnaan lahayd.

- **Qodobka 14(4):** Waxaa laga hadlay Gudniinka fircooniga ayaa la yiri. magaca fircooniga intee laga keenay. Magaca fircooniga maba jiraba, waa la iska dhahay lee fircooniga. Yaa la soo baxay? Magacaas yaa keenay? ma Soomaali ayaa laga maqalay? Ma hooya gooni ah ayaa keentay? Magacaas oo fircooniga ah meel uu ka imaaday ma garanaayo. Fircoonigaas in magaca fircooniga ah na laga beddelo weeyo, Gudniinkana maba jiraba. Gabadha jirkeeda in la jarjaro waaba xaaraanba **S**hareecada sheegeyso, diinta sheegeyso ha imaadeen

Wadaaddada, hana daliiliyeen. Markay daliiliyeen ay sharciga ay ku sheegaan ha lagu daro, Sharci looma hayo oo diiniyan ah. gabadhi in la jarjaro waajib ma aha. Ha laga joojiyo taas.

- **Qodobka 13(3):** Tan kale waxaa sheegay ilmaha-soo-rididdooda. Ilmaha soo rididooda runtii waa xaaraan. Marna waxa uu imaanaaya in lagu badbaadiyo hooyada, Waxaa la yiri khuburo Guddi ah, guddiga goormee ka gaari? Hooyada wayba dhiig baxaysaa. Iyada haddii miirkeeda ay qabto ayadaaba sixiixanayso. Tan kale, gabdho waxaa jiro haddeer walaasheey xildhibaannada ay sheegaysay oo gabdho uuroobay ah.

  Kawaanka Xamarweyne naag waxaa joogto gabadha soo uurowbaba ilmaha ka-soo-riddo. Sharciga maa la geeyo, Sharciga maa la waafajiyo. Haddii sharcigaas wacyigelin loo samaynin, oo aan la hagaajinin runtii ilma ridowga xataa waa farabadnaanaa. Waxa aad u malaysaa sharcigaan carruurta iyo haweenka waxaas in ay ku soo hoobteen. Xeerka qoysa ayaa jiri jiray. Xeerka qoyska maa la sameeyo oo dastuurka lagu soo daro. xeerka qoyska oo Gudniinka, ilmaha la soo riddaayo, fal dambiyeedka kale haweenka lagu sameynaayo, haweenki oo la jirdilaayo, gabdhaan oo bil iskeerso toban cunug ayay ninkaan u heysaa furaayo, Meel ay u dacwooto, xeerka qoyska maa la sameeyo? Meel ay u dacwooto, sharci ay u dacwooto ha loo sameeyo, ileen ma lahan xeer qoys ee. Waxa aad u malaysaa ilmahana inay meel ka hadlaayan, Hooyadana meel gooni ah in lagu hadalsiinaayo, Waxa aad u maleysaa qofka la jirdilaayana meel gooni ah in looga hadlaayo. Gudniinkana waxa aad u maleysaa meel gooni in la isku keeno hal meel xeerka qoyska aad ku soo dartaan. Dastuuka lagu soo daro oo la soo waafajiyo asagoo sidihore ahayn hala soo jarjaro.

- **Qodobka 14(2):** Eregan aan rabo in aan sheego cunfi waqooyi in looga hadlo ayaan u malaynayaa. Ereyga cunfiga ah annaga reer koonfureed ayaa nahay, oo erayga cunfiga waaba nagu cusub yahay, Dasturkaan ayaan ku arkay. Haye yaa qoray? Marka ereygaan cunfiga ah haddaan fiiriyay waa Carabi, Haddaan qaamuuska u galayna waxa aan arkay nin xaaskiisii jirdilaayo, oo carruurtiisa qaraacayo, si xun u qaraacayo aan arkay marka, Ereyga cunfiga meeshaas ayuu ku imaaday, Marka aniga waxaan dhihi lahaa gacankahadal. Gef waaye, gacan kahadal ha lagu badelo.

**29) Xil. Salah Sharif Sayid Ali:**

"Bismilaah. Alxamdulilaahi Calaa Ashrafil Mursaliin. Sayidunaa Muxamamed, Wacaalaa Aaalihi Ajmaciin." Guddoonka labadiisa aqal, Xildhibaannada iyo Saxaafadda dhammaantiid Assalaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuhu.

- **Qodobkiisa 11(1)**: Waxa uu u qoran yahay sida tan: muwaadiniinta oo dhan iyaga oo aan loo eegin lab iyo dheddig, diin, midab, xaalad bulsho ama dhaqaale, afkaar siyaasadeed, qabiil, naafannimo, xirfad, dhalasho, isir, da' iyo af-guri toona xuuquuqda iyo waajibaadka way u siman yihiin xeerka hortiisa si waafaqsan Shareecada Islaamka. marka qodobkaan waxaa ku jira diinta. diintana waxa aan ku soo sheegnay cutubka 1aad, qodobkiisa 2aad (1, 2) oo u qornaa sidan: Islaamku waa diinta dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Diin aan ahayn Islaamka laguma faafin karo dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Sidaa daraadeed, shacabka Soomaaaliyeed 100% waa dad muslim ah, Sunni ah, isku mad'hab ah, wax kala qeybiya haba yaraatee ma laha. Marka mudane Guddoomiye, waxa aan codsanaya ereygaan "diinta ah" in laga saaro faqraddaa, maadaama aan nahay dhammaanteen dad muslimiin ah.

- **Qodobka 11(2)**: Asna waxa uu leeyahay, waxaa reebban in qofna lagu sameeyo si toos ah ama dadban takoor ku salaysan da', midab, qabiil, isir, dhaqan, af-guri, lab iyo dheddig, dhalasho, naafannimo, diin, afkaar siyaasadeed, xirfad, hanti ama sababo kale. Marka waxyaabaha la isku takooro diinta kama mid ahan. Annaga shacab hal diin haysta ayaan nahay, Marka waxa aan rajeyneynaa **Xildhibaannada sida ay sheegeen "kalimadaan" diinta ah in meesha laga saaro, maadaama dhammaanteen aan isku diin nahay**.

- **Qodobka 11(4)** : Qofna maqaam iyo maamuus uu leeyahay awgeed ugama baxsan karo la xisaabtan iyo ciqaab fal dambiyeed uu galay. Qodobkaan sifiican uma cadda. Guddigii soo qabanqaabiyay ma aysan caddayn, dastuurkii horana kuma jirin, Marka waxa aan rajeynaynaa in si fiican loosoocaddeeyo waxyaabaha loolajeedo iyo xasaanadda iyo qodobkaan meesha ay iska qabanaayaan.

- **Qodobka 14(2):** Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay amniga qof ahaantiisa iyo hantidiisa. qofna looma gaysankaro qaab kasto oo jirdil ah ama fal bini'aadannimada kabaxsan, Waxaa reebban xarig aan sharciga waafaqsanayn iyo waxkasta oo cunfi ah, oo ay ka mid tahay kan lagula kaco haweenka. Marka waxyaabaha haweenka lagula kaco maxaa ka mid ah? in la caddeeyo meeshaas dambigaas iyo dambigaas in la dhaho weeyo, oon uusan iska furnaanin waa rajeyneynaa insha allaah.

- **Qodobka 14(4):** Sida oo kale, gudniinka fircooniga ah. anaga Soomaali ayaanba nahaye, muslim ayaanba nahaye kalimadaan fircooni intee ayay naga soo gashay? Ilaa iyo hadda ma fahmin aniga. Marka gudniinkaan fircooniga ah oo gabdhaheena la jarjaraayo, dhiig bax iyo rafaad badan uu keenaayo in xaddidaad loo sameeyo. Gabadha haddii la gudaayo sida loo gudaayo in la caddeeyo, dhakhaatiirta ay caddeeyaan, culimada ay caddeeyaan, wax "criteria" leh in la sameeyo ayaan rajeynaynaa, Insha allah.

- **Qodobka 17aad:** ee la tiray waan boogaadinayaa. Maadaama Somaalida dhammaan ay yihiin dad Muslimiin ah, wax kala qaybiya, Qof kasta waxa uu xor u yahay inuu ku dhaqmo diintiisa. Marka sharcigaan ama dastuurkaan waxaa loo dajinooyaa dad muslim ah oo wax kala qaybiyaha haba yaraatee aysan jirin. tan saxaafada.

- **Qodobkiisa 16aad:** Waxa uu ka hadlayaa xorriyadad. Xorriyad "mud-laq ah" aduunka kama jirto. "Al-xorriyatu taxtal qaanuun" ama "freedom under the law" baa dunida ka jirta. Qofka xorriyaddiisa waxa ay ku dhammaataa meesha qof kale xorriyadiisa ay ka billaabanto. qofka inuu qof caayo, dambi galo, xumaato sameeyo, waa laga joojiyay. Waxaana ka joojisay Guddoomiye "Sacdiyo".

**30) Xil. Mohamed Omar Aimoy:**

Bismilaahi. Walxamdulillaahi. Wasalaatu Wasalaamu Calaa Rasuulillaahi SCW. Guddoonka labada aqal, Xildhibaannada labada aqal, Guddiga isku-dhafka, saxaafadda, dhamaan waxa aan idinku salaamay Assalaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh. Ku dheeraan maayo, maadaama uu waqtiga ciriiri yahay inta badan waa laga wada hadlay hasayeeshee, waxa aan leeyahay waxa aan rabaa inaan ka hadlo:

- **Qodobka 11(1):** Taas oo ka hadlaysa muwaadiniinta oo dhan, iyada oo aan loo kala hiilin, waxa aan qabaa farqadaasi in loo daayo sidii ay u qornayd farqadiisii hore. Haddii uu Allaha awoodda leh oggolaado.

- Qodobka 11(4) **waxa aan la qabaa Xildhibaannada intooda badan ay isugu waafaqeen.**

- **Qodobka 13(3)**: Ee lagu noqnoqday Xildhibaannada waxbadan ka hadleen, kaa oo ahaa soo-rididda-ilmaha, labo sababood baa keenta: mid ku timaaddo caafimaad-darro awgeed. Qofka xaaska ah ah, haweenka ah hadii uur leedahay ay ilmaha ku jira iyo iyada xoogaa u baahan tahay kala badbaadin. Intii labaduba isku dhiman lahaayeen in la kala badbaadiyo waaa xaq, oo dhib ugu imanaayo in laga soosaaro si haddii dhakhtar aqoontaasi u leh, oo ku takhasusay uu caddeeyo. Haddii arrintan kusii jirto marxalada xaalad adag ay galeyso, saa darteed, haddii "operation-"kaa lagu sameeyo laga soo xaaqaya ama lagu sameeyo ay ku caafimadayso. Balse haddii ay tahay waxa la diidayo, waa waxa ku calool galay sharci daro, taasina maadaama dal islaam nahay, waxa aan niri: Wax kasta oo Shareecada ka hor imaanayo waa waxba kama jiraan, shareecadeenana qabtaba, in wixii sharci-darro ku calool-galaa shareecada islaamka la waa fajiyo, maxaa jiro waxaan, way caddahay, wey qoran tahay, diinteenaa caddaysay.

  Waala kala qaadqaaday, hadii qofka bilow ay tahay, wali aysan guursan, ninkanna wali guursan, xadgudubkaas haddii uu sameeyo, hadii qofka xaas tahay ay guursatay ama uu guursado , uu xadgudub uu sameeyo, waxa ay diinta ka yeeleyso way cadahay, maaha in markaasi lagu marmarsiyeeyo la isaga dabo-wareego, oo looga soo xaaqa, Maxaa looga sooxaaqaa? iyo maxaa loo soo bixiyay maba jirtaba? Waxaa loo baahanyahay, waxa aan ka hadleynay kaliya inay ahaato waxyaabaha caafimaad darada u keeni kara, ee sharciga ah, balsa wixii sharci-darro ku calool-galo ee la soosaaraayo oo sharci-darro lagu soosaarayo, diintaa ka hadashay. Wixii falkaasi ku kaca, waa in lagula tiigsadaa sharciga Islaamka waxa uu qabo, maxaa yeelay waa mamnuuc, Marka ugu horrayso annaga oo dad Muslim ah in qof sharci-darro ku calool-galay ama xadgudubku sameysay haday haween ay tahay in la yiraahdo, heblaayo soo-ridday iyo hebalaa yeelay, DNA ha loo raadiyo ama sharci-darro meesha ku yimid. Waxaa DNA loo raadinayo keliya waxa ay tahay. Wax jiray oo xoogaa shaki soo galay, laakiin wax sharci ah dara loojeedo maaha in qiil loo sameeyo, oo la yiraahdo hala raadiyo iyo saan hala yeelo, maadaama dad islaam ah aa nahay sharcigana noo cadeeyay , waxaa loo baahan yahay in la waafajiyo nidaamkii sharciga ahaa , waxa ay shareecada ay ka qabto, lagu qaado, haduu Allaha awooda leh uu ogolaado.

- **Qodobka 14(2)** oo dhahaayo qof kasta waxa uu xaq u leeyahay badqabkiisa iyo inan la jirdilin inaan tijaabo lagu samaynin, hadda ma joogno iyo mana aanan gaarin heerkaas kalka soo maraya, qof bini aadam ah iyo qof soomaali ah ama qof muslim ah, waxyaabaha qaarkood oo lagu sameeyo, Waddamada ajaanibta, wadamada shisheeyo si "practical" loogu sameeyo ahaan, dadka wax la baraayo oo kale lagu "practical"-gareeyo, balsa annaga waa naga reebban tahay, laakiin wax alla wixii nidaam ah, ee wanaag ah ee horseedi karo caafimaadka iyo wadajirka iyo waxqabadka, waan rabna, waxaana la qabaa in sidiisii uu ahaa laftigiisii loo daayo, waxba dhibaato ah ma jirto.

- **Qodobka 17aad:** Waa lagu noqnoqday isaga laftirkiisa. Xildhibaannada wax badan ayay ka hadleen, oo la leeyahay waa la tiray, kaddibna markii lalatashaday culimada. Waa laga joojiyay, waxaana ka joojisay "Gudoomiye Sacdiyo.

**Taariikh:** Febraayo 28, 2024

| | |
|---|---|
| Baarlamaanka: | 11aad |
| Kalfadhiga: | 4aad |
| Kulankiisii: | 19aad ee labada Aqal |
| Goobta: | Golaha Shacabka |
| Guntanka: | Dhammeystirka Doodda cutubka 2aad |
| Wakhtiga uu furmay: | 10:15 a.m |
| Wakhtiga uu xidhmay: | 2:20 p.m |
| Shir-Guddoonka: | Guddoomiyaha Golaha Shacabka<br>Xil. Sh. Aadan Maxaned Nuur "Madoobe |

**Ajendaha:**
(4) Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah.
(5) Ansaxinta Ajendaha.
(6) Dib-u-eegista Dastuurka: Marxaladda 2aad. Ka Doodista soo jeedimaha wax-kabeddelka Dastruurka. Cutubka 2aad. Xuquuqda Asaasiga ah iyo Waajibaadka Muwaadinkta. QODOBKA 21aad ilaa 41aad

**Kulanka 19aad**
**Guddoomiyahay Golaha Shacabka Xil. Sh. Aadan Maxamed Nuur "Madoobe"** oo furay kulanka 19aad ee labada Gole ayaa hadalkiisa ku bilaabay sidan: Xildhibaanada sharafta leh waad salaamantihiin,sida uu habdhowruhu sheegay anigu maalintaa hore waan maqnaa, laakiin Gudoonka intiisa kale waa joogeen,anaguna maalintii ka horaysay markaan fiirinay xaalada waxaan isla soo qaadnay, maxaa ku halaysan hadii cutubka doodiisu socoto ,hadiiba ajendahu yahay sii socoshada doodii, ileen waxaan aragnaa anagoo 200 iyo ku dhawaad ah ayaan kulanka furanaa,sidaas darteed marka la gaadho 12:30 pm oo salaada la aado, kadibna la qaadeeyo,waxaan isku soo hadhnaa 20 xildhibaan oo dadkii qornaa ah. Doodii waa socotaa waa xalaal markaas waa la ogolyahay, laakiin maxaa ku jaban hadii marka cutub cusub la bilaabayo kooramka lala sugo in uu buuxsamo.

Maalintii dambe waxaa la ii sheegay markii intan la yimid in Golaha loo sheegay oo la isla qaatay in marka cutub cusub la bilaabayo iyo marka la xidhayo uun loo baahdo"coram"ku in uu buuxsamo,laakiin doodii socotay in la iska sii wadan karo aad ku heshiiseen, markaa anigu wax gaar ah ma wadano cutubkii labaad ayaa inoo socdo hadii dadka dhiman is qoraan, kuwii shalay dooda u hadhsanayd sii wataan oo ma aragtay marka cutubkii 3aad u gudbayno maalintaas "corum" la'aan malahan, kanaa la xirayaa, cutubka 2aad ayaa la xirayaa kii kalena waa la bilaabayaa maalintaas "corum" la'aan lama dhaqaajin karo, markii wax la ansixinayana "corum" la'aan malaha, laakiin hadii dooda maalintii hore lagu socdo sidaad daraad ku heshiiseen hadaan ku socono maxaa ku jaban? Ilayn marka dambeba ayadoo 20 joogto ayay doodii sii soconaysaaye, sidaas waaye waxa la idiin soo jeediyay.

Mid waa balan hadii ilaahay yidhaahdo, hadii kan inaga dhamaado cutubka 3aad aydoo "corum" fadhiyo ayaa la dulmarayaa oo la gabogabaynaa sida kii hore oo kale loo gabagabeeyey,

midka kalena oo la bilaabaayo "corum" la'aan lama dhaqaajinaayo, laakiin doodii socotay ee isla cutubkii ah aan socono walaalayaal, maadaama galabtii 20 anagoo ah aan doodii wadayno, marka aad ayaad u mahadsantihiin aayadaha qur'aanka ayaan ku furanaynaa shiikha aayadaha quraanka ha inoogu furo waan sii soconaynaa.

1) **Xil. Ahmed Abdi Kooshin:**

Waxaan salaamayaa Guddoonka labadiisa Aqal, waxaan salaamayaa xildhibaanada saaka soo xaadiray, hawlwadeenada. Mudane Gudoomiye intaan bilaabin waxaan jeclaan lahaa in aan xeer hoosaadka sidiisa aan u ixtiraamno, habraaca wax ka-beddelka dastuurka qodobkiisa 2(1) wuxuu dhigayaa kalfadhi kasta oo la furayo waa in "quorum" loo helo, hadiise la isku raaco oo ay xildhibaanadu isku raacaan waxay ahaan lahayd mid muhiim ah oo maalintii u danbaysay kalfadhiga markii la fadhiyey in xildhibaanadu gacan u taagaan bay ahayd "never the less" haatan waa la jiifiyaana banaan, laakiin xeer hoosaadka uun aan ku dadaalno sidii aan u ilaalin lahayn.

- **Qodobka 22(1):** Xuquuqda Shaqaalaha kalmada ah ah **xiriir shaqo** ma qeexna "average" maxamedka suuqa joogana ma fahmayo macneheeda kalmada **xiriir shaqo**, waxaan qabaa **in dib u-eegis lagu sameeyo oo la fiiriyo**.

- **Qodobka 22(3):** waxaa lagu soo kordhiyey qof kasta wuxuu xaq u leeyahay shaqo joojin, haddii aysan khatar ku ahayn nabadgelyada. Waa "very broad" macnuhu waxa weeyaan ayaan u fahmay qofka shaqaalihi inuu xaq u leeyahay in uu mudaharaad ama shaqo joojin sameeyo, hadii ay khatar ku ahayn nabadgalyada. Xeer badan baa qeexaya qaabka mudaharaadka loo dhigi karo hadii uu salmi yahay. **Faqradaasi anigu siday iila egtahay ma cada**.

- **Qodobka 22(5):** ee ka hadlaysa xuquuqda haweenka goobaha shaqada, waxaan qabaa iyadoo la taabtay nuxurka waxyaalo badan oo dumarku daris la yihiin, hadana waxaan jeclaan lahaa in lagu soo daro "ka faa'iidaysiga duruufaha haysta awgeed". Inan yar oo shaqo raadis ah in "advantage" looga qaato shaqo, iyadu lafteedu waxaan filayaa inay ku tahay xadgudub, cirdigeeda iyo shakhsigeeda, markaa in kalmadaa lagu soo qoro **ka faa'iidaysiga duruufaha haysta awgeed waan jeclaan lahaa.**

- **Qodobka 24(1,2) :** Hanti loona beddelay hanti gaar loo leeyahay, **faqradda 1,2**,waxay sharaxayaan hanti gaar loo leeyahay oo dawladdu ay la wareegi karto, haday jirto dan guud waa sax, dawladdu hanti guud way la wareegi kartaa, danihii guud ee loogu talo galayna waa loo isticmaali karaa, laakiin hadii aan eegno Soomaalideena dhibaatada ugu wayn ee soomaali maanta haysta TV ama Radio-yada hadaad dhagaysto waa dan guud oo shakhsiyaad la siiyey.

- Waxaan qabaa faqradaa in la raaciyo "**dawladdu ma iibin karto hantida guud ee bulshadu wada leedahay"**, waa in faqrad gaar ah lagu soo daro in ayna dawladdu hantida guud ee ay ka qaaday ummadda aanay iyadu iibin Karin in lagu soo daro qodobkaa ayaan aaminsanahay.

- **Qodobka 26(3):** Daryeelka Qoyska, faqradda 3aad waxaa lagu soo kordhiyey erayga **carruur**,waxaana ugu qornaa Daryeelka Hooyada iyo Dhallaanka waa waajib saaran Dawladda. Waxaan fahmi waayey dhalaan iyo caruur macnaha gaarka ee ay kala

samaynayaan, erayga carruur ee lagu soo kordhiyey macno ahaan anigu waxba ila samayn maayaan in "confusion" yahay, markaa erayga carruur hadii dhalaan uu yahay, dhalaanku waa wixii hooyo dhashay ee caruura "from zero", markaa eraygaa carrruuri "confusion" uun buu abuurayaaye wax cusub soo kordhin maayo ayaan u malaynayaa aad meesha ku soo darteen.

- **Qodobka 27(1):** Xuquuqda Carruurta,faqradiisa 2aad da'da qaangaarnimada waa 15 sano, da'da xilkasnimaduna waa 18 sano, faqradani waa "highly controvercial" markaan anigu aan eeg, qof walba fikir ayuu leeyahay kolay shakhsi ahaan waxaan qabaa 18sano wixii ka yari in ay carruur yihiin oo aan la kala saarin qaangaar iyo xilkasnimo waa fikirka anigu shakhsiyan aan qabo, laakiin xildhibaanada ayaan u daynayaa ra`yigooda iyo doodooda kala qaybintaasi waxay keeni karto bulshada dhexdeeda .

  "second" sharaxaad laga bixiyey markii qodobkan la samaynayey,waxaa la yidhi waxaa lala tashaday culimada, culimaddu waa "segment" ka mid ah umadda soomaaliyeed, laakiin umadda Soomaaliyeed oo dhan maaha.

  Hooyooyinkii lalama soo Tashan, ururadii bulshada lalama soo Tashan, dhakhaatiirtii lalama soo tashan, "lawyer" ama qareenkii lalama soo tashan, iyada laftigeedii halkaa nuqsaan xaga talada Guddiga inay ku jirto oo ay ahayd "segment"ka soomaalida oo dhan in ay soo waydiiyaan 15,16 inagu duruufyo ayaanu leenahay oo inoo gaar ah.

- **Qodobka 27(5)** : faqradani waxay dabosoctaa faqrada 2aad, horta yaa carruur ah? Marka lagu eego indho amni ah, waxa laga eegay halkan shareecadeeni islaamka, laakiin indhaha amniga markaan anigu ku eego shakhsi ahaan 60% faldanbiyeedyada khawaarijta iyo ciyaal weeradu gaystaan, waxaa gaysta dad soogalaya "bracket"kaa carruurta lagu sheegay.

  Faqradaa waxaa ku qoran in qofkaa la xidhayo mudo kooban tani maaha cadaalad, waxayna ka horimanaysaa xaq muwaadinka la waxyeeleyey, sidaas darteed waxaan qabaa qofkasta oo danbi gaysta in "respective of" da'diisa in lagu qaado waajibaadkiisa la mariyo **بالعين والعين بالسنّ السنّ,** faqradan in dib loo fiiriyo oo aan la odhan qof argagixiso ah oo 14 jir ah oo "bomp" tuurayey baa labo cisho la haynayaa wax macquul ah maaha, ama reerkiisa lagu dhex haynayaa waxaan u arkaa in ay gaf ku noqonayso umaddii soomaaliyeed ee uu dhibaateeyey.

- **Qodobka 27(6):** Carruurtu waxay xaq u leeyihiin in laga ilaaliyo, loona adeegsan dagaallada hubaysan, siiqo toosin baan qodobkan la rabaa **"Carruurtu waxay xaq u leeyihiin in laga ilaaliyo, loona adeegsan askariyayn iyo dagaalada hubaysan"**. Askariyayn waxaan ugu jeedaa 70% human right "books" soomaaliya laga qoro waxaa ka kow ka ah in carruur la askariyeeyo. Wasaaraada Gaashaandhiga oo aan anigu ka soo shaqayn jiray waaxyo dhan baa u dhisan si loo ilaalin lahaa inaan carruurta lagu darin askariyayn, markaa faqradani bulshada uunbay la hadlaysaa dawladdu laftigeedu isla hadli mayso, markaa inaan la askariyayn iyadu laftigeedu aynu la jaanqaadno xeerarka caalamka u yaala ee ah carruurta inaan la askariyayn Karin loona qaadan Karin askarnimo hadii uu da'da uu gaadhin, **waxaan qabaa faqradda in siiqo toosin lagu soo daro oo askariyaynta lagu soo daro.**

- **Qodobka 28(2):** wuxuu qorayaa in dawladda xaq loogu leeyahay in ay muwaadinka gaadhsiiso ilaa dugsiga sare, bulshada soomaaliyeed 80% waa danyar aan awoodin in ay iska bixiso dhaqaalaha jaamacada laga sameeyo ee noqday baayac mushtarka lagu kala faa'ido, waxaa aan qabaa hadii inagu aan iska bixin karno ama carruurteena ka bixin karno, waxaa jira reero aan ka bixin Karin in qofkii ama inankii ama inantii hamiga lahaa inuu jaamacad tago aan awoodin in dawladdu damaanad qaado oo lagu daro ilaa heer jaamacadeed, waxa aan qabaa inay tahay wax waajib ku ah dawladda, siyooyin kale ay lacagta uga soo ceshan kartaa qofku marka uu shaqo helo ayaa wax laga jari karaa, laakiin in la damaanad qaado muwaadinkaa soomaaliyeed ee aan awoodin inuu xaq u helo inuu waxbarto hadii uu hamigeeda leeyahay.

  Qodobkaana waxaan jeclaanlahaa in lagu soo daro ilaa iyo waxbarasho heer jaamacadeed. Jaamacada umadda 10million oo dollar baa sanadkii ugu jira, maxay ku qabtaan? Hadii aan dhaliyarada yaryar ee aan awoodin ayna uga bixinayn "school" kiisa.

- **Qodobka 30(1):** Xaqa Helidda Xogta, Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu helo macluumaadka ay dawladdu hayso, marka laga reebo xogta taabanaysa amniga qaranka iyo xogta lagu ilaalinayo xuquuqda dadka kale, ama xeerku reebayo.

  Qodobkana waxaa lagu soo kordhiyey sharaxaad dheeri ah oo aan loo baahnayn, madaama isla faqradda 3aad lagu cadaynayo in Baarlamaanka Federaalka soo saarayo xeer ku salaysan xaqa helidda xogta"in other word" waa laga soo hordhacay iyadoo faqradii 3aadna leedahay xeer baa lagu soo saarayaa in hadana faqradii xaq muwaadinka sheegaysay la yidhaahdo xeer, waxaan qabaa inay dheeri ku tahay, sidaas darteed xaqa la cadeeyo wixii ka reebana lagu soo daro ayaa ka muhiimsan siday hada u qorantahay. Waxaan soo jeedinayaa in faqraddan sideedii hore faraha looga qaado.

- **Qodobka 31(2):** Xogta ku xusan farqadda 1aad ee qodobkan waxaa lagu bixin karaa oo keliya oggolaashaha shakhsiga xogta leh ama sabab kale oo uu xeer tilmaamayo.

- Waxa aan qabaa in laga saaro **ama sabab kale oo xeer tilmaamayo**, waayo faqradda 4aad ee isla qodobkan waxay sheegaysaa in baarlamaanku jamhuuriyadu soo saarayo xeer nidaaminaya xogta waa "repetative" Guddi qodobada aad soo qoraysaan "confusion" bay dadka ku ridayaan iyadoo tii 3aad la leeyahay xeer baa la soo saarayaa in hadana xaga hore lagu soo xadido, sharciyan, qaanuuniyan iyo "legally" inkastoo anigu aan sharciga baran waan iska boodsanayaaye, hadana waa xaqiiqda.

  **Qodobka 35(1**): Isu celinta eedeysanayaasha iyo dembiilayaasha heshiis baa la isku celin karaa ayey leedahay faqradda 1aad, isla faqradda 2aad muwaaddinka Soomaaliya looma gacangelin karo shisheeye.

  Labadaa qodob side ayay isku waafaqayaan? waana la celin karaa oo heshiis baa lagu celin karaa, muwaadin Soomaaliyeedna looma gacangalin karo, waxaan filayaa labada qodob in ay is khilaafsanyihiin oo ay u baahanyihiin in dib u -eegis lagu sameeyo.

2) **Xil. Abdulkadir Sh. Ali Adan:**
   Gudoonka labada Aqal, xildhibaanada labada Aqal waxaan idin ku salaamayaa salaanta islaamka aslaamu calaykum warxamatulahi wabarakaatuhu. Waxaan rabaa inaan u

mahadceliyo labada Guddi ee ka soo shaqeeyey dastuurka aan yeelan doono insha allah, waxaan rabaa inaan doodayda aan gudo galo.

- **Qodobka 22:** ee ka hadlaya xuquuqda shaqaalaha, runtii xuquuqda shaqaalaha waa run xuquuq cad bay leeyihiin shaqaaluhu in ay helaan fasax, gunno xaq bay u leeyihiin, laakiin ani waxaan rabay inaan halkan ku soo kordhiyo faqradda cusub oo faqradda 7aad oo sheegaysa in haweenka soomaaliyeed ee shaqaalah ah ay helaan 3bilood oo fasax ah xiliga dhalmada iyadoo aan laga goynaynin mishaarka, sidoo kalena darajadooda hoos loo dhigaynin in qodobkaa lagu soo kordhiyo waayo xaq ayay haweenku ama gabdhaheenu u leeyihiin xiliga dhalmada in ay helaan fasax, hadii dastuurka ama xeerka shaqaalaha si kale u qeexaynin waxaan rabaa in lagu muujiyo haweenka xiliga dhalmada ay helaan 3 bilood oo fasax ah, iyadoo aan laga goynayn mishaarka, sidoo kalena darajada shaqadeedana aan hoos loo dhigin.

- **Qodobka 27:** Waa in la hubiyaa in dumarka, dadka da'da ah, (waxa waaye in sidii hore lagusoo celiyaa qodobkaas waxaan rabay in la tiro.

- **Qodobka 28(7):** waxay u qorantahay: Barashada diinta Islaamka waa ku khasab ardayda dhigata dugsiyada dawladda iyo dugsiyada gaarka ah ay leeyihiin dadka muslim ka ah. Waxaan u fahmay ama iiga muuqata, hadii dad aan muslim ahayn ay furtaan dugsi ama "school" waxay noqonaysaa macnaheedu diinta islaamka laguma baran karo, **markaa faqradda waxaan rabaa in si loo fiiriyo.**

- **Qodobka 28(9):** Dawladdu waxay xaqiijinaysaa bixinta iyo helitaanka hay'adaha ayaa qoran, markaa wax loola jeedo waan garanwaayey. Dawladdu waxay xaqiijinaysaa bixinta iyo helitaanka agabka lagama maarmaanka ah si loo horumariyo awoodda dhalinyarada, markaa **hay'adaha** eraygaa in si gaar ah loo fiiriyo.

- **Qodobka 29(1): Dhaqanka iyo Afka,** Hay'adaha dawladda ee heerarka kala duwan waa in ay horumariyaan afka, hiddaha iyo dhaqanka suubban ee shacabka Soomaaliyeed, iyagoo ku dadaalaya, markaa iyagoo ku dadaalaya haday rabaan way dadaalayaan, haday rabaana ma dadaalayaan ayey u dhigantaa.

- Waxaa la rabaa hadii sharci la qorayo, sharcigu waa inuu wax waajibiyo, markaa anigu waxaan qabaa in loo qoro "Hay'adaha dawladda ee heerarka kala duwan waa in ay horumariyaan afka, hiddaha iyo dhaqanka suubban ee shacabka Soomaaliyeed, **iyagoo ku waajibinaysa** in ay bulshada dhexdeeda ka ciribtiraan caadooyinka xun-xun" markaa meeshii ay ku qornayd **ku dadaalaysa** laga dhigo **ku waajibinaysa.**

- **Qodobka 29(3):** Hay'adaha dawladda ee ku shaqada leh waa in ay horumariyaan, dhawraariyaana, erayga **dhawraariyaana** ma aqaano macnaha dhawraariyaana. Waxaa la rabaa marka dastuur la qorayo in qofka baadiyaha jooga iyo kan magaalada jooga afka uu ku qoranyahay dastuurku ay isla fahmi karaan, laakiin af aan baadiyaha laga aqoon hadaan intan ku qorno, waxay u baahanaysaa fasiraad kale, sidaan ognahay dastuurka in eray bixin loo sameeyo ayey noqon hadhow oo eraygan dhawraariyaan la sharxo. Waxaan rabaa qodobkaas in dib loo fiiriyo.

- **Qodobka 30(2):** waxa uu odhanayaa Qof iyo hay'ad midna laguma khasbi karo inuu bixiyo xog haddii aysan maxkamad amrin ama waxa kale oo lagu daray meesha **ama xeererka Jamhuuriyadda**.

- Waxaa fiican in qodobka lagu ekeeyo haddii aysan maxkamad amrin oo uu qornaado **" Qof iyo hay'ad midna laguma khasbi karo inuu bixiyo xog haddii aysan maxkamad amrin",** laakiin aan la dhihin **xeer kale ama xeerka jamhuuriyadda.**

- Waxaan rabaa talo jeedin labada Guddi ah inaan u soojeediyo oo ah mararka qaarkood waxaan arkaynaa qoraalaada, A nigu waxaan ahay dadka aad wax u qora, waxaan jeclahay marka waxa la qorayo "book" ha ahaado ama dastuur ha ahaadee in wuxuu "standard" ahaado oo uu isku ekaado, mararka qaarkood waxaad arkaysaa xarfaha "capital"ka ah sida Diinta, Dalka, Dawladda, Jamhuuriyadda, Fedderaalka dhamaan xarfahaa mararka qaar waxaad arkaysaa iyadoo xarafka ugu horeeya loo qoray "capital" marna "small letter" lagu bilaabayo. waxaa la rabaa xarfahaasi in ay isku eekaadaan, Fedderaal marka la qoro marka ugu horayso iyo marka ugu danbaysa in xarafka Federaalka ee F ay "standard" noqoto ama isku mid ahaato min bilow ilaa dhamaad**.** Xarfaha ka bilaamanaya magacayada sida qaalibka ah ama dadka wax qora ama "book"ta la qoro xarfaha ka bilaamaya magaca 100% waxay ka bilowdaan xarafka "capital"ka ah hada waxaad arkaysaa inuu waxoogaa fudayd ahi ku jiro magacyada qaarkood "capital" ay yihiin, magacyada qaarkoodna "small" ay yihiin marka insha Allah labadaas talo soo jeedina waan soo jeedinayaa.

3) **Sen. Saredo Mohamed Hassan:**
Anigu qodobka 21aad ilaa 30aad uun baa ka hadlayaa madaama ay aad u balaadhanyihiin, 10daqiiqana kuma filno, mana cadayn Gudoonku ma 21 ilaa 3o mise 21 ilaa 41 lagu heshiiyey, arrintaas ma fahmin "any way" anigu 21 ilaa 3o ayaan ka hadlayaa.

   - **Qodobka 21aad**: Muwaaddin kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu si xor ah u doorto xirfadda, shaqada ama mihnadda uu rabo. Dadka markaa aan muwaadiniinta ahayn ee wadankeena martida ka ah ee qodobadii hore lagaga soo hadlay miyaana xaq ku lahaanayn xirfada iyo shaqada? Taasi waa su'aal, mise qof kasta mala odhan karaa.

   - **Qodobka 22(1):** Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu helo xiriir shaqo oo ku dhisan caddaalad. **Fursad shaqo inuu helo weeyi qofku** ,kalmadaa xiriir shaqo waan fahmi waynay. Xiriirka ma waxaa laga wadaa waa inuu qof keeno miyaa laga wadaa, fursad shaqo inuu helo ayey ku haboontahay.

   - **Qodobka 22(3)**: Shaqaale kasta wuxuu xaq u leeyahay shaqo joojin, afsoomaali markaan u akhriyayno Shaqaale kasta wuxuu xaq u leeyahay shaqo joojin, ma asaa shaqada iska joojinaya, ma laga joojinayaa ? Markaan waraystay dad ka mid ah Guddiga waxay yidhaahdeen waxa laga wadaa waa mudahaaradka qofku uu sameeyo marka u rabo in shaqadaan la joojiyo ee Meesha uu ka shaqaynayo.

     Markaa qaab kale oo loo qoro oo ka soomaaliyaysan oo qofka muwaadinka ah ee caadiga ah uu fahmi karo inay waxani tahay mudaharaad si nabad ah oo shaqada dhexdeeda ugu qabanayo qofkaasi in qodobkaas laga dhigo.

Qodobadan xuquuqda shaqaalaha ah waxaan qabaa, waxaan bogaadinayaa xildhibaankii iga horeeyey baa "maternity leave" soo hadal qaaday oo runtii i xasuusiyey aad ayuu u mahadsanyahay xildhibaanka. "maternity leave" in haweenaydu marka ay dhasho ay hesho fasax 3bilood waa inay meeshan ku jirto iyaduna.

- **Qodobka 22(5):** Qof kasa oo shaqaale ah, gaar ahaan haweenka waxay xaq gaar ah u leeyihiin in laga ilaaliyo faraxumeyn, faquuqid iyo takoorid goobaha shaqada.
  Waxaan qabaa qodobkaa in lagu soo daro sidii xildhibaan kooshin uu sheegay in laga ilaaliyo ka faa'iidaysiga duruufta iyo in xeer lagu soo saarayo meeshan ku qorantahay oo "specific" ah oo "anti-harassment law" ah. Duruufta iyo hawlaha ka qabsada hablaha meelahan wax la "imagine" garayn karo ma aha runtii, markaa waa in "anti-harassment law".

  Waxaan arkaynay nin dhan oo agaasime ah oo wasaaradda la keenay oo gabadhii wasiiradda ahayd ku odhanya waa kala kacsantahay walaahi. Kala kacsanaantu waa xagee yacni inuu shaqada ku waayo ayey ahayd, hadana uu sii shaqeeyaa meeshii waa iska joogaa isagoo wasiiradii kala kacsanayd la jooga waana khalad wayn, markaa arrintaa "anti-harassment law" wax laga kaftami karo maaha, Waa in "anti-harassment law" uu jiraa waa qurux badantahay kanaa tahay kii kale ayaa tahay, qofkii qurux badan Alla quruxbadnaysiiyey, ragaba qayb qurux badan baa ku jirta ma cid baa "comment"garaysa isagoo qurux badan baan dhaafnaa.

  Markaa gabadha quruxdeed iyo kala kacsanaateed iyaday u taalaaye waa in arrintaas "anti- harassment law" lagu soo daraa meesha.

- **Qodobka 22(6):** Dadka naafada ahi waxay xaq u leeyihiin in ay goobaha shaqada ku helaan sinnaan buuxda, waana in loo fududeeyaa qaab kasta oo u suurta gelinaya shaqadooda. Xeerka naafada inuu ku soo baxayo arrintaa waa in la qoro, goob walba oo shaqo oo aan tagno ma laha qaab qofka naafada ihi uu usoo gali karo, qofkani baahi gaar ayuu qabaa.

  Anigu waxaan aamisanahay naafo inay tahay qofka maskaxdiisu dhimantahay, laakiin qof Ilaahay SWT maskaxdiisa u dhamaystiray naafo maaha, markaa qofkan baahi gaar ayuu leeyahay, baahidiisa gaarka ah waa in halkaa lagu cadeeyo in xeer laga soo saari doono oo "specific" ku ah arintaas.

- **Qodobka 23(2):** Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu wax ka helo kheyraadka dabiiciga ah, ma fahmin sida uu wax ugu helayo kheyraadka dabiiciga ah ma wax isagu uu leeyahay ayuu ka helayaa ma wax isaga "specific" u ah oo "proportion" Khasab ah baa jiraya oo la leeyahay Sareedo oo ah muwaadinad soomaaliyeed waa in ay 1% ka heshaa kheyraadka dalkan miyaa? Siday u qorantahay iyaduna ma fahmin. Qof kasta wuxuu xaq ku leeyahay inuu wax ka helo kheyraadka dabiiciga ah, ma naloo qaybinayaa ma fahmin? iyadoo laga ilaalinaayo ka faa'ideysi xad dhaaf ah, haduusan ka faa'ideysigu xad dhaaf ahayn qaar ma guran karaa oo qaar ma iibsan karaa oo qaar ma qaadan karaa, xad dhaafna "proportion" noocee ah weeyi ma 1%, 2% la ogolyahay. xad dhaafkaasi noocee buu noqonayaa ? hadii aan 10 geed gubo oo aan dhuxulaysto ma xad dhaaf baa mise xad dhaaf maaha? Xad dhaafkuna wuxuu u baahanyahay inuu qeexnaado waxa laga wado.

- **Qodobka 24(2):** Dawladdu waxay si khasab ah hanti ula wareegi kartaa marka ay jirto dan guud. Qof kasta oo hantidiisa dan guud awgeed loola wareegey wuxuu dawladda xaq ugu leeyahay magdhaw caaddil ah, caadilka laftigiisu waa mid inteeya? Hadii ay 10,000 oo dollar isiiyaan guirigayga oo100,000 oo dollar oo aan boqol sano daganaa oo awowgaygii saddexaad ku dhashay ma caadil ayey noqonaysaa arrintaasi ? hadii 10,000 la i siiyo caadil maaha. dastuur dimquraadiya, waxaan dhahnay dalkan dimuqraadi buu ku dhisanyahay wax Khasab ah bay ku qaadaynsaa waxay u egtahay xoog iyo baad, teeda kale meeshan waa in lagu soo daraa qodob ka hadlaya dawladdu iyadu ma iibin kartaa, gurigaan aan hada ku jirno dawladdu hadii ay damacdo oo ay caawa ku soo dhacdo inay iibiso maxaa uu diidaya? Waa inay jirto wax loo diidayo, wadanka dhulalkiisi sidii la doonaa loo iibsaday.

  Xukuumadu dawaa'irtii ay lahayd sidii la doonaa loo gatay, sidii la doonaa loo sarifay, iyadoo Baarlamaan la soo marin. Mudanayaal idinkoo ansixinin baa dhulalkii oo dhan la iibsada, maxaase laga odhanayaa dhulka la iska haysto ee inta khasabka loo qaatay la iskaga dhaganyahay ee dadka kale ay iska haystaan, waa inay ku cadahay meeshan oo ay ku qeexantahay xuquuqda dhulka.

- **Qodobka 25(4):** waxay odhanaysaa Hay'adaha dawladda ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa in si dhab ah ugu sugaan dadweynaha dhamaantood taabbaggelinta xuquuqda, iyagoo si gaar ah mudnaan u siinaya haweenka, carruurta, waayeelka iyo dadka naafadda ah. Maanta balaayo ayaan iska dhigayaa oo raga ayaan u doodayaaye meeshan maxaa raga looga reebay? Ragu baahiyaha ay dadku qabaan bay qabaan, meeshan waa xuquuq loo simanyahay, markaa in cadaalad laga helo xuquuqda loo simanyahay waa waajib.

  In dad gaar ah mudnaan loo siiyo xuquuq jirta waa waxaan anagu diidnay mana qurux badna in qof kale lagu sameeyo. xuquuda waa loo simanyahay dhamaan dadka waa in loo daayaa meeshaas oo aan dad gaar ah loo fiirinin.
  **Qodobkan sidiisii hore uu ahaa buu ku fiicnaa oo qodobka kale ee la xadfiyey uu meeshiisa ku jiro.**

- **Qodobka 26(2)** : waxay odhanaysaa Qof kasta oo qaangaar ah wuxuu xaq u leeyahay inuu guursado, hadana markaasay qodobka 27(2) waxay odhanaysaa carruur waa qofka 15sano jira, markaa halkan waa inay noqoto qof kasta oo xilkas ah uu guursan karaa, teeda kale guurku waa inuu awood ku xidhanyahay Ilaahay SWT wuxuu yidhi **وليستعفف الدين لايجدون نكاحا**. Yaa yidhi waa Khasab inuu qofku guursado markuu qaangaadho? Waa in uu horta shuruudeedii buuxiyo, markaa qof walba uu guursan karaabaa ha la isku yaaco oo aan xuduud lahayn waayee. Ha la isku yaacadana xuduudeedii ha la sameeyo, hana lagu qoro awoodii iyo xilkasnimadii, qaangaadhnimo kaliya kuma filnaanayso.

- **Qodobka 28aad** ee waxbarashada si guud ayaan uga hadlayaa, waxbarashada waa in lagu soo daraa qodob siinaya waxbarashada nooca ay tahay. Waxbarashadu nooca ay tahay meeshan kuma jirto waa in la helaa waxbarasho asaasi ah ,waa in la helaa waxbarasho fikirka dhisaysa, waa in la helaa waxbarasho halabuurka kordhinaysa, waa in la helo waxbarasho tayo leh waana in la helo waxbarasho "component"ga jihaynta ah uu ku jiro. Jihayn hada ma jirto waxaa la baranayaa uunbaa la yidhaahdaa oo ilmaha maskaxdiisa iyo caqligiisa ka hadlaysa meeshan kuma jirto.

- Waxbarashada asaasiga waa xaq baa la yidhi yay xaq ku tahay? Waxbarashada asaasiga ah waa inay bilaash noqoto, jaamacada umadda 10million baa ugu jirta miisaaniyada ma guri kor laga soo dhisaan aragnay isaga oo hoos aan asaas ka lahayn. Waxbarashada asaasiga ah ee dugsi hoose dhexe waa inay "free"ahaato dawladda ayaana kafaalo qaadaysa, "proportion" boqolkiiba intee miisaniyadda uga jaraysaa waa in meeshan ku cadaato qodobkaa waxbarashada. Waxbarashada dadka waawayn ee "informal education" waa in lagu soo daro qodob ah oo dadka reer miyiga ah oo ay waxbarashadu ugu tagto baadiyaha ay joogaan, xaq ayey u leeyihiin xuquuq ayey u leeyihiin barashada reer miyigu waa in guryahooda ay ugu tagto.

4) **Xil. Mohamed Adam Moalim Ali:**
Guddoomiye Ajendaha aad noo soo dirteen waxaa ku qoran 21 ilaa 41, waxaan aaminsanahay ajendihii aan ku shaqaynay ee aan ku nimid, saakaba xeer hoosaadka waxaa loo jabiyey oo loo furay waxay ahayd in hawshaa la qabsado, anigu markaa intii aan soo diyaarsaday baa sheegayaa, sidoo kalena 10 daqiiqo waa igu filantahay. Cutubkan horta waxa uu ahaa cutub ka hadlaya xuquuqda asaasiga ah iyo waajibaadka muwaadinka oo seddex madax ahaa.
Madaxa kobaad oo ahaa mabaad'iida guud ee xuquuqda aadanaha iyo madax labaad oo ahaa xuquuqda asaasiga ee qofka iyo xadidaadiisa iyo madaxa seddexaad oo ahaa waajibaadka muwaadinka.

- **Qodobka 22(1):** oo u qoran sidan: Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu helo xiriir shaqo oo ku dhisan caddaalad. Arrinkaasi markaa isma qabanayso inuu helo xiriir shaqo oo ku dhisan caddaalad, shaqada ma xiriirbaa, meeshaas waxaan qabaa in dib loo saxo oo lagu beddelo **inuu helo fursad shaqo**. Fursada ayaa loo simanyahay.

- **Qodobka 28(1,6):** labadaba waxaan qabaa sidii kuwii hore oo kale in lagu daro ama dib loo soo celiyo soomaaliya ayaa ku qoran in laga dhigo **soomaaliyeed**. Tii hore waxaa qornaa asalkii dastuurka Waxbarashadu waa xuquuq aasaasiga ah ee ay leeyihiin dhammaan muwaaddiniinta jamhuuriyada federalka Soomaaliyeed. Waxay ka dhigeen Somalia ayay ka dhigeen, marka arrintaasi wali "draft"kii hore waaye, laakiin inaad qaadataan weeyi oo aad soomaaliyeed sideedi aad u soo celisaan, **sidoo kale faqradda 6aad iyadana sidoo kale soomaaliyeed in la dhaho.**

- **Qodobka 28(7)** waxay u qorantahay Barashada tacliinta diinta Islaamka waa ku khasab ardeyga dhigta dugsiyada dawladda iyo dugsiyada gaarka ah ay leeyihiin dadka muslim ka ah sidaasay u qorantahay. Markaa dugsiyada ay leeyihiin dadka muslim ka ah maxaa loola jeedaa? Maxaad ka wadaan? Micnaha ma dugsiyo oo waxaa jira aysan lahayn dad aan muslim ahayn? Qodobkan waxa uu toos ugu hor imanayaa qodobkii ahaa laguma faafin karo waxaan diinta islaamka ahayd dalka. Arrintaas waxaan rabaa inaad cadaynsaan waxaad ula jeedaan dugsiyada muslimka ah? sidii markii hore ay qoranayd inaad u daysaan ayaan qabaa ama inaad qeexdaan waxaad dugsiyada muslimka ah ula jeedaan.

- **Qodobka 29(3):** waxay u qorantahay sidan: Hay'adaha dawladda ee ku shaqada leh waa in ay horumariyaan, dhawraariyaana dhaqan hoosaadyada, kalmadaa **dhawraariyaana** waa kalmad afsoomaali ah oo aad u adag oo aan aad loo fahmayn.

Dhawraariyaana inaad **dhowraan** waan garanay, laakiin dhawraariyaan waa afsoomaali aad u adag oo uu qofkastan fahmayn, markaa meeshaas **waxaan qabaa in lagu beddelo dhowraan.**

- **Qodobka 35(1):** isagana waa sidii oo kale soomaaliya ayaad qorteen **waa inaad Soomaaliyeed aad ka dhigtaan.**

- Qodobka 41(2) xarfaha H iyo K labadaas waxay u baahantahay dib u sixid ayey u baahantahay oo erayga **Soomaaliya** laga dhigo **Soomaaliyeed.**

5) **Xil. Yaasin Xaaji Samatar – Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad Golaha Shacabka**
   - **Qodobka 27(1**) : waxan ognahay dhibaantooyin badan baa kajira "specially" ilmaha nool oo la soo tuurayo oo ay Eyada banaanka ku cunaan oo aad iyo aadka u xanuunka badan, waxaan aaminsanahay qodobo badan marka la akhriyo wuu furanyahay, waxaan rabaa in aan la hadlo Gudiyada qoraya in qodobadaa la xiro oo laga daayo sida hada ay tahay. ubadka marka uu dhasho wuxuu xaq uleeyahy in loo bixiyo magac, in uu jiro xeer cadaynaya magaca loo bixinayaa muxuu yahay ileen waad aragtay dhalinyaro yar yar oo 17 jirro ah ayaa magacyo aan la qaban karin oo aan lafahmayn u bixiya ilmaha, sidee lagu xadidi karaa ma marka ilmahu dhalashada qaadanayaa la xadidayaa, macnaha halkaas xagay ku xirantahay, in magac loo bixinayaa in uu magac muslim yahay iyo in kale, laakiin mida ah in laga keeno sharci markasta waxaad arkaysaa xuquuda caruurta iyo xuquuqda qofka biniadaamka uu leeyahy. hada qodobka 19aad xuquuqda uu leeyahay muwaadinka, muwaadin baan ahay magaaladii aan u dhashay baa la iga sooceliyay dastuurkana qodobka 19aad ayaa wuxuu cadaynayaa in qof muwaadin ah isaga oo aan cidna ka amar qaadan magaalada uu rabo uu ka dagi karo meesha uu rabo uu tagi karo meesha uu rabo uu u duuli karo marka maxaa cadaynaya oo aad rabtaan in aad qortaan hadii aniga Beydhabo la iga sooceliyay qofka isoo celiyay muxuu mutaysanayaa? aniga waxaan qabaa madaama dastuurka la dhameystirayo in lakeeno waxa dambiga qofka gala waxa uu wajahayo in ay cadahay in ladhaho qofka xuquuq baad leedahay xuquuqdi aan leeyahay hadii lagu xadgudbo uusan qofkii wajahaynin waxaan arkaa in aysan ahayn dastuurkii la dhameystirayay macno uusan sameynayn.

     Aan kusoo noqdo qodobka 1aad xeerka ilmaha waa waxa ugu adag oo maanta cuqubada ah oo ina horyaala, ilmaha waalidkiis dilay isagoo 2 jir ah, 1jir ah oo guguban ayaa na hor imaaday Baarlamaankii 10aad 2017 Kii, hooyo ayaa waxay tiri canugaan waxaan u gubay faal ayaa la ii sheegay in aanay ilmo dhalayn marka canugii bay gugubtay, maxaa qorsha ah oo loo hayaa maxay tahay ciqaabta ay mamaadaas marayso hadii laga qaado see looga qaadayaa? ilmaha lasoo tuuray xeerkee lagu qaadanayaa, yaa masuul ka ah ma dowladii baa la wareegaysa oo xeer waxaa jira qodobkaa xeerkaa hebel la dhaho waalidkaas waa laga qadanaa dowladaa iska leh.

   - **Qodobka 32(1**) waa qodobo iyaguna furan, qofkasta wuxuu xaq u leeyahay go'aamada maamuleed ee kasoo baxa maamulada heerarka kala duwan Hay'adaha Dowlada, markasta markaa akhrisid xeer kasta waa furan yahay waxaana lagu dhahayaa oo meshaan ku qoran Go'aanka maamuleed ee cadaalada, waxaan qabaa Soomaaliya 30sano ayay burbursantahay cadaalada markii laga hadlayo in ay jiraan qodob xiran oo kooban waxkasta idinku faahfaahiya, lakiin waa in ay soo xirantahay, waxaan rabaa in

aan Ayido qodobka ma aanan qorine midii maxaabiista la isku kala badalayay iyaduna waa qodob furan meel wuxuu sheegayaa in la isku bedeli karo meelna waxaa la sheegayaa in muwaadinka xiran uu leyahay xuquuq saas ah mana jiro wax cadaynaya , marka waxaan codsanayaa wan soo gaabinayaa in xuuquq kasta oo meel lagu dhaho leeyahay qodob soo xiran .

6) **Xil. Jama Mohamed Askar:**
Waxaan ku dadaalayaa in aan ka hadlo qodobka 20aad ilaa qodobka 30aad sida aan ku heshiinay.

- **Qodobka 22 (3)** : oo ka hadlaya shaqo joojinta Guddigu waxay kusoo kordhiyeen hadii aanay nabadgeliyada wax u dhimayn waxaan jeclaan lahaa iyadoo mudlaq ah in xaqaa la sugo oo layiraahdo **"qofku wuxuu xaq u leeyahay shaqo joojin"** hadii kale waxay keenaysaa in xaqaa sababo nabad geliyo awadeed qofka looga qaadi karo.

- **Qodbka 23aad**: ciwaankiisa waxaa ku qoran deegaan iyo Bey'ad nadiif ah, Ereyga Bey'ad bey soo kordhiyee Gudigu, Bey'ad waa Af carabi ma aha Af soomaali waxayna la micno tahay un eryga deegaan marka waxaan jeclaan lahaa in Gudigu ay sidii hore ku celiso **"Deegaan nadiif ah in layiraahdo"** degaan iyo Bey'ad nadiif ah ma qurux badna.

- **Qodobka 27 (2)** : waxay ka hadlaysaa oo ay qeexaysaa cida carruur ah ama ubad ah, labo Da'ood baa halkaan lagu qoray Da'da qaangaarka oo lagu sheegay 15jir iyo waxa lagu sheegay Da'da xilkaska oo lagu sheegay 18 jir, anigu intaan ogahay dastuur sidaa wax u qora oo sheega 3 "category" tusaale ahaan mid qaangaadh ah , mid xilkas layiraahd iyo mid qof weyn ah ma arkin, dadku waxay u kala baxaan caruur iyo dad waawayn, warbxinta waxaan ku arkay inay eegeen fuqahada islaamku sida ay uga hadleen kuwa maalikiyada, xanaafilada iyo shaaficiyada oo ay isku khilaafeen mas`aladan qaar baa 15 yiri qaar baa 18 yiri xataa waxaa ku qorran kuwo 19 yiri markaan ka hadlayno "taqniina shareecul islamiya" marka "code vecation" lagu sameynayo shareecada islaamka hal mad hab lama cuskan karo madaahib badan baa la cuskadaa, iminka jaamcatul Azhar markaad eegto madaahibta muctamadka ee yaala 8 mad hab weeye 4ta mad hab ee aad taqaanan shaaficiyada , xanaabilada, maalikiyada iyo xanafiyada waxaa dheer mad habka daahiryada, madhabka zaydiyada ,mad habka ibaadiyada iyo madhabka "11" ee jacfariyada ah, 8 weeye sababt sidaa loo yirina waa marka taqniin la sameynayo ama sharci la sameyno waxaa la eegaaa dhamaan madaahibta islaamka oo dhan " contex" keena iyo xaalada aynu ku noolnahayna midka ugu haboon ayaa laqaataa maanta waxbadan baa is bedelay aduunyada waxay ilatahay in laga daayo 15jirka oo lagu daayo 18 jir wixii ka yar baa caruur a., tusaale ahaan hadii aan 15 jir ku qorno oo waan qaangaadh aan niraahno iyo hadii aan niraahno 18 jir weeyoo waa xilkas raadka sharci ee ka ratibmaya hadii uu danbi galo ma 15 jir baa laraacayaa mise 18jir? hadii uu arimo madani ah galayo tusaale ahaan oo uu guursanayo ma waxaan raacaynaa 15jir mise 18jir "confution " iyo waxay keenaysaa khalkhal faro badan qaabkaan dastuur u qoran ma arkin fadlan aa dib ugu celino 18kii.

- **Qodobka 28(4)** oo meesha laga saaray waxay udhignayd sidan, waalidka aan iskii isugu filnayn wuxuu ubudkiisa qaangaadhka ah xaq ugu leeyahay in uu ka helo daryeel, walidiinta aan daryeel ka helin ubkooda qaangaadhka ah ama xigtadooda waxaa daryeelkooda kafaalo qaadanaya dowladda, markii hore wuxuu u dhignaa oo laga

keenay sidan, waalidka aan iskii isugu filnayn wuxuu xaq ubadkiisa qaangaadhka ugu leeyahay daryeel sharci ah,  hadii ay ubadkii wax haystaan oo ay waalidkii daryeeli waayaan waalidku waa in uu xaq u yeeshaa in uu ubadkii dacweyn karo, oo ubadka lagu xukumi karo in ay daryeelaan waalidkood hadii aan ubadku waxba haysan oo ay waalidkood dayeeli Karin markaas ayay dowladu kafaalo qaadanaysaa .

Xuquuqaha halkan ku qoran waxaynu u qeybin karnaa 5 qeybood;  xuquuqo siyaasi ah, kuwo madani ah , kuwo dhaqan , kuwo dhaqaale iyo kuwo bulsho, marka aanu ka hadlayno ajaanibta dalkeena kunool marka laga reebo xuquuda siyaasiga ah mooyaane inta kale oo dhan way inala wadaagaan  xuquuda dhaqan, tan dhaqaale, iyo tan madaniga ah  kuwaas oo dhan way nala wadaagaan, laakiin waxa ayna nala wadaagin xuquuqda siyaasiga oo kaligeen aynu leenahay .

7) **Xil Abdulkadir Mohamud Dagane:**
Saaka Barlamaanka "confuse" badan ayaa ka dhacay, sababtoo ah waxaan rabay ajandihii aad noosoo dirteen in aan ku shaqeyno idinkana mid kale ayaad halkaa ka sheegteen maalintina waxay ahayd in aan soo dhaqsano kaliya laakiin in "quorum" la'aan lashaqeynayo oo aan dooda kaliya wadanayno balantii hore ee Guddoonku  hore noogu sheegeen sidaa ma ahayn.

- **Qodobka 25**: waxaa uu leeyahay  qofkasta waxaa uu xaq u leeyahay In uu helo biyo nadiif ah oo uu cabo, biyo nadiif ah oo uu cabo kaliya hadii lagu koobo waxaad moodaa in ay khalad tahay, nolashuna biyo nadiif ah cabitaan kaliya looma isticmaalo biyo nadiif ah oo uu cabo oo uu ku qabaysto, ku waysaysto ayuu ubaahanyahay  marka in lagu koobo biyo nadiif ah oo uu cabo kaliya in aysan sax ahayn baan qabaa.

- **Qodobka 27 (2)** : aad iyo aad baan u  soodhaweynayaa  Guddiga isbadelka ay kusameyeen qodobkaas, Eryga carruur ee qodobkan ku xusan waxaa loola jeedaa qofkasta oo  ka yar Da'da  qaangaarnimada ee 15 sano,  sida ay Guddiga u qoreen ayaan u arkaa in ay sida saxda ah tahay, Da'da qaangaarnimada tahay 15 sano,.

- Qaangaarnimada wax lagu ciyaari karo ma aha sababtoo ah waa meesha ay ka bilaawato xuquuqda iyo waajibaadka labaduba , qofka markuu qaangaadh noqodo xuquuq  iyo waajibaad mid Illahay ku leeyahay iyo mid dalka ku leeyahay iyo mid dadka ku leeyahay waxaas oo dhan baa fuulaya, waliba Guddigu waxay ku fiican yihiin in ay soo qoreen oo ay ku dareen 18 sano wixii loo gaarana ay u aqoonsadaan Da'da "Rushdiga" waxa ay ku magacaabeen oo ay culimada kala tashteen arrin aad u wanaagsan weeye, aayada qur'aankana waxay leedahay **وابتلوا اليتمي حتي ادابلغواالنكاح فان ءانستم منه رشدا فادفعوا اليه اموالهم**" labduba wa sheegtay qaangaadhka culimada islaamka iyo fiqiga markaad fiirisidna 15 bay u badanyihiin, anaga fiqigana dastuurka halagu qoro oo islaam suni, shaafici aan leenahayna waxaa weeye 15 sano ayuu qabaa sida fiqiga wadanka uu qabo iyo sida dhaqanka iyo curfigu uu yahay iyo sida Guddigu ay soo qoreen waa iswaafaqayaan, qodobkaan waxaan qabaa sidaa in loodaayo 15 sano in uu yahay qaangaarka .

- **Qodobka 28**:  waxbarashada sidaad usoo qorteen waa wanaagsantahay laakiin waxan isleeyhay in halkaan lagu daro qodob aad iyo aad muhiim u ah oo ah waxbarashada dadka reer guuraaga ah, dadka reer guuraaga ah waa in waajib halkaan looga dhigaa dowladu in ay u sameyso "maxwul umiyaha" waxa la yiraahdo qofku inuu waxna akhrin

karo waxna qori karo in loo sameeyaa dawladana waa in midaas lagu waajib yeela oo ay doorkaas iyada ah qaadataa.

- **Qodobka 29 (3)** : Hay'adaha dowlada ee ku shaqada leh wa in ay hormariyaan dhowrariyaanna, **dhowraariyaan** luuqada soomaali ah in aysan ahayn baan filayaa, laakiin waxaa laga yabaa in qoraalka uu khaldamay hadii luuqawiyiinta iyo dadkii ku xeel dheeraa waa joogaan laakiin waxaan umalayn khalad madbaci ah inuu yahay ee luuqada soomaali ah in aan la qorin, khalad madbaci ah haduu yahayna in la saxo ayaan qabaa, dhaqan si gooni ah iyo qolo gooni ah in loo sheego ma qabo ama afguri ha ahaad ama dhaqan hoosaad ha ahaado dhaqanka mar hadii uu dhaqan wadanka kajiro yahay ama waqooyi haka jiro ama koonfur haka jiro ama degaan kale haka jiree dhaqan soomaali leedahay in loo ixtibaaro oo loo qaato si guudna dhaqankaas in loo horumariyo oo loo ixtiraamo ay tahay in loo arko .

8) **Xil. Mahdi Mohammed Guleid:**
Bismillaahi Raxmaani Raxiim, Xildhibanada sharafta leh aan is dhagaysano waxan marka hore u hambalyeynaya Gudoomiye sheekh Aadan madobe sida odaytinimada uu golaha u hogaamiyo waxaana kuso dhawanaya dooda aan is maqalno walalayan 10 minute dhagihiina isiiya, anigu waan idin dhagestaa waana qorta comment iyo faalada xildhibanada bixiyaan si aan cilmi uga faa'iidaysto waxan ka bilawaya Qodobka 21aad Ila kan 30aad.

- **Qodobka 22aad** xuquuqda shaqaalaha farqadiisa 1aad waa qaybta dhexe ee aad wax ka badasheen qaybta aan anan ka doodayo, Qof kasta waxa uu xaq u leyahay inu helo xiriir shaqo Oo ku dhisan cadaaalad waxay ka hadleysaa aniga saan u fahmay xildhibanada qaar baa su`aal ka kenay xirirka shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha, marka qof kasta waxa uu xaq uleeyahay in uu helo xiriirka shaqalaha iyo loo shaqeeyaha oo ku dhisan cadaalad.

- Isla qodobkan Faqrada 5aad meelaha xarfaha sida wax loo qorey wax ka maqan yihiin, taa Guddiga ayaan gaar ugala fadhiisan doona, laakiin halka aad tiraahdeen "fara xumeyn" anigu waxa aan ku badalay in aan lagu xadgudbin oo faraxumaynta macno kale ayay yelanaysaa marka qof kasta oo shaqaale ah gaar ahaan haweenka waxa ay xaq gaar ah u leyihin in laga ilaliyo fara xumeyn halka aad tirahden waxay xaq gaar uleeyihin in aan lagu xadgudbin ayaan oran laha.

  Waxan ku soo dari laha Faqrada 6aad kadib faqrad oranaysa xiriirka shaqalaha iyo loo shaqeyaha iyo xuquuda shaqaalaha xeer gaar ah ayuu Baarlamanka Federaalka soomaliyeed ka soo saari doonaan, marka xeerka sharciga shaqaalaha (legal relations) dunida kalana looga yaqaan oo faahfahsan buu Baarlamanka soo saarayaa **qodobka 7aad in aad ku dartaan waan soo jeedinaya.**

- **Qodobka 23aad** deegaanka iyo bii`adu waa af somali iyo af carabi uun marka in aad ku daysaan deegaan nadiif ah oo **ereyga bii`ada aad ka saartaan ayaan ku talin laha wana ku raacsanahay xildhibaan jamac Mohamed Asker**.

- **Qodobka 25(5**) oo aad tirteen anigu waxa aan ku talin lahaa in la soo celiyo, waayo meel kasta oo xuquuqda haweenka iyo carurta iyo dadka laga tirada badanyahay ama la faquuqo in aad dhowrtan baan ku talin lahaa xaqiiqa jirto mujtamac ahaan Oo aynu La

noolnahay weeyaan, Marka waa in la hubiya dumarka meesha aad tirahden unbaan oran laha haweenka, waayo haweenka uu ka yara macno baalaranyahay wuuna ka asluub ficanyahay dumarka halka la leeyahay in haweenka dadka da`da ah, Naafada iyo dadka laga tirada badanyahay Oo taarikhiyan La takoori jirey in ay helaan kaalmo gaara si ay u gaaran xuquqdooda dhaqan dhaqaale, **qodobka anigu waxan ku talin laha in laso celiyo.**

Isla qodobkaas faqradisa 4aad oo aad tirahden dayacan ubadku waxa uu walidkisu xaq u leyahay xanaano, hadiise xanaanada uu ka waayo qoyskiisa ama xigtadiisa ama uu yahay ubad dayacan halkii hore dariiq jooga ayaa ku qorneyd , laakiin waxaa loo yaqana caruurta darbi jiifka, magaalooyinka soomaalida aad bay runtii ugu badanyihiin,Xuquuq gaar ayay leeyihin carruurta darbi jiifka ahi , **eraygaas ayaana kaga yara asluub badan halka in** lagu beddelo **darbi jiifka "dayacan" ayaan soojeedin lahaa.**

- **Qodobka 27aad** xuquuqda carruurta dadkii af soomaaliguna way joogaan dhowr shay ayaan ku arkay intaan dastuurka aqrinayay, ilmaha, ubadka, carruurta, dhalaanka marka bal 4taas in macno loo kala yeelo Oo markii hore soo tuurida ilmaha ka hadlaynay, ilmuhu inta uu la egyahay ma intu caloosha Kujirabaa, goormu ilmo yahay, gooorma ayuu ilmo ka baxaa oo uu ubad noqdaa? Goorma ayuu ubad dhaafaa oo uu carruur noqdaa? carruurta halkan da`da aha kala saarteen ayaan ugu iman doona.

- **Isla qodobkan farqada** 2aad erayga carruurta oo qodobkan ku xusan waxaa loola jeeda qof kasta oo ka yar da`da qaangaarnimada, anigu labada aad is bardhigten ka saara ayaan idin oran laha ismana qaadanayaan, dastuurka ismana galayaan da`da qaan garnimada oo 15 sano ah iyo da`da xilkasnimada, sharciga mas`uuliyad baa ka dhalata oo xaga dambiga La yirahdo 'criminal responsibility' tusaale qofkan hadii uu dil gaysto ama fal dambiyeed kale galo miyaa lagu qaadi kara, Wa da`da uu masuul noqdo, marka labada da`ood ee la muransiinayo hanalaga daayo anigu buugan kale sharaxaada ayaan eegay oo aad kaga hadasheen wadamo dhowr ayaad tusaale uso qadateen, wana idinku hambalyeynayaa da`da 18jir ka oo tirahden wadamada masar, sudan, kuweyt, aljeriya, iyo azarbejan ayaa uyaqan da`da qaan garka marka qodobkan aan ku sheegno uun da`da qaan gaarka uun 18 sano wixii ka yar aya carruur ah mas`uuliyada dambina ka baxsanaya.

- Waxaa kale oo aad qaybtan kaga hadasheen Bogga 34aad aragtida kowaad iyo madaahibta 4ta sida ay u kala qabaan aragtida koowaad 15jir ba ku shegteen xanabalada iyo shaaficiyada, aragtida labaad 18sano oo malikiyada iyo xanifiyada, aragtida sedexad 19 sano oo xanifiyada iyo daahiriyadu ay qabaan anigu waxa aan oran laha " وابتغ بين دالك سبيلا" anigu waxan oran laha aragtida 2aad ee 18sano jirka ayno qaadano oo aan dastuurka ku qorno, ileen waatan culumaduba qabaan oo meel baaba kaga hadashen madahiibta iyo wadamada 21jir ay qaan gaarka u yaqanan 19 sano jirna waaba dhigteen, inagu odayasheeni hore soomaaliyed waxay oran jiren duul culumo qastey Iyo wadaad qiil uu ku banaystiyo qandi uu ku rito waa yaqaana, dhibatada wali waa ina haysataa, Meel kastana waxa aad kuso qorteen culumada La tashanay culumaduna way fara badanyihin oo kuwan dhiigeeni banaystey ee xagjirka qoriga sita ah ayaa kamid ah oo sheegta culumo, waxa kale oo jiro xagjir qalin sita oo fikirki xagjirka ah qabo oo dadkiiba inay nafisan ogoleen, waxa kale oo jirta culumo soomaliyed oo maskax furan oo wanaagsan oo xamar jooga, oo Hargaysa jooga oo Garowe jooga oo baydhabo jooga oo

maagalo kasta oo soomaliyed joga culumo somaliyed maskax furan kenya joogata ,oo jabuti joogto oo dibadaha joogta.

- Marka guddiyeey culumada aad La tashteen dee hadana ada tirahdan culumaa la tashanay, hadanna tirahdan culuma la tashanay wana afwajisey oo waxa nagu samayseen xariyad lakin marka caqliga ka shaqaysiiso oo culumadii sida ay culumo uga hadlayso aad eegtaana halka waxa mooda inu xayndaab ku xiranyahay, marka la tashiga culumada hala balaariyo ayaan oran lahaa **waxa adkaynaya da`da qaan gaarka 18sano jirka madama madaahibta ba ay ka hadashey in 18ka laga dhigo.**

- **Isla qodobkan faqradisa 3aad** oo aad halka u danbayso aad liiditaan tirahden **anigu waxan oran laha liditaanka bahdilid aan ku badalno**.

- **Isla qodobkan faqrada 5aad** waa masaxdeen oo ubadka waxa ay xaq uleyihin ta 5aad dastuurkii hore sheegaya ubadku waxay xaq uleyihin in ay helaan kaalmo qareennimo waxaa jiro " juvenail offenders' carruurta sharciga qilaafta **qodobka sidiisa haloo soo celiyo ayaan oran lahaa** yaan laga dhex galin dadka kale xuquuq ay gaar u leyihin caruurta weyaan, marka kaalmada qarenimo in uu helo dowlada wajib kutahy hala so celiyo.

- **Qodobka 28(7)** waxay ka hadleysaa in dowlada iyo dugsiyada, faalada waxaad ku qorten in arimaha manhajka waxbarashada tacliinta diinta islamka, barashada diinta islamka waa ku qasab ardayda dhigata dugsiyada dowlada iyo dugsiyada gaarka ay uleyihin dadka muslimka ah, faalada waxa tirahden arimahan waxaa lagala tashan doona culumada, inaga culumada manhajka waxbarasho ino dhigaysa iyo manhajka diinta islamka inoo dajinaysa waxa leyahay golaha culumada hala balaariyo yaan cid gaar lagu koobin oo culumo kala duwan iyo madariis kala duwan iyo afkaar kala duwan oo culumada suufiyadu kamid tahay oo culumada akhwanta iyo kuwa salafiyada kamid yihin madariista kala duwan halaysku keeno oo yaan culumo gaar meel naloogu xarayn, anigu saas ayaan oran laha.

- **Isla qodobkan faqrada 8 iyo 9** waxay ka hadleysaa dhallinyarada iyo sports ka aniga qodob gaar halaga dhigo ayaan leeyahay, waayo dhallinyarada iyo sports wa muhiim dalkana 75% wa dhalinyaro.

- **Qodobka 29(3)** guddiga waxay iga codsatay dhowraariyan dadka in aan usharaxo waxaan iri war anigii baaba fahmin dabadeedna waxay yirahden dictionary laga dayo xaajo ka dhiman qaamuska aad soomaliga ayaa dhigaya, marka qaamuska dib aynu ugu noqono aniga se waxana umaleeyay dhowran in ay macnaheda tahay ayaan is iri, Inaga aqoon baa ino korarto saas baan ku qadanaynaa bay Ila tahay.

- **Qodobka 30aad** helida xogta, helida xogta waxaa kusoo kordhin lahaa halki xoriyada saxafada iyo warbahintana iyo xuryatul qowlkana ka maqnayd 'Right to access information' warbaahintan aad aragteen imika idiin dhibtay hadii xaq loo siiyo in ay war helaan way iska dayn lahayen wararka been abuurka ay faafinayaan ama ay maleenayan, marka xaqa ay warbahinta u leedahay in ay war helaan qodob ah halagu so kordhiyo ayaan oran laha wa mahadsantihiin. Doodayda manta ee qodobka 21-30 intaas ayay ku ekayd 30-40 markale ayaan ka qayb qaadan doona.

9) **Sen: Saynab Ismail Mohamed:**
Bismillah. Allhuma salli calaa sayidinaa muxamed—-------------Guddoonka iyo dhamaan xildhibaanada waa ay salaamanyihiin, waxaan ka hadlayaa qodobka 23 oo qodobka 21 sixidiisu ay noqotay, qof walba oo muwaadin ah wuxuu xor u yahay in u si xor ah u doorto xirfadda shaqada, ama mihnadda, markaan eegno waxaa laga hadlayaa qofka doorashadiisa, Qofka iskuulka qasabka ah dugsi hoose dhexe ilaa dugsi sare waa nooc, laakiin mihnada marka laga hadlo Soomaaliya waxay lahaan jirtay iskuul gaar ah oo laga barto meelaha ay ku yaalaan iyo sida ay u shaqeeyaana la yaqaano, dugsi dhexe marka uu ardayga ka boxo ayuu dooran jiray iskuulka uu aadayo, iskuulkaas oo dowladaysanaa oo dhisnaa oo bilaash ahaa, marka waxaa jiray dugsigii beeraha, xanaanada xoolaha, dugsiyadii farsamada gacanta ee markaa laga baxay, marka waxaan xoojinaynaa in halka waxbarashada dugsiga dhexe loo xusay in muhiimad gaar ah la siiyo dugsiyada farsamamada gacanta oo mihnadada gaarka leh, sababta oo ah waxa aynu ognahay in soomaaliya marka ay duufaan dhacdo ama roobaab daadad ah iyo marka ay abaaruhu dhacaan qoysaska markaas xoolaha ayaa ku yaraada dad badan ayaa magaalada soo gala oo dhalinyaro ah oo wiilal iyo gabdho ba leh, dadkaas hadii aan la jihaynin waxay qayb ka qaadan karaan luminta amniga marka waxaan qabaa in dowlada halkaas aan ku kordhino, in kor loo qaado waxbarashada noocan ah.

- **Qodobka 22(1)** qof kasta waxa uu xaq u leeyahy in uu helo xiriir shaqo oo ku dhisan cadaalad, waxaad moodaa qodobkaas in uu ku hadlayo terminology-ga ama waxa hadda jira oo ah xildhibaan keenso, markaa waxaa ka fiican in la helo in uu qof walba xaq u yeesho sinaanta fursadaha shaqada, in sidaa laga dhigo oo loo simanhahahay, qof walba "merit-kiisa" waxbarashadiisa, xirfadiisa uu shaqo ku helo, laakiin xiriirkaas wax aad moodaa sida hada qabiilo badan ama jufooyin badan aan haysanin xildhibaan, in dadka lagu torture gareeyo xildhibaan keenso, halkaas xiriirkiisa waxa uu ugu muuqdaa hada waxa jira in lagu base-gareeyay, **waxaan soo jeedin lahaa u sinaanta fursadaha in halkaas lagu bedelo.**

- **Qodobka 22(5)** qof kasta oo shaqaale ah gaar ahaan haweenka waxa ay xaq gaar ah u leeyihiin meesha faraxumaynta laga dhigay waxaan dhihi lahaa dhamaan xadgudubyada, xadgudubyada feer ma aha waxa ay noqon karaan hadal, qof ka oo si kale wax loo dhaho ayay noqon karaan, qofka oo domestic violance ku dhoco ayay noqon karaan, marka xadgub kaliya yaan la oranin, **dhamaan xadgudubyada in halkaa lagu kordhiyo.**

- **Qodobka 25 oo noqoday 23** ee deegaanka qof kasta waxa uu xaq u leeyahy in u helo deegaan aan waxyeelo caafimaad darro u gaysanaynin, hadana waxa aynu ognahay magaalooyinka aynu daganahay ee shirkada telecomunication-ka in ay is dhex daganyihiin, oo gurigaaga guriga ku dhagan Tower-o waawayn ay saaranyihiin, marka waxaan rabaa dastuurkan in mar walba xeerarka deegaanka kumo qorno wax xeer ah, in baarlamaanka ammendment ku samaynayaan laguma xusayo waxyaabaha lidka ku ah, waayo gurigaaga guriga ku dhagan haday toweradaas leeyihiin, waxaa la ogyahay scientific ahaan dhibaatada ay u gaysanayso Qofka bani aadamka, **marka xeer hoose in lagu xuso ayaan halkaa soojeedinlahaa.**

- **Qodobka 26 oo 24** noqday hantida gaarka loo leeyahay waxaa ku qoran dowladdu waxa ay si qasab ah ula wareegi kartaa marka ay jirto danguud, qofka waa lagala wareegi

karaa qodobkaas ah hadana waxa aan leenahay maadaama soomaaliya 32 sano ay burbursaneed, qodobkaas lidkiisa in uu meesha ku qoranyahay ayaad moodaa in ay fiicneed oo ahayd ''dowladdu waxay si qasab ah ku soo celin kartaa dantii guud oo soomaaliya'', waa ogtahy danta guud ee soomaliya meesha ay doontaba ha joogto ee isticmaal gaar ah ayaa loo badalay, marka qodobkaas in dastuurka hadii ay ku cadahay, dowladdu waxa ay heli doontaa wax taagero ah in danta guud dib loo soo ceshto xilliga ay doonto ha noqotee, **marka qodobkaas in meesha lagu daro ayaan soojeedinayaa .**

- **Qodobka 27aad oo hada noqday 25aad,** qof kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu helo biyo nadiif ah oo uu cabo, halkaas waxa aan ku dari lahaa xilligeeda hala gaaro in ay noqoto bilaash, dadka waxa ay u badanyihiin dabaqada hoose, shirkado gaar ah ayaa biyaha iska leh, shirkadaha gaarka ahna korontada iyo biyaha shacabka aad ayay qaali ugu yihiin, **in wuxuun biyo dowladu keeni doonto meelahaa lagu xuso, taasna waan soojeedinlahaa**.

- Waxaa jira halkan qof kasta oo qaan gaar ah wuu guursan karaa, qodobka 26aad ee daryeelka qoyska uuna yeesho qoys kamid ah rabitaankiisa iyo rabitaankeeda si waafaqsan shareecada islaamka iyo xeerarka Jamhuuriyadda , had iyo jeer marka la akhrinayo xeerkaas oo kale ama qodobkaas oo kale waxaa related ku ah wax furrin ah meeshaas laguma xusin, waadna ogtihiin soomaaliya waxyaabaha maanta baaba' inoo keenaya waa furiinka oo badan, marka waxa aan xusi lahaa dadka marka ay is guursanayaan in ay cadahay xeerka hoose oo ah in sharci gaar ah lagu xuso meeshan, si loo helo shahaadada guurka, shahaadada furiinka. waxa aad arkaysaa waxyaabaha nagu soo batay waa kiisas dhacay oo haddaba taagan, gabar in ay nin guursato oo xitaa magaciisa uuna u sheegin maalmo kadibna u iska noqdo oo gabadhii uur yeelato oo halkaasi ay dhibaato ka dhacdo, marka xoojinta xeer hoose in uu jiro waxa oo lagu xaajinaayo taas xeerka qoyska oo ay hoos imaan doonto baan u malaynayaa, in furniinkana uu meesha ku cadyahay sida wax loo qabo iyo sida wax loo furo, waa labo isla socdo oo isku mid ah. Ubad kasta wuxuu xaq u leeyahay marka uu dhasho in loo bixiyo magac, magaca waxa uu noqonaya.

- waxaa jirtay markii ay dowladii soomaaliya ahayd waxaa jirtay kaarto nashato family iyo qoys walba wuxuu lahaa tiro uu ka koobanyahy ilmihii soo kordhaba lagu qoro, waan dhiiri galinayaa in magacyadii soomaaliya oo micnaha lahaa la soo celiyo, laakiin waxaan codsanaynaa in halkaa lagu cadeeyo in ay jirayaan xeerar hoose oo markaas lagu qaadayo diiwaan galinta si loo yeesho family-ga ama reerkuba u leeyahay xaqaas.

- Farqada **3aad** ee isla qodobkan ubad kasta wuxuu xaq u leeyahy in laga ilaaliyo dhaqan xumo dacaayad, xadgudub ama liiditaan, hadaba waxa aynu ognahay, ilmaha marka uu 8,10,12,13 sano ay gaaraan ilmaha xoog ayaa ku jiro oo lama celcelin karo, bay'ada aynu hada ku noolnahay laamiga marka aad maraysid waxa aad arkaysaa ilmo laamiga ku ciyaaraya, wadamada kale marka la tago waad aragteen 100 kii guriba waxay leeyihihiim Garden ama haku ciyaaraan ama haku socdaan, ilmaha yar xuquuqdooda waxa ugu muhimsan waa meel ay ku ciyaaraan, marka ayna iskuul lahayn in ay laabis isku sameeyan ama ay ku barataamaan in waxooda loo soo celsho inlagu xuso, si hadhoow xeer hoosaadka loogu xuso, waayo waxa ay ka bilaabanaysaa ilmaha akhlaaqdiisa meelahaas ayay ka bilaabanaysaa, meesha ay bulshada isugu imaato iyo sida loo tarbiyeeyo oo loo baro wadaniyadiisa civic education-ka.

- **Qodobka 30 oo noqday 28aad** waxbarashada aasaasiga ah ee dugsiyada hoose iyo dhexe waa qasab, waxa aynu ognahay malcaamadda ama dugsi quraanka waxaa lagu dhigtaa halkii ardayba 10 doollar, halka dugsiyada dhexe 15 ilaa 20 uu yahay kan sarena 30 iyo wax ka badan uu yahay, qoyska soomaaliyeed average-kiisa waxaa lagu qiyaasaa 6-8 qoysaska qaarna waa ay ka badanyihiin, waxaa laga yaabaa qoyskaas in ay danyar yihiin oo ayna awoodin in lacagta intaas la eg ay bixiyaan, marka waxa aan aad u adkaynayaa oo aan leeyahy iskuulada sida loo raadiyo waxyaabaha kale ee dib u dhiska u ah lafdhabarka waxbarashada ay kamid tahay, waxyaabaha dib u kabaya soomaaliya in ay toosto oo waxbarasho bilaash ah in la raadiyo umadda soomaaliyeed, waayo waxa aan u badanahay dabaqo aan iska bixin karin waxbarashada noocaas ah, dad iskuulada agtooda dagan iskuulkana aan ilmo aan u dhiganin oo ayna helin waxbarashadaas.

- halkan waxaan ku xoojinayaa faqrada 5aad heerarka kala duwan ay leedahay hay'adaha dawladda ayaa u xilsaaran waxbarashada waa in ay hormariyaan aad baan u taageerayaa qodobkaas, waayo hadii ay dowladdu hormariso ama qiimo yar ama bilaash waxbarashada ka dhigto waxaa kor u kacaya ciyaalkii ama dhalinyaradii ay wax barato 75% waa dhallinyaro marka waa arrin wanaagsan.

- **Farqadda 8aad** dowladda waa in ay qaadaa talaabooyin muhim u ah dhaliinyarada si ay u helaan waxbarasho iyo xirfad horumarin leh oo wax ku ool ah, iyadoo la carbinayo laguna beerayo jacaylka wadanka, dadka iyo diinta isla markaasna dowladdu waa in ay dhallinyarada ka ilaalisaa dhaqamada xun xun ee lidka ku ah mustaqbalkooda, qodobkaas aad buu u fiicanyahay, wuxuu ka hadlay dhallinyaradii caadiga ahayd laakiin waxaa jirta dhallimyaro indho la' iyo dhallinyaro dhego la' oo u baahan iyaguna in lagu xuso, waxbarashada naafada farta naafada si iyagana loo hirgaliyo in ayagana lagu xuso ayay u baahantahay, waayo dhallinyaro badan ayaa jirto oo baahiyaha gaarka ah qaba.

  Waxaa ii calaamadaysanaa "dhawraariya" wax la fahmi kara ma aha annaga waa fahmi waaynay ummada soomaaliyeed ee dastuurka loo gudbinayana way ku adkaan doontaa, waxaan jeclaan lahaa wax aynu hadda isku raacsanahay oo la fahmi karo xitaa say u qorantahay xarafka inta la eg waligay somali kuma arag Marka iyadana taasa so jeedin laha waa mahadsantihiin.

10) **Xil. Mohamed Ibrahim Nur Macalimuu:**

Bismillaahi raxmani raxiim, mudane Gudoomiye xildhibaanada sharafta leh ee gudiyada labada qaybood ee Baarlamaanka, gudiyada Madaxabanaan, ururada bulshada dhamaantiin salaamu calaykum.

Marka hore waxaan rabaa in aan xildhibaanada xusuusiyo in ay maanka ku hayaan waxa maanta laga hadlaayo, qodobadan cutubkan inta badan ku saabsan yahay waa kuwa la jaan qaadayo standar-ka caalamiga ah macnaha waxaa Jira heshiisyo caalami ah oo wasaaradda haweenka ama xuquuqul insaanka ama wasaarado kale caafimaadka ay galeen, heshiisyadaas oo heshiisyo caalami ah, uu heshiiska caruurtaa uu kamid yahayh, dowladdeena ama xukuumaddeena ay horey u saxiixday Marka annaga hadii aan ka doodno si kale aan u qaloocino hadhaw waxay dhib ku noqon doontaa Xukuumadda, Marka qodobo caalami ah aduunka isla waa faqsan yahay in Marka aad uga taxadarno waaye waxyaabaha aan badalayno iyo sida ay u saamayneeso hadhawdii shaqada dowladda.d

- **Qodobka 22aad** wuxuu kahadlayaa xuquuqda shaqaalaha wuxuu kamid yahay qodobadaas caalamiga ah Qofkasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo xiriir shaqo oo ku dhisan cadaalad ujeedada waxaa laga soo turjuamay af qalaad, Marka waxaa fiican af soomaali sax ah in lagu qoro oo la yiraahdo "fursadda shaqo helitanka waa in ay noqotaa mid cadaalad ku dhisan tahay", fursad shaqo oo loo siman yahay waa in ay noqotaa waaye, ee ma ahan xiriir shaqo oo loo siman yahay, Marka waa in ay cadaataa u jeedooyinka laga lee yahay. waxaa ku xiga isla qodobkaas farqadda 2aad Qofkasta oo shaqaale ah wuxuu xaq u leeyahay in uu sameeyo kuna biiro urur shaqaale, kana qayb galo hawlaha ururkaas, Maxay uga qayb galayaan waxas oo dhan ? To defend common interest, waxay difaacayaan dan ay leeyihiin ayey difaacayan, hadii dantaas laga reebo waxay noqonaysaa way iskaaga biiri karaan Marka xeerarka caalamiga ah sidaasaa ku qoran.

- Waxaa kaloo Jira isla qodobkas farqadda 3aad shaqaale kasta wuxuu xaq u lee yahay shaqo joojin hadii aysan khatar ku lahayn nabad geliyada. shaqa joojinta waxa waye strike ayuu sameen karaa sax waye, waayo qofka asoo cabanaayo mushaar u cabanaayo samenayaa strike shaqaduu joojinaa xaq wuu u lee yahay Marka uu dastuurku u banaynaayo.

- **Farqadda 4aad** urur shaqaale kasta ama loo shaqeeye kasta waxay xaq u lee yihiin in ay wada gali karaan gorgortan wadareed oo ku saabsan arimaha shaqada, waxaa la yiraahdaa "collective bargaining " aduunku waa kajiraa laakiin waxaa sameeya ururada shaqaalaha dhexdooda u maraysaa, Marka meeshii horey ahayd urur shaqaale iyo loo shaqeeyaasha kuwaas taas horey ayaa saxan, sababta oo ah waa Employee iyo Employers, Marka jamac noqonayaan, Marka meshaas hadda ay ka dhigee n ma aragtay qofkastoo ee qof urur shaqaale kasta ama loo shaqeeye kasta sidoodii in ay u celiyaan oo ay dhahaan loo shaqeeyaasha ''Employers'' waye Marka ujeedkoodu inuu sidaas yahay in la cadeeyo.

- **Farqadda 5aad** wuxuu leeyahay Qofkasta oo shaqaale ah, gaar ahaan haweenka waxa ay xaq u lee yihiin in laga ilaaliyo farxumayn, faquuqid, takoorid, goobaha shaqada, Xeer kasta oo shaqaaleed iyo hab dhaqan kasta waa in uu xeeriyaa sinaanta xuquuqda shaqaalaha ee lab iyo dhedig .

- **Qodobada** inta badan ee haweenka ka hadlaaya ee shaqada marka ay timaado ee shaqaalaha laga hadlaayo waxaa laga hadlaa wax layirahdo ''Equal payment'' inay xuquuqda mushaar bixinta u sinnaadaan, meeshaana kumaba cada in ay mushaarka loo siman yahay gabarna loo fiirineyn, gabadha mushaar ay qaadataa sababta oo ah hay'adaha qaarkood gabadhu way dalaysaa waxay aadaysaa fasax yadeedaa ka badan kan ragga, marka waxaa fiiriyaan shaqadee ka hoos mariyaan ee mushaarka Marka Inaan sidaan la yeelin ayaa loogu dan lee yahay Marka waa equal payment meel walba ay ku jirtaa.

- **Qodobka 24aad** Hantida gaarka loo lee yahay: Farqadda 2aad Dawladdu waxay si khasab ah hanti ula wareegi karta Marka ay jirto Dan Guud, Qofkasta oo hantidiisa Dan Guud awgeed loola wareegay wuxuu dawladdu xaq ugu lee yahay magdhaw caadil ah oo dhinacyadu ku heshiiyeen ama ay maxkamadi go'aamisay, meeshaan maxay ka hadlaysaa Dhulka danta Guud loo qaadanaayo tusaale ahaan hadii larabo meeshaan

biyaha magaalada loogu Saarayo "drainage" uu soo maro dhismahaan oo laqaadi karo oo la burburin karo oo Dan Guud loo baabi'inkaro iyo wax kastoo Dan Guud loo sameeynaayo, Marka waa khasab qofkaas hadhaw waxaa lasiinayaa wax lamid ah wixii ay dawladda siinayso xaqaa looga yeelanayaa dowladda, laakiin soomaaliya waa ka duwan tahay, mararka qaarkood waxaa jira hay'ado badan oo dawladdaa jiray ee dhul badan dawladda dan guudaa jiray, dhulkii dadaa dagay dadaa qaatay dadaa ku dhaqmo dadaa haysto muddo 30 sano 25sano ku dhaqmaayo, Marka dadka noocaasa hadii la yiraahdo xuquuqaa lasiinaa halkaan halagu qoro hadhaw xaqee yeelanayaan ogaada, Marka dadkaas ma qusaynayso sharciga meel reebaysa inay jirto waaye, sababta oo ah asagaa faa`iido qaba 30sano ku dhaqmaaye marka in la yiraahdo xaquu yeelanayaa ma aragtay waa in aad loogu fiirsado qodobkas sida loo qoraayo .

- **Qodobka 25aad** xuquuqda bulshada, Dadaa su`aal ka keenay biyaha lacabo in ay nadiif yihiin "drinking water" biyaha la cabo ugu muhiimsan aduunka, waxa aad ku weeso qaadanaysid iyo kan aad ku qabeesanaysid hadii ay rabaan waa fadaraysanaan karaan, laakiin kan lacabaayo ayaa muhiim ah .

- **Qodobka 27aad** xuquuqda caruurta ka hadlaayo muhiim ayuu yahay, waxaan la qabaa xildhibaanada soojeediye in 18sano lagu dhaafo, qodobkaan labaad ee la sameeyey Meesha lagu darin siduu uu ahaa in 18 lagu dhaafo, sababtoo ah standar-kii caalamiga ahaa wuu ka hor imanayaa, ee Somali conventions -ka ka qayb gashay ka hor imaanaysaa ee mar hadhawdii xataa Marka lagatago anaga teena waxay saameen ku yeelan doontaa shuruucda kale ee wadanka qaybta ka yahay **marka in sidiisii loo dhaafo ayaan qabaa.**

- **Qodobka caruurta** ka hadlaaya Farqadda 6aad, caruurta waxay xaq u lee yihiin in laga ilaaliyo loona adeegsan dagaaladda hubaysan, Micnaha adeegsi wuxuu iska noqon karaa ee meeshaan iiga Soo waran, Meeshaas maxaa yaala, nimankan shabaabka ilmaha way adegsadaan mar qaar qaraxyo ayey u adegsadaan, mar qaar information ayey ka helaan, Marka adeegsi yaa laga hadlaaya laakiin halkaan waa in la cadeeyo sida uu kooshin sheegay in layiraahdo caruurta hala askareeyo, **Marka in layiraahdaa Yan la askareyn carruurta**. intaas ayaan ku Soo koobayaa qodobada ilaa iyo 30 waa mahadsan tihiin.

**11) Xil. Abdillahi Farah Mire:**

Mahadsanid Guddomiye, bismillahi raxmani raxiim, aniga doodaydu waxay ku saabsanaanaysaa qodobada 20-30, waxaan qabaa Guddomiye qodob hal daqiiqo ka badan ama kayar kagama doodi karo marka hadii la idhaahdo 20-40 micnaheeda waxaa waaye 1 kii daqiiqo 2 qodob halagaga doodo waaye wax sax ahna maaha, 10 qodob wax ka badan loogama doodi karo 10 daqiiqo, sidoo kale waxaan inyar raacsanayaa halkaan maalin dhawayd waxa soo istaagay guddoonka qof kamid ah oo iri, xildhibaanada inta is qortay maahane gadaal layskama qori karo waana wax sharciga khilaafsan, xildhibaanka halkaa fadhiyaa wuxuu xaq uleeyahay hadii uu dooda kusoo biiro iyada oo socota inuu gadaal iska qoro oo waxa weeye dooduna ay sidaas kusii socoto.

Qodobka sadexaad een ku darsanayo waxa uu yahay liisasku waxa ay ku qurux badantahay "projector"ka halkaas inoo saran sida saxda ah in loo isticmaalo oo liiska gadaal uu ka muuqdo oo daahfurnaan ay ka muuqato ayay ahayd mudane Guddomiye, waanna qodob buuqa iyo sawaxanka badan ee gudaha ka dhaca xal u noqonaya, waxa kale oon ku darsanayaa qodobada aan dooda ka samaynayno mudane Guddomiye waa

kala mug waynyihiin, qodobo kaligood dood iyo wax is barid dheer u baahan baa ku jira, hada manta waxa is dul saaran qodobo 10 ah laakiin qodobka 10aad oo kaliya hadaad fiirisid isagaa wuxuu u baahanyahay bulshada soomaaliyeedna inay waqti gaara u helaan oo si dhab ah loo tafatiro waana qodobka xaqa waxbarashada ku saabsan, kama wada gaarsiiyo qodobada laakiin isagaan xooga saari doonaa.

- **Qodobka 20** wuxuu ku fiicanyahay in sidiisii hore loo daayo, mushkilada jirta buugta aan haysano sibay isku daba marsantahay, marka qodobka 20aad muwaadin kasta wuxuu xaq uleeyahay inuu ka qayb qaato arimaha siyaasadeed ee dalka, uuna samayn karo, kana mid noqon karo xisbi siyaasadeed, qodobkan waxa lagusoo kordhiyay waxa weeye. waan ka tagayaa intuusan waqti igaga lumin.

- **Qodobka 22** waxaan rabaa horta marka 1aad inay Guddigu qortaan comment-iyada, si aan u dhawrto waqtiga oon qodobka 30aad u galo, comment-iyadii Senator Sareedo iyo Xildhibaan Guuleed ayaan la qabaa waqtigoo yar dartii, si aan waqtiga 10ka daqiiqo uusan iiga dhicin tan uugu muhiimsanayd waxa weeyi, xidhiidhka shaqada in fursadaha shaqada loo badalo.

- **Qodobka 22 (3)** oo ka hadlaysa shaqo joojinta in la samayn karo, dasaatiirta dunida oo dhan waa xaq sida ay u qorantahay waxa weeyi inuu shaqo joojin nabadeed uu qofku samayn karo, marka siiqada waxa weeyi in shaqo joojin nabadeed la sameeyo oo waxba hada xeerar aynaan garanayn sida ay wax u xadidi doonaan oo xaqa dastuuriga sida saxdaa waa in aan xeer lagu xadayn waaye, marka in marka horeba la cadeeyo in la samayn karo shaqo joojin nabadeed, hadaysan shaqo joojin nabadeed ahyn marka iyaday xeerarku xadaynayaan.

- **Qodobka 23** oo xaqa deegaanka ka hadlaaya, kuma cada doorka dawladda yacni dawladda in waajib loogu leeyahay in lagu cadeeyo in muwaadinku deegaan nabad ah oo karaamo leh oo uu ku noolaado inuu helo in lagu cadeeyo weeyi, badanaana qodobada xuquuqda ah waa in doorka dawlada lagu cadeeyaa, qodobo kale oo sidaas u qorana waan dul mari doonaa laakiin in la cadeeyo in ay dawladu kafaala qaadayso, oo ay waajib ku tahay in qofkii daryeel deegaan uu xaq uleeyahay inuu helo deegaan caafimaad ah.

- **Qodobka 27** oo ka hadlaaya **xuquuqda bulshada** isaguna waa sidoo kale waa in isagana la xadidaa oo ka hadlaya biyaha oo kale, dawlada ayay waajib ku tahay waa in la yiraahdaa in qofku uu helo biyo nadiif ah, dawladay waajib ku tahay in la yiraahdo sida qodobada kaleba ay uugu cadahay in ay masuuliyad qaran oo dawlada saran ay tahay, waxa aan kaga gudbayaa intii hordhaca ahayd.

- **Qodobka 26** oo ku saabsan guur ansaxayaa ma jiro hadaanay si xor ah iyo ogolaansho ninka iyo naagta ka timid aanay jirin labadaba. Qodobkayga aan waqtiga u kaydsanayay ayaan u galayaa oo qodobka 30aad ah.

- **Qodobka** 30 oo mudane Guddomiye ku saabsan tacliinta, tacliintu dastuurkeena kana an hada dib u eegista ku samaynayno si kooban oo aan faahfaahsanayn ayay uugu qornayd, maadaama aan Guddi hoosaadkii waxbarashada aan guddomiye ka ahay waxaan qabaa, tacliinta in waqti intaas ka badan lasii galiyo.

- **Qodobka 28** oo ka hadlaya waxbarashada, waa intii hore uun oo dib u siiqayn lagu sameeyay, wax badan laguma so kordhin, qodob waxa weeyaan ku saabsan, qodobka 2aad oo ka hadlaaya muwaadinku inuu xaq uleeyahay inuu helo waxbarasho lacag la`aan ah oo gaarsiisan ilaa heer dugsi sare ilaa uu ka dhamaysanayo dugsi sare, markuu heer dugsi sare gaaro ayay ka joogsanaysaa mise ilaa inta uu ka dhamaysanaayo, **waxaan soojeedin lahaa ilaa uu ka dhamaysanaayo dugsi sare in laga dhigo**, hadii aan ka wadno dugsi hoose iyo dugsi sareba ay lacag la'aan noqonayso mustaqbalka waa in ilaa dugsi sare uu ka dhamaysanayo ay noqotaa sidaasaan soojeedinayaa, marka intaas laga imaado oo qodobada kale oo dhan aan ka dul dhaqaaqo waxaan dul istaagi lahaa xaqa waxbarashadu, xuquuq badan iyo "mucahadaat" badan oo soomaaliya ay qayb ka tahay buu ku cadyahay waxana uugu muhiimsan markii waxbarashada laga hadlayo, waxa waaye dastuurka in uu qodob kamid ahi qeexo, ilayn shaqsiyada qofka muwaadinka ee lasoo saarayo in lagu qeexo waa hadafka guud een waxbarashada ka leenahay, waa in qodob lagu qeexo, dastuur uu wadan leeyahay oo ay ka maqantahay maan arag xuquuqda markii laga hadlaayo, meel kale oo waxbarashada looga hadlayaana dastuurka way ku yartahay in hadafka guud laga hadlo, qodobka labaadna waxa weeyi dasaatiirta dhan waxa lagu "ilzaamiyaa" dawlada maadaama laga hadlayo xuquuq waxbarasho oo 4 million oo caruurteena ah ay waxbarashada banaanka ka tahay, dastuurka gudihiisa waxa dawlada lagu "ilzaamiyaa" inay ku qirato nisbada ay ku bixinayso waxbarashada "percentage" intee leeg ayay waxbarashada ku bixinaysaa oo loo siyaaqeeyay inay kordhayso ilaa laga gaarayo "mucadalaat" yacni "percentage"ka dunida laga gaarayo waxbarashada ay ku bixiso.

  xuquuqdaan yacni muwaadinka soomaaliyeed waxbarashada uu ku leeyahay lama wada gaari karo hadii aan dawlada lagu waajibin oo "percentage" uusan ku qornayn dastuurka gudihiisa ku qoran haday 1% tahay, haday 2% tahay, haday 3% tahay, miisaaniyada waxbarashada waxa waaye qoondada aan ansixino "research"ka ay wasaarada waxbarashadu samaysay markay u fiicantahay qoondada waxa loo sameeyay 53% ayay ka heshaa waa markay u fiicantahay, marka dastuurka gudihiisa waxaan soo jeedinayaa mudane Guddomiye in waxa waaye lagu xadido "percentage" haduu 4% noqonaayo haduu 5% noqonaayo lana cadeeyo inuu kordhayo sanad kasta ilaa laga gaarayo "mucadal"ka dunida.

  Qodob kale oo oo isaguna jira waxa uu yahay, jaamacadaha marka laga hadlaayo si guud baa looga hadlay laakiin dastuurka gudihiisa inay jaamacaduhu yihiin xarumo waxbarasho oo madax banaan inay yihiin waa in dastuurka gudihiisa lagu cadeeyo, sida hada waxaan leenahay akaademiyada afka iyo suugaanta waa hay'ad madax banaan waaye, waxaan leenahay akaademiyad goboleedka "AGA" oo aan miisaaniyad ku bixino waa hay'ad madax banaan waaye, jaamacaduhuna xukunkaasay leeyihiine dastuurka gudihiisa sida dunida kaleba ay ku cadayso jaamacadahoodu inay yihiin xarumo aqooneed oo madax banaan oo ilaalinaya gobanimada dalka waa in lagu cadeeyaa isla markaana intii suurta gal ah in waxa lagu cadeeyo miisaaniyada waxbarashada inay qayb ka ahaadaaan.

  Qodobka kale waxa waaye macalimiinta dastuuradu waxa iyadoo la qiimaynaayo karaamadooda iyo makaanka ay bulshada kaga jiraan dastuurada kala duwan waxa waxbarashada soo qora oo xuquuqda la ilaalinaayo kamid ah markii waxbarashada la imaado macalimiinta iyo xubnaha "faculty"ga waxbarashada iyo kuwa kalkaaliyeyaasha u ah dhamaantoodba in ay dawladu kafaalo qadayso waajibna ay ku tahay inay

horumariso, maadaama ay sabab u yihiin in xaqa waxbarashada la ilaaliyo, sidoo kale in ay dawladu dastuurka lagu cadeeyo inay dhiiri galinayso ama kafaalo qaadayso xoriyada cilmi baarista, dhiiri galinayso hay'adaha cilmi baarista ka shaqeeya, cilmi baaristuna inay miisaaniyada dawlada qayb ka noqoto oo ay "percentage" ka hesho.

tan u dambaysa oon kusoo gabogabaynaayo waxa waaye oo xuquuqda guud oo dasaatiirta u qoran ah dawlada inay waajib ku tahay inay qorshe "strategic" ah dajiso oo ku saabsan la dagaalanka wax aqriska iyo qorid la'aanta haday tahay aqrinta iyo haday tahay xisaabta, "percentage"ka mudane Guddomiye umada soomaaliyeed een waxba qorin 60.2% waaye 2015kii, 60% waxay ka turjumaysaa inaan dawlada ku waajibino inay qorshe cad oo "strategic" ah ay keento halkan oo laga ansixiyo oo isla markaana uu noqdo xaq dastuuriya oo muwaadinka soomaaliyeed uu leeyahay xiligaan adage e lagu jiro.

waxaana rajaynayaa in qodob ku saabsan xuquuqda dastuuriga ah oo waxbarashada in dood bulsho la galiyo oo lagala tashto jaamacadihii iyo dugsiyadii iyo dadkii gacanta ku hayay iyo wasaarada waxbarashadaba si sidan caatada ah ee ay u qorantahay inagoo dib u eegis ku samaynayna dastuurkeena aad ayaad u mahadsantihiin.

**12) Xil. Dahir Amin Jesow:**

Mahadsanid Guddomiye aniga waxaan ka bilaabayaa horta marka ugu horaysa qodobada la sheegaayo oo qodob hebel la leeyahay oo asalka ah, waa qodobadii hore waaye, qodobada qaarna waa isir qaarna waa farac, waxa isirka ah oo aan rabno si aan iskula socono la akhriyo kadibna hadii la tiray meeshiisa kusoo celi ama waa ku saxantahay intaas la dhihi karo waa qodobadii dastuurkaas hore ee aan haysano, qodobadooda la akhrinaayaa marka waxa laga yaabaa qodobkaan 25aad hada 23 ayaa loosoo badalay marka ma akhrinaayo kan 23ka loosoo badalaye waxa aan sheegaayo waa qodobada dastuurkii hore ah kadib ayaan akhrinaayaa sida uu isku badalaayo laakiin hadii aad tiraahdid qodobka 23aad adoo dastuurka qodobkii 25aad ka hadlaayo waa lagu wareeraa qofkaas sidaa ula soco, markaa aniga waxaan ka bilaabayaa dastuurka hada aan haysano.

- **Qodobka 25 (2)** qof kasta wuxuu xaq uleeyahay inuu wax ka helo khayraadka dabiiciga ah ee dalka ayada oo, meeshaas marka "comma" waaye waa hakad, iyada oo laga ilaalinaayo ka faa'idaysiga xad dhaafka ah "comma" markaa meeshaas waxaad moodaa in ayna qeexnayn oo wareer badan uu ka imaan karo waayo markii halkaas "comma" la galiyo ayaa waxaad tiraahdeen, oo wax u dhimaayo deegaanka, khayraadka oo wax u dhimaayo deegaanka, marka ani waxaan qabaa in 2 faqro laga kala dhigo, qofka muwaadinka ah wuxuu xaq uleeyahay oo lahaanshihiisa xaqaas uleeyahay in wax u dhimida deegaanka, 2 faqro in laga kala dhigo ayaan qabaa oo meeshaas waxaad moodaa in laga badbadiyay macnaha sharaxaadeeda **marka faqro 2aad ayay ku fiicantahay.**

- **Qodobka 28** ee dastuurka hada aan haysano oo isku badalay qodobka **26aad** oo ka hadlaaya guurka, guurka waa aasaaska qoyska, guurka waa aasaaska saldhiga bulshada ilaalintiisuna waa waajib sharci ah oo ka saran dawlada, waa hagaag, hadii uu qofkaan waligiis guursanin dawladu intay qoorta soo qabato miyay ku qasbi, Illahay waajib kama dhigin in la guursado laakiin waa sunne marka waxaad moodaa meeshaas iyada ah dawlada la saarin khasab waxay noqonaysaa qofku haduu guursan waayo dawladu in loo sheego, faqiirnimuu u guursan waayay lala hadlo oo la iraahdo guurso saw maaha, culayskaas marka intaas le eg, Allah swt guurka waajib kama dhigin waa sunne oo

"mu'akad" ah oo fiican bulshadu inay ku badhaadho loogu talo galay **marka dawlada inaan culayskaas la saarin waan soo jeedinaayaa**.

- **Farqada (5)** ee isla guurka ka hadlaayo waa saarteen, waxaana fiicnayd meesha aad ka saarteen in faahfaahin dheeraada aad ku dartiin, yaa waaye qofka guursan karo ma 18 jirbaa ma 15 jirbaa, hadii 18 jir la iraahdo ilmahii schoolka dhiganaayay oo yaryaraa gabdhihii yaryarka ahaa waa lawada guursanaayaa odayaasha waliba waxay qabaan gabdhaha yaryar inay dheef badan ku jirto, marka gabar yar oo la qoor qabtay ayaa la arki doonaa oo la guursaday oo 15 jir ah, marka yaanan anaga kasii bad badinin.

- Guurka sida caadiga ah aan ka dhigno 18 meeshii aad ka tirteen guurka saxda ah waa 18 dhaha sababta oo ah soomaaliya waxay ka tirsantahay qaramada midoobay shuruuc badan oo nagala dhaxaysa ayaa jirta waxa wayn oo hada diinteena ay u dhimaysana malaha, in aan canugtaas yar oo 15 jirka ah aan la guursanin oo 18 ilaa ay ka gaarto la sugo wax culays ah oo ay leedahay malaha marka ani waxaan qabaa waxaad tiraahdeen, farqada 2aad waxaad tiraahdeen qaangaarnimadu waa 15, qaangaarnimadu waa 18 sida caalamka oo dhanba ka jirto oo "passport"ka hada aan haysano oo soomaaliga ah ay ku qorantahay, 15 jirkana waa "teenage" oo ilmo ah oo meeshii waxbarashada ku jira, marka inaad kala cadaysiin ayaa fiican, idinka hada waxaad xalaalayseen in 15 jirka la guursan karo, **arintaan diidaayo marka in si fiican loo qoro waan soojeedinaayaa.**

- **Qodobka 30** qodobkan oo waxbarashada ka hadlaayo waxa jira manhaj midaysan ayaad ka hadasheen, meeshaan qodobkaan manhajka midaysan dalkeena wuxuu lahaan jiray iskuulaad carabi ah oo "Allahida" la dhihi jiray, oo aanan manhajkaan kale oo caadiga ah aanan la socon marka ma waxaad leedihiin school ama carabi ha ahaado ama English haku baxo ama "private" ha ahaado dhamaan manhajkiisu waa midaysanyihiin maad ka wadiin? mise maba la yeelan karaba school private ah mala yeelan karo maad ka wadiin? hadii aan manhajka saxda ah lagu dhigayn marka arintaas iyadana waxay u baahantahay in si faahfaahsan loo cadeeyo.

- Aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin ani intaasay igaga dhantahay, meesha tan hada aan ku jirno oo cutubkan 2aad gidigiis waa xaquuqda qofka iyo xuquuqaha aasaasiga ah, wax wayn oo hada badalkeeda oo kii horeba siduu u qornaa ruuxiisaa sax ahaa marka ani waxaan idiin leeyahay labadaba waan soo akhriyay, waa uun micnaha siiqo toosin ah maahine qodobada inta badan markii hore dadkii kasoo shaqeeyay dastuurkii hore ayaan dhihi karaa qoraalkooda afsoomaaliga uu ku saxnaa, marka waad ku mahadsantihiin waad soo dadaasheen qodobkaan yaan waqti badan lagu dhuminin, aad baad u mahadsantihiin.

13) **Xil. Zamzam Muhumed Omar:**

Bismillaah, sellaamu caleykum waraxmatullahi wabarakaatu, labada Guddoon aqalka sare iyo aqalka hoose, labada Golle waxaan idiinku salaamayaa mar labaad sellamulaahi caleykum iyo Guddiyadii kasoo shaqeeyay arrintan aad ayaad u mahadsantihiin, inta badan waa laga hadlay oo ma ogtahay hadii hal xildhibaan uu hadlo oo qofkii kalena kusoo noqdo waxba masoo kordhinayso waad mahadsantihiin waxaan ka hadlayaa.

- **Qodobka 24 (2)** hantida gaarka loo leeyahay, dawladu waxay si khasab ah hanti uula wareegi kartaa marka ay jirto dan guud qof kasta oo hantidiisa danta guud awgeed

loogala wareegayo wuxuu dawlada xaq uugu leeyahay magdhaw caadil ah dhinacyada heshiiska ama ay maxkamadi go'aamiso, hantidu maxay noqon kartaa? ma waxay noqon kartaa guri, ma waxay noqon kartaa dhul, ma waxay noqon kartaa bangi lacag ku jirta, maxay noqonaysaa? Waxa qurux badan waxani waa dastuur inay ku cadaato wax kasta ood soo qoraysaan oo barito qofku xuquuqdiisa iyo xaqiisa uu ku helaayo inaad soo qortaan, laakiin hantida guud markaad soo qoraysaan hantidu waa macno badantahay, soomaali baan nahay hadalkeenu si kasta uu u macno badnaan doonaa.

- **Qodobka 25** xuquuqda bulshada, qof kasta wuxuu xaq uleeyahy inuu helo biyo nadiif ah oo uu cabo, ayuu ka helayaa? Ma dawladuu ka helayaa, ma wuxuu ka helayaa hay'adaha, yaa loo raacayaa? Ilayn kumaydaan soo qorin cida uu ka helayee, inteena badan deegaanada ay abaaruhu ka dhacaan ama deegaanada shabeelada hoose iyo waxa jirta dadku inta badan waxay u dhintaan biyo la'aan, iska daa biyo aan nadiif ahayn, inay u dhintaan wax ay, biyo uun carabka saaraan, inta badan biyo uskag ah ayaa yaala, dawladdi ma gaadho, haayado ma gaadhaan markaa hadii aad tiraahdo waan iska hadlayaa, waxbaan iska xariiqayaa waa ayaan daro, **waxaan soojeedinayaa in la raaciyo cida biyaha laga doonayo**.

- qof kastaa wuxuu xaq uleeyahay daryeel bulsho oo dhamaystiran, daryeelka bulsho yaa keenaya ma dawlad baa keenaysa, ma hay`ad baa keenaysa, yaa laga doonayaa daryeelka bulsho? Waa in lagu cadeeyaa ma dawladaha ay ka hoos imanayaan, ma haayadaha madaxbanaan ee imaanaaya, waa inay kusoo hoos qoraan "because" dadkeena ugu badan ee maanta dhibaataysani waa dadkeena danyarta ah een haysanin caafimaad, maanta caafimaadku waxa uugu horeeya ee uu insaanku helo noloshiisa waa caafimaad, waxaa soo labeeyana waa waxbarasho hadayna kasii horaynba nabadu, markaa inagoo nabadeeniina ay wax inaga maqanyihiin oo dhulalkeenii qaybo kamid ah ay haystaan niman isku sheegaaya in ay yihiin diin ku diriraayaan in caafimaadkoodii iyo biyaha ay cabayaan iyo noloshii adkaydba aad moodo in si looga cararaayo.

- **Qodobka 26** daryeelka qoyska, qof kasta oo qaangaar ah wuxuu xaq uleeyahay inuu guursado, guurkaasina uu ku yeesho qoys uu kula yimid, diiniyan way fiicantahay guurka nabigeenu csw, waa sunne in aynu guursano waa sax, maxay dawladu ay ka qabtaa, inta badan waxaad arkaysaa guur ayna dadka ehelada ahi aanay raali ka ahyn oo laysku guursanaayo awlaado ka dhalanaayaan, wax aan iska kaftamaba ee qudba siro la idhaahdo waa waxyaabaha inagu qaangaaray oo jaahilnimada ah, guurka sidiisa banaanba wuxuu ku qurux badanyahay madal in laysku bixiyo.

- **Qodobkiisa 6aad** xeerka uu soo saarayo Baarlamaanka federaalka soomaaliya arimaha qoyska, waxa jiray waqtigii kacaanka Siyaad Barre, culimo ayaa waxa loo diray inay xeer kasoo saaraan, may culimo maahayne dawladaa loo diray oo waxa lagu dhahay xeer halaga soo saaro, xeerkii laga soo saaray ayaa wuxuu noqday in diiniyan gabadha iyo wiilku ay sinaadaan, dad islaam ah ayaynu nahay inagu (اشهد ان لا اله الا الله محمد رسول الله) Illahay nama simin markaa diiniyan ma simi karno, dawladii Siyaad Barre wadaadadii baa qaylisay way dagaalameen kurkuu madaxa ka wada jaray, masiibadii waqtigaa inagu dhacday wali all'aan way inagu jirtaa waxaan **markaa soojeedinlahaa baarlamaanku xeerkuu kasoo saari doono inaanu khilaafin diinta islaamka**.

- **Qodobka 22** xuquuqda shaqaalaha, qof kasta oo shaqaale ah gaar ahaan haweenku waxay xaq gaar ah u leeyihiin in laga ilaaliyo faro xumayn, faquuqid, takoorid iyo goobaha shaqada xeer kasta oo shaqaale ah iyo hab dhaqan kasta waa inuu xeerka sinaanta xuquuqda shaqaalaha lab iyo dhedig, maxay tahay cunfiga gaarka ah ee haweenka loo gaysanayo eenu ku kala dheernahay shaqaalaha maxay tahay, aniga iyo xildhibaanka i ag fadhiya waxaan ku kala duwanahay ee aniga la ii ilaalinayaa se waxa layga ilaalinayaa maxay yihiin? waxaad moodaaba qoraalada xataa markaynu qorayno in uu qiyamkeenii waxbarashada iyo aqoonta midna aanay ku dheehnayn, hadii la rabo cid in la ixtiraamo oo cunfiga laga ilaaliyo waxa jira dad la idhaahdo waa la takooraa, dadkaasaa u baahan in laga wacyi galiyo cunfiyada loo gaysanaayo sidoo kale waxa jira dad naafo ah oo u baahan iyaguna in cunfiga laga daayo oo loo sinaado qofka naafada ahna Illahaybaa idhi ku cibro qaata ( ma ogtahay curiyaankaba cago looma waayine caynkaa wax loo idhi) saw heesi may odhan jirin, Illahay baa qofkaas bini aadamka ah tusaale inagu siiyay, wax haweenka gaar ah ood halkan aad kusoo xariiqdaan oo loo gaysan karaayi majirto xuquuq bay leedahay, xaq bay leedahay way ku qorantahay dastuurkay ku cadahay.
- sheeko mala-awaalaadkan aad kusoo qorqoraysaan eed keenaysaan, waar waxan waa dastuur waa aayo mustaqbal waxaad manta taagantahay maaha eed sidaad rabto yeeli kartaan, Hussein Iidow adaa maanta Guddomiyihii ah waxaan kaa codsanaynaa markaad qoraalada qoraysaan waxyaabaha "disaster"ka noqonaaya ama dadka dhibaato u keenaaya inaynu iska ilaalino, cunfi baad kusoo qoraysaan haweenka maxaa cunfi loogu gaysan karaa waxaasi waa khalad, hadii aad hiillo u baahantihiin dadka beelaha 5aad ee hadh iyo habeen qaylinaaya ayaa idiinka baahan hiil inaad ku cadaysaan in ay xuquuqda qofka kale uu leeyahay aad la sintaan sidoo kale dadka naafada ah, taasa hiillo idiinka baahan igan raali ahaada haday wax iga tageen toosin bay iga ahyd.

**14) Xil. Adar Ali Mohamed:**

Mudane Guddomiye shir Guddoonka oo dhan iyo dhamaan xildhibaanada baarlamaanka federaalka soomaaliya ee sharafta leh waxaan idiinku salaamaa salaanta islaamka assalaamu caleykum.

Bacda salaam waxaan rabaa qodobka oo qaangaarka aniga inaan ka hadlo ayaan rabaa oo 15ka sanno, caafimaad ahaan ayaa looga hadlaayaa, waxaa looga hadlaayaa gabadha marka 15 sanno sax waaye shareecada islaamkaa qabto waa qaangaartay gabadha laakiin gabadha diyaar uuma ahan body ahaan iyo aqli ahaan diyaar uuma ahan, maxaa ku dhaco gabdhaha markay 15 sanno kayar ku guursadaan, waxa ku dhaco wax la dhaho "fistula" ayaa ku dhaco way isku go'aan gabdhaha, marka ay isku go'aana ninka meeshaasuu uuga tagaa wuxuu leeyahay way soo urtay marabi ayuu leeyahay, marka waxaan leeyahay da'da qaangaarka 18 sanno haloo dhaafo, wadaadadoow meeshaad u ordaysiin 9 jirka iyo 10 jirka waa la baabiiyay, waa isku go'een, waa dhibaatoodeen, isbitaalada maku wareegteen, xaaladooda maka war qabtiin, fistula ku dhacay waa la diiday arinkaas, body ahaan gabadha waxay diyaar u noqonaysaa 18 sanno da'da qaangaarka 18 sanno haloo dhaafo caqli ahaan diyaar ay u noqonaysaa, ay reerka dhaqi kartaa cunug yar oon waxba dhaqi Karin oo miskiin ah yaan la lugoyn ani taasaan dhihi lahaay.

Mida kaleeto waxan ka hadlaayaa qofka muwaadinka ah wuxuu xaq uleeyahay inuu helo shaqo si cadaalad ah, si cadaalad ah hadii shaqo loo helaayo waa wax fiican oo imtixaanaad la qaadaayo waa wax fiican, qodobkaas waxaan dhihi lahaay fulintiisa in uu hirgalaayo iyada laftirkeeda marka dastuurka la galiyo in la helo waaye, sababtoo ah waxa joogo dad jaamacado dhameeyay ama "master" ah ama "phd" ah oo shaqo aanan haysan

waxaana shaqaynaayo dad aanan xirfad u lahayn shaqadaas gaar ahaan waxa ku badan dadka dagan magaalada Muqdisho marka arinkaas in loo cadaalad falo anaga waan soo dhawaynaynaa maadaama aan nahay reer Muqdisho waana mahadsantihiin.

15) **Xil. Abdirizak Adam Warsame (Xusul):**

Waad mahadsantahay mudane gudoomiye, gudoonka labada aqal, xildhibaanada sharafta leh, labada guddi ee dastuurka asalaamu calaykum waraxma tulaahi wa barakaatuh, salaam kadib doodaydaan toos u galayaa Bogga 21

- **Qodobka 24 (1)** Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu helo xiriir shaqo, eraygaas waxaan la qabaa xildhibaanadii hortay soo jeediyey fursad shaqo in laga dhigo meeshaas, sidoo kale *Shaqaale kasta waxa uu xaq u leeyahay shaqo joojin*, shaqojoojin waxaa waaye mindi oo dhawr af leh isaga maa laga joojinayaa, isaga maa iska joojinaaya, waxaan u dhigi lahaa qodobkaas, shaqaale kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu dareenkiisa tabasho ku muujiyo shaqo joojin, **in sidaas loo dhigaan soo jeedin lahaa.**

- **Qodobkaas 24 (5**) aad *Qof kasta oo shaqaale ah gaar ahaan dumarka waxa ay xaq gaar ah u leeyihiin in laga ilaaliyo faraxumeyn,* **faraxumayn meesha la leeyahay in dhibaato ama xadgudub in loo badalo** oo eray xaafadeedka laga daayo oo luuqad rasmi ah lagu qoro.

- **Qodobka 29 (2)** ee ka hadlaaya carruurta, faqradiisa 2aad ee la soo kordhiyey waxaa labo walax oo is khilaafaaya, halka ay ku sheegaaya faqradda 8 aad, faqrada 2 aad iyo 8 aad oo carruur waxaa loola jeedaa qof da'diisu ay ka yar tahay 15 ku dhahaaya faqradda 2 aad, faqradda 8aad ku dhahaaya waxaa loola jeedaa carruurta ay da'doodu ka yar tahay 18, runtii waxay abuuraysaa jahwareer dhanka sharciga ah, qodobkaas labadaas faqradood ku jirta waxaan is leeyahay hal meel in la iskugu yimaado ama 15 loo daayo wixii ka yar inay carruur yihiin ama loo daayo 18 wixii ka yar, ama da'da qaan gaadhka 15 layiraahdo ama layiraahdo 18. fuqahada islaamka ayaa isku khilaafsan oo qaarna ay qabaan 15 qaarna ay qabaan 18 hadii la waayo calaamadihii lagu yaqaanay qaan gaarka marba hadii fuqahadii sidaasba isku haysato inaan anaga dhinac orodno oo "confuse" meeshaas ka abuurmin oo aan qaadano sida uu qabo shaaficigu oo 15 ah ama fuqahada kale sida ay qabaan oo 18 ah oo haldhan ubadano oo "confuse" lagu abuurin sharcigu waa inuu meel udhaco uusan laba dhinac kala aadi Karin marnaba, sidoo kale isla

- **Qodobkaas 29 (7)** waxa ay leedahay danta carruurta ayaa mar walba mudnaan leh marka ay joogto arrinkasta oo maslaxadooda khusaysa, carruur waxaaba carruur loo yidhi in uusan dantiisa isagu ka shaqayn karin halkaas waxaan qabaa maadaama caruurta waalid kood ay masuul ka yihiin in loo dhigo aragtida waalidka ayaa marwalba mudnaan leh, markasta oo ay joogto arinkasta oo maslaxada carruurta khusaysa, hadii waalidku uusan maskax ahaan xanuunsanayn waa in halkaas laga dhigo aragtida waalidka, cunuga ama carr uurta waalidkood ayaa masuul ka ah dantoodana waxayaabaha qaar aysan ku jirin ayey noloshoodu jeceshahay markaa sidaas darteed waalidku inuu masuuliyadaas qaato.

- **Qodobka 30 (2)** ee la soo kordhiyey ee khasab ka dhigaysa in wax barashada aasaasiga ah ee dugsiga hoose iyo dhexe ay tahay khasab qof walba inuu ubadkiisa geeyo, waalidiintana qaarkood ayaa waxaysan awood u lahayn ubadkooda in ay waxbarasho

geeyaan oo la daalaa dhacaaya noloshooda sidaa darteed dhanka kale in la yidhaahdo dawladana waxaa khasab ku ah inay fursad waxbarasho oo lacag la'aana ay siiso ubadka dan yarta ah.

- **Qodobka 30 (6)** aad waxaa ku xusan *Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ayaa u xilsaaran dejinta manhaj waxbarasho mideysan* ee *qaran* halkaasi inuu lagu daro inuu manhajkaasi uu waafaqo dastuurka, maadaama fadhiyadii hore  halkan ka soo jeediyey qodob dastuuri ah iyo manhajkii  ubadkeena la baraayey oo is khilaafsan, si uu u waafaqo manhajku in dawlada dajinayso ama xukuumadu dajinayso dastuurka qaranka iyo shuruucda kale dalka, ee aan ubadkeena iyadoo dastuurkeenu qoraayo heesta qaranka in ay tahay qolaba calankeedu manhajka aan loogu qorin soomaaliyey toosoo, sidoo kale waxaan qabaa in lasoo kordhiyo faqrad si gaar ah ama qodob si gaara u qeexaaya waxbarashada caruurta baahiyaha gaarka qaba in loo helo iskuulo u gaar ah maadaama ay u baahan yihiin qalabka duwan ama aaliyaad ka duwan kuwa caruurta kale u baahan  yihiin, aadbaad u mahadsan tihiin asalaamu caslaykum wa barakaatu.

16) **Xil. Abdinur Ali Adan:**

anigu hada wax badan ma fiirfiirinin waxaan isleeyahay, qodobkaan ka hadlaayo da'da qaan gaarnimada  waxuu lee yahay  caruur waa qofkasta oo ka yar 15 sano,  hadana hoos waxaa laga raaciyay halka ay tahay xilkasnimada waa 18 sano, maxaa laga wadaa 15 sano aaba qoranee 18 sano kale maxa laga wadaa ? ma tii naloo hoos galin rabaa oo hore aan u diidnay oo ahayd qofkasta  oo 18 sano ka yar xilkas ma aha, 15 sano diinta ayaa qabto salaaada waajib looga dhigay soonka waajib looga dhigay waxa marka oo ka dhiman maxay tahay, ilaahay wuxuu  dajiyay wax ka weyn oo ka qiima badan maa jiro taas waxaa lee yahay arintaas looma baahno waa in laga saara 18 sano.

- midda kale dowlada waxay si qasab ah ula wareegi kartaa hanti haday dan guud ugu baahato waxaan is leeyahay qasab ereygaas waa laga fiican yahay dowlada waxan qabaa dowlada hanti waa la wareegi kartaa hanti ma guurto ah ayadoo loo dhigaayo hab dan guud  lana waafajinaayo  qodobka 24 (2), laakiin si qasab ah hadhow  magdhaw la siinayaa labadas isma qaadi karto qasab horta halaga saaro 'why' qasabee ku qaadatay see hadana magdhaw loo siin karaa dowlada waxay dan guud ula wareegi kartaa hanti ma guurta ah ayadoo qofkii hantidaas lahaa laga siinaayo magdhaw si waa faqsan maxkamadaha  ama ay raali ka yahiin dawladii iyo qofkii hantida lahaa  saas in loo dhigaa qaba runta waxa kale way roon yahiin.

- **Qodobka 28** oo waxbarashada ka hadlaayo waxbarashada ilaa dugsiga sare waa inuu helaa qofka muwaadinka ah si "free" ah dugsiga sare waa fara badnaa ardayga markuu dugsiga dhaxe ka baxo waxaa la codsan jiray dugsiga sare ee caafimadka, dugsiga sare ee xanaanada xoolaha, dugsiga sare ee beeraha, intaas koleej ayey ahaayeen iyo dugsiga sare ee farsamada gacanta iyo dugsiga sare oo kale ee caadiga ah waxaa intaas daba yiilay qofka markuu 'class' 8aad ka baxo oo u baahdo waxbarasho dugsi sare oo shaqaale noqon waaye, waxaa jiri jiray dugsiga sare ee aqoon darsiga meel layiraahdo oo buugta waxbarashada sanadkaas dhan ayuu soo qaadanayaa markastana imtixaanka wuu tagayaa asagoo maalinkii shaqeeya habeenkiina daruustiisa hadba meshay mareysay ayuu aqrisanaya  asagoo macalin la joogin, haduu u baahdo waxa kaalmayn  jiray dadka jamacayiinta ah ama kuwa dugsiga sare ka baxay, runtii waa iskuul aad u qiima badnaa waxaa la dhahi jiray dugsiga sare ee aqoon darsiga oo qeyb ka mid ah ahayd wuxuu ku

yaalay xafadan xamar jajab umalaynayaa, sanad markii la gaaro oo dugsiga iska diiwan galiyo oo la ogaado shahaadadisa oo shaqaalo dawlo uu yahay si maalinkiina shaqadiisa u shaqeysto oo ilmahiisa u nooladaan habeenkina iskuulkas ayuu baran jiray duruusta, buugaagta dhan ayaa la siin jiray oo manhajkaas sanadkaa, marka waxaan lee yahay isagana waa loo baahan yahay.

- intaas waxaa dheera waxbarshada dadka waaweyn, dowlada way ka fakirtay qofka hadii wax la bari waayo oo isagoo weyn uu magaalo soo galo oo heerkii iskuulaadkana dhaafo waxbarasho lama dhaafe waa loo weynaada, waxa laga yaaba inuu ilmaha dhex fadhiisan waayo oo ka xishoodo, waxbarashada dadka waaweyn ayaa jirijirtay. waxa kaloo jirijirtay mar mar ayaa qaxooti dhacda, marmar ayaa dadku ka soo guuran sida abaartii dabdheer oo dhacday oo kale ama dadkii Ethiopia ka yimid ee ka soo qaxay oo kale, Hay'adda qaxootiga qaranka waxay dhistay warshad ku tiilay wadada warshadaha oo loo keenay dadka farsamada gacanta ayaa la bari jiray, alxanka la barijiray, toornada la barijiray, sida birta loo laabo ayaa la bari jiray, faryaamada ayaa la bari jiray, ayada dowlada ayaa shahadada waxay ka qaadan jireen dhamaantood marka la isku daro wasaarada waxbarashada, imtaxanka markay ku baasan haduu dugsi dhaxe yahay iyo haduu dugsi sare yahay wasaarada waxbarashada ayaa bixin jirtay shahaadada.

- marka waxaan lee yahay waxa ugu muhiimsan maanta oo dadkeena u baahan yahiin waa qeybta waxbarashada, waxbarashada waxaan lee yahay waa in dadka lagu dadaalaa sikasto oo wax loo bari karo, kacaanka markuu dhalanaayay dadka joogay ayaa garan karo soomaliya 60% waxba ma qori jirin saasa jeclahay, waxba ma qori jirin markii afsoomaliga la keenay ayay soomalidu waxbaratay, dadkii ka aflaxay waayo dadka maanta wadanka hogaaminooyo ayay ka mid yihiin, waxbarashada lacag laanta ah ilaa dugsiga serana ah, aad ayaan usoo dhawaynaynaa midda aan hada ka hadlay maxay aheed waayeelkii waa ka tagay, qofku markuu gaboobo dumar ama rag ha ahaadee waxaa waajib ku ah dadka uu dhalay oo qaangaarka ah inay waalidkaasi hayaan oo ay xanaaneyan, shareecada islaamka ayaa qabto, marka dowlada ayaa kafaala qaadeyso waxaa lagu darayaa shareecada islaamka la waafajinaa ilmahas ayaa lagu qasbaa waalidkaas inay bixiyaan nolashiisa shareecadaa qabta, hadii aan qaldanayn culimada wey joogta hada sida carabta oo kale cunuga markuu caasi noqdonoo lacagna heysto oo aabahis iyo waalidkisa wax siin waayo maxkamad ayuu tagaa odaygii dastuurkoda ayey ku qorantay maxkamad ayuu tagaa waxaa la ogaanaa mushaarka wiilka odayga inta uu ku lee yahay ayaa looga jaraa, odayga ayey "account" ugu dhaceysaa si qasab ah oo aan baryoahayn.

17) **Xil. Mohamed Omar Aimoy:**

Bismilaah, gudddoonka labada aqal, Xubnaha baarlamaanka sharafta leh ee labada aqal, guddiga xubnaha labada gole , saxaafada waxaan idinku salaamay Asalaamu calaykum raxma tulaahi wabarakaatu, bacda salaan wax ala wixii hadala iyo nidaama xildhibaanadii iga horeeya ka hadlay, waxaan rabaa inaan wax ka idhaahdo haduu allaha awooda lihi ogolaado.

- **Qodobka 22(3)** taasoo dhahaysa *Shaqaale kasta wuxuu xaq u leeyahay shaqo joojin,* waxaan rabaa sida uu yahay qodobka 22(3) siduu markii hore u qornaa in loo qaato maadaama uu leeyahay shaqo joojin, hadiise amniga wax u dhimayn, maxaa jira waxaa Lagu kordhiyoo kaliya "joojin uusan wax yeelayn" marba hadii shaqo joojin inta lagu sameeyo ninka shaqaalaha ah uusan amnina wax udhimaynin dee isagana wax u dhimimayso inay

meeshaas wax kasoo gaarto **sidaasi darteed waxaa la leeyahay sida ay u qoranayd fadrada 3aad oo hore in loo qaato ayaan ku talinayaa haduu alle yiraahdo.**

- **Qodobka 24 (2)** waa lagu celceliyey wax badan baa laga hadlay *dawlada waxay si khasaba ula wareegaysaa*, kaliya waxaa fiican siiqadaasi meesha qasabka ah in waxoogaa eraygaasi laga fiican yahay in la saluugayo waana wax jiri jiray waana wax jiraayo wax alla wixii danta guuda dawlada ay u baahato ee uu leeyahay nin shacaba ah baahida dawlada ayaa ka weyn iyadoo ku fulinaysa dan guud, sidaa darteed erayga qasabka waxay qasab ula wareeegi, eraygaas ayaa ah waxoogaa eray culus balse waa wax soo jiri jiray inay dan guud kula wareegto, laakiin halaga saaro eraygaasi waxay khasab ula wareegaysaa maadaama ay meesha soo galyso in ninkii lagala wareegay la siinaayo mag dhaw oo waliba caadil ah la leeyahay waxaa fiican wixii loo arko wanaag ee dawladuna dadka ay wax ugu qabanayso in xaaladaasi ay kula wareegto laakiin **erayga khasabka ah meeshaasi si kale loo badalo**.

- **Qodobka 26 (2)** daryeelka qoyska, wax badanaa isagana laga hadlay waxaan ku waafaqsanahay xildhibaanadii ugu danbeeyey oo hada iga horeeyey oo yiri da'da qaangaadhka waa 15, maxaa jira, ***maya waxa ani ii qoran waa waxa hada gudoomiyuhu ka hadlaayey waxbaa isdaba marsan, buugtaa is daba marsan 26 tanuu qorayaa haduu adi 27 kuu qorayo,*** hase yeeshee waxaan waafaqsanahay inay da'daasi ahaato qaangaadhka 15 , anaga maadaama dad islaama nahay gabdhahanaga qaarkeed waxaa laga yaabaa markay da'da 18 jiraan inay haystaan 3 caruura iyo 4 caruura oo kale , markaa hadii layidhaahdo 18 wixii ka yar ah waa caruur, gabdhuhuna ay rabaan ama xataa wiilal ha nodeene ay ku qaan gaadhaan 15, qaarkeen ayaa xataa soomaaliya laga helayaa 13 inay ku guur galayaan oo xiligaas ay 18 gaadhayaan ay haystaan 4 caruura ilaa 5 caruura, **sidaa darteed waxaan waafaqsanahay xildhibaanadii soo jeediyey in da'da qaan gaadhku ahaato 15 sano.**

- **Qodobka 27(4)** xaquuqda caruurta oo qaba lama adeegsan karo hawl adagna looma diran karo waa isla meeshii, waa is daba joogaa maxaa jira qodobkaasi 27 ee xaquuqda caruurta ka hadlaayo hadii aan niraahno waa caruur wixii 18 sano ka yar, waalidiinta waxaad moodaa in ilmahanaga looga baahan yahay xiligaasi xiligii xoogooda la manaafacsan lahaa inay yihiin, hadii markaa la yidhaahdo waa ciyaal, arintaasi iyada laftigeeda ay tahay waxaan suuro gali karayn, markaa waa inay ahaadaan isla waxay daba joogaan mar hadii 15 qaangaar niri oo wixii danboo yimaado loo dhigaayo inay aahato taasna mubaax laga dhigo

- **Qodobka 28 (3)** ee ka hadlaysa waxbarashada, waxbarashada aasaasiga ah sida laga dhawaajiyey waa qasab hoose dhexe ilaa sare waa inay ahaataa lacag la'aan, waan waafaqsanahay, hase yeeshee waaxaa loo baahan yahay horta in la helo dugsiyadii wax lagu baranayey ee waxbarashada ee meel walba oo belad iyo baadiyo lageeyo, sida iskuuladii la odhan jiray waxbarashada khasabka ah ama ololaha horumarinta reer miiga, si dadka naga wax ubartaan ee ay uga baxaan jahliga, hadii ay waxbartaana waxbadan ayaa soo kordhaaya, markaa waxaan leeyahay waa la isku waafaqsan yahay in wax la barto dadkana wax la baro, hase yeeshee ilaa "secondary" ga na lacag la'aan wax lagu baro, sidaasi darteed waaxan soo jeedinayaa gudigana aan usoo jeedinayaa in ay ku darsadaan in lahelo wax barashadaas dadku meesha ay wax ku baran lahaayeen oo iskuulaad ah oo Baled iyo Baadiya ah oo laga sameeyo haduu alle yiraahdo, sidaa

darteed maadaama inta badan laga wada hadlay qodobada kale dee xildhibaanada kale ayaan la qabaa, halkasaan ku soo koobayaa.

18) **Xil: Salah Sharif Sayid Ali:**

Mahadsanid Gudoomiye Bismillah, Alxmdullahi wasalaaatu wasalaamu————- Guddoonka labadiisa aqal xildhibaanada, sentarada saxaafadda iyo qof walba Asc. Marka 1aad waxaan rabaa in aan inta mahad balaaran uga soo jeediyo Guddonka baarlamaanka sida xilkasmnimada aqoonta iyo khibrada iyo kartida ay ku dheehantahay ee ay Baarlamaanka u hogaamimayaan, waad mahadsantihiin, hadii aan u soo laabto dooda baarlamaanka ama sharciga, mudane Gudoomiye ama xildhibaane.

- Qodobka 22 oo xuquuqda shaqaalaha ka sheekeynaya faqradiisa 1aad wuxuu leeyahy qof kasta wuxuu xaq u leeyahh in uu helo xiriir shaqo oo ku dhisan cadaalad, marka xiiriir sida ay saaxiibaday sheegeen waxaa ka haboon fursad shaqo taas ayaan adkaynayaa,
- isla qoodbkan farqadiisa 3aad, waxa ay leedahay shaqaale kasta waxa uu xaq u leeyahy shaqo joojin xooga migdi ayaa ku jira qumuud waye, marka waxaa ila fiican in aan dhahno, shaqaale kasta waxa uu xaq u leeyahy in uu sameeyo shaqo joojin oo uu ku cabiraayo dareenkiisa, marka shaqaalaha in uu sameeyo in lagu daro shaqa jooojin inaan la dhihin, asi maa laga joojinayaa asi ma iska joojinaya si fiican uma cadda, dastuurka markii la samaynayana waxa uu ku fiicanyahay in uu ahaado clear and consice, wax waadix ah wax cad oo aan gaabnayn in uu yahay, mugdi ah kuma haboono,
- isla qoodbkaas farqaiisa 5aad qof kasta oo shaqaale ah gaar ahaan haweenka waxa ay xaq u leeyihiin in laga ilaaliyo fara xumayn iyo takoorid goobaha shaqada, faraxumaynta waxaan u malaynaayaa in ayna anshaxa ku fiicnayn xadgudub ama kalmad balaaran ayaa ila fiican, sidoo lale qodobkan waxa aan ku dari laha in gabdhaha loo ogolaado fasaxyada dhalmada marka ay xaamilo yihiin iyo marka ay dhalmada yihiin, marka ay gabadhu cuslaato waa in fasax la siiyo, marka ay dhashana waa in ay fasax umul ay hehso, goobaha shaqada xadgudubyada ka dhaca ee gabdhaha loo gaysto in si gooni ah loo janaaxiyo, waxa dhaca taxarush ama harrasment oo gabadhu hadii ay shaqo rabto in saan iyo saan ii yeel la dhaho waa waxyaabo aad u qaab daran, soomaaliduna waa ay ka dhacaam marka dadka saas ku kacaya ee masuuliyiinta ah ee xafiisyada jooga oo mararka qaarkood laga yaabo in ay ku faanaan anigu saan iyo saan ayaan sameeyaa oo waxyaabaha anshax darada in ay ku faanan ayaa laga yaabaa , in waxaa la rabaa BJF waa innaga in dadkaas talaabo sharciga wafaqsan laga qaado si ayna dadka kale ugu dhiiranin gabdhaheenana sharaf iyo karaamo ay ugu noolaadaan.

- isla qodobkaas faqradiisa 6aad waxay leedahay dadka naafada waxay xaq u leeyihiin in ay goobaha shaqada ku helaan sinaan buuxda marka naafo naftirkeeda kalmad laga haboonyahay waaye, waxaa ila haboon in aan dhahno dadka baahiyaha gaar ah qaba oo naafada laga dhaafo, qofka indhoolaha ama dhagoolaha in aan naafo la dhihin, naafada rasmiga ah waa caqliga, qofka marka uu caqligiisu taam yahay naafo ma aha marka in aynu dhahno dadka baahiyaha gaarka ah qaba.

- **Qodobka 25aad** oo ka hadlaya xuquuqda bulshada, qof kasta waxa uu xaq u leeyahy in u helo biyo nadiif ah uu cabo, marka biyaha yuu ka helayaa, in aynu dhahno qof kasta wuxuu dawlada xaq ugu leeyahy in uu helo biyo nadiif ah, diinta islaamka biyuhu waxa ay ukala baxaan, biyo daahir ah, biyo mutadhahir ah, biyo iyagoo nadiif ah aan lagu

waysaysan karin ayaa jira oo wax dayrinaynin  kuwa la cubo sida aan uga sheekynay camal, maadaama aan muslim nahay oo aan cibaadaysano kuwo lagu waysayto kuwo lagu qubaysto  intaas oo dhan in aan lagu soo koobin biyo oo kali ah oo ay ahaato biyo nadiif ah, qofka laga hadlayana ay tahay dowladda Agency-ga ama hay'adda adeega bixinaysa in ay dowladda ahaato, mudane gudoomiye mararka qaarkood waxaa soo laabta kalmad erey bixinteeda dhowr jeer qodobka 26(3) waxa ay leedahay daryeelka hooyada, dhallaanka iyo caruurta , dhallaan iyo caruur laba kalmad miyay kala yihiin in hal kalimad laga soo qaato oo hooyada iyo caruurta la dhoho hal kalimad in tikraar lagu sameeynin.

- **Qodobka 27(2)** oo ay guddigu hadda soo kordhiyeen aad ayaan u bogaadinaynaa, qodobkaas wuxuu leeyahy da'da qaangaarka ugu dambeeya waa 15 sano, lkn diinteenu waxay qabtaa 15 sano ka hor waa la qaan gaari karaa gabadha iyo wiilkaba, gabadha iyada  oo  9 sano jirta hadii ay isku argto xaydka, wiilkana uu ixtilaalo wiilkaas iyo gabadhaas way qaan gaareen, Nabiga SCW xaasaskiisa ummunaa Caa'isha wuxuu ku guursaday 9 sano, marka in la ijraamiyo ma aha, hadii la dhoho  da'da qaangaarka 18 sano ka hor lama qaangaadhi karo, gabadha waxa ay u dhigantaa gabadha iyo wiilka oo 18 sano ka yar ay ilmo ku dhalaan, ilmahaas in aysan ahayn ilmo ku dhashay xariga, da'da qaangaarka ugu dambees waa in uu 15 sano yahay aad ayaan u adkaynayaa, qaybta kale ee 18-ka sano ahna sunno rushdi ah waaye, qofka caqligiisa marka uu taam noqonaayo waaye fii suurati al nisaa ilaahay wixuu leeyahay" ولا توتو السفهاء اموالكم الذي جعل لكم القبام، وارزقوهم فيها واكثوهم وقوا لهم قولا معروف" وابتلوا اليتام حتي اذا بلغوا النكاح فان ءانستم منه رشدا فادفعوا اليه اموالهم" Marka qofka safiga ah asigo 15sano gaaray oo hantida ku cayaaraya oo babi`inayo wuxu walidkiis ugu dhintey ama hantida uu laha ku tagri falaayo, kaas diinteena waxay qabtaa in lo haayo dadka qarabada ka wa wayn ee caqliga ilahey siyay in ay u hayan,  ama dowlada hadi uuna qof saas ah lahayn dowlad ay mamusho, qofka mamulayana usan ku tagri falin hadii uu hanti leyahay hantidisa uu isticmalo qofkana uu u maareeyo hadii usan hanti lahayna waxyar oo uu  cunayo in uu ka isticmalo,  laakn uuna ku tagri falin marka suno rushdigu  18 sano xata Waka waynaan karaa qof 18  sano oo safi ah aya la arki karaa, Marka meesha ugu haboon ee la dhihi laha waala dhahay lkn qaan gaarka 15 sano waye, diintena islamka gaar ahaan madhabkeena shaaficiga madama wadankana 1,000 sano iyo ku dhawaad madhabka shaficiga haysano oo 15 sano sanadka qaan gaarka La dhaho aad ayan u xojinayna.

- Mudane gudoomiye qodobka 28aad oo ka hadlaya waxbarashada aad ayaa loo sheegey faqradisa 7aad waxay leedahay, barashada tacliinta diinta islamka waa ku qasab ardayda dhigata dugsiyada dowlada iyo dugsiyada gaar ka  ay u leyihin dadka Muslim ka ah, marka waxaa is waydinaynaa dugsiyo aan muslim ahayn oo diin kale lagu faafinayo maa wadankeena u ogolnahay qodobkii kowad waxaa so sheegnay wadanka diintisa in ay tahay diinta islamka, diin aan islam ahayna aan wadankena lagu faafin Karin, qodob dastuuri waye marka kan wuxuu ka hor imanayaa qodobadi hore, ani waxaan dhihi laha barashada tacliinta diinta islamka waa ku qasab ardayada dhigato iskulada dowlada iyo dugsiyada gaarka lo leyahay in la dhaho, laakiin iskuulada musliminta ay leeyihin hadii aan dhahno kuwo kale oo public oo diimo kale lagu barnaya ayaa kusoo hoos dhuuman karo, marka qodobkaasna waa in si fiican u fiirino.

- Tan kale waxbarasho hadii la dhaho iskuul lee ma ahan iskuul iyo dugsiga quraanka waye, waxbarashada ugu muhiimsan wa dugsiga quraanka, marka dugsiga quraanka

waxaan ognahay hadii soomaliya joogna markii master plane la samenayo magaloyinka waxa kujiro iskulaadii garoomihi cayaraha, kawaankii meel walbo bulshada leedahay ayaa kujiro, laakiin dugsi quraan oo master plane lagu darayo dugsiyadena banaanka kuyaalaan iyo wadada hareraheeda iyago jiingad ah xaladaha ay ku suganyihin aan aad uga xunahay in aan kuso kordhino dowladu waa in ay daryeesha dugsiyada quraanka si gooni ah loona sameeya plane, marka markey dowladu cayinto garoonki iyo meeshii lagu cayaarayo iyo kawaankii iyo meelihii public center-ka ahaa, saas camalna dugsiyada public center waye, magaloyinkeena in lagu daro waxbarashadisana qasab laga dhigo budget- kiisana dowlada ay bixiso mar 3kun macalimin bixinay, markale 3kun Ilaa hada dugsiyada quraanka iyo masajideena waa dayacan yihiin, marka waxaa rajaynaa dugsiyada quraanka iyo masajidana in si gooni loo fiiriyo, waa mahadsantihiin.

**19) Xil. Shariif Mohamed Abdalla:**

Bismilaah Walxamdulilaah, Guddoomiye waad mahadsantahay, adiga iyo Guddoonka oo dhan, Xildhibaanada jaalayaal waad salaamantihiin, Intaa ka dib maadaama waxbarasho iyo micnaha ay ku jirto erayga jaale. waxaan u isticmaalay waa eray Soomaaliyeed, oo qof dhintay uusan leheen, runtii wax badanna soo koobayay. haddii aan u gudbo qodobada, marka hore Guddigan soo diyaariyay dastuurka maalin dhaweydna waan sheegay qaladaad madbaci ah lagu sheegay baa markasta jira, marka ma filayo in ay dadka aan aqoontaas aanan u laheyn, laakiin aan ahmiyad badan in aan la siinin baan arkayaa, waan sheegi doona qaarkood waa tooshin, hadhowte waa in uusan ku soo bixin qalad madbaci ah.

**Qodobka 21aad :** waxba kuma kordhinayo.

- **Qodobka 22aad(1**) : sida loo sheegay erayga xiriir,waxaan ku badeli lahaa oo aan la qabaa dadka soo jeediyay fursad, qof kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu helo fursad shaqo in kasta oo ay isu dhowyihiin saas ayaan qabaa. faqrada (2) faalada waxaa lagu qoray, faqradaan sideedii baa loo soo qaatay laakiin koleyba erayga ah oo abuuris qof kasta oo shaqaale ahi waxa uu xaq u leeyahay in uu abuuro meeshii ahayd in 'uu sameeyo ' ayaa lagu soo badelay, marka sidiisa ma aha laakiin waa u dhow dahay.

- **Faqrada (3**): shaqaale kasta waxa uu xaq u leeyahay shaqo jooyin haddii aysan qatar ku ahayn nabadgalyada, waxaan ku dari lahaa iyo danta guud ee dhaqaalaha dalka.

- **Faqrada(5):** waxaa ku jira qalad yar oo aan lagu baraarugin, haddii aan aqriyo waxay dhigantahay qof kasta oo shaqaale ah gaar ahaan haweenka waxa ay xaq gaar ah u leeyihiin in laga ilaaliyo, waxaas la sheegayay faquuqidda iyo takooridda goobaha shaqo, waxaan u soo socdaa: xeer kasta oo shaqaaleed ma aha xeer waa xeer kastoo shaqaale waaye, marka taas qalad yar weeye in ay saxaan baan rajeynayaa, Sida ay aniga ila tahay waxyaabaha qaladka dabaciga ah ee soo noqnoqday waxaa ku jira masalanba marka laga hadlayo faqradda (6).

- **Qodobka 22aad** dadka naafadda ahi waxa ay xaq u leeyihiin in ay goobaha shaqada ku helaan sinnaan buuxda, suurtaggelineysa xarafka **g-da** baa labo laga dhigay waa hal. meesha faaladdana waxaa ku qoran faqraddan sabbabta xarafka **b-da** baa labo laga dhigay waa hal **b** uun baan ka dhigi jirnay annagu,taasna waan baraarujinayaa.

- **Qodobka 23aad:** waxaa la yiri siiqo toosin baa lagu sameeeyay, laakiin siyaado ayaa ku jirta siday wax yihiin in loo sheego ayaa fiican idinkaa arkaya.

- **Qodobka 25aad:** isagana waxaa soo noqnoqday qaladkii meel taaboggelin ahayd xarafka **g-da** labaa laga dhigay.

- **Faqradda(4)** waxaa ku xusan erayga taaboggelin xarafka **g-da** meeshaas iyadana waa la labo laabay ma labo laab meeyso, saas aan u oggaano.

- **Qodobka 26aad :** daryeelka qoyka. Qofkasta oo qaangaar ah wuxuu xaq u leeyahay in uu guursado, uu yeesho qoys, arrintaan waxaa weeye culimada Soomaaliyeed in ay madhabtii iyo habdhaqankii Soomaalida laga guurayo oo loo guurayo si loo la jaanqaado aduunkaan aan hadda isku furanay oo 18 iyo 21Sano, rushdigooda waa 18, qaangaar koodan waa 18. kolay arinta haddii ay diin ku shaqo leedahay dalkaan uu ku dhaqmaayay Mad habka shaaficiga ah bulshadana intaan meeshaan ku jirta kaliya ma ahana way balaaran tahay, dareenkooda iyo dhaqankooda ayaan ka turjumeynaa. marka arrintaan waxa ay u baahan tahay fatwo ay culimada soo sameyso oo lala wadaago Baarlamaanka si aan dimmadeena wiixii ka dhalanaya oo dambi ah aan isaga dul qaadno.

- **Qodobka 27aad:** xuqquqda carruurta: waxaa lagu xusay qodobka (1) in loo bixiyo magac suuban, Magac suuban marka aan joogno halkaan Soomaaliya in uu ahaado magac islaami ama uu ahaado magacii Soomaalida ay lahaan jirtay in uu ahaado. meeshaan waxaa laga dhowrsanhaya magac loogu tagay Australia iyo meel ka fog in aanan u bixinin oo waalidka lagu soo celiyo xeyndaabka islaamka iyo kan dhaqanka, oo "john" iyo hebel iyo waxaas oo kale loo bixinin magac suuban baa u baahan muxuu noqonayaa? magac kasta waa fiican yahay, qofkaan in lagu garto un weeye, laakiin anaga magac suuban maxaa noo ah.

- **Qodobka 28aad :** waxbarashada sidii hadda loo sheegay in aan waxbarashad u aqaansano faalada iskoolka kaliya ma ahane, Sida ay noogu suurta galeyso in aan waxbarashadii dugsiyada quraanka aan iraahdo aan u waajib yeelnaa, haddii qof garabaati wato ilmihiisa soo raray markaana uu yiraahdo 'aniga ilmaheyga dugsiga lama geynayo'qur'aanba uma baahni, waxbaba lama barayo, waqti isagama lumin hayo, maxaa la sameeyaa? waa in ardaygii haddiiba qofkii iyo ilmihiisa ay muslim yihiin in sida tacliinta kale loogu qasbaayo tana loogu qasbo, dabcan waan la qabaa. waxbarashada dugsiyada waxaa lagu soo biirin karaa manhajka waxbarashada ee dalka ayaa lagu soo biirin kara, sanooyin saddex sano, labo sano loo aqoonsan karaa. taas waxaa weeyaaan dugsiyada quraankana in aan la hilmaamin bay ila tahay, dabcan dowladda ayaa kafaala qaadeysa.

- **Qodobka 29(3)** : oo erayga dhererka badnaa uu ku jiray, waxaa weeyaan ka sokoow hey'adaha dowladda ee ku shaqada leh waa in ay hormariyaan eraygii dheeraa dhowraan dhaqan hoosaadka iyo afguriyada waxaan leeyahay af rasmi ah baan leenahay oo loo aqoonsaday Maay iyo Maxaa tiri, Af-guri ciddii ku hadleyso ha ku hadasho laakiin dowladda iyo dastuurka waa xil gaar ah maxaa yeelay af-guriyada waa soo yaraanayan afka loo badan yahay baa loo tagayaa taasna saas baan dhihi lahaa.

- **Qodobka 30(2)** : qof iyo hey'ad midna laguma qasbi karo in uu bixiyo xog taas hey'addaha nababgelyada iyo waxaas bay quseyneysaa, dowladda marka ay la

wareegeyso hanti guud, hantida guud maahan guryaha, damanyaalaha maahan, hantida gaar ah baan leeyahay, oo dan guud loola wareegaayo baahi baa jira, dagaal baa jira, Markab qof soorartay suuqa inuu geysto rabay baa dakada ku xiran, dowladdi baa u baahatay, ciidankii baa looga baahday, dabcan waalala wareegayaa, laakiin waxaan la siinayaa xaqiisa, ama tan guryaha waa arin loo bahan yahay, horta sharcigii dhismaha in lasoo saaro, barigii hore waa jiri jirtay damanyaalaha intaan la dhisin naqshad baa la sameyn jiray, Guddi baa loo soo dirijiray caafimaadkiisa, dariishadiisa iyo intaas la fiirin jiray, naqshadaas markii la ogolaado, hadii lala wareegaayo waxaa la sameyn jiray asagana wuxuu ku qasbanaa naqshada sidey aheyd inuu u dhiso, dowladda waxay ku qasbaneyd hadhow in ay magdhow siiso, calaa kuli xaal sharci dhismo ayaa loo baahan yahay, jidadka hada meelahaan soomaraa, afar mitir markii guriga la dhiso, ayaa balakoon lasoo bixinaayaa kanna balakoon buu soo bixinayaa, lug un baa lagumarikaraa mooyaanee, gaari qaar ma marikaro,marka sharciga dhismaha lasoo saaraa loo baahan yahay, oo dabcan guddiga qaabilsana ka jawaabi kara. waa mahasantihiin.

**20) Xil Sareda Mohamed Abdalla:**

Bismillaahi raxmaani raxiim, waxyaalo badan oo isku dhexdaasan meeshaan jiree, qofkasta maqaam iyo maamuus uu leeyahay awgeed uguma baxsan karo la xisaabtan faldanbiyeed uu galay, Qodobkaan waxaa waaye qodobkii xasaanada, qofkii aan dambi galin ayaa dhaxda laga qabsanooyaa, meeqo laqabsaday oo anaga aan aragnay, ayagoo danbi galin inta laqabtay la xiray, qodobkaan waa qodob xasaanad waaye horta, **waa in meesha laga saaraa oo laga tiraa**, lambar one. Wixii oo dhan ayaaba iska hor imaanaayo ilaahay amarkiis, meeshaan lama gaarin ha'i dhihin Gudoomiyow bahalkaan si guud ayaan ugu hadlaayaa, Si wadar ah aan ugu hadlo, Gudoomiye shan iyo toban isku soo noqnoqoneyso waaye walaahi bilaahi, kii la tiray iyo kii la qoray waala kala garan waayay, maanta dhan "prime minister" hore aan wada saxeynay si guud ayaan ugu hadlaaya, aniga waxaan soojeedin lahaa gudoomiye, maadaama aan wax badan Baarlamaanka kusoo jiray, Raxaweyn waxey dhahdaa, "waxaan aqalgudaadkan wuu isku dhex daatay" halfar ayaa laba far la qoraa, marka aniga waxaan jeclaan lahaa, wixii soojeedimo ah oo siyaasad ah inaan gacanta u taagno, oo la agdhigo, markii xoreynta labaad lagu noqdana lasoo xoreeyana shacabka loo dhiibo, oo markaas ka dib quburo loo bixiyo, waxaan leys ku leexiyo, hadana saas gacanta aan ugu taagno, oon saas ku ansixino, wallaahi waan ku wareeray, maanta dhan waxaa isku soo noqonaaya hal qodob, marka waxaan kaloo hada ka hadli rabaa. qeyb kaloo inta ku arkay oo isku dhex daadsan, diimaha, meel ayaan kasoo aqriyay, qof kasta wuxuu ku dhaqmi karaa diintiisa, diintiisa tee waaaye? Dad kale maan dastuur u qoreynaa marka, diinta muslimka in la dhaho soomaahan, wax yaaba saas oo kale isku soo noqnoqonaayo, wixii waan garan weynay waan ku rafaadnay, aniga waxaan qabaa buugaan hadda si qurux badan ayaa looqoray wixii qaldan halaga sheekeeyo, laakiin ereyga sharci oo fasiraayo yaan asaga lakala fasirin lakala bixinin, waxaan jeclaan lahaa, in si duub duub ah aan gacanta ugu taagno, wixii kale oo loo kaba tuuro, siyaasadoo laga hishiiyay, aan gacanta u taagno, wiixii soojeedin gobolada aan gacanta u taagno, wixii guddigaan soo qoreen leysku daro, markii dadweynaha soo mara geedkaana, khubaro loo bixiyo, saas lagu ansixiyo, aniga taas in aan soo jeediyo jeclahay, intii aan ka aqaano waaye Baarlamaanka, ama dastuur la qoraayay, wax saan iskugu dhexdaadsan waligay ma arkin, wixii aan qabana maalin kalaan ka hadlaayaa.

**21) Xil Sahuur Haji Ulusow:**

Bismilaahi raxmaani raxiim

- **Qodobka 29aad** caruurta aniga waxaan dhihi lahaa sidiisa hore halagu sooceliyo, da'da qaangaarka waa 18sano, 15sano sida la ogyahay caruurta waa ku qaan gaaraan, laakiin," it means" waxaa waaye hormoonkoodaa joogo, yacni noloshii hore wey ka gudbeen ciyaal nimada, laakiin waxey soo galeen nolosha qaangaarka, laakiin micnaheeda maahan in ay yihiin dad oo mas'uuliyad qaadi karo, ama reer dhaqan karo, markaan wiil iyo gabar, hormoonkooda waaa isku mid, anaga gabdhaa dhalnay. gabdhanimana waan soo marnay, marka waxaan is leeyahay, yacni gabar 15sano jirto, ineysan qaabili Karin in ay guursata oo kale, sababtoo ah waxaa laga yaabaa koriinkeeda inuusan kaamil aheyn, ha noqoto dhaqan, ha noqoto dhan hormoon da'da guurka 18sano haku yimaado oo da'da qaangaarka iney noqoto 18sano jir.

- **Qodobka 22aad :**xuquuqda shaqaalaha, qofkasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo xiriir shaqo, aniga meeshaas waxaan dhihi lahaa, qofkasta wuxuu xor u yahay inuu helo, fursad shaqo oo loo siman yahay.

- **Qodobka 23aad** : Xuriyada iyo midnimada, muwaandin kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu xor ah u doorto xirfadiisa shaqo iyo muhiimada uu rabo, meeshaan waxaan dhihi lahaa, xirfadiisa shaqo si waafaqsan diinta islaamka, marmar waxaa jirta xirfad aan diinta waafaqsanayn, qofka haduu rabo wuxuu rabo inuu iska sameeyo, haduu rabo ani xirfadaa leeyahay dukaan qamraan furanayaa, diinta ma waafaqsana, haduu dhaho qofka aniga xirfadeyda waaye, inaan meel "music" lagu tunto inaan sameys to, diinta ma qabto, marka xirfadaha shaqo qofka uu leeyahay waa iney diinta islaamka "conflict" ku sameyneynin.

- **Qodobka 25aad** : deegaanka, qofkasta wuxuu xor u yahay inuu helo, deegaan aan wax yeelo laheyn, caafimaad qab, iyo badbaadintiisa nololeed si walbaba, yacni arintaas waxay la xiriirtaa bey'ada, xeer halaga soo saaro waxyaalaha qofka kaliimadka wasaqeynaayo xumeynaayo, taas waxey ku xiran tahay in xeer baabuurtaa ka mid ah, iyo wax yaalo badan iyo dhirta oo lajaro wax yaabo badanaa keento, inuu qofka deegaan xumo ku noolaado, **marak taas waxey u baahan tahay xeer la xiriira bey'ada in laga soosaaro.**

- **Qodobka 24 (2):** dowladda waxey xaq uleedahay in ay la wareegto hantida muwaadinka, hantidaas maxaa ka mid ah, dahab miyaa, dheyman, dhul miyaa, hadii magdhow la siinaayo maxay ula wareegaysaa, marka hantidaas naloo faahfaahiyo wey fiicnaan laheyd.

- **Qodobka 27aad:** qofkasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo biyo nadiif ah, xuquuqda qofka muwaadinka uu leeyahay waxa waaye inuu biyo helo iyo inuu isbitaal helo, Inuu waxbarasho helo, marka biyaha nadiifka cidee laga rabaa, meeshaan kuma xusno, aniga waxan dhihi lahaa, dowladda waxa xaq looga leeyahay in ay bulshada siiso biyo nadiif ah, ceelasahana ay sameysan karin cid aan dowlaada aheyn, sababtoo ah magaaladaan mogdisho ku nool nahay, qofkasta ceeluu sameystay, yacni nolosha biniaadamkana saas maahan, ceelka waxaa loo baahan yahay bulshada biyaha laga siiyo, 200km uu kaga yaalo magaaladda, musqulaa inta ka qodon, ceelaa qodan, cuduro badan, iyo beer xanuun iyo dadkeena waxa jirada badan u keenaayo, waxa waaye, kow biyahooda oo wasaqeysan, marka aniga waxaan dhihi lahaa ceelasha magaalada oo dhan in laga xirxiro ay dowladda ceel ayada qaas u ah in ay ayada dadka siiso saas ma aragtay, biyaha wadanka laga isticmaalaayo la helo. soomaaliya dagaaladii ceelashaa la dhihi jiray

ceelasha ilaa mogdisho intee kiiloo mitir isku jireen, intaas dhan lama dagneen waxaa laga ilaalin jireen in ay ceelasha ay cabayaan musqulo iyo qashin qub u dhawaadaan, marka taasna waxa waaye xuquuq dowladda lagu leeyahay, Cisbitaaalada muwaadinka waxa uu xaq u leeyahay isbitaal “free” uu helo, maadaama waxa aan ka shaqeyneyno ay dastuurka tahay, oon og nahay hada inaan lagu noolaaneynin, ama lagu dhaqmeynin oo jiilka soo socda uu yahay inaan si fiican aan u tafa tirno.

- Shaqaalaha, meesha gabdhaha lagu xusay, faraxumeyn waxaan dhihi lahaa aniga xadgudub, haweenka waxa ay xaq u leeyihiin, inaan lagu xadgudbin, in aan la rikaateynin, rikaato af-soomaali maxaa lagu dhahaa, “madaxfurasho” sidaan anaga aan la socono, gabdho badan , jaamacadu dhigtaan oo shaqaalo ah, ayaa maalin walbo la dhibaateeyaa, oo la dhahaa, hadaadan waxaan ii sameyneynin, adigana horey uma soconeysid, marka taasna wey ku badatay bulshadeena, iyo shaxaari nimo, niman badan oo waaa jira shaxaariyiin eh, waxey iska kaa dhigayaan, iney ku salaamayaan, garabkey kaa maroojoojinayaan, taasna mamnuuc waaye, in gabadha lagu sameyo, igana raali ahaada, igu qaata ,waan dhameeyay saa filaayo, salaamu caleykum waraxmatulaahi wabarak.

**Taariikh:** Maarso 2, 2024

| | |
|---|---|
| Baarlamaanka: | 11aad |
| Kalfadhiga: | 4aad |
| Kulankiisii: | 20aad ee labada Aqal |
| Goobta: | Villa Hargeisa |
| Guntanka: | Sii Wadidda Doodda Cutubka 2aad |
| Wakhtiga uu furmay: | 10:15 a.m |
| Wakhtiga uu xidhmay: | 12:35 p.m |
| Shir-Guddoonka: | Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad ee Golaha Shacabka<br>Xil. Sacdiya Yaasiin Xaaji Samatar |

**Ajendaha:**
(1) Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah.
(2) Ansaxinta Ajendaha.
(3) Dib-u-eegista Dastuurka: Marxaladda 2aad. Ka Doodista soo jeedimaha wax-kabeddelka Dastruurka. Cutubka 2aad. Xuquuqda Asaasiga ah iyo Waajibaadka Muwaadinkta. QODOBKA 31aad ilaa 41aad

**Kulanka 20aad**

**1) Xil. Mahdi Mohamed Gulaid:**

Mudane Guddoomiye, Gudoonka waan idin salaamay iyo hawlwadeenadaba, waxaan ka bilaabayaa:

- **Qodobka 34(1):** akhrinta oo aan u akhrinayo **Eedaysanuhu waa dambi laawe**, halka ay ahayd Eedaysanuhu wuxuu la mid yahay qof aan dembi gelin. Eedaysanuhu waa dambi laawe ilaa maxkamad awood u leh ay si kamadambays ah ugu xukunto dembiga loo haysto, Markaa waxay ku fiicantahay **Eedaysanuhu waa dambi laawe inaan nidhaahno**

- **Qodobka 34(2):** oo aad tidhaahdeen waxaan ka soo rarnay qodobka 17(2) dastuurka asalkiisana ahaa qodobka 19(2) markaad faqraddan 2aad akhridid nuxurku kuma qorna, qodobkaa hore waxa uu odhanaayey waxaa waajib ah in amarka garsooraha si tooos ah loogu akhriyo daganaha hoyga, baadhahana waxaa ka reeban ku xadgudubka sharciga, markaas qodobkaas hadii laga masaxay faqraddaa waa in halkan si cad loogu sheegaa, waayo nuxurka qodobka 34(2) waxa uu ka hadlayo iyo qodobkaa 17(2) oo xormada hoyga hadii sarkaal "police" ah oo amarka qabashada Eedaysanuhu uu joogo, yimaado si cad buu xuquuqdaa u daryeelayey, waxay waafaqsantahay mabaadii'da iyo shuruucda caalamiga ah ee xuquuq insaanka. Markaa **qodobka 17(2) ama halkiisii ha lagu daayo ama halkan faqradda si cad ugu qoran isla siiqadaa leh ha laga dhigo, labadaa "option" ayaan kala siin lahaa.**

  Hoyga waxa kale oo raacsan xuquuqda uu qofka hantiilaha gurigu u leeyahay hoy inaan la iska soo galin Karin lana baadhi Karin " the right to search and seizure" baa la yidhaahdaa,

markaa hadii uu sidan amar maxkamadeed oo garsoore soo qoray "police" sooma gali karo guriga mana baadhi karo **waa inay sidaan waarankaa ay ku baadhayaan.**

- **Qodobkana 34aad**: waxaa ku soo daray **faqradda 12aad** oo ah xuquuqda waxaad kaga hadasheen Eedaysanaha in 48saacadood lagu keeno maxkamadda horteeda 34(6) taasi waa habraaca "procedure" dhigayaan ee saxda ah, laakiin waxaa jirta qofku mar uu la haysta yahay oo aan la keeninba maxkamad, markaa waxaa la yidhaahdaa xuquuqda habyas, korbaska dastuurada aduunka badankoodu iyo xeerarka habka ciqaabta way leeyihiin, inaga waxa la laalay waagii "military" gu kacaanku dalka gacanta ku dhigay.

  Xuquuqda ''habeas corpus'' ee ah in qofku jidhkiisa ama shakhsiyadiisa la horkeeno maxkamada way ka saareen sharciga. Dastuurkeenu hada si cad uma qorayo, markaa "the right" habeas corpus oo ah in qofka maxkamad la keeno oo aanu lahayste ahayn oo ah macneheedu lahayste ma jiro waa inay dastuurkeena ku cadahay.

- **Qodobka 34(12)**: ee masuuliyadda ciqaabta waa shakhsi **waa sax oo quraankuba** ولا تزر وازرة وزر اخري **ayuu leeyahay.**

- **Qodobka 34(13):** Qofna looma ciqaabi karo fal markii uu qofku ku kacaayay uusan sharcigu dembi u aqoonsaneyn, haddii uusan ahayn dembi lid ku ah bani'aadannimada, laakiin marka ay ku jirto danta Eedaysanaha waa ka faa'iidaysanayaa sharcigaa. Qodobkan waxa la yidhaahdaa **"the principle of non-interactivity"** dib u noqosho la'aanta xeerarka ciqaabta oo macnaheedu waxay tahay haddii faldanbiyeedka markaad gashay lagugu xukumay 10sanadood oo xadhiga ah, laakiin markii sharcigan la sameeyey isla qodobkaasi yahay 20sanadood.

- Qodobkaas horay laguugu xukumay 10 sanadood laguma cuskan karo oo lama odhan karo qodobkii waa la badalayoo 20sano ayaa xadhiga lagaaga dhigay xadhig, laakiin hadii qodobkii ahaa ciqaabtiisu 10sanadood uu sharcigu ka dhigayo 5sano, waxaa la eegayaa danta Eedaysanaha, markaa **"the principle of non-interactivity"** ayaa la qaadanayaa xeerarka ciqaabta iyo dastuurada aduunka sidaas ayey dhigayaan, **markaa faqradaa danbe inaga oo eegayna danta Eedaysanaha ayaan ku soo kordhiyey**.

- Waxaad ka soo hadasheen shakhsiyaadka la eedeeyey, laakiin shakhsiyaadka la xidhay xuquuqda ay leeyihiin waad ku arki kartaan dastuurada kale "**person's arrest and person's abused"** waa kala labo. Markaa qodobkan dhowr iyo tobanka qodobi xuquuqda dadka Eedaysanaha uun ka hadlaysaa, dhowrkaa qodob ee dadka la xidhayna waan ku soo dari karnaa. Waxa kale oo aan anigu ku soo kordhiyey oo aan idinla wadaagi donaa qodob kale oo la yidhaahdo reebanaanta labo jeer ciqaabinta, qofna fal danbiyeed labo jeer looma ciqaabi karo oo waxa la yidhaahdaa **"prohibition of double jeopardy".**

- **Qodobka 35(3):** Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay hormarinaysaa siyaasad iskaashi iyo iskaalmaysiga sharciga ee caalamiga ah ee ka hortaga xakamaynta iyo baadhista dambiyadda, waa qodobka ka hadlaya Isucelinta Eedaysanayaasha iyo Dembiilayaasha oo xeerkeena habka ciqaabta inta ugu danbaysa baa ka hadlaysa wasiirka cadaalada doorka uu ku leeyahay heeshiisyada Isucelinta eedeysanayaasha, laakiin waxaan odhan lahaa taas waxa la yidhaahdaa **"extra addition"** aynu ku soo kordhino qodob kale oo la yidhaahdo **"dhandhishan "** dhiibid qofkan waa la qabanayaa waa la dhiibayaa, waxa loo dhiibayaa

wadankale oo "torture" laga isticmaalo in lagu soo baadho. Markaa taana "document" iyada xuquuqul insaanku badankoodu way mamnuucayaan waa wax imika la soo kordhiyey ,dalal badan xuquuqda insaanka ay ku soo kordhisteen oo ay ku dareen.

- **Qodobka 36aad:** oo ka hadlaya Qaxootiga iyo Magangelyada, waxaad ka saarteen faqrada 2aad madaama ciwaanku qaxootigu yahay, waxaadna tidhaahdeen Qodobbada 53aad iyo 54aad baa laga hadli doonaa ee awoodaha dawladda Federaalka iyo dawlad goboleeyadu kala leeyihiin, madaama se ciwaanku yahay Qaxootiga iyo Magangalyodoonka ama Magangelyada faqradaasi halkan ayey ku fiicantahay in loo daayo, madaama ciwaanku yahayba Qaxootiga, halkii loogu dari lahaa qodobada 53 iyo 54aad.

- **Qodobka 38aad: waxaan soo raray qodobka 11(4) oo ay baarlamaanku ka qayliyeen oo u qornayd sidan:** Qofna maqaam iyo maamuus uu leeyahay awgeed ugama baxsan karo la xisaabtan iyo ciqaab faldembiyeedka uu galay. Qodobkaa hadaad ugu jeedaan **"the culture of impunity"** waa sax weeyi, **laakiin waa inaad u qortaan faqrada odhanaysa xildhibaanadu waa ka baxsanyihiin oo xasaanad ayey leeyihiin oo macnaheedu waxa weeyi marka dambiyo la galo qofkaasi waa qof ama suldaan** ah ama kaabo qabiil wayn ah, ama qabqable dagaal oo wayn ahaa, ama wasiir ahaa lama keeni karo maxkamad lama horkeeni karo, qofka kagama baxsan karo darajaduu lahaa faldanbiyeed u galay, hadii taa loola jeedo waa inay ku cadahay oo aad baraakit galisaan nuxurka. Qodobkaana sidiisa waa lagu fulin karaa waxa uu soo hoosgalayaa qodobka 38(5).

- **Qodobka 39(2)**: fasiraada waxaan ku dari lahaa qodobkan 39(2) oo odhanaysa marka ay fasirayso xuquuqahani waxay maxkamaddu tixgelineysaa Shareecada Islaamka, dhowr shay ayaad taxdeen iyo si waafaqsan shuruucda iyo qawaaniinta caalamiga ah ee xuquuq insaanka ayaan ugu danbaysiinlahaa **intii aan ka horimanayn shareecada islaamka.**

- **Qodobka 40(1):** ee aad tirteen anigu sideeda ayaan ku daynlahaa oo Baarlamaanka Federaalka ihi waa inuu dhisaa Guddi Xuquuqda Aadanaha u qaybsan oo ka madax bannaan maamulka Dawladda lehna ilo dhaqaale oo uu si habsami leh ugu fuliya hawlihiisa. Faqradaas markaan sideeda u daayo faqrada 2aad ayaan ku xusi lahaa awoodaha iyo waajibaadka Guddiga Guddiga Madaxabannaan ee Xuquuqda Aadanaha, markaad intaas oo shay aad taxdeen ayaan ku dari lahaa, sidoo kalena xarfaha waxaan u bedeli ahaa B,T,J,X waad aragteen "computer" qolo badan oo IT taqaana ayaa inagu jirta dunida kale hadii ay Af "Chinase" tahay farta chinase waad aragteen "computer" waa aqbalay, farta xabashiga waa aqbalay, yuhuuda ee qalqaloocada waa aqbalay, hinida waa aqbalay waar inaga maxaa loo heli waayey IT ilaa wasaaradeena boostaha iyo isgaadhsiinta iyo shirkadaheenuba isku taga oo inaad "computer" aad oglaysiisaan Af Soomaaliga inuu qoro oo A,B,C intaad naga daysaan aad B.T.J aad ku badashaan.computer waa inuu fahmaa Af.Soomaaliga, sidoo kalena akhrikaraa oo aad arkaysaa in "artificial intelligence" baa la marayaa qof caag ah ayaad la sheekaysanaysaa sidii qof caadi ah oo qaangaadh ah ayuu kuula sheekaysanayaa oo uu kuugu jawaabayaa, markaasna waxaan odhanlahaa aan waajibino wasaaradda Waxbarashada iyo boosaha iyo isgaadhsiinta in lagu daro.

- Qodob u danbeeya ayaan ku dari lahaa awoodaha Guddiga xuquuqu insaanka u doodista dhibanayaasha ku xadgudubka xuquuqda aadamaha. xuquuqdan aadamaha ee lagu xadgudbay in ay u doodaan, hadaba qodob ayaan ugu danbayntii soo kordhiyey.

Dastuurku waxa uu ka hadlayaa xuquuqda carruurta, waxa kale oo ka hadlayaa xuquuqda qoyska, waxa kale uu ka hadlayaa xuquuqda ilmaha soo xaadhistiisa, laakiin xuquuqda haweenka kama hadlayo. Haweenka ama hooyaduna waxa weeyi saldhiga ama udub dhexaadka qoyska iyo bulshada, markaa qodob 30aad oo la yidhaahda xuquuqda haweenka ayaan soo kordhiyey wuxuu leeyahay qodobkaasi:

1. Haweenku waxay raga kala mid yihiin xuquuqda iyo xorriyaadka asaasiga ah ee dastuurku jideeyey si waafaqsan shareecada islaamka iyo xeerarka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya.
2. Haweenku waxay xaq u leeyihiin in ay hanti yeeshaan maamulaan, kormeeraan, iibiyaan, iibsadaan ama wareejiyaan si waafaqsan xeerarka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya.
3. Haweenku waxa ay xaq u leeyihiin fasaxa dhalmada, mudada fasax dhalmada xeer ayaa qeexi doona waana in mushaarka oo dhamaystiran la siiyaa.
4. Fasax dhalmadu waa inuu ku jiraa fasaxa xiliga dhalmada ka hor "prenatal iyo postnatal" dhalmada ka hor fasax bil ah ayey ugu yaraan xaq u leedahay, dhalmada ka dibna ugu yaraan 3 bilood. xeerbaana qeexaya oo faahfaahinayaa.
   Haweenku waxay rag kala siman yihiin shaqaalaysiinta, dalacsiinta iyo waxyaalihii la mid ah oo dhan, markaa haweenow qodobka siyaasada ayaad ku baraarugsantihiin, laakiin xuquuqda kale ee aad leedihiin kuma baraarugsanidiin taa anaa "lawyer" idiinku ah oo idiinku doodaya. Qodobkaan ha lagu daro ayaan leeyahay oo iigu hiiliya.

2) **Xil. Guled Bihi Abdi:**

Xildhibaanada sharafta leh, bahda saaxafada iyo dhamaan ciidamada Amaanka waxaan idinku salaamay salaamu caylkum waraxmatulahaa wabarkaatuhu. Waxaan si guud ugu hadli doonaa hal ama labo qodob, madaama oo uu wakhtigu inoo saamaxyn.

- **Qodobka 31aad:** Xaqa Ilaalinta Xogta Shaqsiga guud ahaan waan bogaadinayaa cidii ka soo shaqaysay dastuurka qodobkan oo ah mid cusub kana kooban 4 faqradood, waxaan odhan lahaa siiqada sixid yar ha lagu sameeyo.

- **Qodobka 31(2):** Xogta ku xusan farqadda 1aad ee qodobkan waxaa lagu bixin karaa oo keliya oggolaashaha shakhsiga xogta leh ama sabab kale oo xeer tilmaamayo, markaa sababtaa kale ee xeerku tilmaamayo in loo daayo faqradda 4aad oo gabi ahaan sheegaysa in baarlamaanku soo saari doono xeer.

- Qodobka 30 iyo 31aad: waxay ka hadlayaan xaqa helidda macluumaadka iyo Xaqa Ilaalinta Xogta Shaqsiga waxa jirta dunida xaqa **"intellectual property law"** ayaa jira dastuurada dunida badankooda way ku jiraan,"Africa" intaa arkay "Tunissia" " egypt" "kenya" ayaa ka mid ah, sidoo kale waxaa jira **hey'ado "world intellectual property organization"** oo "WIPO" la yidhaahdo iyo "the African regional **intellectual property organization" "ARIPO"** anoo filayo Soomaaliya inay ka mid tahay, markaa waxaan soojeedinlahaa in dastuurka lagu daro sida xaqa helid macluumaadka iyo xaqa dhowrsita xogta shakhsiga loogu daray in loogu daro **xaqa ilaalinta hantiyaha maskaxeed** oo maanta dunidu aad ayey ahmiyad gaar ah u siisaa hal abuurka qof waxa uu soo saaray, qof waxa u hindisay in aan si yar oo fudud loo xadin ama hadii la musuqo in ay jiraan shuruuc ka dhalanaysa oo ciqaabaysa cidaa samaynsa.

- Qodobka 41aad: oo ka hadlaya xuquuqda Aadamaha, gabi ahaanba "chapter" aan ka soo hadlaynay waxa uu ka hadalyaa xuquuqda Aadamaha, Xuquuqda Aadmahana ma fulin karno ilaa Guddiga xuquuqa insaanka aynu samayno. Guddiga xuquuq insaanku waxaan isleeyahay bishii 6, 2016 'term" kii hore ee Madaxwayne Hassan Sheikh in la sameeyey ilaa hada may dhaqan galin, **markaa hey'adaha khusayso waxaan ku dhiirigalinayaa in Guddiga la sameeyo**. Guddiga la'aantii "chapter" kan aan ku xiiqsanahay maalmahan wax badani kama hirgalayaan .

3) **Sen. Abdixakiin Moallim Ahmed:**
Mudane Guddoomiye, xidhibaanada sharafta leh dhamaantiin waan idin salaamayaa asaalum caylkum waraxmatulaahi wabarakaatuhu.

Waxaan u malaynayaa qodobada ka hadlaya xuquuq insaanka oo 21 ilaa 40aad, sidii Guddoomiye Sacdiya inoo sheegtay maalintii dhawayd waa la isla akhrinayey,markaa hadana waxaa laga bilaabay 20 waxaan isku dayaayaa inaan wakhtiga aan beekhaansado.

- **Qodobka 31(1):** waxaan rabaa inaan isla fiiriyo qoraalka aan soo diyaariyey iyo book markaa iga raali ahaada. Qodobka 31aad waxaan ka soo calaamadeeyey uun eray sixid, waxaan ku qoran Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in la ilaaliyo xogtiisa qof ahaaneed, taas oo loo isticmaali karo oo keliya ujeeddadii loo uruuriyey, markaa in loo ilaaliyo miyaa loo jeedaa macnaha mise qofka xogta yaa haya, yaa ilaalinaya? faqradan 1aad xogta la ilaalinayo maxay tahay ,yaa u haya xogta, yaa u ilaalinaya ? taas hadii loo jeedo inuu qofka siiqada ay u qorantahay in wax yar laga beddelo.

- **Qodobka 32(1):** iyadana eray sixid ayaan ku sameeyey oo qoranayd sidan: qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in go'aamada maamuleed ee ka soo baxa maamullada heerarka kala duwan ee hay'adaha dawladda ay ahaadaan kuwo ku dhisan sharci, maangal ah oo sababaysan, go'aan-kagaaristoodana loo maray hannaan cadaali ah,markaa meeshaas la yidhi hannaan caaddil ah, caaddilka waa sameeye waa qofka wax samaynaya waaye, laakiin halkan waxay noqonaysaa **hannaan cadaalad ah,** yacni hannaan caadil ah iyo **hannaan cadaalad ah** habka la marayo ama la isticmaalayo kalmadaa asalkeedii waaa kalmada carabi ah caadil ama cadaalad ha ahaatee waa carabi, laakiin farqiga u dhexeeya waxa weeyi hannaanka cadaalada ahi, hannaan waa "system" iyo wax la samaynayo, laakiin caadil marka la yidhaahdo waa sameeye, markaa halkan hada waxay ugu jirtaa waa wixii la samaynyey, markaa ***hannaan cadaalad ah*** **weeyi ee *hannaan caadil ah maaha*. Waxaan qabaa in erayga la saxo oo lagu beddelo.**

- **Qodobka 35(1):** isagana meel yar ayaan ka saxay oo ah Meesha ugu dambaysa oo dhahaysa oo ku waajibinaya Dawladda Federaalka Soomaaliya, qodobku waxa uu leeyahay Isucelinta eedeysanayaasha iyo dembiilayaasha waxaa lagu oggolaan karaa oo keliya si waafaqsan xeerka iyo in uu jiro heshiis isucelin ah, oo ay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya dhinac ka tahay iyo heshiis caalami ah oo ku waajibinaya Dawladda Federaalka Soomaaliya celinta eedaysanaha ama dembiilaha.

  Markaa meeshaa la leeyahay heshiis caalami ah oo ku waajibinaya Dawladda Federaalka Soomaaliya, waxaa dhici karta heshiisyo ay gaadhaan **منظمات** aan xubnaha ka nahay ama urur caalamiga ah ee aan xubnaha ka nahay, sida qaramada midoobe, kuwa Africa, kuwa carabta inay jiraan ayaa dhici karta,laakiin dawladda soomaaliya in ay ka

taxafuday, markaa ogalaasho in loo badalo meeshan hada la leeyahay heshiisyo caalami ah oo ku waajibinaya in laga dhigo dawladda Soomaaliya ogalaashaheegu inuu jiro oo ay dawladda Soomaaliya ay ogalaatay in la yidhaahdo.

- **Qodobka 35(3):** Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay hormarinaysaa siyaasad iskaashi iyo iskaalmaysiga sharciga ee caalamiga ah.

  Faqraddan ma cada, qaanuunka horta waxa la rabaa marka sharci la samaynayo waa inuu noqdaa wax la taaban karo oo la fulinkaro oo la yaqaano inay tahay ayaa la rabaa oo ah oo wax la dhaqan galin karo inay yihiin.

  Marka qodobkan marka la fiiriyo sideebaa loo hormarinayaa? Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya waxay hormarinaysaa siyaasad iskaashi iyo iskaalmaysiga sharciga ee caalamiga ah waxaan u malaynayaa inuu aad u cadayn qodobkaasi, markaa ha la caddeeyo faqradaasi Guddig dib ha ugu laabtaan oo waxay uga jeedaan inay si fiican u saxaan ayaa aniga ila quman, hadii anigana fahanku iga xumaadayna waa laga socon donaa.

- **Qodobka 37(1):** xadidaada xuquuqda: Xuquuqdan waxaa xaddidi karaa xeer, ama xaddidaad si gaar ah Dastuurka dhexdiisa ugu xusan, waase haddii xaddidaaddaasi ay tahay mid si cad u maangal ah ama kuwo la aqbali karo waafaqsanna qiyamka lagu qeexay Dastuurka, islamarkaasna xaddidaaddaasi aysan si gaar ah u bartilmaameedsanayn shakhsiyaad ama kooxo gaar ah.

  Hadalkan marka la fiirsho waa hadal is dhexyaala waaye oo muujinaya inaad 20jeer ku celiso, markaad 20jeer ku celiso kadibna aad xataa fahmayn waana faqrad cusub oo ay Guddigu soo kordhiyeen sidaan filayo, maya ee waa labo faqro oo la isku daaweyey oo la is dhex galiyey waaye, markaa labadooduba marka la fiirsho labadii faqro ee hore siday u qornayd waa yara cadayd,laakiin marka la is dhexgaliyo labadaa faqro waxa ay muujinayaan iyo waxay ka hadlayaan labadan faqro aad uma cado, hadal is dhexyaala oo aad u tiro badan waaye, markaa dastuurkana waxaa la rabaa in qof kasta oo akhrista inuu fahmi karo ,markaa **qodobkaa 37(1) oo labo faqro la isku keenay, waxaan codsanayaa in isagana dib loogu laabto oo si fiican loo qeexo**.

- **Qodobka 37(2):** Xadiddaadu waxay imaan kartaa oo keliya markaay jirto baahi culus oo lagu xaqiijinayo dhawritaanka xuquuqda cid kale, meeshaas anigu waxaan qabaa in laga saaro arrimaha kale ee lagu soo dhex daray oo ka bilaamanaya amniga guud, difaaca dalka, caafimaadka guud iyo anshaxa wanaagsan, intaas oo dhan in laga saaro ayaan qabaa, horta dastuurkani waxaad ogaataan hey'adaha dawladda "power" ayey haystaan oo ay awoodooda ku meel marsadaan, marwalba hey'adaha dawladdu waxay leeyihiin awood ay shacabku lahayn oo ay iyagu maamulkooda haday si wanaagsan u isticmaalayaan iyo haday si khaldanba u isticmaalayaan ay ku meel marsan karaan bay leeyihiin, cida u baahan inaan sida xoog leh u ilaalino marka aan xuquuqu insaanka ka hadlayno ,markaa dastuurka ka hadlayno waa arrimaha mushtamaca si guud u taabanaya ama qofka u taabanaya oo uu awood u lahayn inuu isagu is difaaco ama uu is ilaaliyo ,sidaas darteed markasta waa inuu dastuurkeenu u jilicsanyahay xaga qofka iyo shakhsiyada inuu u jilicsanyahay waaye, Meesha hada anaga marwalba hey'adaha amniga iyaga is ilaalinaya waxoogana dhacsanayoo qaabka u raadsanayaa garanaya, **markaa waxaan qabaa qodobkaa ha laga tiro intaa dhex xadidaada la xadidayo yaan lagu xidhin hey'ado amniyo iyo difaac dal midnaba** yaan lagu

xirin ha laga daayo, markaa ha la soo koobo waayo dastuurka shuruuc kale ayaa faahfaahinaysa oo midwalba gaar ugu hadli doonta, markaa ha la soo kobo, xadidaadu waxay iman kartaa oo kaliya markay jirto baahi culus oo lagu xaqiijiniyo dhawritaanka xuquuqda cid kale iyadoo la tixgelinayo isudheellitirnaanta xaddidaada iyo asbaabta keentay intaa dhexe ha laga saaro ayaan qabaa.

- **Qodobka 38(4):** Dacwadaha ku xusan faqradda 3aad ee qodobkan waxaa qaadi kara maxkamad awood u leh, madaxbannaan, oo eex ka maran garsooriddeeda, gabood-faladaas lama siin karo gabbaad, horta madaxbannaan laga hadlayo ee qodobkan ee maxkamad madaxbannaan la leeyahay, waxay wax la wadaagaysaa maxaakiimta kale ee dalka ka jira, hadii loo jeedo maxkamad gaar ah oo markaas loo samayno "issue" oo kaliya ma ogi aniga, laakiin haday tahay madaxbannaani maxkamadaha guud bay la wadaagaysaa, sabab halkan si gaar ah madaxbannaan maxkamad gaar ah loogu xuso ma jirto. hadii maxkamaduhu madaxbannaanyihiin way madaxbannaanaysaa, hadaysan madaxbannaanina siday yihiin bay la wadaagaysaa, mida kale isla qodobkan lagu xusay oo eex ka maran baa la yidhi ma cid aan u ogolnahay baa jirta ma maxkamad aan u ogolnahay baa jirta in ay iyadu eex samayso? ma jirto, markaa maxkamadaha oo dhan baa eex ka wada madhan. Markaa halkan sida gaarka ah ee loogu soo gaar yeelay oo la yidhi dacwadan cida qaadaysa waa in ay eex ka madhnaataa iyadana hadal Meesha soo gali kara maaha, Maxkamadaha oo dhan ayaa la rabaa inay eex ka madhnaadaan, markaa waxaan soojeedinaya hadalka yara ee dhahaya madaxbannaan, oo eex ka maran garsooriddeeda in Meesha laga saaro oo inta kale faqradda sideeda loogu sameeyo.

Wixii hal mar naloo sheego waa inay sharci noqdaan, adiga halkan waxaad ka sheegtay qodobka 20aad ilaa 41aad in doodoodu isku furantahay oo laga wada shaqaynayo. Anigu arbacadii maan iman waan maqnaa, cudur daar baa lahaa, laakiin waxaan isku diyaariyey 20 ilaa 40, Maanta ajendaha cusub waxaad ka soo dhigteen qodobka 31aad ilaa 40aad, markaa 10 qodob aragtidii iyo ra'yigii aan ka lahaa way baabaday oo maynaanu soo gudbin. markaa wixii aad halkan Guddoon ahaan nooga soo gudbisaan oo inaad siday tahay u ilaalisaan si inagana Khalkhal xaga jadwalka ahi inoogu dhicin waayo waxani waa dastuur qof walbana inuu ra'yigiisa iyo fikirkiisa ku darsado ayuu rabaa.

Qodabadan aan hoos ku qori doono Sen. Abdixakiin Macalin Axmed ayaa gadaal Guddiga ugu soo gudbiyey, madaama 10 daqiiqo ka dhamaaday waxa uu keenay aragtidii uu qabay qodobadan hoos ku xusan iyagoo warqad ku qoran, waxa uu la wadaagay commissioner farxiya, commissioner farxiyana aniga ayey ila wadaagtay si aan ugu soo daro maxdarqoraalka.

- **Qodobka 22aad:** dadka naafada ah waa in ay ku helaan goobaha shaqada sinaan buuxda. Faqro gaar ah ha la soo kordhiyo oo ilaalinaysa duruufta ku xeeran naafada gaar ahaan indolayaasha iyo curyaanka, (dhismayaalka dowladda waa in loo yeelo "elevator" hadlaya iyo meelo uu gaariga curyaanku fuuli karo}

- Qodobka 27aad: faqradan ha la soo kordhiyo oo odhanaysa: Ubad kasta oo ay dhaleen laba waalid oo Soomaali ah, uu dhalay Aabo Soomaali ah ama Hooyo Soomaali ah, wuxuu xaq u yeelanayaa jinsiyadda Soomaaliya.

- **Qodobka 27(2):** qodobkaa wuxuu ka hadlayaa xuquuq ee kama hadlayo waajibaad ,sidaa darteed madaama xuquuq laga hadalyo carruurtu waxay xaq u leeyihiin in la xanaaneeyo ilaa ay gaarayaan da'da 18sano, waana in la cadeeyo da'da qaangaarnimada ma dhici karto

dastuurka in la laba labeeyo(15,18) sidaa darteed faqradii hore waa in sideeda loo dhaafo da'da qaangaarku waa 18 sano.

- **Qodobka 28aad:** faqradda cusub ayaan ku soo kordhiyey oo dhigan: Lagama reebi karo tacliinta asaasiga ah laguman haysan karo guriga caruurta da'doodu gaartay ugu yaraan lix sanno.

- Qodobka 29aad: faqrad 1aad sidii hore ha loo daayo. Sax ma aha kalimadda( saamayn xun ku yeelan kara diinta) Diintu cidna saamayn kuma yeelato. **انا نحن نزلنا الذكر وانااله لحافظون**

4) **Xil. Abdulkadir Mohamud Dagane:**

- **Qodobka 31** asalkii dastuurka kuma jiro waa qodob ay Gudiga sookordhiyeen aad iyo aad ayuuna ugu mahadsanyahay gudiga arintaas waana qodob loo baahnaa,lakiin su'asha aniga waxaan iska weydiinayaa qodobkan ah xaqa ilaalinta xogta shaqsiga ah waxaa wanaagsanayd in lagu daro qodob kale oo isaguna muhiim ah oo ah xaqa ilaalinta xogta shaqsiga waa wax shaqsi ah, laakiin waxaa ka muhiimsanayd xogtii guud ilaalinteeda in meeshaan lagu daro, maanta waxaa dayacan xogtii guud sirtii dowlada iyo qarankan dayacan, waad na ogtihiin Barlamaanka maalin dhaweyd waxay ansixiyeen heshiis heshiiskaana lama qeybin waxa aan loo qeybina waxaa weeye in layiri in uu gacanta kabaxo ayaa laga baqayaa, dastuurkana kuma qorna xogta nooocaas ah iyo ilaalinteeda, anigu waxaan qabaa gudigu **in ay halkan kusoo daraan qodob ah "ilaalinta xogta guud" in halkan lagu soodari qofka bixiyana in loo aqoonsado qof galay khiyaano qaran inuu yahay**

- **Qodobka 34(1**) eedaysanuhu wuxuu lamid yahay qof aan dambi gelin ilaa maxkamad awood u leh ay si kamadanbeys ah ugu xukunto denbiga loo haysto, eedaysuhu lamid ma aha qof aan denbi gelin, halkaas siiqo toosin bey u baahantahay, waxaad leedihiin eedaysane hadana waxaad leedihiin wuxuu lamid yahay qof aan denbi gelin isma qabato qofka eedaysanaha ah dambi baa lagu tuhmay waxaa heysta xeerilaalin waaba xiranyahay, qof aan dambi gelina waa qof banaankiisa maraya oo aan waxba loo haysan isla mid ma aha in la isbarbar dhigana ma aha, siiqada in loo toosiyo unbuu ubaahanyahay, qodobkaana waa qodob culimada fiqiga islaamka iyo culimada ka shaqeysan qawaaniinta iyo dastuurada iyo gaalo iyo islaam ba way isla qaateen qodobkaan sidaas ayuuna ugu wada qoran yahay meel walba oo aad tagtid "Almutamu barii un hata tathbuta idaanatuhu" qofka mutahamka ah waa bari ilaa waxa loo haysto ay maxkamada ku cadayso oo ay ku xukunto qodobkaas aniga sidaa in loo qoro ayaan qaba "qofka eedaysanaha waa beri ilaa maxkamada awooda uleh ay ku xukunto dembigaa isaga ah"

- **Qododka 34(11)** waxaad dhahdeen qofna laguma soo oogi karo mar labaad dembi si kama danbeys ah loogu xukumay ama loogu sii daayay si sharciga waafaqsan, qofka xabsibaa laga siidaayaa ee dambi lagama sii daayo, halkaa waxaa oran lahaa siqadaa "ama laga beri yeelay si waafaqsan sharciga" laga siidaayay aniga xabsi unban u arkaa in laga siidaayn karo, dembiga lagu soo eedeeyay qofka waa lagu xukumaa ama waa laga beri yeelaa oo wuxuu noqdaa qof aanan dambigaa gelin oo aanan lahayn.

- **Qodoka 41aad(2)** dhiiro geliyo midnimada qaranka isaga oo kaashanayo muwaadiniinta kale, midnimadu waxa ugu weyn weeye dhiiri gelin kuma filna waxaa loo bahanyahay in layiraahdo "ilaaliyo, difaaco, dhowro midnimada wadanka" laakiin dhiirogelintu waa wax ad

hadii aad dhiiro geliso "ok" tahay hadii aadan dhiiro gelina caadi ay tahay, marka dastuurka la qorayo erayada iyo isticmaalkooduna wax weyn buu katarayaa dastuurka, waxaa wanaagsanan lahayd erayada loo isticmaalayo meeshaan maxaa ka dhalanayo in la is weydiiyo kalmadi ku haboonayd ma tahay waxan wa la daliishan doonaa hadhow, waxaana laga yaabaa eray aad isticmaashay daraadeed in aad xuquuq badan kudhumisid eray aad isticmaashay daraadeedna xaq aan cid lahayn in aad u siisid baa laga yabaa, waxaan qabaa in meesha laga bedelo aad iyo aadna loo adkeeyo midnimada "difaacaa laga dhigo ama dhowrid " dhowr kalimo in la isugu daro ayaan qabaa .

5) **Xil. Ifrah Mohamed Awad:**

Maalmahan gudiga madaxa banaan iyo gudiga labada gole ee dib u eegista dastuurka waxaa naga yara dhexeeyay xifaaltan marka waxaan rabaa qodob ay halkan kusoo dareen in aan ugu hamblyeeyo oo ah Qodobka 38(1) qofkasta wuxuu xaq u leeyahay magdhaw hadii lagu xadgudbo xuquuq diisa aasaasiga ah waxaana go'aan ka gaadhaya maxkamada awooda u leh .sida aynu wada ognahay inaga dhaqankeena iyo diinteena umadeena caado uma laha in bini'aadamka la aflagaadeeyo ehaladooda lagu xadgudbo, sida aynu wada ognahay waxaa soo baxay wax la yiraahdo "social media" oo qof aan weligiis isticmaalin inta uu furto bini'aadamka ku xad gudbo eheladooda dadka xilka haya ama umadaha kaleba ha ahaatee, qodobkani wuxuu jidaynayaa in qofkii ku xadgudba qof kale ama oo muwaadin ah xuquuqdiisa ama aflagaadeeya ama wax aanu ahayn ka sheega in maxkamada lalatiigsan karo magdhawna uu bixin karo isla markaas. aad baad ugu mahadsantihiin, qodobkani markiisii hore wuxuu ahaa sharcigu waa in uu qeexo habraaca haboon oo lagu saxayo xuquuqda Aadanaha. Gudidu waxay kusoodareen qodobkan aad abay ogu mahadsanyihiin

- **Qodobka 35** oo ka hadlaya isu celinta eedaysanayaasha iyo dembiilayaasha waxaad moodaa waxyaabaha ay guddiga sooqoreen qaarkood in ay iska hor imanayaan farqadiisa koowaad hadaad eegto isu celinta eedaysanayaasha iyo dembiilayaasha waxaa lagu ogaalankaraa oo kaliya si waafaqsan xeerka iyo in uu jiro heshiis isu celin oo ay Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya dhinac katahay iyo heshiis caalami ah oo ku waajibinaya dowlada Fedraalka Soomaaliya celinta dembiilaha ama eedaysanaha, dastuurkan waxaa iskaleh umada soomaliyeed wuxuuna kafaalo qaadayaa qofkasta oo soomaali ah in aan xaquuqdiisa lagu xad gudbaynin, qodobkani wuxuu sheegayaa qof soomaali ah oo muwaadin ah oo "passport" ajaanib ah haysta haduu soomaaliya kusoo nqodo oo uu wadn kale soo dalbado in laceliyo. Farqadiisa 2aad qodobkan waxay sheegaysaa muwaadin soomaliyeed looma gacan gelin karo dal shesheeye, farqada 1aad iyo tan 2aad aadbay isku khilaafsan yihiin, hadana faqrada 4aad gudigu waxay kusooqoreen Barlamaanka federaalka ah ayaa soosaaraya xeer kusaabsan isu celinta eedaysanayaasha iyo dembiilayaasha iskaalmeysiga sharciyeed ee arimaha dembiyada, markaa xeerka ugu danbeeya ee faqrada 4aad ah iyo midka 2aad unbaa ku haboon ayay ila atahay midka 1aad inay muhiim tahay ilama aha marka gudiga waxaan usoojeedin lahaa in xeerkaa lagasoo saarayo ay kudhaafaan .

6) **Sen. Ahmed Ibrahim Mohamed:**

"qabiil iyo dil baa inoo kordhiyo qoys anaa badane, qorax noolba boqolaal dhintay qeyladood timide, qarbiga inoo taliya iyo qaar uu leeyahaye hadii aanu Allah qaadirka ah qiil inoo bixinin, ninwlba xabaashaada qodo waaba quuse" buu yiri abwaan hore .

- **Qodobka 20aad** xaqa kaqeyb galka siyaasada, muwaadinkasta wuxuu xaq u leeyahay in uu ka qeyb qaato arimaha siyaasadeed, qofkasta hadii la yiri siyaasaduu ka qeyb qaadanayaa

qofka mujrimka ah  ee danbiile qaran ah oo aaynu garanayo macruufka ah hadii uu hadana siyaasada kasoo qeyb galo oo halka ugu sareysa ka fuulo maxaa laga filan karaa?wuxuu yiri abwaan hore "tuug caasiya iyo jaahil baad tamar u yeeshaane toorey afbadan baad u xidhaan taarig xoogsaday" hadii ninkii danbiilaha ahaa lasii caleemo saarto ama madaxweyne laga dhigto marka waxaan oran lahaa in meesha laga saaro hadii uu dambi qaran galo waa in laga mamnuuca in uu xilba umada uqabto.

- Qodobka waxbarashada ilaa hadii la yiri ilaa dugsi sare ayaa laga dhigayaa lacag la'aan waynu ognahay oo danyar baynu nahay dadkeenu  waxaa laga yaabaa 70% ama 80% in ay fuqara yihiin markaa inta yare ee 20% ay noqdaan siyaasiyiin ama hantiile yaal oo iyagu carrutooda jaamacadana geyn kara meshay doonana oga tasarufi kara oo wax uqaban kara umadii balaadhnayd ee soomaaliyeed ee kale madaama ay hada isku xidhan yihiin aqoonta iyo dhaqaalaha qof aan aqoon lahayn ay dhaqaalo helaynin maxaa loogu talagalayaa dadka danyarta ah ee tirade badnaa soomaha in ay inta hantiilayaasha iyo siyaasiyiinta un ay maamulaan dalkii iyo dadkii oo kuwa kale kutuntaan oo laba dabaqadood  oo kala sareeya oo kala fo aynu noqono, waxaan oran lahaa jaamacaduhu waa in ay bilaash u noqdaan dowlada sida aynu hore ba usoomarnay oo umada guud ahaan ay u dhexeeyaan .

- Qodobka ka hadlaya qaan gaadhnimada 18 iyo15 buu ku noqonayaa masuul lasoo dhigay anaga ka islaam ahaan madaama aan dad islaam ah nahay lana yidhi oo ay noo qorantahay waxkasta oo shareecada khilaafsani "laa yuctabar" ilmuhu markuu gaaro 15 wuxuu noqday qaandhay waxaana ka rabtibmaya wajaabaad bad oo diini ah cibaado ayaa laga rabaa salaad baa lagarabaa waxbadan ayaa baa laga rabaa 18 meesha halaga saaro oo halagudaayo 15 ka. Caruurta dayacan hal eray baan ku mulaaxadaynayaa oo kooban, caruurta dayacan baa layidhi soomali baynu nahayoo waxaynu ubaahanahay in aynu Afkeena korino oo ilaalino labo eray oo an rebay in aan soo jediyo oo wax laga bedelo caruurta dayacan waxaan oran lahaa halagubedelo "caruurta beylahda ah" Ereyga bedel waxaan ku bedeli lahaa "doorin" doorin waa Afsoomali laakiin bedel Afcarabi weeye markaa Afkii baynu ilaalinaynaa .

7) **Xil. Abdullahi Hassan Roble**

Mahadsanid Gudoomiye xildhibaanada sharafta leh Guddiyada hawshan ka soo shaqeeyay iyo inta kale ee meeshan fadhida Asc. Waxaan kamid ahaa dadkii uu ka dhamaday tiradii hore ee ahayd  21-30 meelahas, marka intii  aan kaso gaaray iyo waxa kale oo dhan baan isku dari doonaa annigo ilaalin doona waqtiga.

- **Qodobka 22aad** qof kasta waxa uu xaq u leyahay ayaa kusoo qorteen in uu helo xiriir ereygaas waxaan ku raacsanahay dadkii faraha badnaa ee yiri waa fursad ee maaha xiriir, marka fursada aan u dayno saas ana waan  ku racsanahay.

- **Farqadisa 2aad** qof kasta oo shaqaalo ah wuxu xaq u leyahay ereyga aad ka tirteen ee ahaa abuuro ayaa sax ah, marka waxaan leeyahay haloo daayo in uu abuuro ama kubiiro urur shaqaale oo kale, marka meeshaas abuuro ayay ku fiicantahay, qofka isaga aya abuuri kari urur shaqaalo. Isla qodobkaan farqadisa 3aad shaqaalo kasta wuxu xaq u leyahay shaqo joojin ereygan su`aal ayaa ka imanayso, joojintu wajiyo badan ayay leedahay qofka isaga iska joojin karo ama kaba tagi kara sidiisaba, marka ereyga in aan wax yar oo qeexitaan ku darno oo ku saabsan shaqada uu markaa hayo in lagu daro waaye.

Hadii uu doono wuu ka tagi karaa, taasba waa shaqo joojin, marka shaqada uu haayo in lagu daro ayaa loo baahanyahay ayaan isleeyahay. Isla qodobkam faqradiisa 4aad urur

shaqaale iyo loo shaqeeye waxay wada gali karaam gorgortan ku saabsan shaqadooda sidaa in loo daayo ayay ku fiicantahy, wax kale ma wada gali karaan, labadooda waxay wada gali karaan shaqo noocaas oo kale ah. qodobka ku xiga, goobaha shaqada waxay leeyihiin hanaan shaqo oo ilaalinaya sinnaanta iyo xuquuqda labadaba midkii doono hala hormariyo, xuquuqda shaqaalaha iyo sinaanta shaqaalaha sidaas ayaan u arkaa.

- **Qodobka 26aad** waxaa ku qoran qofkasta iyo qof kastaa inta badan luuqada meesha ku qoran waxay u baahantahay sixitaan, laakiin ereyo kooban ayaan soo qaadanayaa meelna waxaynu isticmaalaynaa "kastaa" oo laba A ay u dambaynayso, midna waa mid laliya waa mid "kasta" kan saxda ah qof kastaa cida ku hadlaysaa annigu garan maayo, waa laga yabaa dadka qaarkii in ay qof kastaa isticmaalaan, lkn u maleen maayo afka rasmiga ah in ay sidaa tahay, marka qof kasta ereyadaas in aan fiirino aad iyo aad ayay u fiicantahy.

- **Qodobka 27aad** qof kasta waxa uu xaq u leeyahay daryeel caafimaad iyada oo mudnaanta la siinaayo Caafimaadka dagdaga ah sidaas in loo qoro ayaa ka wanaagsanaa ayaan u malaynayaa, laakiin qofka ay arrimaha dagdaga ay haystaan taas ayaa mudnaanta 1aad la siinayaa ayaan isleeyahay. Ereyga kale ee aad ku soo qaadeen qodobka 27aad ilamaha lkn meel kale ayaan si wanaagsan ugu soo qaadan doonaa waa in aan aad u daneeyaa markii ereyada la qorayo .

- **Qodobka 35aad** isku celinta eedeysanayaasha iyo ereyga aad soo qaadaysaan waxay ila tahay in loo qoro eedeysanayaasha iyo dambiilayaasha, waxaana la isugu celin karaa heshiis dowlada FS ay **qayb ka tahay** ereygaas ayaa loo baahanyahay in la galiyo ay "qayb ka tahay", heshiis kasta ma aha waa in aynu qayb ka nahay, hadii heshiisyadan markii horeba aynu qayb ka ahayn waxaan u malaynayaa isu celintaas macno badan ma samaynayso. ereyo yaryar baan ku soo koobayaa oo aan doonaayo in ay guddigu dib u fiiriyaan, dastuurku sidiisaba waa amar, ama waa reebid, marka labadaas erey mid uun waa in la isticmaalaa, waxaa kamid ah tusaale ahaam "waa in" in la isticmaalaa amaa " waa inaa" ee ma ahan talo bixin, talobaxinta faraha badan ee ku jirta in laga daayo ayaa macno samaynaysa, waxaan u arkaa in aynu u baahanahay in amar laga dhigo ama reebid laga dhigo.

- **Tan 2aad** in ereyada laftooda loo soo jeedsado waxaa kamid ah erayga aan hadda soo qaadayay, markasta iyo mar kastaa ereygaas ayaan soo qaadayaa, ereyga kale ee aan soo qaadayo ee aad ku darteen qodobkan waxaa kamid ah ereyga "Ubadka" oo aad tiraahdeen Ubadku marka uu dhasho, ubadka sidiisu maaha afka wuxu leeyahay waxaynu ku tilmaamno qof ahaan iyo jamac, marka ubadku ma aha qof ee waa "dad badan", marka ubad ha isticmaalina waxaad tiraahdaam **"Cunug" ama " Ilmaha"** lkn ubadka marka uu dhasho ma aha, caruurta marka ay dhalato ama ilmuhu marka ay dhashaan. Arrinta kale ee aan isleeyahay wuu ku jiraa qodobka 27aad ama qodobka 35aad waxaa kamid ah heshiisyada soomaalidu ay dhinac ka tahay ayaa ka mid ah, ereyga dhinac ma aha qayb kamid ah, dhinac ka tahy qayb ma aha dhinac waxa ay noqon kartaa waa ay ka soo horjeedaa ama wuu ka soo horjeedi karaa, **marka ereygaa ma aha in ay qayb ka tahay ee ma aha in ay dhinac ka tahy.**

- **Qodobka 31aad** xogta qofka lama adeegsan karo hadii aan ogolaansho laga haysanin isaga ama aan loo adeegsanaynin dan qaran saas ayay ku haboontahay ayaan is leeyahy, hadii aan asaga laga haysanin ama dan qaran tahay.

- **Qodobka 27(3)** xukuimaddu waa in ay mudnaanta 1aad siisaa horumarinta iyo baahinta waxbarashada kuma filno ayaan u arkayaa tan, waxaan u bahaanahay in aan niraahno waxaa lagu soo daray qodob kale oo la yiraahdo baahinta waa aynu soo qaadnay laakiin sida loo samaynayo iyo xeerar gaar ah oo waxbarashadu si gaar ah ay u leedahay, waxbarashadu waa aqoon balaaran oo dalkan muhiimad aad iyo aad u leh waa in aynu qodob ku soo darnaa in xeerar gaar ah loo sameeyo oo ay aqoontu ku salaysantahay sidii loo habeen lahaa, marka ilaa 2bo xeer oo kale baan isku dayaynaa in aynu ku soo darni hadiu alle yoraahdo, aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin WSC.

8) **Xil Daahir Amin Jeesow:**

Mahadsanid gudoomiye; Bismillah alxamdullahi wasalaatu wasalaamu calaa rasuulillahi. xildhibaanada sharafta leh waxaan aqrinayaa nuqulka rasmiga ah ee aan hadda haysano lambaradiisa iyo qodobadiisa, inta badan xildhibaanadu waxaan ku arkay in ay akhrinayeen kan dhexe ee hadda loo guuraayo, markaas ayaa lagu wareerayaa.

- **Qodobka 31aad** ayaan aqrinayaa dastuurka hada aan haysano ah meesha ay ka dhigeen Hay`ada qoraalka markii hore wuxuu ahaa dowladda waa in ay hor marisaa hidaha iyo dhaqanka suuban ee shacabka soomaaliyeed, waxaan ani wax ka qabo waxay tahay dowlada ayay badaleen waxay ku badaleen "Hay`ad" dowladana waa 3 Hay`adood markii la isku qabto, marka uma baahno in Hay`ada la dhaho ee waxay u baahan yihiin in dowladda loo daayo ayaan qabaa hadalkaas wuxuu sax ku yahay dowlad. Faqrada 2aadd sidoo kale waaye waxay badaleen dowladda waxayna ku badaleen Hay`ad, nuxurka qoraalka waa fiicnyahay lkn meesha ay Hay`adaha ka dhigeen ha ku badalaan oo dowladda hadhahaan .

- **Qodobka 32(2)** waxay u qoran tahay qof iyo Hay`ad midna laguma qasbi karo in uu bixiyo xog marka qasab ma ahan, waxaa jiro Hay`ado baarayaal ah ama eed laga tirsan haayo oo xogta la waydiinayo, laakiin hadii aan dhahno qofka ma bixin karo wax xog ah waxaa is taagayaa dacwooyinka iyo maxkamadihii, Marka qofka in uu sida dhabta ah xogta u sheego waa lagu qasban yahay si uu hadhow Hay adaha garsoorka ay ugu fududaato, lkn xogta lama bixin karo hadii la dhaho waa culees xeerarka Jamhuuriyadda qofka run sheego ayay dhiiri galinaysaa, laakiin ma dhiiri galinayso in uusan qofkaan xog bixinin.

- **Qodobka 33(1)** qofkasta waxa uu xaq u lee yahay in go`aamada maamulada ee ka soo baxa maamulada heerarkooda kala duwan ee Hay`adaha dowladda ay ahaadaan kuwa ku dhisan sharci maangal ah oo sababaysan go`an ka gaadhistoodana loo maray hanaan caadil ah. Sida aan ka war qabno Hay`adaheena dhamaan ama Fulin ha noqoto ama Garsoor ama Baarlamaanka waxay leeyihiin xeer hoosaad marka waxaad moodaa qodobkaas in aan ku kalax tagayno oo aan xeer hoosaadkii Hay`adaha aan dhax galnay oo aan arrimahooda gaarka ah ku fara galinayno , **ani waxaan qabaa sidii hore ayaa sax ah sidii hore haloo daayo ayaan qabaa.**

- **Qodobka 36aad** ee lagu badalay qodobka 35aad farqadiisa 3aad jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya waxay hor marinaysaa siyaasad Iskaashi iyo is kaalmaysi sharciga caalamiga ah, waa farqo cusub laakiin hadana ma cado waxaad moodaa inuu madmadow badan ku jiro Sharciga caalamiga ah ee aan hor marin hayno waa kee? Shuruuc badan oo caalami ah oo ay soomaliya qayb ka tahay ayaa jiro oo aan anaga si toos ah inoo taabanaynin ayaa jiro in aan hormarino aysan qasab ahayn, Waxaan qabaa qodobkaan in si faah faahsan oo cad loogu qoro dastuurka.

- **Qodobka 38aad** oo loo badalay qodobka 37aad **waxaan qabaa qodokaas faqradiisa 1aad in sidiisa loo daayo** waayo waxbaa laga badalay nuxurkii dhamaa waala badalay waxaa loo badalay farqada 2aad marka waxaan qabaa sideeda ayay sax ku tahay sideeda halagu daayo yaan la badalin, Sideeda waxay u qornayd xuquuqda lagu sheegay cutubka waxaa xaddidi kara sharciga hadii sharcigaasi uunsan si gaar ah bartimaameedsanaynin shaqsiyaad ama koox, marka kan ayaad moodaa inaad ka badbadiseen, marka sidiisii in loo daayaan qabaa

- **Qodobka 39aad ee isku bedely 38** sida farqada 1aad u dhigteen xaqiiqatan waan u bogay wayna fiicantahay, aad iyo aad ayaad ugu mahadsantihiin guddiga sharafta leh ee soo qoray, qofkastaba wuxuu xaq u leeyahy magdhow hadii uu lagu xadgudbo xuquuqdiisa aasaasiga ah waxaana go'aan ka gaaraya dacwadiisa maxkamadda awooda u leh, maalin walba waxaad arkaysaa dad lagu xadgudbayo faysbuugyada lagu caynayo hadii dadkaas ay xuquuq yeesheen, aad iyo aad ayaad igu mahadsantihiin, faqradii hore ayaa ka qurxan waadna mahadsantihiin WSC.

9) **Xil. Abdirahman Mohamed Mohamud**

Mahadsanid guddoomiye, Waxaana kamid ahaa dadkii la sheegay term-kii dhawayd dadkii 10 qodob yara dhaafay, marka waxaan rabay wax yaro comment ah in aan ku darsado 10kii dhexe ee hada laso dhafay.

- **Qodobka 22(6)** uu guddigu soo kordhiyay waan ka mahad celinaynaa aad bu muhiim u yahay, kaliya waxaan rabay in aan ku darno meesha dadka naafada ku qorantahay in **baahiyaha gaarka ah laga dhigo**.

- **Qodobka 25(2)** qof kasta wuxu xaq u leyahay in u u helo daryeel caafimad in lagu daro waxbarasho iyo amni ayan so jeedin lahaa. Isla qodobkan farqadiisa 4aad Sida u dhigayo hay`adaha dowlada ee jamhuriyadda federaalka Soomaliya waa in si dhab ah ay u sugaan dadwaynaha dhamaantod taaba galinta xuquuqda iyaga oo si gaara mudnaanta u siinayo haweenka, caruurta, waayeelka iyo dadka naafada ah, marka meesha naafada ah in baahiyaha gaarka ah lagu badalo.

- **Qodobka 26(2)** daryeelka hooyada iyo dhallaanka waa waajib saaran dowladda, **marka in farqadaas asalkeeda loo daayo**, hada waxaa ku qoran daryeelka hooyada iyo dhallaanka waa waajib saaran dowlada ayaa ku qoran, sida kooban ee mabadi`da u taabanayo in loo daayo ayaan Soo jeedin lahaa.

- **Qodobka 27aad** oo xaquuqda carurta ka hadlaya farqadda 4aad, caruurta looma diri karo in ay qabtaan howlo ama adeegyo aan ku habonayn da`dooda ama halis galin kara, meesha caafimaadkooda kaliya lagu qoray in amnigooda, Caafimadkooda, koriinkooda lagu daro ayaan qabaa. Isla qodobkan farqadiisa 5aad waxaa qornaa ubadku waxay xaq u leyihiin in ay helaan kaalmo qarenimo oo qarash koodu ay dowladda bixiso, si ay uga badbaadan dacwa kasta oo cadalad darro ah, qodobkaas marka waa muhiim yaan laga tirin ayaan soo jeedin lahaa madaama si gaara caruurta uu u taabanayo, qodobka kale ee laga hadlay wuxuu fasirayaa dadka kale muwadininta, marka carurtan in qodobkaan laga tirin ayaan soo jeedin lahaa.

- **Qodobka 28(5)** waxaan soo jeedinayaa in lasoo celiyo wa muhiim, xukuumadu waxay dhiiro galineysaa sare u qaadida cilmi baarista hal abuurka, farshaxanka, hormarinta ciyaraha,

hidaha iyo dhaqanka sports-ka qodobkaas aad ayuu u faah fahsanyahay in laga tirin ayaan soo jeedin lahaa. Isla qodobkan farqadiisa 7aad isagana sidii La shegey waaku haboon yahay waala tirey waa ok way is fasirayaan labada qodob.

- **Qodobka 29(4)a** waxa uu u qornaa xukuumada federaalka waa in ay abuuurto hay`ad si gaar ah u hormariso, marka waxaan soo jeedin lahaa in laga dhigo "xakumadu wa in ay hormarisaa una kobcisaa hidaha dhaqanka iyo afka sooyaalka ah" oo hay`adda xeerarka lagu jeediyo oo aan mesha lagu xusin.

- **Qodobka 34(2)** wuxuu dhigayaa qof kasta wuxu xaq u leeyahay in uu helo garsoor madax-banaan oo caadil ah aan eex lahayn laguna qaadayo Maxkamad dadwaynaha u furan laguna heli karo waqti macquul ah ama golihii kale ee awood go`aan ka garis ah u leh, farqadan asalka dastuurka ayaa aad ufaahfaahinayo, Waxaad moodaa marka waxa guddiga uu soo qoray inuu kooban yahay, halkan waxa ku qoran A: Arrın kasta oo ku saabsan xuquda iyo waajibaadka madaniga ah B: fal dambiyeed kasta oo lagu soo oogay ciqaabna lagu mutaysan karo, Gudiga marka in uu soo koobay ayaa ka muuqata, qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu helo garsoor madaxbanaan cadaalad ku dhisan aan eex lahayn laguna qaado maxkamad dadwaynaha ay u furantahay laguna galo mudada xeerka jideeyay, marka asalka ayaa cadayn fiican ku qorantahay in asalkiisa loo daayo ayaan so jeedin laha. Isla qodobkan farqadisa 10aad Waxay leedahay qofkasta oo maxkamada lagu soo taagay tuhun fal dambiyeed ciqaab ah wuxuu xaq u leyahay in uu garsoor caadil helo, waxa lagu badalay eedesanuha **marka in asalka lagu daayo ayaan soo jeedin lahaa.**

- **Qodobka 34(2**) muwaadin Soomaliyeed looma gacan galin karo dal shisheeye oo farqad cusub ah waan uga mahad celinaynaa guddigu qodobkaas aad ayuu muhiim u ahaa.

- **Qodobka 40(1)** waxan rabaa in aan soo jeediyo meesha waxaa ku xusan guddiga xuquqda aadamaha asalka dastuurka wuxuu sharaxayaa Baarlamanka federaalka waa in ay dhisaan guddi xuquuqda aadamaha u qaybsan oo ka madaxbanaan maamulka dowladda lehna ilo dhaqaalo oo si habsami leh ugu fuliya howlihiisa, guddiga waxay soo qoreen waxaa la dhisayaa guddi madax banaan oo waajibaadkiisu yahay A,B,C,D oo wajibaadkii ah marka halkan waxaan is leenahay in ayna muhiim ahayn in laguso qoro qodobkan, oo uu asalka koobayo micnaha guddiga qodobadan ay ku saabsanyihiin xeerki guddiga loo samayn lahaa waxaan soo jeedin lahaa marka asalka in la qaato, qodobkaas oo ay noqoto asalka oo koobayo micnaha guud uu guddigu ka koobanyahay oo u leeyahay, Barlamanka federalka waa inu dhisaa guddi xaquuqda aadamaha u qaybsan oo ka madaxbanaan maamulka dowlada lehna ilo dhaqaalo oo si habsami leh ugu fuliyo howlihiisa. Isla qodobkan farqadiisa 2aad waxaa ku qoran howlaha guddiga xuquuqda aadamaha oo asalkii dastuurka waa in ay ku jiraan hormarinta aqoonta xuquuqda aadanaha gaar ahaan shareecada, asagoo dajinaya halbeegyada dhaqangalinta lagu hirgalinayo waajibaadka xuquuqda aadanaha dardargelinta xuquda aadanaha ee dalka gudihiisa iyo baarista eedaha la xiriira xuquu,qda aadanaha, qodobkaas waala tiray guddigu waxaan so jedinaynaa in ay soo celiyaan meshisa ayuu ku haboonyahay in aan laga saarin.

- **Qodobka 42(2)** waxay leedahay ku dhaqanka sinaanta xoriyaadka iyo xuquuqda lagama sooci karo waajibadka, sidaas darteed muwaadin kasto waxaa waajib ku ah halkan waxa ku qoran A: wadani daacad u ah hormarinta iyo wanaga dalkiisa B: ka qayb qaadasho ama ka qayb qaato howlaha waxtarka u leh muwadiniinta qoyska iyo wanaaga guud iyo in uu ka

qayb qaato hormarinta qaranka iyo bulshada uu ku noolyahay C: hormariyo masuliyadda waalidnimo, waxaan aqrinaayo wa asalkii D: dhiiri galiyo midnimada hormariyo mabd`a la xisaabtanka la talinta sharciga, Qodobkan marka waxay guddigu soo qorayaan oo ay ku badaleen wax dheeraadna way kusoo dareen micnihiisuna waa is badalay, marka waxaan so jeedinaynaa in qodobkan sidiisa lagu qaato oo waxba laga badalin, Maxa yeelay meeshan qodobo dheraad ayaa lagu daray kuwii halkana qayb ayaa ka maqan xuruufta waa kala badalantahay, marka aad uma nidaamsano qodobka ugu dambeeya ee 41aad in lagu qaato asalkii oo aan nuxurka aan laga qaadin, faahfaahin badan u aad ubixinayo noqdo qof aqoon u leh dastuurka si dacad ahna uu utaageero una difaaco dastuurka oo uu ku dadaalo cod bixinta xiliyada doorashada, noqdana canshuur bixiye, **qodobka u dambeeya difaaca dhulka jamhuriyada waxaan soo jeedinayaa guddiga in sidiisa lagu daayo** wa mahadsantihiin.

10) **Xil. Mohamed Muhumed Mohamed:**

Bismillahi raxmani raxiim, alhamdullilahi rabil caalamiin, "awalan" shir Guddoonka baarlamaanka labada aqal, Xildhibaanada iyo Senatorada, marti sharafta kale, Guddiga dhamaan asalaamu caleykum waraxmatullahi wabarakaatu, waxaan isleeyahay waxa baryahanoo dhan ilaa sadexdii week ee u dambaysay aan ka hadlaynay dhamaystirka dastuurka, laakiin in badan anagoo dad masuuliyiin ah Guddoonku inuu maalin kasta idhaahdo waar hala dhagaysto xoogaa ceeb bay inagu tahay marka la eego sababta iyo waxa aan iskugu nimi oo ah dhamaystirka wixii aan heshiis ku noqon lahayn, dalkaan dawlad uu ku noqon lahaa, inaguna aan ku wada dhaqmi lahayn, dhamaystirka dastuurka ama ka doodista cutubyadani waxay "base" u yihiin dib u heshiisiin inaan helno, sababtoo ah bini aadamku wuxuu ku heshiiyaa wuxuu meel wada dhigto, qodobadaana waxay ka turjumayaan wixii aan meel wada dhigan lahayn, xaquuqdii qof kastaba uu lahaa, waajibaadkii lagu lahaa oo laysku geeyayay oo heshiis aan ku nahay kadibna aan u dhisno xukuumad fulisa wixii aan ku heshiinay inay fuliso, markaa waxaan isleeyahay arintaa muhiimad gooni ah aynu siino si waxa khaldan ay inoogu hagaagaan, sidoo kale waxaan intaanan horay u galin yara xusayaa oo aan dul istaagayaa qodobkii xildhibaan Mahdi uu hadaayay ka hadlay oo ahaa xuquuqda dumarka oo kaleeto waa qodob dhan oo uu soo siyaadiyay oo muhiim ahaa, waxaad mooda dumarku baryo dhawaytoo dhan markay hadlayeen muhiimadoodu waxay ahayd 30% oo siyaasada ah laakiin xuquuqdii aasaasiga ahaa waxa uuga muhiimsanayd wixii iyagu siyaasiyan ay rabeen taana muhiim maaha, marka waxaan rabnaa qofka waxa shakhsiyadiisa danahaa kale oo siyaasada inta meel la dhigo, dastuurkaan waxa loo qorayo umad maqan weeyi, waa kuwo dhalan doona, waa "generation" dhawrka boqol ee soosocda ay ku dhaqmi lahaayeen, marka shaqsiyaadka, danaha khaaska intaan ka saarnoo si guud oo maskax furan aan uuga wada doodno wixiina aan ku saxno intaa hadaan uuga baxo.

- **Qodobka 35 (1), (2) iyo (4)** waxaan isleeyahay xoogaa yar oo waxaa meeshan ku jira, qodobku wuxuu dhigayay ciwaankiisu, isku celinta eedaysanayaasha iyo dambiilayaasha, farqada 1aad marka waa "base"kii qodobka, "base"ka hadii aan la fahmin farqooyinka kale lama fahmi karo marka waxaan isleeyahay "base"ka fahamkiisa oo faqrada 1aad ah waxbaa kayara khaldan, hadii khaladkaas sidiisa aad u raacdana, faqrada 2aad iyo mida 4aad ma fahmaysid, tusaale ahaan marka waxa meesha ku qoran, isku celinta eedaysanayaasha iyo dambiilayaasha waxa lagu ogolaan karaa oo kaliya si waafaqsan xeerka iyo inuu jiro heshiis isku celin ah oo ay jamhuuriyada federaalka soomaaliya dhinac ka tahay iyo heshiis caalami ah oo ku waajibinaya dawlada federaalka soomaaliya celinta eedaysanayaasha ama

dambiilayaasha, qodobku marka intaa bas uu yahay markaad la akhriso faqrada 2aad oo ah muwaadinka soomaaliya looma gacan gelin karo dal shisheeye, kaa hore marka fahamkiisu waa iyara adkaanaysaa, sababtoo ah siduu meesha uugu qoranyahay waa sax faahfaahintuna waa sax, midka 4aad oo ah baarlamaanka federaalka ayaa soo saaraya xeer ku saabsan isku celinta eedaysanayaasha iyo dambiilayaasha iyo iskaalmaysiga sharciyeed ee arimaha dambiyada, waa sax oo kaligeen "isolated" ma ahaan karno waa inay jirtaa heshiis sharciyeed oo wada shaqayn ah, marka si layskula wada fahmo sadexda qodoba waxa muhiim ah mida "base"ka ah oo faqrada 1aad ah inay faahfaahintu intaan ka balaarantahay, sidiisa isagoo ku saxan laakiin faahfaahin badan maleh, **marka siiqada qoritaanka in la saxo si loo fahmo faqrada 2aad iyo mida 4aad, intaa waa talo soo jeedin.**

- **Qodobka 38 (4)** xildhibaano horena way sheegeen kaliya waxaan ku siyaadinayaa sixitaan, dacwadaha ku xusan faqrada 3aad ee qodobkan waxa qaadi kara maxkamad awood uleh, madax banaan oo eex kamaran, marka maxkamado eex ah markay jiraan ayaa la odhan karaa maxkamad eex ka maran, marka eraygaas meesha wax ku jira maaha, **eraygaas waa in meesha laga saxaa oo laga saaraa isagana, xildhibaan horena horay ayuu u xusay marka waan xoojinayaa**.

- **Qodobka 39 (3)** ayada lafteeda markaad akhrisid ta 1aad iyo tan 2aad, faqrada 3aad meesha kuma jirayso, sababtoo ah waa ku celis weeyi, aqoonsiga xuquuqda aasaasiga ee ku xusan cutubkan kama hor imaan karo xaquuqda kale ee shareecada islaamku aqoonsatay, marka "already" faqrada 2aad ayaa intaa tiriba marka sabab hadana loo iraahdo oo wixiina lagu celiyo wax iyadana meesha ku jira maaha. Ugu dambayn bini aadamku waxyaabaha sharciga loo sameeyo waxa kamid ah "naturally" dadka bini aadamku waa "selfish" weeyi "selfish"ka macnaha waxaan ka wadaa qofku wax walba asagaa isku raba, haduusan helin wax xadida ama wax lagu xadido oo xayndaab ah, ilaa iyo cutubkaan waxaan kasoo hadalnay lagasoo bilaabo qodobka 10aad ilaa iyo 41aad waxayna ka hadlayeen xaquuqda aasaasiga iyo waajibaadka muwaadinka 31kaas qodob, 30 kamid ah waxaan kaga hadlaynay xuquuqda bas, waajibaadkii na saarnaa marka hal qodob bas ayaa laga dhigay, macnaha waxay ku tusaysaa bini aadamku wax walba inuu asaga isku rabo oo uusan dareemin waajibaadka asaga saaran inta badana waxa na dilay waxa kamid ah, wuxu inaad adigu rabto waxa waajibaadka adiga ku saarana ay adagtahay in laguu fuliyo, waxa tusaale hada inoogu filan oo cad, waxaa la iri waar waqtiga anagoo beekhaaminayna xildhibaan kasta iyo senator kasta wuxuu xaq uleeyahay 10 daqiiqo inuu meeshan markuu imaado hadlo, 10kii daqiiqo waxaad arkaysaa xildhibaan dhaafay marka la iraahdo waqtigaagii waa gaarayna ma ogola inuu meesha ka baxo, "that means" wax walba qofku uu isla raba isaga, xaquuq yarna ma rabo inuu cafiyo waxyaabaha isaga laga rabo oo waajibaadka ahna way ku adagtahay fulintoodu. marka waxaan isleeyahay 31daas qodob ee cutubkan uu ka koobanyahay ee xuquuqda iyo waajibaadka ah 30 kamid ah inaan xuquuq bas ku sheegano waajibadkiina 1 xabo uu noqdo xoogaa waxaan isleeyahay, qodobka 1aad markaad akhrisaan wuxuu leeyahay sida diinta islaamku qabto, waa qodobka 41aad faqrada 1aad, sida diinta islaamku qabto cadaaladu waxay ku jirtaa isku dheeli tirnaanta xaquuqda iyo waajibaadka, markaa "at least" 30 qodob xuquuqdii baan ka dhignay 1 qodobna waajibaadkii markaa isku dheeli tirnaan meeshaa kama muuqato, markaa **waxaan isleeyahay chapter-kaan in dib loogu yara laabto oo xuquuq kastaba waxa ka dhalanaya waajibaad markaa "at least" waajibaadkii in lagu dhex cadeeyo waan soo jeedin lahaa** oo xuquuq markii la qoraba waajibaadka ka dhalanayana si cutubku uyara koobmo lagu hoos qoro weeyi aad bay u fiicnaan lahayd waan soo jeedin lahaa, marka intaasay iiga eegtahay aniga asalaamu caleykum.

11) **Xil. Ahmednur Sh Mohamed Lohos:**

Bismillah salaamu caleykum waraxmatullahi wabarakaatu, mudane Guddomiye, mudaneyaal maalin wanaagsan, aniga waxaan hadal ka qabaa labo qodob.

- **Qodobka 35** xuquuqda eedaysanaha, dalkeenan wuxuu ka duwanyahay xaalado badan oo deganaanshaho ah dalalka qaba, sidaa darteed qof kasta oo lasoo qabto ama lagusoo xiro tuhun faldambiyeed wuxuu xaq uleeyahy in lagu wargaliyo dambiga lagusoo tuhmay looguna sheego af uu garanayo wuxuuna isla markaa xaq uleeyahay inuu ka aamuso hadalka uu ku eedaysnaa qodob odhanaya. Qodob kalena wuxuu odhanayaa qof kasta laguma qasbi karo in uu xog uu ogyahay sheego sidaa darteed, iyadoo aanay maxkamadi xukumin, maxkamada kahor ayaa qofku haay'adaha amniga ay u baahanyihiin in ay, waad ogtihiin xaalado argagixiso ayaa ku jirta oo dad laayay oo dhibaatooyin gaystay in aanay hay'adihii dambigu ay dambigii ku "torture" garayn karaynin inuu sheego xogta uu ogyahay, marka sidaa darteed qodobadan iyada ah hadba wixii aan sharciyayno hadii fulintiisa dastuuriga aan ka dhigno aanan hada la sixin waxa weeyi hadhow caqabad bay u keenaysaa hay'adaha amniga, sidaa darteed waxaan soo jeedin lahaa qofka qodobka awood usiinaya in uu wixii la waydiiyo ka jawaabin iyo qodobka kaleeto oo la midka ah oo isagna inaanan cadaadis lagu samayn karin iyadoo xog laga raadinayo, labadaas qofba duruufta hada aan ku jirno labo qodob oo la shaqayn kara maaha sidaas darteed waxaan soo jeedin lahaa in laga saaro oo waxa weeyi qofka hadii wax la waydiiyana xaqbaa loogu leeyahay, hay'adaha amnigu ay uugu leeyihiin inuu ka jawaabo waxyaabihii la waydiiyay, haduu diidana waa in si kasta oo warka looga heli karo loo isticmaalo weeyi, **sidaas darteed aniga waxaan soo jeedin lahaa in labadaas qodob meesha laga saaro**, wasalaamu caleykum waraxmatullahi wabarakaatu.

12) **Xil. Abdinuur Ali Adan:**

Bismillah, Guddoonka waan salaamayaa Baarlamaankana waan salaamayaa waxaan usoo istaagay.

- **Qodobka 34aad (1)** eedaysanaha wuxuu lamid yahay qof aan dambi galin ilaa maxkamad awood uleh ay ku xukunto dambigaas, ugu dambayn dambigaas loo haystay, horta dambigaas halaga saaro waxaan dhihi lahaa, eedii loo haystay hala dhaho ilaa ay maxkamad ku xukunto eedii loo haysatay. Waxaan dhihi lahaa qodobkaan horta waa badanyahay waana culusyahay 15 faqradood waaye hada waa faqrada 1aad waxaan ka hadlaayo halagu daro marka hoos halaga raaciyo faqrada 1aad, eedaysanuhu ilaa ay maxkamad ku xukunto eeda loo haystay, magaca loogu yeeri karo waa eedaysane, xaquuqda xaq uu leeyahay waaye dad ayaa ugu yeero qofkii oo eedaysane ah waryaa dambiile waryaa soo istaag dambiile dhaha, marka si xuquuqdiisa loo ilaaliyo ilaa maxkamad ka xukunto magaca loogu yeeri karo qofka eedaysanaha ah waa eedaysane, maxkamadahaa isticmaalayo, waxa isticmaalaya xeer ilaaliyeyaasha isticmaalaya, abukaatahaa isticmaalaya in sidaas la dhaho.

- **Qodobka 34 (10)** waa 15 faqradood waaye, faqradaan 10aadna siiqo ahaan hala toosiyo meesha ay ku qorantahay ilaa dambigii loo haystay in laga saaro oo ilaa eedii loo haystay laga dhigo, waan fiiriyay 15 faqradood waaye, qodobkaan waxa sidaas 15 faqradood u noqday waxa waaye waa qodob culus oon caadi ahyn oo aad ayaa loo ilaaliyay xuquuqda marka, inta kale waa okey waa ila fiicantahay aniga fikirkayga kaliya qofka xuquuq si uu u helo, qofka lasoo eedeeyay ee maxkamada la keenay ilaa ay maxkamad ku xukunto eedii lagusoo eedeeyay magaca loogu yeeri karo waa eedaysane in dastuurka lagu daro waana jiri jirtay, wayna ahaan jirtay arintaas waa horey u jirtay, hadii laga raadiyo dastuurkii 1960kii in laga

helaa laga yaabaa laakiin booliiska isticmaali jiray waxa mamnuuc ka ahyd qof lasoo eedeeyay in maxkamadaha iyo maxkamadaba inay dhahaan waryaa dambiile soo istaag waxa la dhihi jiray eedaysane intaasaan ka hadli lahaa qodobkaan 34aad ilaa faqradiisa 15aad waan wada saxiixay intaas bas ayaan ku darsanayaa wabillahi tawfiiq aslaamu caleykum waraxmatullahi wabarakaatu.

13) **Xil. Duniya Osman Yusuf:**

Salaamu calaykum guddoonka dhamaan, waxaan rabaa inaan ka hadlo

- Qodobka 28(2) *Dhammaan muwaadiniintu waxay xaq u leeyihiin inay helaan waxbarasho lacag la'aan ah ilaa iyo dugsi sare*, waxaa lagu bedelay *Muwaaddin kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo waxbarasho lacag la'aan ah oo gaarsiisan ilaa heer dugsi sare,* waxaan qabaa ilaa dugsi sare weeyi waxbarashadu lacag la'aanta ahi , waxaa wanaagsan in la raaciyo sida jaamacada oo kale, ardaydu markay dugsi sare ka baxaan qaar waxaa jira aan shaqaynin u baahana qayb hay'ad faninacial Aid ah loo fiirinkaro hadii inta uu shaqeeyo, haduu lacag fiican sameeyana income kii loo eegayaa in 30% laga bixin karo dad baan awoodin jaamacada qaybtaasna in la fiirsho "financial aids" dadka aan income lahayn ama low income ka ama aan shaqaynin, qaybta qodobkaasina aad buu u fiican yahay in aad loo fiirsho kaasi waa ka labaad.

- Qodobka 28(3) *Waxbarashada aasaasiga ah ee dugsiyada hoose dhexe waa khasab,* baa la yidhi, waa sax waa inay khasab ahaataa, hadana waa in waalidiinta loo sheegi karo cunuga 6 sano markuu gaadho iskuulka inuu bilaabi karo fulltime class ka 1aad, waalidkiis haduu keeni karo, dad waxaa jira waxbarasha in la gaadh siiyo beled iyo baadiyeba, dad waxaa jira waalidiinta aan iskuul ilmahooda in lageeyo ogolayn, waalidkii iskuulka gayn waaya in la yidhaahdo waa lagu ganaaxayaa, si macnaha ganaaxaa uga caranaan oo ilmihii iskuulka ku keenaan,taas waa taa.

- Waxaan kale oo aan ka hadlayaa ubadku waxay xaq u leeyihiin inay helaan kaalmo qareen nimo, qareennimo ma looyarkaa kharshaka ay dawladu bixiso si ay uga badbaadaan dacwad kasta oo cadaalad darro keeni karta, waxaa iyadana 5 ah caruurta waxaa lagu bedelay markaa caruurta waxaaa la xidhi karaa oo kaliya muddo gaaban markii la waayo xal kale lagumana xidhi karo dadka waaweyn dhexdooda, waa sax taas, marka laga reebo xigtada u dhaw, caruurta hadii la xidhaayo meelaha lageeyaa waa juvenile, juvenile ku waxay noqon karaan 18 la dhihi karo 15 sano wixii ka yar baa lagu xidhikaraa waxaa la raaciyey marka laga reebo xigtada ugu dhaw, xigta u dhaw in lala xidho maaha cunugu hadii uu dambi galo 15 wixii ka hooreeya waa in lageeyo jeel caruurtu leedahay oo lagu dhibaatayn Karin, maaha xigto in lala xidho, waa in lagu hayaa baa la yidhi xaalad ku haboon, okey caruurta waa in sida ugu dhaqsiyaha badan suurogal ah loo wargaliya xidhitaankooda, way wanaagsantahay in waalidkooda loo sheego oo la war galiyo laakiin waa in dad xigto ah ama dadka ama adult ah lagu ag xidhin 18 sano la dhihi karo waxaa lagu xidhi karaa qayba jeelalka ilmaha yaryarku lee yihiin ugu weynaan 15, macnaha 18 inaan la ogolaan baan qabaa iyadana taasna halkaasaan uga baxay.

- Qaybta kale iyna waxa weeye ubadku wuxuu waalidkiisa xaq ugu lee yahay xanaano oo ay kamid tahay waxbarsho iyo barbaarin toosan, hadiise xanaanadaas uu ka waayo qoyskiisa ama xigtadiisa ama uu yahay ubad dayacan dawlada ayaa kafaala qaadaysa xuquuqda, waa sax taana waa muhiim, lakiin xuquuqda dawladu kafaalaqaadayso waa in la cadeeyo oo ay ka mid tahay meelaha ilmaha lagu xanaanayn karo, lagu haynkaro ilaa ay ka qaan gaadhaan waxbarashadooda, caafimaadkooda in loo sameeyn karo kaar caafimaad waalidiinta iyo

ubadkooda sida naagaha uurka leh waa inay heli karto dhakhtarka qaybta ay ku umuli lahayd ama kaar caafimaad oo free ah, taasna in lagu cadeeyo wey wanaagsan tahay

- Qodobka 20(1) Muwaaddin kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu ka qeybqaato arrimaha siyaasadeed ee dalka uuna sameysan karo kana mid noqon karo xisbi siyaasadeed, loona dooran karo xil kasta, oo xisbiga gudihiisa ah, si waafaqsan xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Markaa waxaan qabaa iyadana in la raaciyo wey haboontahay in la raacsho iyadana Muwaaddin kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu ka qeybqaato arrimaha siyaasadeed ee dalka uuna sameysan karo, kana mid noqon karo xisbi siyaasadeed, loona dooran karo xil kasta, oo xisbiga gudihiisa ah, si waafaqsan xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, iyo doorashooyinka ama xisbiyaddu way wanaagsan yihiin, khasab maaha xisbiyadu inay tiro bataan xisbiyo waxaa jiro badanaa 2 xisbi 3 xisbibaa ugu weynaan karaan in lacadeeyo iydana ma xisbiyo furanbaa mise xisbiyo xiran, in la raaciyona jamhuuriyada federaalka soomaaliya taasna waa wax wanaagsan in lagu daro, markaa waxaan u maleynayaa inuu wakhtigaygii dhamaaday taasna in taasaan ku ekay siinayaa.

14) **Xil. Mohamed Ibrahim Nur Macalimuu:**

Bismilaahi raxmaani raxiim, mudane gudoomiye, xildhibaanada sharafta leh, aniga qodoba koobanaan ka hadlayaa

- Qodobka 31 ee ku saabsan xaqa ilaalinta xogta shaqsiga waa "data protection" wuxuu ku cusub yahay dastuurka aad ay muhiim ugu tahay guddigana waa ku mahadsan yihiin in xiligana la joogo oo aduunku waliba artificial intelligence ga laga hadlayo inay soo galiyaan xasaasi ayey tahay muhiim u tahay, markaa xogta dawlada iyo xogta ha'ayada gaara ay u leeyihiin ayey xogtu u qayb samaysaa, markaa kuma kala cadda oo inta badan xogteenu waxay yaaliin meelaha private ka xog caafimaaday noqonaysaa, xog bangiyadeena way noqonaysaa, waxaas oo dhan ha'ayada private-ka ayaa gacanta ku haya, waxay dawladu hayso waxaa ka badan inta private ku hayaan, markaa in meelo si uun loogu xuso in dhinacyadoo dhani ilaaliyaan xogta shaqsiga ah, waad og tihiinoo xogta shaqsiga maanta heerka ay ka taagan tahay aduunka ""icloud" yar oo la waydiiyey shirkada teleefonada ayuu aduunka maraykanka ka diiday, markaa xogta shaqsiga si loo ilaaliyo ahmiyad gaaray leedahay xiligan la joogo oo waliba aduunku digital yahay, waxaan kaloo rabi lahaa guddigu inay af soomaaligana dad khubara ay kala tashadaan oo luqadaha fake ah ee mararka qaadkood ku jira dhaqanka suuban ee soomaaliyeed la leeyahay waa fake waaye, shareecada islaamka waa la gartay dhaqanka suuban ee soomaaliyeed markii dastuur sharci laga hadlaayo aas aas malaha .

- Qodobka 33(1) *Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu dacwad sharciga waafaqsan ka furto maxkamadaha awoodda u leh.*

- Qodobka 33(2) *Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo garsoor madaxbannaan, caddaalad ku dhisan, aan eex lahayn; laguna qaado maxkamad dadweynaha u furan, laguna galo muddada xeerku jideeyey.* Laguna galo maxaa lagu galayaa hadii loola jeedo in dacwada lagu galo waa in dacwda la cadeeyaa inay dacwada tahay, muddada xeerku jideeyey, xeerkaas waa xeerkee isna taas laftigeeduna ma cadda, markaas in la cadeeyo xeerkaasi wuxuu yahay iyo waxa la galayaa waxa ay yihiin, hadii kale qodobkaasi oo dhan wax dacwada kuma qorna hadii dacwo loo la jeedo.

- Qodobka 35 (3) Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay hormarinaysaa siyaasad iskaashi iyo iskaalmaysiga sharciga ee caalamiga ah. Macna ahaan waa la fahmayaa laakiin

labo iskaashi iyo iskaalmaysi sharciga macnaha hal mid in lagu dhaafoo siiqad ka qurxoon oo afsoomaali ha loo dhigo, Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay hormarinaysaa siyaasad iskaashi iyo iskaalmaysiga sharciga ee caalamiga ah, waxoogaa afsoomaali laga fiican yahay iyadana in dib loo fiiriyo.

- Qodob 37(3) ee ka hadlaaya xaddidaada xuquuqda wuxuu lee yahay *Hay'adaha garsoorka ayaa dammaanad qaadaya in aan lagu xadgudbin xuquuqda iyo xorriyaadka, lana dhawro qiyamka saldhiga u ah Dastuurka.* haayadaha garsoorku wey balaadhan yihiin, hay`adaha garsoorka ee maxakamaduhu, markaa maadaama dastuurku sheegaayo maxakamad dastuuri ah maxakamadaha oo dhan ma ilaaliyaan sharciga wixii dastuurka ku saabsan, waxaa ilaaliya maxakamada dastuuriga markaa *Hay'adaha garsoorka ayaa dammaanad qaadaya in aan lagu xadgudbin xuquuqda iyo xorriyaadka, lana dhawro qiyamka saldhiga u ah Dastuurka,* markaa maxakamadihii tee awood u leh maadaama dastuukeenu ka hadlay maxakamadii dastuuriga. qodobka udanbeeya,

- Qodobka 40 ee ka hadlaaya guddiga xuquuqda aadamaha oo runtii qodobo qurux badan ay ku soo dhigeenoo aad buu muhiim u yahay guddigaas in la sameeyo oo "National Human Rights Commission" ka aduunyada siyaaba kala duwanaa loo magacaabaa, dalkan Kenya madaxweynhaa soo magacaaba, kadibna dadkaa la keenaa, qof walba CV giisa baarlamaankaa la horkeenaa si shaqsi, shaqsi ah ayaa loo mariyaa ka dibaa qofkaas aqoontiisa iyo xirfadiisa iyo kalsoonidiisa iyo integrity-tigiisa isagoo la ilaalinaayo la fiiriyaa qofka, ka dibna wuxuu noqonayaa guddi madaxbanaan oo si madaxbaan ku shaqeeya, laakiin anaga wasaarada oo ku shaqada leh human right iyo haweenka ka ayaa golaha wasiirada keenaysa, golihii wasiiradaa ansixinaaya, halkanaa la keenayaa, maxweynahaa saxeexaaya, markaa cid hadee dawlada gola wasiir soo martay oo siyaasadi soo dhex martay badanaa ma noqon karaan wax madaxbanaan maadaama aan ka hadlayno "independent commission" oo waliba "Human Rights" oo masuuliyaad waaweyn laga rabo waxaa fiican in iyadana qaabka ay magacaabistiisu ku imaanayso iyadana in la iska eego, markaa aad iyo aad baad u mahadsan tihiin.

**15) Xil. Mohamed Omar Aimoy:**

Bismilaah, guddoonka labada aqal, xildhibaanadda sharafta leh ee labada aqal, saxaafadda, kasoo qayb galayaasha dhamaan waxaan idinku salaamay salaanta islaamka, asalaamu calaykum waraxmatulaahi wa barakaatu, bacda salaam, waxaan rabaa inaan ka hadlo haduu ee ogolaado,

- Qodobka 30(2) oo ahayd midna laguma khasbi karo inuu bixiyo xog haddii aysan maxkamad amrin ama xeererka Jamhuuriyadda, **waxaan rabaa arrintaasi in loo daayo faqradii hore siday ugu qornayd.**

- Qodobka 34(1) ee ka hadlaysay eedaysanaha wax badan ayaa laga hadlay oo hada lagu soo diyaariyey wuxuu lamid yahay qof aan dambi galin qofka eedaysanaha waxa loo yidhi eedaysane qofka hadii ifiito loo geeyo iyo hadii la baadhayaba horta inuu dambi galay waaye, hase yeeshee la dhihi karo dambiile, ilaa ay ka xukunto maxakamada awooda u leh ee ay xukun kurido, laakiin erayga ah mar hadii loo yeedho wuxuu la mid yahay qof aan dambi galin, marka layidhaahdo waxaan la qabaa xildhibaanadii hore u hadlay, waxa loo yeedhiba waxa waaye hastaa dembi waaye, laakiin lama dhihi karo ilaa xukun kudhaco dambiile lama dhihikaro wuxuu taagan yahay eedaysane siduu sharcigu qabo.

- Qodobka 35 (1) *Isucelinta eedeysanayaasha iyo dembiilayaasha,* isucelinta eedeysanayaasha ama qofka denbiga galey, waxaan halkan faqradiisa 1aad ku leenahay hadii la saxiixo heshiis caalami ah haddana meelkale ay leedahay isla faqradaa ah lama celin karo, taasi waxaan leehay in loo daayo go'aan keeda dawladda, meelkale oo isla faqradeeda 2aad ayaa waxa ay leedahay go`aanka looma gacangalin karo dal shishiiye danbiile, hada mar hadii oo heshiiska caalamiga wax ka saxiiday in maxbuus ama eedaysane ha la isku celiyo, haddana aad tiraahdid lama dhiibikaro arintaasi maxay noqon kartaa? waxaan rabaa guddiga in ay yiraahdaan ama loo daayo Baarlamaanka federaalkaa go'aan ka gaadhaya labadiisa aqal ama in loo daayo in la yidhaahdo lama celinkaro balse go'aanka kama danbeynta ah waxaa iska leh dawladda, ninkaasi in la celinaayo iyo inkale maadaama heshiisyo la kala saxiixday uu jiro oo caalami ah.

- Qodobka 37 (2) waxaa layidhi nuxurkeeda waxaa lagu daray faqradii 1aad **waxaan qabaa iyadana anoon ku fogaanayn faqradaasi in loo daayo sidii markii hore ay u qornad**, intaas hadalkayga yahay, waanan ka baxay salaamu calayku waraxma tulaahi wa barakaatu.

16) **Xil. Shariif Mohamed Abdalle:**

Bismillaah, dhamaam waan salamayaa dhamaan jaalayaasha ay ugu horeeyaan guddoonka golaha, waxaan marka hore yare mulaaxadeeyay in qodobada iyo faqradooyinka la raray, ama hor loosoo dhigay, ama gadaal loo dhigay oo faraha badan aan loo baahneyn, oo meelahooda wixii lagu hagaajin karo lagu hagaajiyo aheyd.

- **Qodobka 31aad** xaqa ilaalinta xogta shaqsiga ah, horta **"kh"** ka dhiga meeshaas, af soomaaliga aan gadaal ka bartay bey ka mid tahay, Meesha shaqsi aad ka dhigteen shakhsi ka dhiga,

- **Qodobka 33(2)** qofkasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo garsoor madax-banaan, aniga waxaan qabaa in laga dhaafo, cadaalad ku dhisan aan eex laheyn in lag dhaafo, garsoor hadii la yiri, meeshaas ayay ku dhamaatay, madax-banaanina waa hal **"n"**, "nuunka labaad" halaga tiro.

- **Qodobka 34(3)** qofkasta oo xuriyadiisa shaqsiga ah laga qaado, waa in xaaladiisa lagaarsiiyo, qoyskiisa ama eheladiisa iyo qareen kiisa, waxaan isleeyahay soomaali hadii aan nahay qareyn malihini, odeygiisa la dhahayo maahine, qof qareen leh wuu iska yar yahay, taasna wa mid zaaid nagu ah, naguma dawaqmi karto. Isla Qodobka 34a(12) guddiga waxey faalada ku sheegeen, faqradaan waa faqradiisa 12aad asalka aheyd dastuurka aheyd ayadoo loo habeeyay hab qaanuuni ah, laakiin kolomkii koowaad ee bidixda ahaa, oo 12 ka lagu sheegaayay maba qorna waa banaan yahay, kolomkaas waa laga boday asagana in la sifeeyo . hadii aan dib wax yar u noqdo.

- **Qodobka 11aad**, qofka laguma soo oogi karo, mar labaad danbi si kama danbeys ah horey loogu xukumin, ama loogu sii deynnin, si waafaqsan sharciga, waa daryeelid waaye. faqradda 13aad ee qodobka 34aad, waxaa la leeyahay faqradaan waa isla faqradii 13aad ee Qodobka 34aad, waxaa la leeyahay faqradaan isla faqradda 13aad ee soojeedinta wax-ka bedalka dastuurka meesheedana kuma qorna, waa arinta aan leeyahay, guur guurinta faqrooyinka uma fiicna, meel koraa lageeyay meeshay ku qorneyd, marka waxaan isleeyahay arintaas, dastuurkii hore ama nusqadii hore oo ad loo gadgadiyay waxaa fiicneyd intii laga dhoorsan karo laga dhoorsado in la rogrogo, in meelo kala gadisan lageeyo.

- **Qodobka 35aad** isu celinta qoraal ahaan la dhaho isu-celinta laga dhigo ayaa aad iila fiicantahay.

- **Qodobka 37aad(1)** xuquuqdaan waxaa xadidi kara xeer, ama xadidaad si gaar ah dastuurka dhaxdiisa ugu xusan, waase hadii xadidaadaasi ay tahay mid sicad u maangal ah hadal adag waaye, waxaa ku filan mid maangal ah, ama la yiraahdo, si maangal ah mugdi ku jirin, hadii cadaanta la rabo, laakiin si cad u maangal ah, "u" daasi kaligeed Meesha taagan wey ila culustahay, faqradda 3aad ee cusub isla qodobka 37aad waxay leedahay hey'adaha garsoorka ayaa damanad qaadaaya, in aan lagu xadgudbin xuquuda iyo xuriyaadka lana dhowro qiyamka saldhiga, waxaa waaye iyadoo damaanad qaad iyadoo aan la dhihin, waxey ila tahay in siiqo kale loo qore, Hey'adaha garsoorka ayuu waajib ka saran yahay in aan lagu xad gudbin, hadiii larabo xataa waxaa lagu darikaraa amniga, laakiin damaanad qaad hey'adaha garsoorka waxaa ka munaasabsan waa waajib in la yiraa.

- **Qodobka 38aad** ciwaankiisa wuxuu igula saxan yahay sidii markii hore ahaa, sixidda ku-xadgudubka xuquuqda aadanaha maxaa yeelay, dib u xaqsoorida erey aad loo isticmaalo maaha, wuu ila culus yahay, **marka ciwaanka in loo dhaafo sidiisa hore ayaan kusoo tala jeedinayaa**, **Qodobka 38aad** faqradiisa 3aad meel dhexe ayaan ka qabanaayaa ama aan kor kasoo akhriyo, malahan waqti xadidan furida ama oogida gal-dacwadeedka, la xiriira gabood falka xuquuqda aadanaha, danbiyada dagaalka iyo danbiyada lidka ku ah bini aadam nimada waa ay xeeriyeen xeerarka maadaama ay isku dhow yihiin, xeeriyeen iyo xeerarka ay jideeyeen, xeerarka in layiraahdo si loo kala badalo, labada erey ee madaxa isla galay.

- **Qodobka 39aad** waxaa ku xusan marka laga soo gudbo dhaqanka suuban ee soomaaliyeed iyo mabaadi'da, mabaadi'dee? xoogaa yar in la tilmaamo mabaadi'da qodobkaan uu tilmaamaayo.

- **Qodobka 41aad** xarafka "J" inuu ka ilaaliyo deegaanka wasakhda, waxaan dhihi lahaa wasakh iyo wasakhowga laba micno ayay kala leeyihiin, wasakhda wax yaalahaan yar yar waaye, laakiin wasakhowga kan plution ka layiraahdo weeye.

17) **Xil. Omar Yusuf Galadid:**

Bismillaah alxamdullihaahi wasalaato wasalaamu calaa rasuuli laahi SCW. Gudoonka labada aqal, xilibaanada labada aqal, howl wadeedana labada aqal, saxaafada, asalaamu calykum warax matullaahi wabarakaatuhu. Waxaan umaleynayaa cutubkaan cutubka ugu dheeraa buu noqday oo aan mareyno gabagabadiisii, maalinta 4aad, waana muhiim xuquuqda aasaasiga ah waajibaadka muwaadinka, cutubkaan runtii guddiga madaxa-banaan iyo guddiga la socodka shaqo badan bey soo qabteen mahadna wey mudan yihiin, marka la fiiriyo shaqada ay soo qabteen, waxa ay toosin ku sameyen 61 faqradood, 27 faqradood iyo hal ay tireen, laba qodob iyo 23 faqradoodna wey kusoo kor dhiyeen, runtii taa waxey muujinaysaa shaqada culus ay qabteen. Runtii jaanis uma helin inaan hortiina soo istaago, qodobo yaryar ayaan dul istaagayaa waana soo koobayaa, inta bandanna waan second gareynayaa xilibaanada saaxiibadeyda ah.

- **Qodobka 11aad** sinnaanta, qodobkaas waxaan rabaa hal qodob oo muwaadinka soomaaliyeed oo ku waayay xuquuqdiisa oo wasaaradaha markii shaqada laga raadinaayo ah, hada ka hor wasaarada arrimaha gudaha, hindise sharciyeed ay inoo keetay ayaan ka maqnaa, oo runtii guddida ayna soo xusin ayaa hada waxaan jaanis ka helnay inaan

xuquuqda aadanaha markii lakeenay inuu muwaadinkaas booskaas heli karo, waxaa ka mid ahaa hadaan qodobkaa taabto, waxaa waaye qofku markuu shaqadu apply gareenaayo, shuruudaha laga rabo waxaa waaye, inuu yahay muwaadin soomaaliyeed oo muslim ah maskaxdiisu taamtahay, wax yaabahaas ka mid ahaa, marka waxaa ku jirtay matalan agaasimaha guud hey'ada soocdaalka iyo jinsiyadaha iyo labadiisa ku xigeen, inuu muslim yahay, marka Meesha waxaa ka baxeysa, gaalka soomaaliga ah in uusan meshaa jaanis ku laheyn, laakiin hada qodobkaan sinnaanta markii laga hadlaayo, muwaadiniinta oo dhan iyadoo aan loo eegeenin lab iyo dhigid, diin, midib ,xaalad bulsho, ama dhaqaale, afkaar siyaasadeed, qabiil, naafonimo, xirfad, dhalasho, isir, da` iyo af guri, xuquuqda iyo waajibadka wey usimanyihiin xeerka hortiisa si waafaqsan shareecada islaamka, marka diinta la dhaho gaalka soomaaliga hadii bini aadamnimo lagu siiaayo, dadka kale ay xuquuq ku yeelanayaan maxaa gaalka soomaaliga u diiday inuu shaqada qaban karo?, gaal soomaali haduu jiro dhibba majiro, laakiin haduu gaal soomaali jiro laga hadlaayaa wadamo badan baan dagannahay waa laga yaabaa inuu gaal soomaali jiro.

- **Qodobka 11aad (4)** qofna maqaam iyo maamuus uu leeyahay awgeed uguma baxsan karo, laxisabtan iyo ciqaab fal danbiyeed uu galay, qodobkaan xilibaano badan waxey ka muujiyeen walwal, laakiin waxaan qabaa oo ku "second" gareynaya sharciga qof ka sareeyo majiro, marka waxaan second garey karaa xilibaan ahow, wasiir ahoow ama madaxweyne ahow ama raisul-wasaare ahoow, majirto qof sharciga ka sareyn karta ineysan jirin, aniga taas ayaan second gareynaya.

- **Qodobka 18aad** xuriyada kulanka banaanbaxa, cabashada iyo codsi wadareedka, qodobkaan qofkasta wuxuu xaq u leeyahay, inuu abaabulo kana qeyb galo, kulumo ama banaan bax cabasho taageero lagu oo muujinaayo si xaslooni ah, iyadoo aan ogolaansho loo baahneyn, si waafaqsan xeerarka jamhuuriyada soomaaliya, aduun yadu majirto meel waraaqad la'aan leys ka banaan baxo, soomaalidu 4.5 waaye, ninbaa si qalad wax ku sameynaayo banaan bax buu abaabulayaa wuxuu rabuu sameynayaa, marka arintaa aniga ma qabo waxaan ku waafaqsanahay cidii tiri waa in waraaqo waliba waraaq ogolaansho aan mid iyo labo wasaaradood aheyne ay yihiin sadax ilaa afar yihiine ay kasoo qaadan karaan, laakiin ay suurta gal noqoneynin waraaqad la'aan baa la banaan baxayaa, taas ma qabo.

- **Qodobka 34aad** xuquuqda edeysanayaasha waan "second" gareynaya, waxaan second gareynayaa guddiga sida ay usoo qoreen baan "second" gareynayaa, dambi galin macnaha eedeysanuhu wuxuu la mid yahay qof aan danbi galin, ilaa maxkamada awooda u leh ay si kama dambeys ah ugu xukunto dambiga loo heysto, marka **waxaan "second" guddiga madaxa-baan iyo guddiga lasodka usoo diyaariyeen**.

- **Qodobka 35aad** isu celinta edeysanyaasha iyo dambiilayaasha, faqrada 1aad issu celeinta edeysanayaasha iyo dambiilayaasha waxaa lagu ogolaan karaa si waafaqsan xeerka iyo inuu jiro heshiis isu celin ah, oo ay jamhuuriyada federaalka soomaaliyeed dhinac ka tahay iyo hishiis calami ah oo ku waajibinaaya dowlada federaalka soomaaliya issu celinta edeysanayaasha ee dambiilayaasha, halkaan waxaan rabaa anagu waxeynu dagannahay wadama kala gadisan beynu dagannahay, siiba kasoo qaad mareekanka ka oo kale ninka mareekan ku dhashay oo heysta jinsiyad mareekan ah, dambi kasoo galay wadan kaa marekanka ee soomaaliya imaaday, dhalshadiisu asalna ay hooyadii ama aabihii soomaali tahay ama aabihiisa soomaali yahay, ama labadooda soomaali yihiin, dhalshada wadankaa heysto markii loo fiiriyo sharcigii caalamiga markii loofiiriyo mareykan buu noqonayaa,

laakiin markuu halkaan uu yimaado muxuu noqonaya shaqsigaa mala celinayaa misa lama celinaayo? taas lafteeda waxaa fiicnaan laheyd in ay cadaan laheyd baa haboonaan laheyd. Faqrada 2aad muwaadin soomaaliyeed looma gacan galin karo dal shisheeye, runtii guddiga wey ku amaanan yihiin in ay kusoo daraan farqadaan, maxaa yeelay aad buu muhiim u yahay hada ka horna wey dhacday, dambiilayaashii falkaa geystay oo muwaadinka soomaaliyeed halkan ka tarxiilay, dhibaatada u geystay oo intaasoo soomaaliyeed ka xanaajisay intaas oo soomaaliyeed dhibaato u geystay ayaa la dhiibay in y kusoo daraan runtii amaan bey ku mudan yihiin.

- **Qodobka 38aad** dib u xaqsoorida la xiriirta xad gudub yada xuquuqda aadamaha, qofkasta wuxuu xaq u leeyahay, magdhow hadii lagu xad gudbo xuquuqdiisa aasaasiga ah, waxaana go'aan ka gaaraya maxkamada awooda u leh, qodobkaan waxaan qabaa in uu aad muhiim u yahay laftiisu, waxaa meeshaas dhibanayaan ama dad lagu gadoodfalay oo dhibaatooyin badan loo geystay oo waxaa jirta waligood aan cadaalad helin, laakiin arintaan yididiilo galineyso in ay maalin maalmaha ka kid ah magdhow heli karaan ama maxkamad cadaalad ay helikaraan, faqradda 3aad malaha waqti xadidan furida, oogista, gal dacwadeedka la xiriira gabood falada xuquuqda aadamaha, dambiyada dagaalka iyo dambiyada lid ku ah bini aadamnimada oo ay xoojiyaan, xeerarka jamhuuriyada ama hishiisyada caalamiga ah oo ay soomaaliya qeyb ka tahay, faqradaan runtii ayada muhiim waaye guddiga wey ku amaanan yihiin, maxaa yeelay ummadda soomaaliyeed muhiim bey u tahay, runtii dambiyo iyo gaboodi falo ayaa lakala geystay ilaa hadana wey socotaa dhibkiina waa taagan yahay yididiilo u noqoneysaa in la dhaho gal dacwadeedka dib baa loo furayaa, ama waala furikaraa taa lafteeda waxey yidiilo galin kartaa in badanoo dhibanayaal ahaa yey yididiilo galineysaa, runtii guddiga amaan gooni ayaan ugu soojeedinayaa qodobodaan cusub ay kusoo dareen.
- Ugu danbeyn waxaan rabaa xilibaanada maaalin dhaweyd gabdhaha ayay aad ugu hadlaayeen waxey kusoo dareen oo aad ugu xumaaday gabdhaha qaar ka mid ah ay yiraahdeen rag shaxaariyaal ah ayaa baarlamaanka joogo, garbaha naqabanayo waxaan rabaa gawadhii tiri iney cudur daar ka bixiso, maxaa yeelay ma geyno xilibaan soomaaliyeed gabar walaashiis oo muxrim ka ah inuu taabto ama isku soo dhajiyo, taas ma sameyno, dhaqankeena maahan, dhaqan islaamna maahan runtii, mana sameyno baahi noo heysana gabar walaasheyna inaan garabka ku dhagno maba majirto, gabdhaheena soomaaliyeed wey joogaan weyna naga badan yihiin, hadii hab sax ah jiri karo, laakiin arintaasi mahaboona, waa mahadsan tahay asalaamu caleykum.

18) **Sen. Naima Hassan H. Mohamud:**

Bismillaahi raxmaani raxiim asalaamu caleykum waraxmatullahi wabarakaa tuhu. Dhamaantiin waad wada salaman tihiin, oo u horeeyo guddoonka labada aqal xilibaanada labada aqal ee sharafta leh, asalaamu caleykum waraxmatullahi wabarakaatuhu. Gudoomiye waxaan soo koobayaa qodobo yar yar oo kooban oon waqti badan qaadaneynin inshallaah. qodobka ugu horeeyo,

- **Qodobka 36aad** waa qodobka ka hadlaaya qaxootiga iyo magangalyo doonka, waxey ila tahay sida ay Meesha ugu qoran tahay si yara faahfaahsan maaha, qaxootiga iyo magangalyo doonka labo xaaladood oo kala duwan weeyaan, marka waxaa qurux badnaan laheyd in lagu cadeeyo dastuurka waxa ay kala yihiin, qaxootiga waa qofka markuu kasoo cararo dhibaato, dagaal iyo qax, magangalyo doonka waa qof ka yimi wadan nabad ah oo taagan oo dhib kajirin, laakiin kasoo cararay waxyaala siyaasadeed, ama takoor lagu sameeyay, shakhsiyan, marka labada xaaladoodba, markey wadan keena soogalaan waxa loo aqoonsankaraa in ay magangalyo doon yihiin, ama qaxooti yihiin marka uu wadanka cadeeyo oo kiiskooda

dhageyso ka bacdi ayaa loo aqoon san karaa. Tankale, iyaduna ka hadleysa inaan loo gudbin Karin wadan kale iyaduna faahfaahin dheeraad bey u baahan tahay, sababtoo ah, inaga wadamadeena “Africa” inta badan maqaadno qaxootiga, “capacity” uma lihin aynu qaxootiga ku qaadno, aynu ku qaabilno, ama aynu ka hadalno, yacni baahidooda la dhameys tiro, marka inta badan waxaa dhacda in hey’ada caalamiga qaxootiga iyo mangalyo doonka qaabilsan in ay u sameeyaan, wax layiraahdo, “recycle ment” oo ah in wadankale loo gudbiyo oo baahidooda kaafin kara, oo inta badan wadamada “western‘ ka, marka waxey halkas ila tahay yara faafaahin u baahan tahay, guddiga in ay ku yar noqdaan, iyagoo kala sharaxaaya magangalyo doonka iyo qaxootiga, sidoo kale in aanu labadaba loo aqoonsan, ilaa wadanku xaaladooda “acess” gareeyo, ama dib u baaro.

- **Qodobka 41aad** qodobkaasi waxa uu ka hadlayaa Guddiga xuquuqul aadamaha, waxaa ku xusan halkaan in ay ka kooban yihiin sagaal xubnood, sagaalkaa xubnood waxaa ila banaan aan u maleynayo seytahay in lagu qoro oo dastuurkana lagu cadeeyo ama “one percent ” ka mida sagaal kaa xubnood, ama hal xubin ka mid sagaalkaa xubnood, ay noqdaan dadka baahiyaha gaarka ah qaba, “because” waxeynu ogsoon nahay xuquuqul aadamaha inta badan waxaa loogu gafaa dadka baahiyaha gaarka qaba, xuquuqohooda masinna hadeynu nahay soomaali , waana wax aan banaaneyn. Mudane gudoomiye hadada ii saamaxdid waxaan jeclaan lahaa maadaama manta sookoobeyno cutubka labaad, qodoba kale dib ugu yara noqdo oo aan ayadana fikrad ka dhiibto, maadaama manta iigu horeyso inaan halkaan soo istaago, anigoo waqtigeyga ka baxay raali ahaada,

- **Qodobka 28aad (1)** waxey ka hadleysaa wax barashada, waxbarashada iyo ilaalinta waxbarashada iyo af-soomaaliga, iyada laftirkeeda in lagu xuso, waxbarshada dadka naafada ah, ama baahiyaha gaarka ah qaba, iyada laftirkeeda halagu xuso, iney xaq u leeyihiin, sidoo kale ilaalinta af-soomaaliga, waxeynu ka hadalnay cutubkan wey ku jirtay, ilaalinta afsoomaaliga ah, iyo farta soomaaliga iyaduna meynu xusin, horta dadka dhagool yaasha ah iyo dadka indha la` indhoolaha meynu xusin, far gaar ah wey leeyihiin luqad gaar ah wey leeyihiin, markaa labaduba in laxuso, u baahan yihiin. technology

- **Qodobka 20aad** xaqa ka qeyb galka siyaasada, taana waxaan is leeyahay iyada laftirkeeda anigoo u hadlaaya dadka baahiyaha gaarka ah qaba iyadana in lagu xuso, dadka baahiyaha gaarka qaba in ay ka qeyb galikaraan siyaasadda, “percentage” koodana in lagu xuso, hadii gudiyo lasameynayo hadii Baarlamaanka ay kasoo qeyb galayaan iyada laftirkeeda waxaa haboon “parcentage” keeda ina lagu xuso dadka baahiyaha gaarka qaba.

- Waxaan kaloo jeclaan lahaa, in aan dib ugu noqdo laba qodob, midi ka haleysay da’da qaan gaarka, waxaa leys ku heystay 15 jir iyo 18 sano jir, waa run diinteena waxey na fareysaa qofka 15sono jir ka ah in uu qaan gaar yahay, laakiin maadaama aynu ka hadleyno dastuur aynu dooneyno inuu hirgalo ama lagu dhaqmo boqolaalka sano ee soo socda, iya caruuraha aynu dhalno iyo kuwii ay sii dhaleenba, waxaan isleeyahay waxeynu u baahan nahay in aynu laftirkeenu lasocono waqtigaan iyo waayahaanba jira, technology-gii baa wax waliba badalay, waayihii baa is badalay, dadkii wey is badaleen, korniinka caruurtuna isbadal badan baa ku dhacay, markaa manta ma oran karno maskaxdeena saliimka 15sano jir baa qaan gaara, 15sano jir waa ciyaal “tiktok” waa ciyaal, “tichnology” gii la koray, ciyaal mas’uuliyad qaadi kara maaha, sina markii loo eego, 15sano jir “high school” kama uusan bixin, oo wax barashidii aasaasiga aheyd ugu horeysay foundation ka aheyd ee khasabka aheyd ee qofka inuu “high school” dhameeyo muusan dhameynin, 15jir, 16 jir, 17jir iyo wixii ka weyn baa dhameeya, markaa anugu waxaan is leeyahay ama ku talin lahaa, in 18sano jirkaa lagu

ekaado, waayo qofka 18jirkii kalmadii dawanka wuu kasii baxayaa, toban, marka latirinayo sida gaalada yiraahdan tiinka  tiinka wuu kasii baxayaa, tiin age, marka ineynu 18sano jirka ku ekeyno.

- **Qodobka** kii ka hadleeyay gudniinka, guddigeena sharafta leh labada guddi ee kasoo shaqeeyay, dastuurkan sida  sharafta leh, uga soo shaqeeyay aad iyo aad waqti badan u galiyeen marka laga hadlaayo gudniinka, waxaa ku qoran gudniinka fircooniga inuu reeban yahay, laakiin aniga maqabo gudniin inuu abtirsiin leeyahay, iyo magacyo kale gaar leeyahay gudniin waa gudniin, marka in lagu daayo sidiisii hore, oo ah in gudniinka reeban yahay mid fircooni ah, mid sunni ah waxaas aan hoosheeda la galin waa in la iska dhaafo, waxeynu ku jirnaa qarnigii 21aad, in aynu waqtigaan aynu taagan nahay inagoo ka hadleyna mustaqbal dadkiina satellite  ka ayay aadeen inaguna aynu wali ka hadleyno, waxey nagu tahay foolxumo, waxeynu ka shaqeyneyno waa dastuur, mustaqbalka lagu dhaqmidoono, markaa taana sideeda ku daaya, guddiga sharafta leh. Aad iyo aad ayaad u mahasan tihiin, Asalaamu caleykum.

**Diyaariyey:**

(1) Abdimajid Abdisalan Mohamoud
(2) Mustafe Mohamed Abdi
(3) Abdiwaaxid Iman Mohamed
(4) Ali Mohamed Rooble
(5) Yuusuf Abdilahi Hassan
(6) Abdiwahid Iman Mohamed
(7) Khalid Mohamed Deheye
(8) Mahad Abdikarim Jimale
(9) Dayah Ahmed Mohamed

**Tifaftiray:**

(1) Mohamed Deheye Ismail
(2) Ahmed Ali Mohamed
(3) Fahad Mohamed Omar

**Hubiyey:**

(1) Sen. Said Abdi Hussein
Xoghayaha Guddiga Lasocodka Dastuurka

(2) Abdulkadir Mohamed Hassan
Xoghayaha Guud ee GMDHD

**Oggolaaday:**

(1) Avv. Burhan Aadan Cumar
Guddoomiyaha GMDHD.

(2) Xil. Hussein Qasim Yusuf Idow
Guddoomiyaha Guddiga Lasocodka Dastuurka

GUDDIGA MADAXABANNAAN
EE DIB-U-EEGISTA IYO HIRGELINTA DASTUURKA
اللجنة المستقلة لمراجعة وتنفيذ الدستور
Independent Constitutional Review
and Implementation Commission

KM-0, Degmada Shibis, Muqdisho – Soomaaliya

www.icric.gov.so